OFFICE OF THE
UNITED NATIONS
HIGH COMMISSIONER
FOR HUMAN RIGHTS

# Heshiisyada Caalamiga Ah Ee Ugu Waaweyn Ee Xuquuqda Aadanaha

UNITED NATIONS
POLITICAL OFFICE
FOR SOMALIA

# Heshiisyada Caalamiga Ah Ee Ugu Waaweyn Ee Xuquuqda Aadanaha

UNITED NATIONS
POLITICAL OFFICE
FOR SOMALIA

OFFICE OF THE
UNITED NATIONS
HIGH COMMISSIONER
FOR HUMAN RIGHTS

## Ogeysiis

Buuggan ganacsi ahaan looma iibinayo. Waxaase la ogolyahay in waxyaabaha ku qoran buuggan six xor ah looga soo xigsado ama mar kale la daabaco, haddii buugga xaqiisa loo qiro oo nuqul ka mid ah waxa la daabacayo oo wata waxyaabaha mar kale dib loo daabacayna loo diro Xafiiska Wakiilka Sare ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha: Office of the United Nations High Commissioner for Human Rights, Palais des Nations, 8-14 Avenue de la Paix, CH-1211 Geneva 10, Switzerland.

Printing: UNON, Publishing Services Section, Nairobi, ISO 14001:2004-certified.

# Tusmada


Arar ........................................................................................................vi

Baaqa Caalamiga ee Xuquuqda Aadanaha.......................................................... 1

Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda .......................................... 8

Baratakoolka aan qasabka ahayn ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda ........................................................................................ 29

Baratakoolka Labaad ee Iktiyaariga ah ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda looguna talagalay ciribtirka ciqaabta dilka-toogashada ................. 34

Heshiiska Caalamiga Ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Arimaha Bulshada Iyo Dhaqanka ............ 38

Borotokoolka Iktiyaariga ah ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka ........................................................................ 50

Axdiga Caalamiga ah ee Ciribtirka Dhammaan Noocyada Cunsuriyadda Isirka .................. 61

Heshiiska Tirtiridda Dhammaan Qaababka Takooridda Haweenka.................................... 75

Sharciyada Habka Ikhtiyaariga ee Heshiiska Tirtirida Dhamaan Qaababka Takoorida Haweenka ............................................................................................. 89

Heshiiska Lidka ku ah Jidhdilka iyo Kuwa Kale ee Arrxan Darro Aadaminimada Lid ku ah ama Hab Dhaqan Quudhsasho, ama Ciqaab ............................................. 96

Habka Ikhtiyaariga ee Heshiiska Lidka ku ah Jidh Dilka iyo Kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani Aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab ................ 111

Heshiiska Xuquuqda Caruurta ............................................................................ 126

Sharciyada Habka Ikhtiyaariga ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Caruurta ee Ka-qaybgalka Caruurta ee Dagaalada Hubaysan ............................................ 148

Sharciyada Habka Ikhtiyaariga ee Heshiiska Xuquuqda Caruurta ee La Xidhiidha Iibka Caruurta, Ka Ganacsiga Jidhka Caruurta, iyo Caruurta loo Adeegsado Sawirada Jinsiga/galmada ........................................................................................ 155

Axdiga Caalamiga ah ee Ilaalinta Xaquuqda Dhamaan Shaqaalaha Soogalootiga ah iyo Xubnaha Ka-tirsan Qoysaskooda ........................................................................ 164

Heshiiska Xuquuqda Dadka Naafada ah ........................................................................ 204

Hab-Maamuuska Ikhtiyaariga ah (borotakoolka) ee Axdiga Ilaalinta Xuquuqda Dadka Naafada ah ........................................................................ 243

Heshiiska Caalamiga ah ee Ka-badbaadinta Dhamaan Dadka Qarinta Khasabka ah.......... 248

# Hordhac

Waxaa buuggan mar kale lagu daabacayaa heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha ee waaweyn iyagoo lagu soo koobay bug yar. Marka ay daabacayso heshiisyada waaweyn oo Af Soomaali ah, Waaxda Xuquuqul Insaanka ee Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya waxay rajeynaysaa inay heshiisyada ka dhigto kuwo ay heli karaan dadkoo dhan, gaar ahaan mas'uuliyiinta Dowladda, bulshada rayidka, dadka u dooda xuquuqda aadanaha, qareenada iyo sharci yaqaanada, culimada iyo dadka kale ee daneeya shuruucda iyo shuruudaha xuquuqda aadanaha.

Waaxda Xuquuqul Insaanka ee UNPOS waxay jeceshahay inay mahad u soo jeediso Kuliyadda Shareecada iyo Qaanuunka ee Jaamacadda Muqdisho, Kuliyadda Qaanuunka iyo Shareecada ee Jaamacadda Dowladda Puntland iyo Kuliyadda Qaanuunka – Shaybaarka Kaalmada Sharciga ee Jaamacadda Hargeysa, waxayna ugu mahadinaysaa iskaashiga ay kala yeesheen diyaarinta buuggan.

# Arar

Xuquuqda aadanuhu waa wanaag caalami ah oo adduunka oo dhan laga tixgeliyo waana udub-dhexaadka nabad waarta iyo horumar ka hirgala Adduunka. In la garowsado in sinnaanta iyo xuquuqda lama taabtaanka ah ee dhammaan xubnaha qoyska baniaadanka waa waxay xoriyadda, caddaaladda iyo nabaddu ku tiirsanyihiin.

Heshiisyada xuquuqda aadanaha ee Qaramada Midoobay ayaa ah xuddunta nidaamka caalamiga ee horumarinta iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha. Waxay xambaarsanyihiin xuquuqda qof walba oo Adduunka ku nool uu mudanyahay, waxayna dejinayaan nidaam ilaalin ee caalami ah si loo xaqiijiyo in xuquuqdan la dhowro.

Soomaalia waxay qayb ka qaadatay horumarinta nidaamka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, waxayna horeba qayb uga tahay dhowr ka mid ah heshiisyada xuquuqda aadanaha. Sannadkii 1975, Soomaaliya waxay saxiixday oo ku biirtay Heshiiska Ciribtirka Kala-takoorka Isirrada, Heshiiska ka dhanka ah Jirdilka iyo Siyaaba kale ee xun ee dadka loola dhaqmo, sida Ciqaabta Naxariis Darrada ah, Baniaadannimada ka baxsan, Sharaftana wax u dhima, iyo weliba Heshiiska Xuquuqda Dhaqaale, Bulsho iyo Dhaqan. Sannadkii 1990, Soomaaliya waxay saxiixday oo ku biirtay Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda iyo Borotokoolkiisa kowaad ee aan qasabka ahayn. Bishii September ee 2011, intii lagu gudajiray Dib-u-eegidda Caalamiga ah ee Marxaladlaha ah ee Golaha Xuquuqda Aadanaha, Soomaaliya waxay caddeysay inay ka go'antahay inay xubin ka noqoto – ama inay qaado tallaabooyin ku aaddan arrintan – dhammaan heshiisyada xuquuqda aadanaha ee asaasiga ah iyo borotokoolladooda aan qasabka ahayn.

Hase ahaatee, wacyiga guud iyo garashada macnaha dhabta ah ee heshiisyadan weli way hooseeyaan, sidoo kale waxaa meesha ka maqan oon jirin agabyo iyoo qoraallo ka hadlaya xuquuqda aadanaha oo Af Soomaali u tarjuman, taasoo ah caqabad weyn oo hortaagan in dalka lagu xoojiyo wacyiga xuquuqda aadanaha sarena loo qaado fahamka ballaaran.

Iyadoo arrintan la eegayo ayaa qoraalkan ama buuggan la daabacay. Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya (UNPOS) iyo Xafiiska Wakiilka Sare ee Xuquuqda Aadanaha (OHCHR), markay Af Soomaali u tarjumayaan heshiisyada xuquuqda aadanaha ee waaweyn, waxay rajaynayaan in xuquuqda aadanaha loo soo dhoweeyo dadweynaha, si ay mas'uuliyiinta Soomaaliyeed, xubnaha bulshada rayidka, dadka u dooda xuquuqda aadanaha iyo muwaadiniinta caadiga ahiba ay u helaan, u fahmaan, una adeegsadaan.

Xuquuqda aadanaha, iyo mas'uuliyadda naga wada saaran inaan ilaalino, waa wanaag caalamka ka dhexeeya waana mas'uuliyad saraan dadka deegaanka. Waxaan rajeynaynaa in qoraalkan uu ka dhigi doono garashada Soomaalidu ay u leeyihiin heshiisyada caalamiga ee xuquuqda

aadanaha mid qotodheer, abuuri doonana dhaqan dhab ah ee xuquuqda aadanaha oo ka dhasha gudaha Soomaaliya. Waxaan sidoo kale rajeynaynaa in dadka Soomaaliyeed ay xuquuqul insaanka u adeegsadaan qalab ay ku xoojiyaan sharciga iyo kala dambeynta, ku ilaaliyaan, kuna horumariyaan sharafta dadka Soomaaliyeed. Intaa iyo in ka badanba way mudanyihiin.



**Augustine P. Mahiga**
Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha
Guud ee Qaramada Midoobay u
qaabilsan Soomaaliya



**Navanethem Pillay**
Qaramada Midoobay
Wakiilka Sare ee Xuquuqda Aadanaha

# Baaqa Caalamiga ee Xuquuqda Aadanaha

***Waxa lagu ansaxiyay qaraarkii Golaha Guud ee tirsigiisu yahay 217A (III), 10-kii December 1948***

## HORDHAC

Iyadoo aqoonsiga sharafta uu ku dhashay iyo xuquuqda maguurtada ah ee ay u siman-yihiin dadweynaha adduunku uu yahay saldhigga xorriyada, caddaaladda iyo nabadda dunida.

Iyadoo aqoonsi la'aanta iyo ku tumashada xuquuqda aadanuhu ay ka dhasheen falal waxashtinimo ah oo shucuurta aadanuhu ka danqato iyo iyadoo gaaritaanka duni aadanaha ku nooli haystaan xornimo ay ku cabbiraan fikradahooda iyo waxay aaminsan yihiin iyo iyagoon qabin cabsi iyo baahi, laguna dhawaaqay inay tahay ujeedada ugu weyn ee uu dadku leeyahay.

Iyadoo ay tahay lagama maarmaan in xuquuqda aadanuhu ay noqdaan kuwo sharcigu dhowro, si uusan qofku, ugu dambeynta, ugu baahan inuu xoog kaga soo horjeesto cadaadiska.

Iyadoo ay tahay lagama maarmaan in sare loo qaado horumarinta xiriirka saaxiibtinimo ee ka dhexeeya Dowladaha.

Iyadoo dadyowga dunidu ay ku caddeeyeen mar kale Dastuurka Qaramada Midoobay sida ay u aaminsan yihiin sharafta iyo qiimaha qofka aadamiga ah iyo sinnaata xuquuqda ragga iyo dumarka iyagoo goostay inay hore u mariyaan bulshada heerka, noloshoodane la wanaajiyo iyagoo ku nool xornimo ballaaran.

Iyadoo Dawladaha xubnaha ka ah Qaramada Midoobay ay dhexdooda iska ballan qaadeen iyagoo la kaashanaya Hayadaha caalamiga ah sare u qaadidda dhowritaanka iyo xushmaynta xuquuda aadanaha iyo xorriyadda aasaasiga ah.

Iyaadoo helitaanka aragti midaysan ee la xiriirta xuquuqdan iyo xorriyaadkan ay tahay arrin qiima weyn ku fadhisa si loo fuliyo ballan qaadkan.

Golaha loo dhanyahay ee Qaramada Midoobay wuxuu soo saarayaa Baaqan oo saldhig u ah dadyowga dunida ku nool dhammaantood sidii qof waliba ama xubin kasta oo ka mid ah bulshada, isagoo maskaxda ku haya Baaqan, ugu dadaali lahaa sare u qaadidda dhowritanka xuquuqdan iyo xorriyaadkan, isagoo u mareya waxbarasho iyo barbaarin, talaabooyin xiriir ah qaadaya xagga dibadda iyo gudahaba sidii loo xaqiijin lahaa in si dhab ah loo aqoonsado

ha ahaato dadweynaha ku dhex nool Dawladaha xubinta ka ah Qaramada Midoobay ama dadyowga ku nool dhulalka xukonkooda hoos yimaado.

*Qodobka 1aad*

Aadanaha dhammaantiis wuxuu dhashaa isagoo xor ah kana siman xagga sharafta iyo xuquuqada Waxaa Alle (Ilaah) siiyay aqoon iyo wacyi, waana in qof la arkaa qofka kale ula dhaqmaa si walaaltinimo ah.

*Qodobka 2aad*

Qof kastaa wuxuu leeyahay xuquuqda lagu tilmaamay Baaqan iyada oo aan loo kale soocin xag qabiil, midabka, dheddig ama lab, afka, diinta, siyaasadda ama fikrad kale, dhalasho ama meesha uu ka soo askumay, xoolaha, dhalasho ama xaalada kale. Waxaa kale oo aan lagu samayneyn kala soocid ku salaysan arrimaha siyaasadeed, xukun ama xaal caalami ee uu ku suganyahay, dhulka ama dalka uu qofka u dhashay, ha ahaado dalkaasi mid madax bannaan, mid weli dawlad kale maamusho (wisaaya) mid aan haysan xukun hoosaad ama aan haysan gobanima buuxda.

*Qodobka 3aad*

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay nolol, xorriyo iyo nabad gelyo.

*Qodobka 4aad*

Ma jiro qof loo hoysan karo addoon, addoonsiga iyo ka ganacsiga addoonta way reebanyihiin cayn kasta ay ku yimaadaan.

*Qodobka 5aad*

Ma jiro qof loo geysan karo silic dilyo ama ciqaab ka baxsan aadaninimada.

*Qodobka 6aad*

Qof kastaa wuxuu xaq u laayahay in loo aqoonsado, meel kasta oo uu Joogo, qofnimadiisa.

*Qodobka 7aad*

Dadka oo dhammi way u simanyihiin sharciga waxayna xaq u leeyihiin, iyaga oo aan la kala soocin, in sharcigu dhowro. Dadka oo dhammi waxay xaq u leeyihiin in si siman looga badbaadiyo wax alla wixii kala sooc-sooc ah oo ka soo horjeeda Baaqan ama dhiirigelni kara kala sooc-soocid.

*Qodobka 8aad*

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo Maxkamadaha ku hawsha leh ee dalkiisa cawin celin dhab ah marka lagu xad-gudbo xuquuqda asaasiga ah oo uu dastuurka ama sharciga siiyay.

*Qodobka 9aad*

Qofna looma xiri karo, looma hayn karo, ama looma masaafurin karo si sharci darro ah.

*Qodobka 10aad*

Qof Kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo sinnaan buuxda Maxkamad Caadil ah horteed marka la gaynayo xuquuqdiisa iyo waajibaadkiisa iyo marka ay dhacdo in loo haysto dacwo ciqaab ah.

*Qodobka 11aad*

1. Qof kasta oo lagu soo oogay dacwo ciqaab ah wuxuu xaq u leeyahay in loo ictiqaado inuu yahay dembi laawe ilaa laga caddeeyo inuu yahay dembiile sida uu qabo sharcigu, ayna ku dhawaaqdo Maxkamad dadka u furun oo eedeysanayaasha loo oggolaaday dammaanadaha lagama maarmaanka u ah difaacooda.

2. Qofna lama saari karo ciqaab ka dhalatay fal ama fal l'aan haddii falkaasi ama fal la'aantaasi xagga sharciga Dalka ama kan Caalamiga ah, aanay ahayn dembi waqtiga la galay. Sidoo kale dembilaha lama saari karo ciqaab ka adag tii u degsanayd falka dembigaas markii la galay.

*Qodobka 12aad*

Qofna si sharci darro ah looma faragelin karo arrimihiisa u gaarka ah, qoyskiisa, gurigiisa ama warqadihiisa; sidoo kale lama dhaawici karo sharaftiisa ama sumcaddiisa. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu sharciga ka hoos galo fara gelintaas iyo dhaawicidaas.

*Qodobka 13aad*

1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu si xornimaa ugu dhex socdo una dego gudaha dal kasta.

2. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu ka dhoofo dal kasta oo uu ku jiro kiisa, kuna soo laabto.

*Qodobka 14aad*

1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu dal kale u raadsado kana helo magan gelyo siyaasadeed isagoo ka baxsanayo cadaadis.

2. Xaqa kor ku xusan laguma doodi karo haddii cadaadisku yahay mid dhab ahaan ka dhashay dembi aan siyaaso la xiriirin ama falal ka soo horjeeda ulajeedooyinka iyo mabaadiida Qaramada Midoobay.

*Qodobka 15aad*

1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay Jinsiyad.

2. Qofna si sharci darro ah loogama qaadi karo Jinsiyadiisa, loomana diidi karo xaqa ah inuu Jinsiyadiisa beddesho.

*Qodobka 16aad*

1. Ragga iyo dumarka qaan gaarka ah, iyaga oo aan loo kala soocin xagga dhalashada, qowmiyada ama diinta, waxay xaq u leeyihiin inay guursadaan oo qoys abuuraan. Way u siman yihiin xaqa ku saabsan guriga, muddada xiriirka guurka socdo iyo marka uu xiriirkaas dhammaanayo.

2. Guur wuxuu dhici karaa oo keli ah marka la helo rabitaan buuxa oo xor ah ee labada doonaysa inay is-guursadaan.

3. Qoysku waa unugga saldhigga u ah bulshada, wuxuuna xaq u leeyahay in Dawladda iyo mujtamacu bad baadiyaan.

*Qodobka 17aad*

1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu keli ahaan xoolo yeesho ama cid kale xoolo kula shirkoobo.

2. Qofka xoolahiisa si sharci darro ah loogama qaadi karo.

*Qodobka 18aad*

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xorriyadda xagga fikradda, wacyiga iyo diinta; wuxuu kale uu qofka xaq u leeyahay inuu beddelan karo diinta iyo wax alle wuxuu aaminsanyahay. Waxa kale uu qofku xaq u leeyahay inuu, keli ahaan ama isaga oo dad kale wehliyaan, soo bandhigo meel fagaara ah ama meel gaar ah, diintiisa ama waxa uu aaminsan yahay, kuna muujinayo xagga waxbarid, ku dhaqanka, caabudid iyo cibaadaysi.

*Qodobka 19aad*

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xornimo xagga ra'yiga iyo hadalka; wuxuu kale xaq u leeyahay inaan lagu fara gelin ra'yigiisa iyo inuu raadsado, helo, dhiibo warar iyo fikrado isaga oo isticmaalaya qalab kasta oo war baahin ah iyaga oo aan loo fiirin ama xayirin wax soohdima ah.

*Qodobka 20aad*

1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xornimo uu uga qayb galo isu-tag iyo urur leh ulajeeddo nabad-gelyo.

2. Qofna laguma khasbi karo inuu ka mid noqdo urur.

*Qodobka 21aad*

1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu ka qayb galo maamulka Dalkiisa si toos ah ama isagoo si xornimo ah u dooranaya cid wakiil ka ah.

2. Dadka oo dhami way u simanyihiin inay ka qayb galaan maamulka sare ee dalka ka jira.

3. Rabitaanka dadweynuhu waa saldhigga awoodda Dawladda; rabitaankaas waxaa lagu muujinyaa dooroshooyin run ah oo xilliyo joogta ah dhacaya, laga wada qayb-galaya, waxayna u dhacayaan si qarsoodi ah ama hab kale oo wax lagu doorto oo xor ah.

*Qodobka 22aad*

Qof kastaa, maadaama uu xubin ka yahay bulshada, uu xaq u leeyahay inuu helo daryeel caafimaad. Daryeelkaas oo qof waliba u fududaynaya xuquuq dhaqaale, mujtamac iyo mid aqooneed ee lagama maarmaanka u ah qofka sharaftiisa, xornimadiisa iyo koritaanka qofnimadiisa. Taasoo ku imaanaysa dadaalka gudaha iyo iskaashiga caalamiga, isagoo laga eegayo nidaamka iyo ilaha dhaqaale ee Dawlad kasta.

*Qodobka 23aad*

1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu shaqo helo, inuu u madax bannaanaado doorashada shaqada uu qabanayo, in sharuuduhu shaqada ahaadaan kuwo caddaalad ku fadhiya, isagana u danaynaya iyo inaysan shaqo la'aan ku dhicin.

2. Qof kastaa, iyadoon dadka la kala soocin, wuxuu xaq u leeyahay inuu helo mushaar la mid ah kan uu qaato qof kale oo ay isku shaqa qabtaan.

3. Qofka shaaqeeyaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo mushaar wax taro, kuna filan si uu ugu noolaado isaga iyo qoyskiisuba. Loona kabo haddii loo baahdo daryeellada kale.

4. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu abuuro urur ama ku biiro kuwo jiray si uu u ilaaliyo danihiisa.

*Qodobka 24aad*

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay nasasho oo ay ku jirto waqti kooban oo macquul ah oo laga jaro saacadaha shaqada iyo xilliyo fasax oo uu mushaar u socdo.

*Qodobka 25aad*

1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu gaaro heer nololeed oo waxtar u ah caafimaadka iyo ladnaanta naftiisa iyo qoyskiisa; ha ugu horeeyaan cuntada, dharka, hoyga, daryeel caafimaad iyo wax alle wixii adeeg bulshadeed oo lagama maarmaan ah; wuxuu kale uu xaq u leeyahay inuu helo daryeel markii ay ku timaada shaqo la'aan, cudur, curyaanimo, geeri, gabow ama dhibaatooyinka kale uusan la shaqaysan kari ka baxsan awoodiisa.

2. Hooyada umusha iyo dhalaanku waxay xaq u leeyihiin xannaano iyo gacan siin gaar ah. Caruurta oo idil, ha ku dhashaan ama yaanay ku dhalan meher, waxay xaq u leeyihiin xannaana isku mid ah.

*Qodobka 26aad*

1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo wax-barasho. Waxbarashadu waa lacag la'aan, ugu yaraan heerka dugsiyada hoose iyo heerka aasaasiga ah. Waxbarashada dugsiyada hoose waa khasab. Waxbarashada farsamo iyo midda xirfadeed waa inay noqdaan kuwo la helo; tacliinta sare sidoo kale waa inay u furnaataa dadka oo dhan, iyada oo la tix-gelinayo qof la arko mudnaantiisa.

2. Waxbarashadu waa inay ahaato mid loola jeedo in lagu kobciyo shakhsiyadda qofka xoojinta dhowritaanka xuquuqda aadanaha iyo xorriyaadka asaasiga ah. Wax-barashadu waa inay ahaato mid wax ka tarta is-af-garadka isu-dulqaadka iyo saaxibtinimada ka dhexaysa qowmiyaadka ama dadka kala jinsiga iyo diinta ah, waana inay si adkayso hawlaha Qaramada Midoobay ee la xiriira sugidda nabad-gelyada.

3. Waalidka ayaa iska leh xaqa koobaad oo ah inay doortaan nooca waxbarashada la siinayo caruurtooda.

*Qodobka 27aad*

1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu si madax bannaan uga qayb qaato hiddaha nololeed ee bulshada, inuu ka faa'idaysto farshaxanka, inuu ka qayb galo, horumarinta cilmiga iyo ka faa'idaysigiisa.

2. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in la daafoco danihiisa maadiga iyo macnawiga ha ee ka dhasha waxa uu isagu curiyay xagga cilmi suugaanta iyo farshaxanka.

*Qodobka 28aad*

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyaday inuu helo nidaam bulsho iyo hab caalami ah oo xuquuqda iyo xorriyaadka lagu tilmaamay Baaqan si buuxda loogu dhaqan gelin karo.

*Qodobka 29aad*

1. Qof kasta waxaa ka saaran bulshadiisa waajibaad; bulshadu waa meesha qura oo ay suurtowdo in qofku shakhsiyadiisu si madax bannaan oo buuxda ay ugu kobocdo.

2. Marka uu qofku gudanayo xuquuqdiisa iyo xorriyaadkiisa waxaa xiraya oo qura inta sharcigu ka reebay, iyadoo ula jeedadu tahay oo keliya aqoonsiga iyo dhowritaanka xuquuqda iyo xorriyaadka dadka kale in la dhowro iyo sidoo kale anshaxa, nabad-gelyada guud iyo wanaagga guud ee mujtamaca diimaqaraadiga ah.

3. Xuquuqda iyo xorriyaadka kor ku xusan looma isticmaali karo si ka soo horjeeda ulajeedooyinka iyo mabaadiida Qaramada Midoobay.

*Qodobka 30aad*

Baaqan kuma jiraan wax loo fasiri karo in micnahoodu yahay in Dawlad, koox ama qof xaq u leeyahay inuu ku kaco fal ama falal loola jeedo in lagu burburiyo xuquuqda ama xorriyaadka lagu qoray Baaqan.

# Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda

***Waxaa lagu ansixiyay Heshiiskan QaraarkaTirsigiisu yahay 2200 (XXI), loona gudbiyay in la saxiixo, la ansaxiyo kadibna lagu soo biiro ee 16-kii December 1966***

DHAQAN GALAY HESHIISKAN: 23 MARCH 1976-KII, SI WAAFQSAN QODOBKA 49

## GOGOLDHIG

*Dowladaha qeybta ka ah Heshiiskan:*

Iyada oo la eegayo, sida waafaqsan mabaadii'da ku xusan xeerka Qaramada Midoobay, karaamada soo jireenka ah ee sinnaanta & xuquuqda aan lagu tagrifali karin ee ay leeyihiin dhammaan bini'aadamku ayna asaaska u tahay xorriyadda, cadaaladda iyo nabadda caalamka,

Iyada oo la aqoonsanayo Xuquuqdaas ka dhalatay karaamada facaweyn ee uu leeyahay qofka Aadamaha ah,

Iyada oo la aqoonsanayo in si waafaqsan baaqa caalamiga ah ee xuquuqda Aadanaha, fikaradda in la helo aadane madaxbanaan oo haysta xornimo xagga madaniga, siyaasada iyo inuu xor ka yahay baqdin iyo baahi, taas oo ah midda kaliya oo lagu guulaysan karo, hadii la abuuro xaalado keenaya in qofku uu helo xuquuqdiisa madani, siyaasadeed iyo sidoo kale xuquuqdiisa dhaqaale, bulsho iyo dhaqan,

Iyada oo la tixgalinayo, waajibka ka saaran dowladaha marka la eego xeerka Qaramada Midoobay oo ah in ay sare u qaadaan xushmaynta guud, ilaalinta xuquuqda iyo xorriyadda aadamaha,

Iyada oo la garwaaqsanayo, in qof kasta uu waajib ka saaran yahay dadka kale iyo bulshada uu la nool yahay loogana baahan yahay inuu fuliyo waajibka ka saaran dhawrista iyo adkaynta xuquudan lagu aqoonsaday heshiiskan caalamiga ah,

*Dowladuhu waxa ay ku heshiiyeen qodobadan soo cocda:*

# QEYBTA I

*Qodobka 1aad*

1. Dhammaan dadyowga duniddu waxay xaq u leeyihiin in ay si madaxbannaan aayahooda uga tashadaan, iyadoo la tixgelinayo arrintaas waxay xaq u leeyihiin in ay si madaxbanaani ah u maamulaan arrimahooda siyaasadda, horumarkooda dhaqaale, bulsho iyo dhaqan.

2. Dhammaan dadyowga dunidu, si ay u gaaraan ujeedooyinkooda gaarka ah, waxay ay xaq u leeyihiin inay si madaxbanaan u maamushaan hantidooda iyo khayraadkooda dabiiciga ah iyaga oon waxna u dhimayn waajibaadka ka dhasha iskaashiga dhaqaalaha adduunka ee ku dhisan mabda'a is dhaafsiga iyo wax wadaqabsiga adduunka iyo sidoo kale aan wax loo dhimin xeerka caalamiga ah. Marnaba mabannaano in cid laga hor istaago hab noleleedka u gaarka ah.

3. Waxaa laga rabaa dowladaha saxiixay heshiiskaan oo ay ku jiraan dowladaha gacanta ku haya maamulka goballo kale oon haysanin madaxbannaani buuxda, iyo kuwa ku jira wisaayada in ay ka shaqeeyaan xaqiijinta xaquuqda aaya-ka-talinta iyo dhawrista xaqaas si waafaqsan qodobada heshiiska Qaramada Midoobay.

# QEYBTA II

*Qodobka 2aad*

1. Dowlad kasta oo saxiixday heshiiskan waxay ballan qaadaysaa in ay xushmaynayso, kuna dadaali doonto in ay xuquuqaha heshiiskan u saamaxdo dhammaan dadka ku nool dalkeeda una dabaqdo si aan kala sooc lahayn oo aan loo fiirinayn isir, midab, lab ama dhadig, diin, aragti siyaasadeed ama mid kale, qowmiyad ama bulsho, hanti ama abtirsiimo IWM.

2. Dowlad walba oo heshiiskan dhinac ka ah haddii aysan horay u lahayn qaab sharciyeed ama hab kale oo lagu ilaalinayo dhaqangelinta xuquuqdaan, waxay ballanqaadaysaa in ay qaadayso tallaabooyin lagu hirgelinayo qodobada heshiiskan ku qoran si waafaqsan dastuurkeeda iyo qodobada heshiiskan ku qoran, ha-noqdaan tallaabooyinkaasi kuwa wata qaab sharci ama qaabkale.

3. Dowlad kasta oo heshiiskan dhinac ka ah waxay ballan qaadaysaa:

(a) In ay diyaariso hab-raac wax tar leh oo loogu garnaqo cid kasta oo lagu xadgudbo xaquuqdiisa ama madaxbanaanidiisa lagu aqoonsaday heshiiskan xataa haddii xadgudubkaas ka soo fulo cid rasmi ahaan wadata magac dowladeed;

(b) Waana in ay dowladdu u heshaa cid kasta oo dulmi ka cabanaysa hay'ad garsoor, mid maamul, sharci u gaar ah ama hay'ad kale oo sharciga waddankaasi awood siinayo, iyada oo mar walba la raadinayo suuragelidda garnaqa garsoorka;

(c) Sidoo kale waa in la hubiyo in hay'adaha ku shaqada leh ay fulinayaan xukunnada soo baxa markii uu sharcigu ballanqaado.

*Qodobka 3aad*

Dowladaha saxiixay heshiiskan waxa ay ballan qaadayaan in ay dhawrayaan sinnaanshaha ragga iyo dumarka ee dhammaan wixii xuquuqa oo ay leeyihiin kuna cad heshiiskan ha ahaato mid madani ah ama mid siyaasadeed.

*Qodobka 4aad*

1. Hadii ay jiraan xaalado degdeg ah oo khatar gelinaya nolosha umadda iyo jiritaankeeda, si rasmi ahna loogu dhawaaqo, sharcigu waxa uu u fasaxayaa dowladaha qaybta ka ah heshiiskan in talaabooyin kooban oo ay ku moodayaan, kuna laalaayaan waajibaadka ku cad heshiiskan, waxaase la rabaa in aan tallaabooyinkaasi ka hor imaanaynin xeerka caalamiga ah, waana in aysan ka imaanin halkaas kala faquuqid ku salaysan dadka isirkooda, midabkooda, nooca lab ama dhadig, luqadahooda, diintooda, iyo bulsha ahaantooda meesha ay ka soo jeedaan.

2. Qodobkan marnaba ma ogolaanayo in la laalo ama jabiyo qodobada 6, 7, 8, (faqrada 1, 2) 11, 15, 16, iyo 18.

3. Waxaa looga baahanyahay dowlad kasta oo dhinac ka ah heshiiskan kana faa'iidaysatay qodobka xaqa ka-moodida ama laalida, in ay si degdeg ah u ogaysiiso dowladaha kale ee kula jiro heshiiskan qodobada ay ka baxday iyo sababaha ay uga baxday iyada oo arrintaas u maraysa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Sidoo kale waa in ay lasocodsiiso marka xaaladaas dhammaato, waana in ay u marto isla wadadii hore.

*Qodobka 5aad*

1. Heshiiskan kuma jiro wax qodob ah oo sheegaya ama u bannaynayo dowlad, koox ama qof gaar ah, fasiraad ah in ay u bannaan tahay samaynta fal ama in uu ku dhaqaaqo tallaabo looga gol leeyahay in wax loogu dhimo xaquuqda iyo xorriyaadka lagu aqoonsaday heshiiskan ama lagu yareynayo baahinta awooddiisa.

2. Laguma soo rogi karo cabburin ama is hortaagid wax ka mid ah xuquuqaha asaasiga ah ee bini'aadmiga ee la aqoonsan yahay ama ka jirta waddamada qaybta ka ah heshiiskan, iyada oo la raacayo xeerarka, heshiisyada, nidaamyada, ama dhaqammada jireenka ah ama iyada oo marmarsiinyo looga dhigayo in heshiiskani uusan aqoonsanayn xuquuqahaas ama aqoonsigiisu kooban yahay.

# QAYBATA III

*Qodobka 6aad*

1. Xaqa noloshu waa mid qof kastaba uu leeyahay, qaanuunkuna waa in uu ilaaliyaa xaqaas. Mana banaana in qofna lagu xadgudbo nolosha uu xaqa u leeyahay si cadaalad darro ah.

2. Dowladaha aan wali laga joojin ciqaabta toogashada waa in aysan xukumin ciqaab dil ah haddii aysan jirin fal danbiyeed aad u adag oo khatar ah kuna cad sharciga kadhaqan gashan waddanka waqtiga fal danbiyeedku dhacayo, waana in uusan ka hor imaanayn qodobada heshiiskan iyo heshiisyada xaraantinimaynayo danbiyada xasuuq-wadareedka ah ee ciqaabta adagi ka taallo, mana la ogolo fulinta ciqaabtan hadii aan la helin xukun kama danbays ah oo ka soo baxay maxkamaddii iska lahayd.

3. Mar haddii uu yahay dilku fal danbiyeed xasuuq-wadareed ah, waxaa si cad loo garan karaa in aan qodobkan laga fahmaynin wax tusinaya in loo ogol yahay dowlad saxiixday heshiiskan in ay iska fogayso wax ka mid ah waajibaadka ka saaran dhawrista qodobada heshiisku xarrimayo fal danbiyeedka iyo ciqaabta xasuuq wadareedka ah.

4. Qof kasta oo lagu xukumay dil toogasho ah waxa uu xaq u leeyahay in uu dalbado cafis gaar ah ama in loo badalo ciqaabta, mar walbana waxaa bannaan in la bixiyo cafis guud, cafis gaar ah, ama in loo badalo ciqaabtaas.

5. Sharcigu ma ogolaanayo in lagu xukumo ciqaab dil ah faldanbiyeed uu galay qof ka yar siddeed iyo toban sano, sidoo kale ciqaabtan laguma fuliyo haweenka uurka leh.

6. Qodobkan lagama fahmayo wax cadaynaya ama u banaynaya dowladaha saxiixay heshiiskan in dib loo dhigo ama la joojiyo baabi' inta ciqaabta dilka ah.

*Qodobka 7aad*

Ma banaano in qofna la marsiiyo jirdil, hab dhaqan xun, ciqaab adag oo ka baxsan bani'aadaninimada, ama wax u dhimayo karaamada, waxaana si gaar ah loo mamnuucay in lagu sameeyo wax tijaabo caafimaad ah ama in lagu fuliyo qalliin qof aan laga haynin raali ahaasho buuxda.

*Qodobka 8aad*

1. Ma banaano in qof si addoonsi ah loola dhaqmo, waana sharci darro addoonsigu iyo ka-ganacsiga addoonsiga si walbo oo ay noqoto arrintaas.

2. Sidoo kale waa sharci darro in qof lagu qasbo addoonsi.

   (a) Waa sharci darro in qof lagu qasbo in uu aqbalo wax laga yaqyaqsoodo, ama shaqo lagu qasbo;

(b) Looma qaadan karo faqrada 3 (a) in ay diidayso in la fuliyo ciqaabta shaqa culus oo ay xukuntay maxkamadda iska leh sida ka jirta waddamo badan oo leh xeer ciqabeed noocaa ah;

(c) Micnaha faqradan lagama qaadan karo oraahda (shaqo qasab ah) in ay ku jiraan:

(i) Shaqada iyo adeegga aan loola jeedin faqrad-hoosaadka (b) waxyaabaha lagu soo rogo sida caadiga ah qofka lagu soo xiro go'aan maxkamadeed, mid sharciyeed, ama qofka laga soo saaray go'aan, laakiin kadib lagu sii daayay shuruudo;

(ii) Adeeg kasta oo leh muqaal dhaqan milateri ama shaqa qaran oo sharcigu kusoo rogo dadka kacarara shaqada gurmadka milatari sida waddamada qaarkood ka jirta;

(iii) Adeeg kasta oo xaalad degdeg ah ka dhashay, ama shidda ku habsatay umad nolosheed, iyo barwaaqadeed;

(iv) Shaqa kasto oo leh qaab ah waajibaadka madaniga ah.

*Qodobka 9aad*

1. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu helo xornimo, qof ahaan tiisuna u nabadgasho, qofna lama joojin karo, lamana xiri karo si caddaalad darro ah, qofna lagama xayuubin karo xorriyaddiisa haddii aysan jirin sabab sharci ah, oo waafaqsan hab-raaceeda.

2. Waxaa waajib ah in qaf kasto oo loo soo qabto sabab sharci ah in markiiba laga wargeliyo sababta loo soo qabtay, waana in si degdeg ah loo ogeysiiyaa eedda loo haysto.

3. Qofka la soo qabtay ama la soo xiray waa in si degdeg ah loo horgeeyaa garsoore ama ciddii sharcigu siiyo qabashada howlaha garsoorka, wuxuuna xaq u leeyahay in waqti macquul ah uu helo xukun ama la siidaayo, mabda ahaan qasab ma ahan xiritaanka qofka maxkamad sugaha ah, ee waxaa la ogol yahay in lagu siidaayo damaanad, si loo hubiyo in la horkeeno maxkamada mar kale inta dacwaddu socoto, ama in lagu fuliyo haddii loo baahdo xukun.

4. Qof kasta oo looga qaado xornimadiisa qabasho, ama soo xirid waxa uu xaq u leeyahay in kayska loo gudbiyo maxkamada si loo hubiyo sharcinimada xiritaankiisa, waana in horay laga sii daayo haddii xiritaanku yahay sharci darro.

5. Qof kasta oo la kulma xiritaan ama qabasho sharci darro ah waxa uu xaq u leeyahay in uu helo magdhaw.

*Qodobka 10aad*

1. Qof kasta oo laga xayuubiyay xorriyaddiisa waa in loola dhaqmaa si bini'aadanimo leh, waana in la dhawro karaamada qofka uu asalka u leeyahay:

2. Waxaa habboon in la kala saaro eedaysanaha iyo qofka xukun ku dhacay haddii aysan jirin duruuf arrinkaas keentay, cid kastana waxaa lagula dhaqmaa wixii ku habboon xaaladdiisa, iyaga oo loola dhaqmayo in ay yihiin dad aan wali la xukumin;

3. Waa in la kala saaro eedaysanayaasha da'yarta ah iyo kuwa qaan gaarka ah, waana in sida ugu suuratagalnimo badan loogu wareejiyaa garsoor kala saara gartooda.

4. Nidaamka xabsiyadu waa in uu kula dhaqmaa qofka xabisan dhaqan looga dan leeyahay hagaajintooda iyo dhaqan celintooda, waana in lakala saaro da'yarta iyo dadka kale waana in loola dhaqmaa sida ku habboon da'dooda iyo xaaladooda sharcinimo.

*Qodobka 11aad*

Qofna looma xiri karo kaliya in uu awood u yeelan waayay in uu ka soo baxo mas'uuliyad heshiis madani ah.

*Qodobka 12aad*

1. Qof kasta si sharci ah gudaha dalka wuxuu xaq u leeyahay in uu u kala goosho gudihiisa, wuxuuna xor u yahay in uu doorto meesha uu dagayo.

2. Qof kasta waxa uu xor u yahay in uu isaga baxo waddan kasta xataa haddii uu yahay kiisa.

3. Xuquuqda aan soo sheegnay kuma xirno wax shuruud ah oo aan ka ahayn tan sharcigu caddeeyay oo ah midda aan looga maarmin ilaalinta nidaamka qaranka, midka guud, faya dhowrka, asluubta guud iyo xorriyadda iyo madaxbannaanida dadka kale ahna mid la jaanqaadaysa xuquuqda kale ee lagu aqoonsaday heshiiskan.

4. Qofna lama duudsin karo xaqa uu u leeyahay in uu galo waddankiisa.

*Qodobka 13aad*

Waa sharci darro in qof ajnabi ah laga saaro waddan ka mid ah saxiixayaasha heshiiskan haddi uu si sharci ah ku joogo, haddaysan ku imaan fulinta go'aan sharciyadeed. Waana in qofka lala socodsiiyaa sababaha keeni kara masaafurinta, sidoo kale waa in kiiskiisa la horgeeyo maxkamada leh ama cid ay u magacawdo arrintaas haddii aysan jirin khatar ammaanka qaranka ku imaan karta, waana in loo ogolaado in uu wakiisho cid u matasho maxkamada horteeda.

*Qodobka 14aad*

1. Dhammaan dadku waa u siman yihiin garsoorka hortiisa qof kasta marka la dhagaysanayo eedda loo soo jeediyay ama marka dacwad madani ah kataalo waajibaadkiisa iyo xuquuqdiisa wuxuu xaq u leeyahay in kiiskaas u noqdo mid hela caddaalad u furan dhegaysiga dadwaynaha laguna qaado maxkamada leh kiiska oo leh madax bannaani, dhexdhexaadnimo laguna dhisay hab sharci ah. Waxaase la ogol yahay in loo diido dadwaynaha in ay ka soo qayb galaan maxkamadda intay socoto ama qaar ka mid ah sababo dhanka anshaxa ah, nidaamka guud ama nabad galyada qaranka ku saabsan waddamada ah dimoqaraadiga, ama arrimo la xiriira xushmada u gaarka ah dhinacyada dacwaddu ka dhaxayso. Sidoo kale waxyaabaha si gaar ah maxkamadu u aragto in ay wax u dhimayaan hab socodka caddaalada haddii maxkamaddu noqoto mid furan mar walbana waa in lagu soo saaro xukunka dacwad ciqaabeedka iyo ka madaniga ahba meel muuqata, haddii arrinta xukunkaasi aysan ku lug laheyn wax muuqaalka dhibayo ama dacwaddu aysan ku saabsanayn khilaaf u dhaxeeya laba lammaane ama aysan ku saabsanayn dardaaran caruur.

2. Eedaysane kasta oo loo haysto in uu galay dambi waa in loo arkaa danbi laawe inta danbigiisa looga caddaynayo si sharci ah.

3. Qof kasta oo loo haysto danbi marka dacwadiisa la dhegaysanayo waxa uu xaq u leeyahay si sinaansho buuxda leh damaanadqaadyadan ugu yar oo ah:

(a) In si degdeg ah oo faahfaahsan iyo luqad la fahmi karo loogu ogeysiiyo waxa ay tahay eedda loo haysto iyo sababaheeda;

(b) In la siiyo waqti iyo howl fududayn ugu filan in uu diyaarsado is difaaciddiisa iyo in uu la xiriiro qareenkiisa;

(c) In la maxkamadeeyo iyada oo aan marna dib loo dhigayn sabab la'aan;

(d) In si fool ka fool ah loo xukumo in uu iskii isu difaaco ama qareenkiisa difaaco, waxaa kale oo uu xaq u leeyahay in lala socodsiiyo in uu heli karo qof difaaca hadduusan haysan cid difaacda, waana in maxkamaddu soo saarto xukun in uu helo qareen haddii cadaaladu ku jirto sidaas. Iyada oo aan la saarin wax qarashaad ah haddii uusan laheyn awood uu ku bixiyo lacagta qareenka;

(e) In loo ogolaado in uu isagu nafsad ahaantiisa su'aalo waydiin karo markhaatiga ama cid kale u waydiiso. Iyada oo loo fasaxayo in uu keensado markhaati lid ku ah waxa loo haysto oo la mid ah markhaatiga ay soo gudbiyeen dacwad oogayaashu;

(f) In loo helo turjumaan hadii uusan fahmi karin ama uusan ku hadli karin luqadda loo adeegsanayo maxkamadda;

(g) In aan lagu qasbin in uu ku markhaati furo ama uu isku qiro dambi.

4. Haddii arrinta taalla ay ku saabsan tahay da'yar waxaa waajib ah in habka maxkamadda la waafajiyo dhallintooda lagana dhigo mid sahlaya dhaqancelintooda.

5. Qof kasta oo lagu soo eedeeyay in uu gaystay fal dambiyeed waxa uu xaq u leeyahay in uu u dacwoodo maxkamadda sare si dib u eegis loogu sameeyo go'aanka eedeyntiisa iyo ciqaabta lagu xakumay.

6. Haddii xukun eedayn ah oo kama dambays ah soo baxo, kadibna la buriyo xukunkaas, ama uu soo baxo cafis u gaar ah oo ku dhisan dhacda cusub, ama dhacda la helay mar dambe oo wadata caddeyn hubaal ka dhigaysa in uu dhacay xukun qalad ah waxaa waajib ah in qofkaas la siiyo magdhaw waafaqsan xeerka haddii aysan caddaan in uu leeyahay mas'uuliyadda qarinta dhacdadaas waqtigii ku habbonaa si buuxda ama qayb ka mid ah mas'uuliyaddaas.

7. Waa sharci darro in qof la maxkamadeeyo mar kale ama loo ciqaabo fal dambiyeed horay loogu soo eedeeyay ama xukun kama dambays ah oo waafaqsan xeerka iyo habraaca waddan kasta leeyahay looga beri yeelay.

### *Qodobka 15aad*

1. Qofna laguma soo eedayn karo fal ama diidmo fal sababtiis, haddii waqtiga la galay falkaas uusan aheyn danbi ku cad shuruucda waddanka ama kuwa adduunyada, sidoo kale laguma xukumi karo ciqaab ka culus tan shaqeynaysay markii faldanbiyeedka la galayay, haddiise la soo saaro kadib markii fal dambiyeedka la galay xeer caddeynaya ciqaab ka fudud tii hore, waxaa waajib ah in eedaysanuhu ka faa'iido fudaydkaas.

2. Qodobkan kamid ma'aha wax dhibaata ku ah in qof loo ciqaabo fal ama diidmo fal oo ahaa markii la galayay dambi si waafaqsan mabaadii'da xeerarka guud ee ummaduhu wada aqoonsan yihiin.

### *Qodobka 16aad*

Qof kasta meel walba ha joogee wuxuu xaq u leeyahay in loo aqoonsado qofnimadiisa qaanuunka hortiisa.

### *Qodobka 17aad*

1. Ma bannaana in qof si sharci daro ah loogu xad gudub ah ama la farageliyo arrimihiisa gaarka ah sida arrimaha qoyskiisa, gurigiisa iyo fariimihiisa, mana lagu qaadi karo olole sharci darra ah oo taabanaya sharaftiisa iyo sumcadiisa.

2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in sharcigu ka ilaaliyo faragelintaa iyo weerarkaas oo kale.

*Qodobka 18aad*

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu u ahaado xor fikirkiisa, damiirkiisa iyo diintiisa sida in uu xor u yahay in uu diin yeesho, inuu xor u yahay in uu galo diinta ama caqiidada uu doonayo, in uu xor u yahay in uu diintiisa ku muujiyo cibaado iyo muujinta calaamadaheeda. Dabaqitaankeeda iyo baaritaankeeda isaga oo kaligii ah ama isaga oo la jooga dadyaw kale iyo in uu ku cibaadaysto dad hortii ama isaga oo kaligii ah.

2. Qofna laguma sameyn karo caga jugleyn iyo qasab wax u dhimaya diintiisa in uu ilaashado ama uu qaato diinta ama caqiidada uu rabo.

3. Lama xadidi karo xorriyadda qof uu u leeyahay in uu muujiyo diintiisa ama caqiidadiisa si ka baxsan sida sharcigu waajib ka dhigay ama danta ilaalinta nabadgelyada qaranka, nidaamka iyo kala dambeynta guud, caafimadka guud, anshaxa guud, ama xuquuqda iyo madax bannaanida lagama maarmaanka ah.

4. Dowladaha sixiixay heshiiskan waxay ku ballanqaadaayaan inay dhawrayaan xorriyadda waalidka ama kuwa haya masuuliyada waalidnimo u leeyihiin barbaarinta caruurtooda sida ay iyagu u rabaan xag diin iyo xag dhaqanba.

*Qodobka 19aad*

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu qaato aragti iyadoon la caburin.

2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu sheego waxa uu rabo, waxana uu xor u yahay in uu raadsado cilmi kala duwan oo uu ku qaato fikirro kala duwan iyo in uu ugu gudbiyo si aan soohdin laheyn dadyow kale isaga oo adeegsanaya qaab qoraaleed, qaab madbacadeysan, qaab tiknika ah ama qaab kale oo uu jecel yahay.

3. Xuquuqda lagu soo caddeeyay faqrada 2-aad ee qodobkan waxay wadataa waajibaad iyo mas'uuliyaad u gaar ah, sidaas darteed waxaa la ogol yahay in lagu xiro shuruud gaar ah oo ku astaysan sharciga ahna mid lagama marmaan u ah:

   (a) Dhawrista xuquuqda iyo sumcadda dadka kale;

   (b) Dhawrista nabadgelyada qaranka, kala danbaynta guud, fayo-dhawrka guud iyo asluubta wanaagsan.

*Qodobka 20aad*

1. Wax kasta oo ah borobagaando ama xayaysiin dagaal ah sharciga waa ku xaaraan.

2. Wacyi gelin kasta oo ku saabsan nacayb kuna salaysan qowmiyad, midab kala sooc, arrima diimeed oo keenayo dhiirigelin midab kala sooc, cadaawad, iyo gacan ka hadal sharciga waa ku xaaraan.

*Qodobka 21aad*

Xaqa kulamada leh qaab nabadeed waa mid la aqoonsan yahay, mana banaana in lagu sameeyo wax xanibaad ah oo aan sharciga waafaqsanayn, isla markaana aanay xanibaadu lamahuraan u aheyn bulshada dimuqraadiga ah iyo sugida nabadgelyada qaranka, amaanka guud, faaya dhowrka guud, anshaxa iyo asluubta wanaagsan, ilaalinta xuquuqda iyo madaxbannaanida dadyowga kale.

*Qodobka 22aad*

1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu la samaysto dad kale ururo, sidoo kale wuxuu xaq u leeyahay dhisidda iskaashatooyin iyo in lagu biiro karo si uu u ilaashado danahiisa.

2. Ma bannaana in wax xanibaad ah la saaro ku dhaqanka xaqaan haddii aan xeerku caddeyn xannibaadaas, isla markaana aanay xanibaadu lagama maarmaan u ahayn bulshada dimuquraadig ah si ay u ilaashadaan nabadgelyada qaranimo, badbaada guud, kala dambaynta guud, ilaalinta faaya dhowrka, anshaxa wanaagsan, ilaalinta xuquuqda iyo madaxbanaanida dadka kale. Qodobkaan ma diidayo in la saaro xannibaada sharciyada ciidamada milatariga iyo kuwa booliiska ee ku aadan xoriyaddan.

3. Qodobkaan kuma jiro wax tusinaya in loo ogol yahay "dowladaha ku jira heshiiska Ururka Shaqaalaha Adduunka ee 1948 ee ku saabsanaa madaxbannaanida iskaashatooyinka iyo ilaalinta xaqa aasaasida iskaashatooyin" in la qaadan karo tallaabooyin xaga sharciga ah ama dhaqangelin sharci ah, taasoo wax u dhimaysa damaanadqaadka lagu caddeeyay heshiiskaas.

*Qodobka 23aad*

1. Qoysku waa midaynta iyo aruurinta dabiiciga ah ama saldhigga u ah bulshada, qoyskuna wuxuu xaq u leeyahay in uu helo ilaalinta bulshada iyo dowladaba.

2. Ragga iyo dumarku waxay xaq lawada aqoonsan yahay u leeyihiin, laga billaabo marka ay gaaraan sanadka guurka in ay aroosaan oo ay dhistaan qoys.

3. Heshiiska guurka/meharku sharci ma aha haddii aan la helin ogolaansho buuxa oo aan leheyn jujuub kana yimaada labada dhinac oo guurku ka dhaxeeyo.

4. Dowladaha heshiiskaan dhinaca ka ah waa in ay qaadaan tallaabada ku habboon si loo hubiyo sinnaanshaha labada lammaane xagga xuquuqda iyo waajibaadkaba marka guurku dhacayo, marka ay is qabaan iyo marka ay kala tagayaan. Haddii ay kala tagaanna waxaa waajib ah in la qaado tallaabooyin lagu xaqiijinayo ilaalinta ay u baahan yihiin carruurta joogta.

*Qodobka 24aad*

1. Dhallaan kastaa wuxuu xaq ugu leeyahay qooskiisa, bulshadiisa iyo dowladda in ay qaadaan tallaabooyinka lagama marmaanka u ah ilaalinta qofkaas iyo ilmaha, iyada oo aan lagu sameyn kala faquuqid xagga isirka ah, midabka, lab, dhadig, afka, diin, qowmiyada uu ka dhashay, bulshada, dhaqaalaha iyo abtirsiinyada.

2. Waxaa waajib ah in la diiwangeliyo dhallaan kasta isla marka uu dhasho, waana in loo bixiyaa magac lagu yaqaanno.

3. Dhallaan kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo shahaado dhalasho.

*Qodobka 25aad*

Qof kasta oo muwaadin ah iyada oo aan lagu sameyn kala faquuqidda lagu caddeeyay qodobka 2-aad, wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo fursad uu ku helo xuquuqda soo socota iyada oo aan lagu xirin wax aan caqli gal aheyn:

(a) In uu ka qayb qaato maamulka arrimaha qaranka si toos ah ama si dadban oo ku timid wakiil lagu soo doortay si xornima ah;

(b) In uu wax doorto ama la doorto, doorasho u dhacayso si sharaf leh oo dadku u siman yihiin lana qabto xilli joogto ah iyada oo la dhiibanayo cod qarsoodi ah oo lagu muujinayo rabitaanka cod bixiyayaasha;

(c) In loo sahlo loona bixiyo si loo wada siman yahay fursadaha shaqo qorista ee waddankiisa.

*Qodobka 26aad*

Dadku dhammaan waa u siman yihiin xeerka hortiisa iyo in sharcigu ilaaliyo. Sidaa awgeed waxaa waajib ah in xeerku mamnuuco kala faquuqid kasta iyo in xeerku damaanad qaado dadka dhamaantood si siman oo wax tar leh in looga ilaaliyo kala faquuqida si walba oo ay ku timaado, isir, midab, lab/dhedig, luqad, diin, aragti ah mid siyaasadeed ama midkale, qowmiyad, bulsho, dhaqaale, abtirsiimo iyo qaab walbo oo la mid ah.

*Qodobka 27aad*

Dowladaha ay ku nool yihiin dadyowga looga tirada badan yahay xaga asalka, diinta, ama afka, dadkaas lagama hor istaagi karo inay samaystaan dhaqanka u gaarka ah, inay muujiyaan ama ay ku dhaqmaan diintooda iyo inay adeegsadaan afkooda.

# QEYBTA IV

*Qodobka 28aad*

1. Waxaa la abuurayaa guddiga lagu magacaabo guddiga u dooda xuquuqda banii'aadamka (waxana lagu magacaabay sida ku cad heshiiskaan (Guddi) wuxuuna ka kooban yahay guddigaan sideed iyo toban xubnood oo qabanaya hawlaha soo socota:

2. Guddigaan wuxuu ka kooban yahay muwaadiniinta wadamada heshiiskaan qaybta ka ah oo sharaf weyn ku leh bulshada dhexdeeda laguna yaqaan inay ku takhasuseen arrimaha xuquuqda bani'aadamka, waxana wanaagsan in laga qaybgeliyo dad leh aqoon iyo khibrad sharci.

3. Xubnaha gudigaan waxaa lagu soo xulayaa doorasho waxayna ku shaqaynayaan magacooda gaarka ah.

*Qodobka 29aad*

1. Waxaa lagu dooranaa xubnaha guddiga cod qarsoodi ah oo laga soo xulayo liiska dadka buuxiyay shuruuda lagu caddeeyay qodobka 28-aad oo ay u soo sharaxeen kamid noqoshada gudigaan dowladaha xubnaha ka ah heshiiskaan.

2. Waxaa loo ogol yahay dowlad kasta oo heshiiskan qayb ka ah in ay ka soo sharaxdo dadkeeda wax aan ka badnayn laba qofood.

3. Waxaa bannaan in hal qof lasoo sharaxo wax ka badan hal mar.

*Qodobka 30aad*

1. Doorashada koobaad waxaa laqabanaa mudda aan ka badnayn lix bilood marka dhaqangelinta heshiiskani billaabanto.

2. Ugu yaraan afar bilood kahor intaan doorashada xubinta kursigeedu bannaanaaday bilaaban sida ku cad qodobka 34-aad, wuxuu gudbinaa xoghayaha Qaramada Midoobay warqad uu uga codsanayo dowladaha qaybta ka ah heshiiskaan inay soo gudbiyaan saddex bilood gudahood magacyada cida uga qayb gelayso gudigaan.

3. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu soo bandhigaa liiska murashaxiinta oo u habaysan sidaan, tartiibta magacyadooda si alfabeeta ahaan ah, in la sheego dowladi soo sharaxday, kadibna waxaa liiskaan loo gudbihaa ugu yaraan bil ka hor waqtiga doorashada dowladaha qaybta ka ah heshiskaan.

4. Waxaa lagu dooranaa xubnaha guddigaan isku imaad uu isugu yeerayo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay oo ay qabsadaan dowladaha qaybta ka ah heshiiskaan. Isku imaadkasi

kooramkiisu waa soo xaadirida sedax duleel laba meelood wakiilada dowladaha heshiiskaan qaybta ka ah, waxaana guusha xubinnimada helaya cidii ku guulaysato codadka ugu badan ama haldheeri codadka ay dhiibteen wakiilada dowladaha heshiiskan qaybta ka ah oo jooga goobta codbixinta isla markaan codkooda dhiibtay.

*Qodobka 31aad*

1. Ma bannaana in dowladu guddiga ku darsato waxkabadan halqof.

2. Marka xubnaha gudiga ladooranaayo waxaa la ilaalinayaa habka cadaalada wax ku wadaagidda jogqoraafiyada aduunka iyo in ay kawada muuqdaan dhammaan umudaha leh ilbaxnimada facawayn iyo nidaamyada sharciga ah ee ugu waawayn aduunyada.

*Qodobka 32aad*

1. Mudada xubnaha gudiga ladoortay shaqaynayaan waa afar sano, waxaase banaan in lasooceliyo doorashadooda hadii mar kale lasoo rashaxo laakiin madaxtinimada sagaal ka mid ah Gudiga lagu doortay doorashada koobaad waxay dhamaanaysaa labo sano kadib, waxaana lagu sheegayaa sagaalkaas isla markay dhacdo doorashada koobaad waana in gudoomiyaha fadhiga sida ku cad faqrada 4-aad ee qodobka 30-aad uu ku sooxulo qorituur magacyadooda.

2. Hadii mudadu dhamaato loona baahdo doorasho kale, waxay kusoconeysaa si waafaqsan qodobada aan soo dhaafnay ee ku jiray qaybta (IV) ee heshiiskaan.

*Qodobka 33aad*

1. Haddii xubin katirsan guddiga uu qabsan waayo shaqadiisa sabab aan aheyn maqnaasho kooban, isla markaana ay xubnaha guddiguna ay isku aragti ka yihiin, guddoomiyaha Guddiga wuxuu si deg deg ah u gaarsiinayaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Xoghayaha Guud ayaa isla markaasi ku dhawaaqaya in uu bannaan yahay kursigaas.

2. Haddii xubin ka mid ah guddiga ay ku timaado dhimasho ama uu sameeyo shaqa kategis, waa in gudoomiyaha gudigu si deg deg ah ula socod siiyaa arinkaas Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay isla markaasna Xoghayaha Guud wuxuu ku dhawaaqayaa inuu banaanyahay kursigaas laga billaabo taariikhda geerida xubintaas ama taariikhda shaqa kategista ay bilaabanto.

*Qodobka 34aad*

1. Haddii lagu dhawaaqo in kursi bannaanaaday sida ku qayaxan qodobka 33-aad, oo xubinta in labedela la rabana waqtigeedu uusan dhamaaneyn mudo lex bilooda laga bilaabo ku dhawaaqista banaanaashada kursiga, Xoghayaha Guud ee Qaramda Midoobay wuxuu gaarsiinayaa dowladaha qaybta ka ah heshiiskaan, si ay mudo laba bilood gudohooda u soo gudbiyaan laba musharax si waafaqsan qodobka 29 si loo buuxiyo kursiga banaanaaday.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu soo bandhigaa liiska murashaxiinta, oo u habaysan sidaan, tartiibta magacyadooda si alfabeeto ahaan ah, in la sheego dowladii soo sharaxday, kadibna waxaa liiskaan loo gudbinayaa uguyaraan bil kahor waqtiga doorashada dowladaha qaybta ka ah heshiiskan, kadibna waxaa la qabanaa doorasho si loo buuxiyo kursiga bannaan iyadoo ladhaqan gelinayo waxyaabaha gaarka ah ee kucad qaybtaan ka midka ah heshiiskaan.

3. Qofka loo doortay gudiga si uu u-buuxiyo kursi bannaanaaday si waafaqsan qodobka 33aad, wuxuuna qabanaa howlaha xubinimada inta ay ka dhamaanayso muddada xubinnimada Guddiga ee uu buuxiyay sida ku cad qodobkaas.

*Qodobka 35aad*

Xubnaha gudigu waxay qaadanaayaan kadib markay isku waafaqaan Golaha Guud ee Jimciyadda Quruumada ka dhexaysa gunno laga bixinayo qasnada Qaramada Midoobay iyadoo la ilaalinayo shuruuda ay ka dhigeen Golaha Guud, lana siinayo fiiro gaar ah mas'uuliyaadka saaran gudigaas.

*Qodobka 36aad*

Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu diyaarinayaa shaqaale iyo waxkasta oo fududaynaya hawlaha gudiga si uu uqabsado howlaha loo idmaday sida ku cad heshiiskan.

*Qodobka 37aad*

1. Waa in Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ugu yeeraa gudiga inay kalfadhigooda koobaad ku qabsadaan xarunta Qaramada Midoobay.

2. Kal-fadhiga koowaad kadib guddigu waxay isku imaanaayaan waqtiyaasha ku cad xeer hoosaadkooda.

3. Fadhiyada caadiga ah ee guddigaan waxaa lagu qabtaa xarunta Qaramada Midoobay ama xafiiska Qaramada Midoobay ee Jeneva.

*Qodobka 38aad*

Mid kastoo ka mid ah xubnaha guddiga inta uusan qaban xilka waa in uu ku ballanqaadaa meel fagaare ah in uu ku gudanayo shaqadiisa si sharaf iyo eex la'aan ah.

*Qodobka 39aad*

1. Guddigu waxay u dooranayaan maamulka xafiisyada mudda laba sano ah, waxaana bannaan in mar kale la soo doorto.

2. Guddigu waxay iskood u dhiganayaan xeer hoosaadkooda, laakiin waa in ay ku darsadaan labadan xeer-hoosaad ee hoose:

(a) Kooramku wuxa uu ku buuxsamaayaa inay isku yimaadaan laba iyo toban xubnood;

(b) Go'aanada gudiga waxaa lagu qaataa codka inta xubin ee isku timid dhinaca uu u bato/ cod-dheeri.

*Qodobka 40aad*

1. Dowladaha qaybta ka ah heshiiskan waa inay ku ballanqaadaan inay soo gudbinayaan warbixinno ka hadlaya tallaabooyinka ay qaadeen si loo dhaqangeliyo xuquuqdan la aqoonsanyahay, iyo horumarka laga sameeyay helitaanka xuquuqdan:

(a) Hal sano gudihiis laga bilaabo marka dowladuhu dhaqangeliyaan heshiiskan;

(b) Iyo markastoo guddigu ka codsado arinkaas.

2. Dhammaan warbixinada waxaa loo gudbinayaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, isaguna wuxuu u gudbinayaa guddiga si uu u eego, waana in lagu sheego warbixinta wax kasta oo imaan kara oo dhibaatooyin ah oo saamayna ku leh fulitaanka go'aanada heshiiskan.

3. Kadib marka uu latashado gudiga Xoghayaha Guud ee Qaramada Middoobay wuxuu leeyahay inuu siiyo wakaaladaha kale ee arintan ay khusayso min hal nuqul mid kasta oo ka mid ah warbixinadaas.

4. Gudigu wuxuu ku samaynayaa aqrin warbixinada laga soo gudbiyay dowladaha qaybta ka ah heshiiskan, sidoo kale waa in guddigu siiyaa dowladahan warbixinada ay diyaariyeen, iyo aragtida guud ee ay qabaan. Sidoo kale Gudigu wuxuu u gudbinayaa Golaha Dhaqaalaha iyo Bulshada (Economic and Social Council) aragtiyada oo ay la socdaan nuqulo ka mid ah warbixinada ay ka heshay dowladaha qaybta ka ah heshiiskan.

5. Waxa ay xaq u leeyihiin dowladaha qeybta ka ah heshiiskan inay gudiga u gudbiyaan wixii faallo ah ee ku saabsan aragtidooda si waafaqsan faqrada 4aad ee qodobkan.

*Qodobka 41aad*

Dowlad kasta oo qayb ka ah heshiiskan waxay leedahay awood ah inay ku baaqdo waqti kasta si waafaqsan qodobkan inay aqoonsan tahay in gudigan sharci u leeyahay inuu qabto oo baaris ku sameeyo cabashooyin sheegaya in dowlad qayb ka ah heshiiskan ay ka cabanayso in dowlad kale oo heshiiskan qayb ka ah aysan kasoo bixin waajibaadka ka saaran heshiiskan mana bannaana in la qabto ama baaritaan lagu sameeyo warbixinada ku yimaada si waafaqsan qodobkan hadii aan laga soo gudbin dowlad qayb ka ah heshiiskan, taasoo bixisay baaq ay ku aqoonsanayso dhigaalkeeda howlaha gudigan, mana banaana in gudigu qabto warbixin ku saabsan dowlad

qayb ka ah heshiiskan oo aan bixin baaqa la soo sheegay. warbixinnada lagu aruuriyo si waafaqsan qodobkan waxaa loola dhaqmaa habka soo socda:

(a) Hadii dowlad qayb ka ah heshiiskan u aragto in dowlad kale ka cagajiidayso dhaqangelinta heshiiskan waxay ku soo jeedin kartaa indhaha dowladaha qaybta ka ah cagajiidkaas si qoraal ah waana in dowlada heshay warbixintaas ku dhaqaaqdo saddex bilood gudohood laga billaabo marka ay dowladu heshay warbixibta in ay u gudbiso dowladaas soo dirtay cabashadaas qoraal caddaynaya ama fasiraya arrintaas, waana in uu wataa xeerka iyo qaabka loo adeegsado ama loo adeegsan jiray isku garnaqa oo wali lagu dhaqmo;

(b) Haddaan arrintaas xal labada dowladood ku wada raali yihiin aan laga gaarin mudo lix bilood ah, laga billaabo taariikhda dowladdu ay heshay warbixinta 1-aad, waxay ay Dawlad kastaa xaq u leedahay in ay arrintaas ku wareejiso guddiga iyada oo la ogeysiinayo dowladda kale;

(c) Mana bannaana in gudigu eegaan arrinta lagu soo wareejiyay ilaa laga hubiyo in dhammaan wadiiqadaha garnaqidda ee la heli karo in la qabtay si waafaqsan mabaadii'da xeerka caalamiga ah ee lawada aqoonsan yahay. Qodobkan laguma dhaqo xaaladaha ay waqti badan oo xad dhaaf ah ay qaadan karto habka garnaqidda;

(d) Guddigu wuxuu qabsadaa fadhiyo qarsoodi ah marka uu baarayo warqadaha la xiriira qodobkan;

(e) Waxaa laga rabaa gudiga iyada oo la ilaalinayo waxyaabaha ku qoran faqrada-hoosaadka (c) in uu u bandhigto dadaalkiisa uu ku ammaanan yahay labada dowladood ee qaybta ka ah arintuna khusayso, si looga gaaro xal nabadgelyo arrintaas iyada oo asaas looga dhigayo dhowrista xuquuqda aadanaha iyo madaxbannaanida asaasiga ah ee lagu aqoonsaday heshiiskan;

(f) Arrin kasta oo loo soo gudbiyo gudiga waa in uu ugu yeeraa labada dowladood oo arrintani khusayso, laguna tilmaamay faqrada (b) si loo siiyo warbixinada khuseeya;

(g) Labada dowladood ee arrintan ay khusayso ee qaybna ka ah heshiiskan laguna tilmaamay faqrada (b) waxa ay xaq u leeyihiin in ay soo dirsadaan cid u matasha marka la eegayo arrintan iyo in ay soo gudbistaan aragtidooda af ama qoraal ahaan.

(h) Guddigu waa in uu soo gudbiyaa warbixin muddo laba iyo toban bilood gudohood ah laga billaabo taariikhda uu helay ogeysiiska sida ku cad faqrad-hoosaadka (b):

(i) Haddii uu gaaro xal si waafaqsan shuruuda faqrada (e) guddigu wuxuu warbixintiisa ku soo koobayaa soo bandhigid dhacdooyinka oo gaaban iyo xalkii laga gaaray;

(ii) Haddii aan la gaarin xal si waafaqsan shuruuda faqrada (e) guddigu wuxuu warbixintiisa ku soo koobayaa soo bandhigid gaaban oo ah sida wax u dheceen, waxayna ku lifaaqayaan warbixintaas qoraal gacmeedyada, cadaymaha af-ahaanta ah ee oobiga la geliyay kana soo baxay labada dowladood ee qaybta ka ah heshiskan arrintuna khusayso.

Dhacda kastana waxaa la rabaa in warbixinta la gaarsiiyo labada dhinac ee ay khusayso.

1. Qodobada ku qoran maadadaan waxay dhaqan galeyaan haddii toban dowladood oo qayb ka ah heshiiskan ay soo saaraan ogeysiis si waafaqsan faqrada (a) ee qodobkaan, dowladaha qeybta ka ah heshiiskan waxay samaynayaan inay dhigaan ogaysiiskooda xafiiska Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, isaga oo u diraaya nuqullo ka mid ah dowladaha kale ee qaybta ka ah. Dowlada qaybta ka ah waxaa u bannaan in ay qaadato ogeysiiskeeda waqti kasta iyadoo wargelinayso Xoghayaha Guud. Qaadashadaas waxba u dhimimayso eegista arin horay loo soo gudbiyay si waafaqsan qodobkan mana la ogala in laga qabto cabasho cusub dowlad kastoo qayb ka ah heshiiskan kadib marka Xoghayaha Guud helo wargelin in lala noqday ogeysiiskii, haddii aan dowlada qaybta ka ah ee arrintuna khusayso aysan soo saarin ogeysiis cusub.

*Qodobka 42aad*

1. a) Haddii guddigu ay ka gaari waayaan xal ay kuwada raalli yihiin dowladaha qaybta ka ah heshiskan arrinta loo soo gudbiyay sida ku cad qodobka 41-aad, waxaa u bannaan guddiga markay helaan ogolaashaha labada dowladood in uu magacaabo guddi dhexdhexaadin oo gaar ah, kaasoo lagu tilmaami doono (Guddi) iyada oo uu dadaalkiisa wanaagsan ku bixinayo sida labada dowladood uga gaari lahaayeen arrintooda xal saaxiibtinimo oo ku dhisan dhowrista waxyaabaha heshiiskan ku qoran;

b) Guddigan dhexdhexaadinta wuxuu ka koobnaanayaa shan qof oo ay ogolaadaan labada dowladood ee arintani khusayso. Haddii dowladaha qaybta ka ah heshiiskan ku guuldareystaan isku-waafaqida xubnaha gudida mudo saddex bilood ah ama qayb ka mid ah xubnaha guddiga, xubnaha guddiga ee wali aan heshiiska laga gaarin waa in lagu doortaa cod qarsoodi ah aqlabiyad saddex meelood laba ah xubnaha kale ee guddiga.

2. Xubnaha guddigan waxay ku shaqaynayaan magacooda gaarka ah. Ma noqon karaan muwaadiniinta labada dowladood ee arrintaan khusayso ama dadka dowlad aan qayb ka ahayn heshiiskan, ama qayb ka ah heshiiska laakiin aan soo saarin ogeysiiska ku cad qodobka 41-aad.

3. Guddigan wuxuu dooranayaa guddoomiyehooda, waxayna degsanayaan xeer hoosaadkooda u gaarka ah.

4. Kal-fadhiyada guddigan waxay si caadi ah uga dhacayaan xarunta Qaramada Midoobay, ama xafiiska Qaramada Midoobay ku leedahay Jineefa. Waxaase la ogol yahay in lagu qabto meel kale oo ku habboon oo guddigu magacaabo iyada oo la tashanaya Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay iyo labada dowladood ee arrintani khusayso.

5. Xoghaynta lagu soo caddeeyay qodobka 36-aad waa inay u qabataa wixii adeeg ah oo ay u baahdaan gudiyada si waafaqsan qodobkan.

6. Wixii warbixinno ah oo guddigu helo ama uruuriyo waa in uu gacanta ka saaraa Komishanka, sidoo kale Komishanku waxay xaq u leedahay in ay ka dalbato labada dowladood ee arrintani khusayso in ay siiyaan wixii xog kale ah kuna saabsan arrintaas oo ay hayaan.

7. Marka Komishanku dhamaysto aragtida dhinac walba ee xaaladda taagan, ama si kastoo xaalku yahay muddo aan ka badnayn laba iyo toban bilood laga bilaabo markii loo soo gudbiyo arrintas, waa inay u gudbisaa warbixin guddoomiyaha guddiga si isaguna uu ugu gudbiyo labada dowladood oo arintani khusayo:

(a) Haddii aynan u suuragelin hay'adda inay wax ka qabato arrintaas, muddo laba iyo toban bilood gudohooda ah, waxay warbixinteeda ku soo uruurineysaa war kooban oo ku saabsan waxa ay ka gaartay arintan;

(b) Haddii loo helo xal saaxiibtinimo arrintaas kuna dhisan dhowrista xuquuqul insaanka lagu aqoonsan tahay heshiiskan, Komishanku waxuu kusoo koobaysaa warbixintiisa in uu si kooban u soo bandhigo waxyaabaha dhacay iyo xalka laga gaaray arrintaas;

(c) Haddiise aan la helin xal leh shuruudaha faqrad hoosaadka (b), Komishanku waxay ku soo darayaan warbixintooda, waxyaabihi dhacay oo dhan kuna saabsan arrintan ay isku haystaan labada dowladood oo qaybta ka ah heshiiskan, arrintaanina khusayso, waxa kale oo lagu soo daraayaa aragtida ay ka qabaan suuragalnimada in xal saaxiibtinima ah la gaaro, sidoo kale waxaa la soo gudbinayaa qoraalada gacanta ah, oobiga lagu qoray, warbixinada afka ah ee labada dowladood ay soo gudbiyaan;

(d) Haddii Komishanku soo gudbiyo waxbixintiisa si waafaqsan faqrad hoosaadka (c) waa in labada dowladood ee qaybta ka ah heshiiskan saddex bilood gudahood laga billaabo markii ay helaan warbixintaan ay gaarsiiyaan guddoomiyaha guddiga haddii ay aqabalayaan ama aysan aqbaleyn waxyaabaha ku jira warbixinta Komishanka.

8. Xukunnada qodobkan waxba uma dhimayaan masuuliyadaha saaran guddiga sida ku cad qodobka 41-aad.

9. Dowladaha qaybta ka ah heshiiskan waxay si isku mid ah u qaybsanayaan bixinta dhamaan qarashaadka ku baxay xubnaha guddiga iyada oo aasaas looga dhigayo qoondaynta Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

10. Haddii loo baahdo wuxuu leeyahay Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay awood uu ku dhiibi karo qarashaadka xubnaha guddigu ay u baahan yihiin ka hor inta aysan bixin dowladaha qaybta ka ah heshiiskan oo arintani khusayso si waafaqsan faqrada 9-aad ee qodobkan.

*Qodobka 43aad*

Xubnaha guddiga iyo xubnaha kale ee ku-meelgaarka ah ee komishanka loo soo magacaabo sida waafaqsan qodobka 42, waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan sahalada iyo xasaanadka uu leeyahay qofka aqoonyahanka ah ee loo xil saaro in uu ka qabto shaqo Qaramada Midoobay, kuna cad faqrad hoosaadyada heshiiska xasaanada Qaramada Midoobay oo arrintaas ka hadlaya.

*Qodobka 44aad*

Xukunnada la xiriira fulinta heshiiskan waxaa loogu dhaqmaa sida waafaqsan qoraalada aasaasidda iyo heshiisyada gaarka ah ee Qaramada Midoobay iyo wakaaladaha gaarka ah ee raacsan iyada oo aan wax loo dhimayn habraaca ku qeexan maadada xuquuqda aadamiga, mana laga hor istaagi karo dowladaha qaybta ka ah heshiiskan inay helaan wadiiqada kale oo ay ku xalistaan muranadooda si waafaqsan heshiisyada caalamiga ah iyo kuwa gaarka ah ee ka dhaqangalay dhexdooda.

*Qodobka 45aad*

Guddigu wuxuu u gudbinayaa Golaha Guud ee Qaramada Midoobay warbixin sanadle ah oo ka hadlayso shaqadiisa isaga oo soo marsiinayo Golaha Dhaqaalaha iyo Arimaha Bulshada (Economic and Social Council).

## QEYBTA V

*Qodobka 46aad*

Xukunnada heshiiskan kuma jiraan wax bannaynayo in loo fasiro qaab wax u dhimayo waxyaabaha ku qoran Heshiiska Qaramada Midoobay iyo wakaaladaha gaarka ah ee la xiriira arrimaha heshiiskan.

*Qodobka 47aad*

Mid ka mid ah xukunnada heshiiskan kuma jiraan wax bannaynayo in loo fasiro qaab wax u dhimayo xuquuqda facaweyn ee ay u leeyihiin dadyowga aduunku inay si xoriyad buuxda leh ugu raaxaystaan uguna manaafacaadsadaan maalkooda iyo khayraadkooda dabiiciga ah.

## QEYBTA VI

*Qodobka 48aad*

1. Heshiiskan waa uu u furanyahay sixiixa dowlad kasta oo xubin ka ah Qaramada Midoobay, wakaaladaha gaarka ah, dowladaha qaybta ka ah sharciga lagu dhisay maxkamadda adduunka,

ama dowlad kasta oo Qaramada Midoobay ugu yeertay inay qayb ka noqoto heshiiskaa.

2. Waxaana loo baahan yahay in la ansaxsho heshiiskan lana dhigo warqadaha heshiiskan Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa.

3. Waa in loo fududeeyaa dowlad kasta oo lagu tilmaamay faqrada (1) ee qodobkaan inay ku soo biirto heshiiskan.

4. Ku soo biiriddu waxay ku imaan kartaa in la dhigo warqadaha ku soo biirista Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa.

5. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu ku wargelinayaa dhammaan dowladaha sixiixay ama ku soo biiray in ay dhigaan warqad kasta oo ka mid ah warqadaha ansixinta iyo ku soo biiridda.

*Qodobka 49aad*

1. Fulinta heshiiskani wuxuu bilaabmayaa saddex bilood kadib taariikhda la dhigo warqadaha ku soo biirida iyo kuwa ansixinta ee shan iyo sodonaad Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa.

2. Dowlad kasta oo ansixisa heshiiskan ama ku soo biiridda kadib markii uu dhamaaday keenista warqadaha ansixinta iyo kuwa ku soo biirista Shan iyo sodonaad, dhaqangelinta heshiiskaani wuxuu u billaabmaa dowladahaas laga bilaabo taariikhda dhigista warqadaha ansixinta iyo warqadaha ku soo biirista.

*Qodobka 50aad*

Xukunnada heshiiskan waxaa laga hirgalinayaa dhamaan qaybaha dowladaha federaalka ah iyadoon lagu sameyn kala soocid ama aan lagu xirin wax shardi ah.

*Qodobka 51aad*

1. Dowlad kasta oo qayb ka ah heshiiskan waxay xaq u leedahay in ay mooshin keento iyadoo codsanayso in wax laga badelo heshiiska, waxaana la dhigaa faylkaas Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa. Intaas kadibna waxaa Xoghayaha Guud sameynayaa inuu gaarsiiyo dowladaha qaybta ka ah heshiiskan mooshinada la soo gudbiyay isaga oo ka codsanayo inuu ogeysiiyo hadii ay jecelyihiin in loo qabto shir dowladaha qaybta ka ah, si loo fiiriyo mooshinadaas iyo in loo codeeyo. Haddii qabashada shirkaas ay soo dhaweeyaan ugu yaraan saddex meelood meel ka mid ah dowladaha qaybta ka ah, wuxa uu Xoghayaha Guud qaban doonaa shir ay soo qabanqaabisay Qaramada Midoobay, wax kasta oo waxkabedel ah oo ay ogolaadaan dowladaha qaybta ka ah heshiiskan ee jooga shirka, codkana ka dhiibta shirka intooda badan, waxaa loo bandhigi doonaa Golaha Guud ee Jimciyadda Quruumaha ka dhexayso si loo ansaxiyo.

2. Wax ka badelidu waxay dhaqan galaysaa marka Jimciyada Quruumaha ka dhaxaysaa ay ogolaato, ayna aqbalaan dowladaha qaybta ka ah heshiiskan oo dhan saddex meelood laba, si waafaqsan habraaca dastuurka dowlad walba ay leedahay.

3. Haddii uu billaabmo dhaqangelinta waxyaabaha la-bedelay waxay noqonaysaa mid waajib ku ah in ay qaatan dowladaha qeybta ka ah ee aqbalay, dhinaca kale dowladaha kale ee qaybta ka ah heshiiskaan waxay ku qasbanyihiin xukunada heshiiskan iyo wax ka badelid kasto oo horay loo aqbalay.

*Qodobka 52aad*

Iyada oo aan la eegeyn wixii wargelin ah ee ku saabsan faqrada 5-aad ee qodobka 48-aad, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu ogeysiinayaa dowladaha lagu soo sheegay faqrada 1-aad ee isla qodobkasi, sidan soo socota:

(a) Sixiixa, ansixinta iyo kusoo biirista loo keenay sida waafaqsan qodobka 48-aad;

(b) Taariikhda ay bilaabantay dhaqangelinta heshiiskaan si waafaqsan qodobka 49-aad iyo taariikhda ay bilaabantay wax ka-badelid kasta oo ku timaada si waafaqsan qodobka 51-aad.

*Qodobka 53aad*

1. Heshiiskan oo soo xigashadiisu isku mid yihiin luqadaha Carabiga, Shiinaha, Ingiriiska, Faransiiska, Ruushka iyo Isbaanishka, waxaa la dhigayaa diiwaanka kaydka ee Qaramada Midoobay.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu u dirayaa nuqullo la ansixiyay oo ka mid ah heshiiskan dhammaan dowladaha lagu soo sheegay qodabka 48-aad.

# Baratakoolka Ikhtiyaariga ah ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda

***Waxaa lagu ansixiyay baratakoolkan qaraarka Golaha Guud ee tirsigiisu yahay 2200 A (XXI) loona gudbiyay in la sixiixo, lana ansaxsho kadibna lagu soo biiro 16-kii December 1966***

DHAQAN GALKA HESHIISKA: 23-KII MARCH 1976-KII, SI WAAFAQSAN QODOBKA 9

*Dowladaha qaybta ka ah baratakoolkan,*

Markay arkeen inay habboon tahay xoojiyo hirgalinta ujeedooyinka Heshiiska Caalamiga ah ee u gaarka ah Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda oo loo yaqaan magaca (Heshiis), iyo in la fuliyo waxyaabaha ku qoran, loona suurtageliyo Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee lagu dhisay si waafaqsan qodobada qaybta (IV) ee heshiiska ee loo yaqaan magaca (Heshiis) in ay u istaagaan si waafaqsan qodobada borotokoolkan ee qabashada iyo eegista qoraalada ay soo gudbinayaan dadka ka cabanaya in ay la kulmeen dhibaato laguna tuntay xuquuqahooda ku xusan heshiiskan,

*Qodobka 1aad*

Dowlad kasta oo dhinac ka ah heshiiskan, sidoo kalana qayb ka ah borotokoolkan, waxay aqoonsanaysaa, in shaqada guddigu tahay qabashada iyo eegista qoraalada ay soo gudbinayaan dadka garsoor ahaan hoos yimaada dowladahaas qaybta ka ah heshiiskan iyaga oo sheegayo inay yihiin dhibanayaal, kana cabanaya xadgudub lagu sameeyay xuquuqda lagu ogolaaday heshiiskan oo isla markaana ay dowladu xubin ka yahay heshiiskan. Mana loo ogola gudigan qabashada wax warqad ah oo la xiriirta dowlad aan qayb/xubin ka ahayn baratakoolkan.

*Qodobka 2aad*

Iyada oo la tixgelinayo xukunnada qodobka 1aad, dadka ka cabanaya in lagu tuntay xoriyadaha lagu sheegay heshiiskan in ay xaq u leeyihiin, ee hadana soo maray dhamaan wadiiqadaha maxaliga ah ee suuragalka ah ee loo maro xallinta garsoorka, waxay u gudbisan karaan Gudida fartiin qoraal ah si loo tixgaliyo kayskooda.

*Qodobka 3aad*

Waa in guddigu qaato go'aan ah diidmada qoraal kasta oo khuseeya baratakoolkan, balse aan lahayn magac lagu tilmaansado/magac laawe ah, isla markaana aan lahayn saxiix ama gudigu u arkeen in si xun loo adeegsaday lana marin habaabiyay xaqa soo gudbinta warqadaha, ama kasoo horjeeda xukunada heshiiskan.

*Qodobka 4aad*

1. Iyada oo la tixraacayo xukunada qodobka 3aad, guddigan waxay u gudbinayaan warqad kasto ee kusoo gaarto siwaafaqsan baratakoolkan dowlada qaybta ka ah baratakoolkan ee lagu eedeeyay in ay jebisay mid ka mid ah xukunada ku qoran hesheeskan.

2. Dowladahaasina waa in ay mudo 6 bilood gudahooda ku siiso gudiga faahfaahin qoraal ah oo cadeynayo arinta iyadoo la tilmaamayo haddii loo baahdo waxkasta oo talaabooyin ah ee loo qaaday dhinaca wax ka qabashada arrintaas.

*Qodobka 5aad*

1. Guddigu waxay eegayaan dhammaan qoraalada ugu yimid si waafaqsan borotokoolkan iyagoo ku eegayo dhamaan warbixinada qoraalka ah ee ay ka hayaan qofka ay arintu khuseyso ama dowlada qeybta ka ah arintan.

2. Uma bannaana gudigani in ay eegaan warqad uga timid cid kale iyagoon hubsan:

   (a) In aan arintan hore loogu gorsoorin ama lagu xalin hanaan kale oo caalami ah oo ku sameeyay baaris ama lagu xaliyay;

   (b) Waa in cidda ay arintaan khusayso dhamaysataa dhammaan wadiiqadaha suuragalka ah ee garnaqa ee waanka, balse waxaa ka reeban sharuudan hadii garsoorka wadanka gudahiisu jiitamo oo uu qaadanayo waqti xad dhaaf ah.

3. Guddigu baratakoolkani marka ay fiirinayaan waraaqadaha ay heleen waxay ku fiirinayaan/imtixaamayaan fadhiyo albaabadu u xiran yihiin.

4. Guddigan waa inay u diraan aragtida ay gaareen dowladaha arrintan qeybta ka ah, iyo qofka.

*Qodobka 6aad*

Guddigan wuxuu ku daraa warbixin sanadeedka uu diyaarinayo si waafaqsan qodobka 45-aad ee heshiiskan, war kooban oo ku saabsan shaqooyinka uu qabtay si waafaqsan baratakoolkan.

*Qodobka 7aad*

Iyada oo la sugayo in lagu guulaysto danaha laga leeyahay qaraarka 1514 (XV) ee ay isku raacday jimciyada qurumaha ka dhaxaysa, 14 December 1960-kii ee ku saabsanaa baaqa madaxbanaani siinta wadamada, iyo dadyowga la gumaysto, xukunnada borotokoolkan ku qoran ma saarayso wax xanibaad ah noocay ahaataba xuquuqda gudubsashada codsashada lagu siiyay dadyowgan Heshiiska Qaramada Midoobay ama heshiisyada kale, ama qoraalada caalamiga ah ee lagu galay qabanqaabada Qaramada Midoobay iyo hay'addaheeda gaarka ah.

*Qodabka 8aad*

1. Baratakoolkan waxa uu u furan yahay in ay saxiixdo dowlad kasta oo heshiiskan saxiixday.

2. Baratakoolkan waa in ay ansixisaa dowlad kasta oo heshiiskan ansixisay ama ku soo biirtay, warqadaha ansixinta waxaa la dhigaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa.

3. Ku soo biiridda Baratakoolkan waxaa loo fududaynayaa dowlad kasta oo ansixisa heshiiskan ama ku soo biirta.

3. Ansixintani waxa ay dhaqangaleysaa marka la dhigo qoraalada ansixinta Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa.

5. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu ku wargelinayaa dhammaan dowladaha saxiixay borotokoolkan, ama ku soo biiray in la dhigo warqad kasta oo ka mid ah warqadaha ansixinta ama ku soo biiridda.

*Qodobka 9aad*

1. Iyada oo la tixraacayo billaabashada dhaqangelinta heshiiskan, baratakolkan waxa uu dhaqan gelayaa 3 bilood kadib laga billaabo marka la dhigo warqadaha ansixinta ama ku soo biiridda Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa.

2. Laakiin dowladaha ansixiyay baratakoolkan ama ku soo biiray markii la dhigay kadib warqahada ansixinta 10aad, dhaqangelinta baratakoolkan waxa uu u billaabanayaa 3 bilood kadib laga billaabo taariikhda warqadaha ansixinta ama ku soo biiriddooda la dhigo.

*Qodobka 10aad*

Qodobada baratakoolkan waxaa loo dabaqayaa si aan kala sooc lahayn oo aysan ku xirneyn wax shardi ah dhammaan qeybaha ay ka kooban yihiin dowladaha federaalka ah.

*Qodobka 11aad*

Dowlad kasta oo qeyb ka ah baratakoolkan waxa ay xaq u leedahay in ay soo gudbiso in wax

laga badelo baratakoolkan iyada oo u dhiibeyso mooshinkeeda Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Intaas kadib Xoghayaha Guud waxa uu sameynayaa in uu gaarsiiyo dowladaha qeybta ka ah baratakoolkan isbadel kasta oo la soo jeediyo, isaga oo ka codsanaya in ay ka talabixiyaan haddii ay jecel yihiin in shir loo qabto dowladaha qeybta ka ah baratakoolkan si loo fiiriyo waxyaabaha la soo jeediyay loona codeeyo. Haddii ay shirkaa qabashadiisa soo dhaweeyaan saddex meelood hal meel ugu yaraan dowladaha qeybta ka ah baratakoolkan qabashada shirkaas, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu qabanayaa shir ay qabanqaabineyso Qaramada Midoobay. Wax ka badelid kasto oo ay ogolaadaan dowladaha qeybta ka ah heshiiskan kana soo qeybgalay codna ka dhiibtay shirka waxaa loo gudbinayaa Golaha Guud ee Jimciyada Qurumaha ka dhexeysa si ay u ansaxiso.

Wax ka bedalistani waxa ay dhaqangaleysaa marka ay ogolaadaan Golaha Guud ee Qaramada Midoobay iyo inta badan dowladaha qeybta ka ah borotokoolkan oo gaaraya saddex meelood labo meel. Si waafaqsan habsami u socodka xeerka dowlad kasta ay leedahay.

Marka ay billaabato dhaqangalka wax ka bedelidaas wuxuu waajib ku noqonayaa dowladahaas qeybta ka ah heshiiskan oo kaliya iyada oo dowladaha kale ee qeybta ka ah ay noqonayaan kuwo ku qasban fulinta qodobada baratakoolkan iyo isbedel kasta ee hore u dhacay oo ay aqbashay dowladdaas.

### *Qodobka 12aad*

Dowlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskan waxa ay xaq u leedahay in ay ka baxdo waqti kasta baratakoolkan iyada oo ku ogeysiineysa qoraal ay u gudbineyso Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, ka bixitaankaasu wuxuu dhaqangelayaa 3 bilood kadib laga billaabo marka la ogeysiiyo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

Ka bixitaankan wax u dhimi maayo in lagu sii dhaqo sharciga baratakoolkan waraaqadaha ku yimaada si waafaqsan qodobka 2aad inta aan la dhaqangelin ka bixitaanka.

### *Qodobka13aad*

Iyada oo aan la eegeyn wargelinta ku timid si waafaqsan faqrada 5-aad ee qodobka 8-aad ee baratakoolkan, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu ku wargelinayaa dhammaan dowladaha lagu sheegay faqrada 1aad ee qodobka 48aad ee heshiiskan sida soo socota:

(a) Wixii ka aamusid ah, qoraal ah, wargelin ah, ee ku soo baxa si waafaqsan qodobka 2aad ee borotokoolkaan.

(b) Wixii cadaymo ah ee ku soo baxa si waafaqsan qodobka 4aad ama qodobka 5aad ee baratakoolkan.

(c) Saxiixyada, ansixinta, iyo ku soo biirista si waafaqsan qodobka 7aad ee baratakoolkan.

(d) Taariikhda uu bilaabmay dhaqangalka baratakoolkan si waafaqsan qodobka 8aad.

*Qodobka14aad*

1. Waxaa la dhigayaa baratakoolkan oo ay nuqullada afafka Carabiga, Shiinaha, Ingiriiska, Fransiiska, Ruushka iyo Isbaanishka ay dhammaantood leeyihiin awood xigasho oo siman, diiwaanka kaydka ee Qaramada Midoobay.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu u dirayaa nuqullo ansaxsan oo ka mid ah baratakoolkan dhammaan dowladaha lagu sheegay qodobka 48aad ee heshiiskan.

# Baratakoolka labaad ee Iktiyaariga ah ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda looguna talagalay Ciribtirka Ciqaabta Dilka-toogashada

***Waxaa lagu ansixiyay borotokoolkan qaraar tirsigiisu yahay 44/128 oo soo baxay 15-kii December 1989***

DHAQAN GALKA HESHIISKA: 11 JULY 1991, SI WAAFAQSAN QODOBKA 8 (1)

*Dowladaha qaybta ka ah baratakoolkan,*

Iyaga oo rumaysan in ciribtirka ciqaabta toogashada ah ka qeyb qaadanayso xoojinta karaamada bani'aadamka iyo hormarinta xuquuqdiisa si tartiib tartiib ah,

Markii ay dib u eegeen baaqa caalamiga ah ee xuquuqul insaanka ee la ansaxshay 10 December 1949, qodobka 3-aad iyo heshiiska caalamiga ah ee u gaarka ah Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda, ee la ansaxshay 16 December 1966kii,

Markii la arkay in qodobka 6-aad ee heshiiska caalamiga ah ee Xuquuuqda Madaniga iyo Siyaasadda in uu si tusan u tilmaamayo in labaabi'iyo ciqaabta toogashada iyo in baabi'intani tahay arrin wanaagsan,

Iyada oo lagu qanacsan yahay in ay tahay lagamamaarmaan in loo arko dhammaan tallaabooyinka looga dan leeyahay baabi'inta ciqaabta toogashada in ay tahay horumar laga sameeyay dhinaca xagga helidda xaqa nolosha,

Iyada oo aad loo danaynayo in dowladuhu xil qaranimo iska saaraan si waafaqsan baratakoolkan in la baabi'iyo ciqaabta toogashada ah,

*Waxa ay isku raaceen sida soo socata:*

*Qodobka 1aad*

1. Lama toogan karo qof hoos yimaada garsoor daacad u ah dowlad qeyb ka ah baratakoolkan.

2. Dowlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskan waa inay qaadato dhammaan tallaabooyinka waajibka ah si loo baabi'iyo ciqaabta toogashada ah inta awoodeeda garsoor ay gaarsiisan tahay.

*Qodobka 2aad*

1. Lama ogolaanayo in lagu sameeyo baratakoolkan ka aamusid/xxerin haddii aysan ahayn mid la mujinayo marka la ansixinayo borotokoolkan ama lagu soo biirayo; waana in xeerintaas lagu caddeeyo in ay dhaqangelinta ciqaabta toogashadu khusayso waqtiga dagaalada iyada oo lagu dhaqayo qof lagu soo eedeeyay fal dambiyeed aad u adag oo leh muuqaal milatari lana galay waqtiga dagaalada.

2. Dowladda qeybta ka ah heshiiskan kuna dhawaaqday ka aamusidda noocan ah waxa ay ku wargalineysaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay marka la ansixinayo ama lagu soo biirayo baratakoolkan qodobada sharciyada waddankeeda ka mid ah ee lagu dhaqo waqtiyada dagaalka.

3. Dowlad kasta oo qeyb ka ah ee muujisa ka aamusidda/xeerin noocan ah waa in ay ku wargelisaa billaabashadeeda iyo dhammaashada xaaladda dagaalka ah ee ka jirta waddankeeda.

*Qodobka 3aad*

Dowladaha qeybta ka ah baratakoolkan waa in ay ku daraan warbixinta ay u gudbinayaan guddiga xuquuqda aadamiga si waafaqsan qodobka 40-aad ee heshiiskan xogta ku saabsan tallaabooyinka ay qaadatay si ay u hirgaliso baratakoolkan.

*Qodobka 4aad*

Dhinaca dowladaha qeybta ka ah heshiiskan ee soo gudbistay baaq si waafaqsan qodobka 41-aad awoodaha guddiga xuquuqda aadanaha, waxa ay gaaraysaa in ay qabato warqadaha oo ay fiiriso haddii dowlad qeyb ka ah heshiiskan ay sheegato in dowlad kale aysan oofinayn waajibaadkeeda ku aaddan qodobada baratakoolkan haddii aysan dowladda qeybta ka ah arrintan soo saarin marka la ansixinayo ama lagu soo biirayo wax caddayn ah oo intaas ka duwan.

*Qodabka 5aad*

Dhinaca dowladaha qeybta ka ah baratakoolkan aan qasabka ahayn ee heshiiska caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasiga ee la isku waafaqay 16 December 1966, awoodaha guddiga xuquuqda bini'aadamiga waxa ay gaareysaa inay qabato waraaqadaha kaga imaanayo dadka hoos yimaada awoodeeda garsoor oo ay fiiriso waajibaadkeeda, ku aadan qodobada baratokoolkaan hadii aysan dowlada qeybta ka ah arintaan ay soo saarin marka la ansixinaayo ama lagu soo biiraayo wax cadayn ah oo intaas ka duwan.

*Qodobka 6aad*

1. Qodobada baratakoolkan waxaa loo dhaqangelinayaa sida qodoba ka mid ah heshiiskan oo dheeri ah.

2. Iyada oon la taabanin suurtagalnimada ka aamusidda/xeerinta waafaqsan qodobka 2aad ee baratakoolkan, xaqa lagu ballanqaaday qodobka 1aad ee faqrada 1aad ee baratakoolkan, balse lama laali karo sida waafaqsan qodobka 4aad ee heshiiskan.

*Qodobka 7aad*

1. Albaabka saxiixida baratakoolkan waxa ay u furan tahay dowlad kasta ee ka mid ah dowladaha saxiixay heshiiskan.

2. Waxaa ansixinaya baratakoolkan dowlad kasta oo ansixisay heshiiskan ama ku soo biirtay waxaana la dhigayaa warqadaha ansixinta Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa.

3. Waxaa loo furayaa albaabka ku soo biiridda baratakoolkan dowlad kasta ee ansixisay heshiiskan ama ku soo biirtay.

4. Waxa uu billaabanayaa dhaqangalka ku soo biiridda marka la dhigo warqadaha ku soo biirida Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa.

5. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu la socodsiinayaa dhammaan dowladaha saxiixay heshiiskan ama ku soo biiray in la soo ag dhigo warqad kastoo ka mid ah warqadaha ansixinta ama ku soo biiridda.

*Qodobka 8aad*

1. Dhaqangalka baratakoolkan wuxuu billaabmayaa saddex bilood kadib laga billaabo taariikhda la soo dhigo warqadaha ansixinta ama ku soo biirista tobanaad Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa.

2. Marka loo fiiriyo dowladaha ansaxshay baratakoolkan ama ku soo biiray kadib markii la dhigay warqadaha ansixinta iyo ku soo biirista tobanaad dhaqangalka baratakoolkan waxa uu u bilaabmayaa saddex bilood kadib laga billaabo taariikhda la soo dhigo warqadaha ansixinta ama ku soo biirista tobanaad ee u gaarka ah Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa.

*Qodobka 9aad*

Qodobada baratakoolkan waxaa lagu dhaqaa dhammaan qeybaha dowladaha federaalka ah iyada oo aan lagu xirin wax shuruud ah ama aan wax laga reebin.

*Qodobka 10aad*

Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu gaarsiinayaa dhammaan dowladaha lagu soo sheegay faqrada 1aad, qodobka 48 ee Heshiiska waxyaabaha soo socda:

(a) Wixii ka aamusid ah, qoraal ah, wargelin ah, ee ku soo baxa si waafaqsan qodobka 2aad ee borotokoolkaan.

(b) Wixii cadaymo ah ee ku soo baxa si waafaqsan qodobka 4aad ama qodobka 5aad ee baratakoolkan.

(c) Saxiixyada, ansixinta, iyo ku soo biirista si waafaqsan qodobka 7aad ee baratakoolkan.

(d) Taariikhda uu bilaabmay dhaqangalka baratakoolkan si waafaqsan qodobka 8aad.

*Qodobka 11aad*

1. Waxaa la dhigayaa baratakoolkan oo ay nuqulada afafka Carabiga, Shiinaha, Ingiriiska, Fransiiska, Ruushka iyo Isbaanishka ay dhammaantood leeyihiin awood xigasho oo siman, diiwaanka kaydka Qaramada Midoobay.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu u dirayaa nuqullo ansaxsan oo ka mid ah baratakoolkaan dhammaan dowladaha lagu sheegay qodobka 48aad ee heshiiskan.

# Heshiiska Caalamiga Ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Arimaha Bulshada Iyo Dhaqanka

***Waxaa Lagu Ansixiyey Heshiiskan Qaraar Tirsigiisu Yahay 2200A (XXI) loona gudbiyay in la saxiixo, ansixiyo, kadibna lagu soo biiro 16-kii December 1966***

DHAQAN GALKA HESHIISKA: 3 JANUARY 1976, SI WAAFAQSAN QODOBKA 27AAD.

## GOGOLDHIG

*Dowladaha Qeybta ka ah Heshiiskan:*

Kadib markay arkeen Dowladaha saxiixay heshiiskan in dhamaan aadamuhu leeyahay karaamo soo jireen ah, xuquuq sinaasho iyo xuquuq ay u siman yihiin dhaaman bulshada caalamka oo aan laduudsiin karin, taa oo ah mid waafaqsan mabaadi'da ku cad axdiga Qaramada Midoobey aasaasna u ah xuriyada, cadaalada iyo nabada caalamka.

Markay aqoonsadeen xaquuqdaa ka dhalatay karaamada facaweyn ee uu leeyahay qofka aadamiga ah.

Markay aqoonsadeen in si waafaqsan baaqa caalamiga ee xuquuqda aadamiga iyo fikirka ah in la helo aadami madaxbanaan oo haysta xornimo xaga madaniga, siyaasada iyo inuu xor ka yahay baqdin iyo baahi. Taas oo ah mida keliya ee lagu guulaysan karo, hadii la abuuro xaalado keenaya in qofku helo xuquuqdiisa siyaasadeed, midiisa dhaqan dhaqaale, iyo xuquuqdiisa bulshadeed. Arintaan oo ah wadada keliya ee lagu xaqiijin karo qofkasta in uu helo xuquuqdiisa madani, siyaasadeed, dhaqan dhaqaale, iyo mid bulsho.

Kadib markii xisaabta lagu darsaday masuuliyaadka ka saaran dowladaha caalamka, si waafaqsan axdiga caalamiga ee Qaramada Midoobay, ilaalinta, xurmaynta, dhawrista xuquuqda aadamiga iyo madaxbanaanida caalamiga ah.

Kadib markii lagarwaaqsaday in qofkasta masuuliyadi ka saaran tahay qofka kale ama bulshada uu la noolyahay, loogana baahan yahay inuu fuliyo masuuliyada ka saaran dhawrista iyo adkaynta xuquuqdaa lagu aqoonsaday heshiiskan caalamiga ah.

*Dowladuhu waxay ku heshiiyeen qodobadan soo cocda:*

# QEYBTA I

*Qodobka 1aad*

1. Dhamaan dadyowga caalamku waxay xaq uleeyihiin inay iskood aayahooda uga tashadaan. Ayadoo la tixgelinayo arintaas, waxay xaq u leeyihiin inay si madaxbanaani leh umaamulaan arimahooda siyaasiga, iyo horumarinta dhaqalahooda, arimahooda bulshada iyo tooda dhaqan intaba.

2. Dhamaan dadyowga caalamku waxay xaq uleeyihiin iyagoo ilaalinaya danahooda gaarka ah inay si madaxbanaan umaamulaan dhaqaalahooda, iyo khayraadkooda dabiiciga ah iyaga oo aan waxba u dhimeyn waajibaadka ka dhalanaya iskaashiga dhaqaalaha aduunka ee ku dhisan is dhaafsiga iyo wax wada qabsiga aduunka, iyo sidoo kale in aan wax loo dhimin xeerka caalamiga. Marnaba mabanaana in cid laga hor istaago hab nololeedka ugaarka ah.

3. Waxaa laga rabaa dowladaha saxiixay heshiiskan oo ay kujiraan Dowladaha gacanta kuhaya maamulka gobolo kale oo aan haysan madaxbanaani buuxda, iyo kuwa ku hoosjira gacanta Qaramada Midoobay (trust territories) inay ka shaqeeyaan xaqiijinta xaquuqda aaya ka-talinta iyo dhawrista xaqaas, si waafaqsan qodobada axdiga Qaramada Midoobay.

# QEYBTA II

*Qodobka 2aad*

Dowlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskan, waxay balan ku qaadaysaa inay qaadayso tallaabooyinka waajibka ah si iskeed ah ama si iskaashi heer caalami ah, ayadoo si gaar ah loo tixgelinaayo dhaqaalaha, iyo tiknoloojiyada, lana adeegsanayo wixii la haayo, oo kheyraad ah. Si loogu hanto xaqiijin buuxda oo tartiib tartiib ah xuquuqaha la aqoonsaday ee ku xusan heshiiskan taas oo loo marayo dhamaan wadiiqooyinka ku haboon, oo ay ku jirto qaadashada talaabooyin sharci ah.

Dowladaha qeybta ka ah heshiiskan waxay ku balanqaadayaan inay ka dhigaan xuquuqaha lagu cadeeyey heshiiskan mid aan ku salaysnayn kala sooc sida: isir sooc, midab, jinsi (sex), luqad, diin, siyaasad iyo aragti kalaba, qowmiyad ama dhalasho, bulsho, lahaansho hanti, abtirsiimo, IWM.

Dowladaha soo koraaya iyagoo ilaalinaaya waajibaadka kasaaran xuquuqda aadamiga iyo dhaqaalaha wadankooda, waxa u suurtogal ah in ay cabiraan heerka xuquuqda dhaqaalaha, ee ku xusan heshiiskan, ee ay u qoondaynayaan dadka aan u dhalanin wadankooda.

*Qodobka 3aad*

Dowladaha qeybta ka ah heshiiskan waxay ku balan qaadayaan inay dhawrayaan u sinaanshaha

raga iyo dumarka helitaanka dhamaan xuquuqda dhaqaalaha, arimaha bulshada iyo dhaqanka ee ku cad heshiiskaan.

*Qodobka 4aad*

Dowladaha qeybta ka ah heshiiskan waxay cadaynayaan, in aan Dowladi lahayn awood ay ku xadayso helitaanka xuquuqaha lagu damaanad qaaday heshiiskaan si ka baxsan qaabka ku xusan xeerka. Xadayntan noocan ahi waa in ay la-jaanqaadi karto dabeecada xuquuqda, waxaana shardi ah in ujeedada kaliya ee xadayntu in ay ahaato xoojinta barwaaqeynta guud ee bulshada dimoqoraadiga ah.

*Qodobka 5aad*

1. Kamid ma ahan heshiiskan wax qodob ah oo loo qaadan karo ama lagu fasiri karo qaab laga fahmaayo inuu wax xaq ah siinayo Dowlad, koox, ama qof inay sameyso fal looga danleeyahay in lagu baabiiyo wax xuquuq ah ama xoriyad ah oo lagu aqoonsan yahay heshiiskan, ama kusoo rogaya xanibaad kabalaaran tan lagu cadeeyey heshiiskan.

2. La aqbali maayo wax xanibaad ah, ama caburin ah, oo lagu sameeyo wax kamid ah xuquuqda aasaasiga ah ee aadamiga ee la aqoonsan yahay ama lagu fuliyo wadan ayadoo ladhaqan gelinaayo xeerar, heshiisyo, xeer-hoosaadyo, dhaqamo, ayadoo marmarsiiyo laga dhiganaayo in heshiiskan uusan oqoonsaneyn, ama aqoonsigiisu uusan gaarsiisneyn halkii larabay.

## QEYBTA III

*Qodobka 6aad*

Dowladaha qeybta ka ah heshiiskan waxay aqoonsanayaan xaqa shaqada, oo ay ku jirto xaqa qofkasta uu leeyahay in loo sahlo inuu kutacbado irsaqiisa, shaqo uu isaga doorto ama iskiis ku ogolaado, waana inay qaado tallaabooyinka ku haboon ilaalinta xaqaan.

Waxaa qasab ah in tallaabooyinkaas ay qaadayaan Dowladaha qeybta ka ah heshiiskan si loogu helo xaqiijin buuxda xaqaan, inay kamid ahaato helitaanka barnaamij lagu tusaayo teknoloojiyada, xirfadaha, iyo barnaamij tababar. Ayadoo xooga lasaarayo siyaasadaha, farsamada keenaysa in la helo hubinta horumar dhaqaale, bulsho, mid dhaqan iyo shaqo abuuris leh wax soo saar buuxa looguna damaanad qaadayo qofka, xuriyadaha aasaasiga ee siyaasadeed iyo dhaqaalaba.

*Qodobka 7aad*

Dowladaha qeybta ka ah heshiiskan waxay aqoonsanayaan xaqa qof kasta uu u leeyahay inuu helo shaqo shuruudeedu tahay mid cadaalad ah, oo raaligelisa, una damaanad qaadaysa si gaar ah:

(a) Guno lasiinayo dhamaan shaqaalaha ugu yaraan:

i. Mushaar cadaalad ah, iyo guno u dhiganta qiimaha shaqada ayada oo aan la kala saareyn, waana in loo kafaalaqaadaa si gaar ah haweenka inay helaan shuuruud shaqo oo aan ka liidan tan ragu heysto, iyada oo qaadaneysa mushaar la mid ah kan raga marka shaqadu isku mid tahay;

ii. Nolol hagaagsan oo anfacda ayaga iyo qoyskooda si waafaqsan qodobada heshiiskan;

(b) Xaalad shaqo oo leh damaanad nabad gelyo, iyo mid caafimaad;

(c) Dhamaan inay u sinaadaan fursadaha, in loo dalacsiiyo inta ayku jiraan shaqadooda darajo munaasab ah oo kasaraysa darajadii hore ayadoon la eegeyn wax aan aheyn kala horeyn iyo karti;

(d) Nasasho, waqtiyaal firaaqo ah, in la iskula meel dhigo si caqli gal ah saacadaha shaqada, in la helo fasaxyo joogto ah oo mushaaraadkooda la bixiyay, sidoo kale gunooyinka maalmaha fasaxyada rasmiga ah.

*Qodobka 8aad*

Dowladaha qeybta ka ah heshiiskan waxay ku balanqaadayaan inay damaanad qaadaan wax yaabaha soo socda:

(a) Xaqa uu qofku u leeyahay sameysiga ururo shaqaale iyo inuu ku biiro ururo shaqaale sida uu doonayo, wuxuuna u hogaansamaa oo kaliya qodobada ururkiisa khuseeya. Si uu u xoojiyo danihiisa dhaqaale iyo mida bulsho, una ilaaliyo. Mana banaana in sameynta xaqaan lagu xiro wax shardi ah oo aan aheyn tan xeerka dhigayo ee lagamamaar maankana u ah bulshada dimoqraadiga ah ama danta amaanka qaranka, kala dambeynta guud iyo weliba ilaalinta xuquuqda iyo xoriyadaha kale;

(b) Xaqa ururada shaqaalahu u leeyihiin abuurista ururo federaal ah ama kuwo konferedaraal ah, iyo in ururadaasi xaq u yeelan karaan dhisida ururo caalami ah ama ku biiridooda;

(c) Xaqa ururadu ay u leeyihiin sameynta hawlahooda si xornimo ah oo aan wax shuruud ah ku xirneyn, oo aan ka aheyn mida xeerku dhigayo, iyo mida lagamamaar maanka u ah bulshada dimoqoraadiga ah, ama si loo ilaaliyo nabadgelyada qaranka, nidaamka guud iyo dhawrista xuquuqda iyo xoriyada dadka kale;

(d) Xaqa shaqa ka fidhiisiga hadii loo sameeyo si waafaqsan xeerarka wadankaas.

1. Qodobkaan kama hor istaagaayo qeybaha ciidamada qalabka sida booliska, ama shaqaalaha maamulada Dowlada inay u hogaansamaan shuruudaha qaanuunku qoraayo marka ay xuquuqdaan adeegsanayaan.

2. Qodobkan kamid ma aha xukun u baneynaaya Dowladaha qeybta ka ah Heshiiska Caalamiga ee Shaqada (International Labour Organization Convention) ee lagu heshiiyey 1948-dii kuna sabsanaa xoriyada iskaashatada. Ilaalinta xaqa uu u leeyahay urur kastaa qaadista tallaabooyin xaga sharciga ah, ama u dhaqangelinta sharciyada, qaab wax u dhimaya kafaalaqaadkaas lagu cadeeyay heshiiskani.

*Qodobka 9aad*

Dowlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskan waxay aqoonsatay xaqa qof kastaa uu leeyahay kafaalaqaad/ daryeel bulsheed oo ay ka mid tahay caymis bulshadadeed (social insurance).

*Qodobka 10aad*

Dowladaha qeybta ka ah heshiiskan waxay aqoonsadeen:

1. Inay waajib tahay in la siiyo qoyska oo ayna ka dhalato midnimada dabiiciga ah, oo aasaaska u ah kooxaha bulshada, waxa ugu badan ee suuragal ah oo ilaalin ama kaalmeyn ah, waliba si gaar ah in loo kaalmeeyo abuurista qoyska iyo masuuliyada xanaaneynta iyo waxbarista caruurta ku tiirsan qoyska. Waxa kale oo waajib ah in guurku kuyimaado raali noqoshada labada dhinac ee la rabo in la isku maheriyo ayadoon la dirqin.

2. Waxaa waajib ah in loo helo ilaalin gaar ah hooyooyinka mudo macquul ah guduhood ka hor iyo kadib umulista. Waana in la siiyo haweenka shaqeeya mudada lasoo sheegay dhexdeeda fasax mushaar leh ama fasax wata faa' iidada kafaalaqaad bulsheed oo ku filan.

3. Waxaa waajib ah in la qaado tallaabooyin ilaalin, iyo kaalmeyn gaar ah oo loogu daneynaayo dhamaan caruurta iyo qaangaarka bilowga, ayada oo aan loo kala saareyn abtirsiinyo, iyo xaalad kale. Waxaa waajib ah in laga ilaaliyo caruurta, iyo da'yarta in looga faa'iidaysto dhinac dhaqaale ama bulshadeed. Waxaa kaloo waajib ah in laga dhigo xeerka mid ciqaabayo u adeegsiga shaqa kasta oo keeni karta in akhlaaqdoodu halowdo, in dhibaato soo gaarto caafimaadkooda, in noloshooda khatar la geliyo, ama dhibaato ay soo gaarto koritaankooda caadiga ah. Dowladuhuna sidoo kale waa inay u sameeyaan da' xadeysan oo xeerku ku xaaraantimeynayo in lagu qasbo caruurta aan gaarin da'daas shaqo mushaar lagu bixiyo, lana xarimay leyskuna ciqaabayo.

*Qodobka 11aad*

1. Dawlaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay aqoonsanayaan xaqa qof kastaa uu leeyahay inuu helo heer nololeed ku filan isaga iyo qoyskiisa, oo ay ku jirto cuno, dhar iyo guri ku filan, xaqiisa in la joogteeyo, iyo hormarinta xaaladiisa nololeed. Dowladaha heshiiskan qeybta ka ah waa inay qaadaan tallaabooyinka ku haboon si loo hubiyo in lahelay xuquuqdaan. Ayada oo

la aqoonsanayo muhiimada weyn oo ay leedahay iskaashi caalami ah ee ku dhisan ogolaansho madaxbanaan.

2. Ayadoo la aqoonsanyahay xuquuqda aasaasiga oo ah in laga xoroobo gaajada, dawlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskan waxay qaadeysaa dadaal iskeed ah, iyo ayadoo kaashaneyso caalamka tallaabooyin ay kamid tahay barnaamijyo la taaban karo oo laga maarmaan u ah waxyaabaha soo socda:

(a) Hagaajinta hababka wax soo saarka, ilaalinta, xifdinta iyo qeybinta cuntada, ayada oo si buuxda looga faa'iidaysanaayo farsamada iyo aqoonta cilmiga, waana in la baahiyaa aqoonta mabaadii'da nafaqeynta. Sidoo kale waa in la keenaa ama la hagaajiyaa qaabka qeybinta dhul beereedka, si fiicana loogu damaanad qaadaa horumarinta kheyraadka dabiiciga ah;

(b) Waa in xisaabta lagu darsadaa mushkiladaha si siman ugu dhacaaya Dowladaha soo dhoofsada cuntada, iyo kuwa dhoofiya si loo hubiyo in loogu helo cuntada aduunka qeybin cadaalad ah oo la socon karta baahida.

*Qodobka 12aad*

1. Dowladaha qeybta ka ah heshiiiskan waa inay aqoonsadaan xaqa qofka aadamiga u leeyahay helitaanka heerka ugu sareeya ee caafimaadka jirka, iyo mid maskaxeedba wixi lagaari karo.

2. Waxaa kamid ah tallaabooyinka ay waajibka tahay in ay qaadaan Dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan si loogu helo si buuxda xuquuqdaan tallaabooyinkan muhiimka ah oo ah:

(a) In laga shaqeeyo hoos u dhigida heerka ku dhimashada xiliga dhalmada, heerka dhimasho xiliga nuugmada, kor u qaadista korida dhalaanka si caafimaad leh;Hagaajinta dhamaan dhinacyada caafimaadka deegaanka, iyo waxbarashada;

(b) Ka hortaga cudurada faafa, kuwa daashaday, kuwa shaqada ka dhasha, iyo kuwa kale, daaweyntooda, iyo ka hortagooda;

(c) Asaasida xaaladaha lamahuraanka u ah/hubin kara dhamaan adeegyada caafimaadka iyo daaweynta marka xaalado cuduro yimaadaan.

*Qodobka 13aad*

1. Dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan, waxa ay aqoonsadeen xaqa qofkasta u leeyahay waxbarshada iyo barbaarinta waxayna isku waafaqeen in loo jiheeyo waxbarashada, si loogu helo qofka aadanaha horumarin buuxda, iyo inay dareento karaamadeeda, sidoo kale in la xoojiyo dhowrista xuquuqda aadamiga, iyo xoriyadiisa asaasiga ah. Waxaa kale oo ay isku waafaqeen in laga dhigo waxbarashada, iyo barbaarinta mid suura gelineysa in qofkasta ku yeesho kaalin fiican bulasho madaxbanaan, iyo in la xoojiyo isfahamka, isku dulqaadashada, saaxiibtinimada

u dhexaysa dhamaan umadaha dhexdooda, dhamaan isirada dadyawga aduunka, dhamaan diimaha iyo kala duwanaanshaha dhaqamada. Sidoo kale in la taageero hawlaha Qaramada Midoobay ay hayaan si loo ilaaliyo nabada caalamka.

2. Dowladaha heshiiskan qeybta ka ah waxay aqoonsan yihiin, in si buuxda loogu guuleeysto xaqiijinta xuquuqahan:

(a) In laga dhigo waxbarashada aasaasiga ah waajib, iyo in loogu fududeeyo si lacag la'aan ah dhamaan bulshada;

(b) In la fidiyo tacliinta kala duwan ee dugsiyada sare oo ay kamid tahay waxbarashada sare ee teknoloojiyada, xirfadaha, iyo in loo fududeeyo wada kasta oo suuragal ah dhamaan umada, waxaana aad u wacan in la helo si tartiib tartiib ah waxbarsho lacag la'aan ah;

(c) Tacliinta sare waa in laga dhigaa mid si siman dadka oo dhan ay u heli karaan wada kasta oo suuragal ah, ayadoo la raacayo kartida qofka. Waxaa wanaagsan in si tartiib tartiib ah loo helo waxbarasho lacag la'aan ah;

(d) In la dhiirigeliyo waxbarashada asaasiga ah, lana badiyaa intii suura gal ah, si ay u helaan dadka aan helin ama aan dhameystiran waxbarashada aasaasiga;

(e) In laga shaqeeyo hormarinta dugsiyada ee heerarka kala duwan iyo in la abuuro hab deeqo waxbarasho oo lagu fuliyo arintaas. Sidoo kale in la joogteeyo hagaajinta xaalada nololeed ee shaqaalaha waxbarashada.

3. Dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay balanqaadaayaan in la dhawro xoriyada waalidka, iyo hadii ay jiraan waaliyeedka sharciyaysan (legal guardians) inay u xulaan caruurtooda dugsiyo aan ahayn kuwa Dowlada, laakin waa in laga helaa dugsigaa uu rabo isla heerka ugu yar ee dugsiyada waxbarashada Dowladu dhistay ama ay ogolaatay. Waxaa kale oo ay xaq uleeyihiin inay hubsadaan diinta iyo dabeecada waxbarasho ee caruurtooda sida ay iyagu ku qanacsan yihiin.

4. Qeybaha qodobkaan uu ka kooban yahay kuma jirto wax sinaba u banayneysa in lagu fasiro qaab laga fahmayo inuu wax u dhibaayo xoriyada qofka ama ururadu u leeyihiin aasaasida iyo maamulida macaahid waxbarasho, waana in marwalba laraacaa mabaadiida ku qoran faqrada 1 ee qodobkaan. Waana in la hubiyaa in waxbarashada ay ururadu abuurayaan in ayna ka hooseyn heerka tayo ee ugu yar ee Dowladu u dejisay waxbarashada.

### *Qodobka 14aad*

Dowlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskaan, markay kusoo biiraysana aan awood u yeelan in ay ka hirgeliso mabaadiida waxbarasho ee waajibka ah wadankeeda ama gobolada kale ee hoos yimaada maamulkeeda, waa inay ku sameyso laba sano gudohood kuna ansixiso qorshe shaqo oo faahfaahsan, si loogu helo fulin dhab ah oo tartiib tartiib ah, mabda'a waxbarashada qasabka

ku ah dadka oo idil oo bilaash ah, laguna hirgalinayo mudo/sanado macquul ah oo lugu xusayo qorshaha.

*Qodobka 15aad*

1. Dowladaha heshiiskaan qeybta ka ah waxay aqoonsanayaan inuu qofkastaa xaq u leeyahay:

(a) Inuu kaqeyb qaato nolosha dhaqanka;

(b) Inuu ku raaxaysto faa' iidada sayniska iyo ku dhaqankiisa;

(c) Inuu ka faa'iidaysto ilaalinta danaha sharafka/mooralka iyo mida maadiga ah ee kadhalata curinta qoraaladiisa saynis, farshaxan ama suugaaneed.

2. Dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay ilaalinaayaan marka ay qaadaayaan tallaabooyin lagu ilaalinaayo si buuxda xaqaan inay ku jirto tallaabooyinka looga baahan yahay dhawrista cilmiga, dhaqanka iyo in la kobciyo lana faafiyo.

3. Dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay ku balanqaadaayaan inay ixtiraamaan madaxbanaanida aan looga maarmin baaris cilmiyeedka iyo howlaha abuurista wax curinta.

4. Dowladaha heshiiskaan qeybta ka ah waxay aqoonsanayaan faa'iidada laga helaayo dhiirigelinta iyo horumarinta xiriirka iyo iskaashiga caalamiga ah ee cilmiga iyo dhaqanka.

# QEYBTA IV

*Qodobka 16aad*

1. Dowladaha qeybta ka ah heshiiskan waxay ku balan qaadayaan inay soo gudbiyaan si waafaqsan qodobada qeybtaan ee heshiiska, warbixino ku saabsan tallaabooyinka ay qaadeen, iyo horumarka laga sameeyay habka kafaalaqaadka ilaalinta xuquuqda lagu aqoonsaday heshiiskan.

2. (a) Dhamaan warbixinada waxaa loo gudbinayaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, isaguna wuxuu nuqul siinayaa Gudida Dhaqaalaha iyo Bulshada si ay u fiiriyaan sida waafaqsan qodobada heshiiskan;

(b) Marka warbixinada ka imaanaya Dowladaha qeybta ka ah heshiiskan, ama qeybtiis ama intiisa badan la xariirto arin galeysa awoodaha mid ka mid ah wakaaladaha gaarka ah sida ku cad qoraalada lagu dhisay wakaaladaas, isla markaana Dowladaas lasoo sheegay ay xubin ka yihiin wakaaladaas, waxaa looga baahan yahay, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay inuu u gudbiyo wakaaladaas nuqul kamid ah warbixintaas, ama qeybta xiriirka la leh arintaas, inta baahidu kolba leeg tahay.

### *Qodobka 17aad*

1. Dowladaha qeybta ka ah heshiiskan waa in ay warbixintooda u soo gudbiyaan si qeyb qeyb ah, iyadoo la raacayo barnaamijyada uu dejinaayo golaha dhaqaalaha iyo maamulka mudo sanad ah laga bilaabo dhaqan gelinta heshiiskan kadib marka lala tashado dowladaha qeybta ka ah iyo wakaaladaha gaarka ah ee arintu quseyso.

2. Warbixinada waa in lagu sheega culeysyada iyo waxyaabaha saameynaya in si buuxda loo fuliyo waajibaadka ku cad heshiiskan.

3. Markii dowlada heshiiskaan qeybta ka ah ay horay ugu dirtay warbixinta ku haboon Qaramada Midoobay ama wakaaladaha gaarka ah, muhiim ma ahan in mar kale warbixintaan dib loo soo saaro, waxaana ku filan in si toos ah loogu xawilo warbixinadii la soo sheegay.

### *Qodobka 18aad*

Sida ay tahay masuuliyadaha ku cad xeerka Qaramada Midoobay qeybtiisa xuquuqda aadamiga iyo madaxbanaanida aasaasiga ah, waa in gudiga dhaqaalaha iyo arimaha bulshada ay la sameeyaan qorsho wakaalada ku shaqada leh wixii looga baahan yahay ee tallaabooyin ah, sidii loo diyaarin lahaa warbixino kusaabsan horumarka laga gaaray qaadashada qodobada heshiiskan, gaar ahaan qeybta la xiriirta shaqadooda. Waxana suuragal ah in lagu soo daro warbixintaan faahfaahin kusaabsan go'aanada iyo talooyinka ay ka qaateen hay'adaha ku shaqada leh ee wakaaladahaan arinta ku dhaqanka.

### *Qodobka 19aad*

Gudiga dhaqaalaha iyo arimaha bulshada waa inuu u gudbiyaa gudiga xuquuqda aadamiga warbixinada iyo tusaalooyinka la xariira xuquuqda aadanaha ee laga soo gudbiyay Dowladaha, si waafaqsan qodobada 16 iyo 17-aad, ama arimaha khuseeya xuquuqda aadamaha oo laga soo gudbiyay wakaaladaha shaqada ku leh, ayadoo la dhaqan gelinaayo qodobaka 18-aad.

### *Qodobka 20aad*

Dowladaha ka tirsan heshiiskan iyo wakaaladaha shaqada ku leh waa inay u gudbiyaan golaha dhaqaalaha iyo arimaha bulshada aragtidooda iyo tusaalooyinkooda si waafaqsan qodobka 19aad, iyo inay farta ku fiiqaan wixii talo guud ah ee ku jira warbixin kasta ee gudigu kasoo saarto xuquuqda aadamaha, ama dukumiinti kasta oo ayaga loo xilsaaro.

### *Qodobka 21aad*

Golaha dhaqaalaha iyo arimaha bulshada waa inuu u gudbiyaa golahaa guud waqti ka waqti warbixinno lagu daraayo talooyin guud mara, iyo xogta laga helo Dowladaha heshiiskan qeybta ka ah iyo wakaaladaha shaqada ku leh oo kooban, loogana hadlaayo waxyaabaha laqaatay, iyo horumarka laga sameeyay damaanadqaadka baahinta iyo ilaalinta xuquuqaha lagu aqoonsaday heshiiskan.

*Qodobka 22aad*

Golaha dhaqaalaha iyo arimaha bulshada waa inay u soo jeediyaan indhaha hay'adaha Qaramada Midoobay ee kale, iyo hay'adaheeda hoose iyo wakaaladaha ku shaqada leh ee arintaan daneeya, sidii ay uga bixin la haayeen qeybinta kaalmo farsamo, arinkasta oo ka dhalata warbixinada lagu sheegay qeybtaan ka mid ah heshiiskaan. Waxaana suuragal ah in hayad kastaba ay kaalmeyso dhinaca ay ku shaqada leedahay, si loo abuuro aragti ku aadan qaadashada tallaabooyin caalami ah oo sahli kara in heshiiskani u hirgalo si waxtar leh oo tartib tartiib ah.

*Qodobka 23aad*

Dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay ogolaanayan in waxqabadka caalamiga ee looga gol-leeyahay damaanada dhaqan gelinta xuquuqaha lagu aqoonsaday heshiiskaan inay ku jirto qabasho heshiisyo, ansixinta talooyinka/soojeedino, qeybin kaalmo farsamo, qabasho kulan goboleed, iyo kulamo farsamo, ayadoo looga dan leeyahay wada tashi, iyo daraasado ay wadaagayaan Dowladaha arintaani khuseyso.

*Qodobka 24aad*

Qodobada heshiiskan kuma jirto wax banaynaya in loo fasiro qaab wax udhimaayo waxyaabaha ku qoran axdiga Qaramada Midoobay iyo wakaaladaha gaarka ah, taasi oo qeexaysa waajibaadka qeybaha kala duwan ee Qaramada Midoobay iyo wakaaladaha gaarka ee ku aadan arimaha looga hadlay heshiiskan.

*Qodobka 25aad*

Kamid ma ah xukunada heshiiskaan kumana jirto wax banaynaya in loo fasiro qaab wax u dhimaya xuquuqda facawayn oo ay u leeyihiin dadyowga aduunka inay si xoriyad buuxda leh ugu raaxaystaan uguna manaafacaadsadaan maalkooda iyo khayraadkooda dabiiciga ah.

## QEYBTA V

*Qodobka 26aad*

1. Heshiiskan waa u furan yahay saxiixa Dowlad kasta oo xubin ka ah Qaramada Midoobay, wakaaladaha gaarka ah, Dowladaha qaybta ka ah sharciga lagu dhisay maxkamada aduunka, ama Dowlad kasta oo golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay ugu yeertay inay qayb ka noqoto heshiiskan.

2. Waxana loo baahan yahay in la ansaxsho heshiiskan, lana dhigo qoraalada heshiiskan Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa.

3. Waa in loo fududeeyaa Dowlad kasta oo lagu tilmaamay faqrada (1) ee qodobkaan inay ku soo biirto heshiiskan.

4. Kusoo biiridu waxay ku imaan kartaa in la dhigo warqadaha ku soo biirista Xogeyaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiis.

5. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu ku wargelinayaa dhamaan Dowladaha saxiixay ama ku soo biiray, inay dhigto warqad kasta oo ka mid ah warqadaha ansixinta iyo kusoo biirida.

*Qodobka 27aad*

1. Fulinta heshiiskani wuxuu bilaabmaya sedax bilood kadib taariikhda la dhigo warqadaha ku soobiirida iyo kuwa ansixinta ee shan iyo sodonaad, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa.

2. Dowlad kasta oo ansixisa heshiiskan ama ku soo biirta kadib markii uu dhamaaday keenista warqadaha ansixinta iyo kuwa ku soo biirista shan iyo sodonaad, dhaqangelinta heshiskaani wuxuu u bilaabmaya Dowladahaas laga bilaabo taariikhda dhigista warqadaha ansixinta, iyo warqadaha ku soo biirista.

*Qodobka 28aad*

Xukunada heshiiskan waxaa lagu dhaqayaa dhamaan qaybaha ay ka kooban yihiin Dowladaha faderaalka iyada oo aan lagu sameyn kala soocid ama aan lagu xirin wax shardi ah.

*Qodobka 29aad*

1. Dowlad kasta oo qayb ka ah heshiiskan waxay xaq u leedahay in ay soo jeediso codsatana in wax laga bedelo heshiiska, waxana la dhigayaa faylkaas Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa. Intaas kadibna Xoghayaha Guud wuxuu gaarsiinaya Dowladaha qaybta ka ah heshiiskan, mooshinada la soo gudbiyey isaga oo ka codsanaaya in uu ogeysiiyo hadii ay jecel yihiin in loo qabto shir Dowladaha qaybta ka ah, heshiiskan si loo fiiriyo mooshinadaas, iyo in loo codeeyo. Hadii qabashada shirkaas ay soo dhaweeyaan ugu yaraan sadex meelood meel ka mid ah Dowladaha qaybta ka ah, wuxuu qabanaya xoghayahu shir ay soo qaban qaabisay Qaramada Midoobay, wax kasta oo wax kabedel ah oo ay ogolaadaan Dowladaha qaybta ka ah heshiiskan oo jooga shirka, codkana ka dhiibta shirka intooda badan, waxaa loo ban dhigaya golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay si loo ogolaado.

2. Wax ka bedelidu waxay dhaqan geleysa marka golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay uu ogolaado, ayna aqbalaan Dowladaha qaybta ka ah heshiiskan tiro dhan sadex meelood labo meel, si waafaqsan hab raaca dastuurka Dowlad walba ay leedahay.

3. Hadii uu bilowdo dhaqan gelinta waxyaabaha la bedelay waxay noqoneysa mid waajib ku ah in ay qaatan Dowladaha qeybta ka ah ee aqbalay, dhinaca kale Dowladaha kale ee qaybta ka ah heshiiskan waxay ku qasban yihiin xukunada heshiiskan, iyo wax ka bedelid kasta oo horay loo aqbalay.

*Qodobka 30aad*

Ayada oo aan la eegeyn wixi wargelin ah ee kusaabsan faqrada 5aad ee qodobka 26aad, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu ku wargelinaya Dowladaha lagu soo sheegay faqrada1aad ee qodobka la soo sheegay sida soo socota:

(a) Saxiixyada, ansixinada iyo ku soo biirista loo keenay sida waafaqsan qodobka 26aad;

(b) Taariikhda ay bilaabantay dhaqangelinta heshiiskan si waafaqsan qodobka 27aad iyo taariikhda ay bilaabantay wax ka bedelid kasta oo ku timaada si waafaqsan qodobka 29aad.

*Qodobka 31aad*

1. Heshiiskaan oo dhamaan afafka Shiinaha (Chinese), Ingiriisiga (English), Faransiiska (French), Ruushka (Russian) iyo Isbaanishka (Spanish) oo nuquladoodu wada sax yihiin oo leh awood soo xigasho siman, waxa la dhigayaa diiwaanka kaydka ee Qaramada Midoobay.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu u dirayaa koobiyaal la ansixiyey oo ka mid ah heshiiskan dhamaan Dowladaha lagu soo sheegay qodabka 26aad.

# Borotokoolka Iktiyaariga ah ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka

***Golaha loo dhanyahay wuxuu meel mariyay qaraarkan A/RES/63/117, 10 December 2008***

*Golaha loo dhanyahay,*

Markuu arkay qaadashada golaha xuquuqda aadanaha qaraarkeedii 8/2 ee 18 June 2008 borotokoolka aan qasabka ahayn ee ku lifaaqan heshiishka caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka.

1. Wuxuu qaatay borotokoolka aan qasabka ahayn ee ku lifaaqan heshiishka caalamiga ah ee xuquuqda dhaqaalaha, bulshad iyo dhaqanka.

2. Wuxuu ku talinayaa in borotokoolkan aan qasabka ahayn loo furo saxiixid xafladda saxiixa ee la qaban doono 2009-ka, waxuuna ka codsanyaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay iyo gudiga sare ee xuquuqda aadanaha Qaramada Midoobay in ay bixiyaan kaalmada laga maarmaanka ah.

LIFAAQ

***Borotokoolka aan qasabka ahayn ee ku lifaaqan Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka***

GOGOLDHIG

*Dowladaha qaybta ka ah heshiiskan,*

Iyagoo tixgelinaya, sida waafaqsan mabaadi'da lagu cadeeyay heshiiska Qaramada Midoobay, aqoonsiga karaamada soo jireenka ah iyo sinaanta iyo xuquuqda lama taabtaanka ah ee ay leeyihiin dhamaan aadanaha in uu sal u yahay xoriyada, cadaaladda iyo nabada aduunka,

Iyagoo og baaqa caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha in uu cadeynayo dhamaan aadanaha in uu dhashay isagoo xor ah kana siman xaga sharafta iyo xuquuqda iyo in qof kasta in uu xaq u leeyahay dhamaan xuquuqaha iyo xoriyadaha lagu sheegay halkan, iyadoo aan lagu kala

sooceynin kala soocid noocey dooniba ha ahaatee sida isir, midab, jinsi, af, diin, siyaasad ama aragti kale, qaran ahaan ama asal bulsho, hanti, dhalasho ama siyaabo kale,

Iyagoo xusuusinayo in baaqa caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha waxay aqoonsanyihiin in sida ugu wanaagsan ee aadami xor ka ah cabsi iyo baahi in kaliya lagu gaari karo hadii la abuuro xaalado qofkasta uu ku heli karo xuquuqda madaniga, dhaqanka, dhaqaalaha, siyaasada iyo bulshada,

Iyagoo dib u xaqiijinaya caalaminimada, qaybsami la'aan, isku tiirsanaanta, isku xirnaanta dhamaan xuuqaha aadanaha iyo xoriyadaha aasaasiga ah,

Iyagoo xusuusinaya in dowlad kasta oo qayb ka ah heshiiska caalamiga ah ee xuquuqda dhaqaalaha, bulshada, iyo dhaqanka (halkan markii la joogo loogu yeero heshiiska) ay balanqaadeyso qaadida talaabooyin, si iskeed ah iyo si iskaashi iyo wadashaqayn caalami ah gaar ahaan dhaqaalaha iyo farsamada, oo gaarsiisan halka ugu sareyso ee waxay heli karto, iyadoo ujeedadu tahay in la gaaro si tartiib tartiib ah xaqiijin buuxda ee xuquuqaha lagu aqoonsaday heshiiskan iyadoo loo marayo dhamaan hababka munaasabka ah, oo ay ku jirto gaar ahaan qaadashada talaabooyin sharci ah,

Iydoo la tixgelinayo, si loogu sii guuleysto ujeedooyinka heshiiska iyo dhaqangelinta qodobadiisa, waxaa munaasab ah in awood loo siiyo gudiga xuquuqda dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka (halkan markii la joogo loogu yeero Gudi) in ay fuliyaan shaqooyinka lagu cadeeyay borotokoolkan,

*Waxeey ku heshiiyeen sidan soo socota,*

*Qodobka 1aad*

## *Shaqadada gudigu waa waxyaabaha la xariira qabashada iyo eegista cabashooyinka*

Waxay aqoonsatay Dowlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskan qeybna ka noqotay Borotokoolkan in hawlaha gudigaan tahay qabashada cabashooyinka, iyo fiirintooda ee loo soo gudbiyo si waafaqsan waxyaabaha ku cad Borotokoolkan.

Uma banaana gudigaan qabashada cabasho kasta oo la xariirta Dowlad kasta oo ka mid ah heshiiskaan, balse aan qeyb ka ahayn Borotokoolkan.

*Qodobka 2aad*

*Cabashooyinka*

Waxaa banaan inay soo gudbiyaan cabashada dadka, ama qeyb ka mid ah dadyawga hoos yimaada maamulka Dowlada qeybta ka ah heshiiskan oo sheeganaya inay yihiin dhibanayaal

lagu tuntay xuquuqdooda dhaqaale, bulsho, iyo mida dhaqan ee lagu cadeeyay heshiiskan, taas oo ay geysatay Dowlad qeyb ka ah heshiiskaan. Marka cabasho ka timaado dad ama koox ka mid ah dadkaas waa in la helaa ogolaanshahooda ama waa in wakiilkoodu cadayn karaa in uu kasbaday ogolaanshahooda in uu wakiil u noqdo.

*Qodobka 3aad*

*Ogolaasho*

1. Gudigani ma fiirinaayo cabasho hadii aan la hubin in dhamaan wadiiqadaha garsoorka ee wadanka gudahiisa ee suuragalka aysan dhamaan. Sharuuda qodobkan ma reebayo hadii dhaqangelinta wadiiqadaha garsoorka gudaha ay qaadanayso waqti dheer oo aan caqligal ahayn.

2. Gudigu wuxuu ku dhawaaqayaa in aan la aqbaleyn cabashada xaaladaha soo socda:

(a) Hadii aan cabashada la soo gudbin muda sanad gudihiisa kadib marki laga daalay wadiiqadaha garsoorka gudaha, hadii uusan keenin qofka cabanaayo sababta uu dib uga dhacay waqtigii la qabtay;

(b) Hadii ay ku saabsantahay dhacdada cabashadu arin dhacday kahor dhaqangalka bootokolkan, kuna tacaluqda Dowlad qeyb ka ah heshiiskan. Hadaan dhacdooyinkaas aysan sii socan kadib dhaqan galka heshiiskan;

(c) Hadii arintaan nafteeda, horay gudigu u fiiriyay ama horay iyo hadaba lagu eegayo si waafaqsan hab kale oo ka mid ah hababka baarista caalamiga. Ama horay loogu sameeyay dhexdhexaadin caalami ah;

(d) Hadii cabashadan ay ka soo horjeedo qodobada heshiiskan;

(e) Hadii cabashadu aysan ku tiirsaneyn asaas cad ama aysan wadan daliil kufilan, ama uu yakay kurikuteen ku tiirsan waxay warbaahintu u sheegtay;

(f) Hadii cabashada ay ka muuqato in xaqa soo gudbinta cabashada si xun loo isticmaalay; ama

(g) Cabashadu tahay mid aan la ogeyn halka ay ka timid, ama aan qoraal ahyen.

*Qodobka 4aad*

*Cabashooyinka, aysan ka muuqan dhibaato*

Gudigu wuxuu xaq u leeyahay, hadii loo baahdo, in uu diido fiirinta cabashada aysan ka muuqan in qofkaa uu qabo dhibaato macruufa, balse waa fiirin kartaa hadii ay gudigu u aragto in cabashadu wadato arin guud oo aad u muhiim ah.

*Qodobka 5aad*

*Tallaabooyin ku meel gaar ah*

1. Waxaa u banaan gudiga, waqti kasta oo ay soo gaarto cabasho, inta aysan qaadanin go'aan ku saabsan arinta, in uu ku wareejiyo Dowlada qeybta ka ah heshiiskan oo arintani khuseyso codsi ah inay Dowladaas qaado tallaabooyin lamahuraanka ah ee loo baahanyahay xaaladahan gaarka ah si loogu hortago in dhib aan laga soo kabsan ku dhacdo dhibanayaasha sheeganaya xadgudubyada.

2. Markii gudigu dhaqangalinaayo awoodihiisa codsiga ee waafaqsan faqrada (1) ee qodobkaan, arintaas macnahedu maaha in gudidu aqbashay kayska ama yahay mid ku mustaqiim/sax ah.

*Qodobka 6aad*

*Wareejinta cabashada*

1. Hadii aan gudigu u arag cabashada mid aan la aqbali karin, ayada oo aan loo noqon Dowlada qeybta ka ah, kuna shaqada leh arinkan, waa in gudigu si dahsoon uugu bandhigaa codsi kasta oo loo keeno, si waafaqsan borotokoolkan, Dowlada ay khuseyso.

2. Lix bilood guduhood waa in Dowlada qeybta ka ah heshiiskan u gudbisaa gudiga fasiraada ama cadeymo qoraal ah, oo lagu cadaynaayo arintaas, iyo hadii ay jiraan wadiiqado garbixin oo lagayaabo in Dowladaasi diyaarisay.

*Qodobka7aad*

*Dhexdhexaadinta saaxiibtinimada ah*

1. Gudigu dadaaladiisa wacan wuxuu u soo bandhigayaa dhinacyada ay khuseyso, si looga gaaro arintaas xalin saaxiibtinimo, oo ku dhisan aasaaska dhawrista waajibaadka heshiiskani xusayo.

2. Heshiis kasta oo kusaabsan arinta xalinta saaxibtinimo inay tahay mid lagu eegayo cabasho si waafaqsan borotokolkan.

*Qodobka 8aad*

*Baarista cabashooyinka*

1. Gudigu wuxuu baarayaa cabashooyinka u yimaada si waafaqsan qodobka 2aad ee borotokoolkan, isaga oo eegayo dhamaan dukumintiga loo soo gudbiyay, waxaase shardi ah in dukumintigaan lagu wareejiyo dhinacyada ku shaqada leh.

*2. Gudigani wuxuu qabsanayaa fadhiyaal irduhu u laaban yihiin marka uu baarayo cabashooyinka loogu soo gudbiyay si waafaqsan borotokoolkan.*

3. Marka la baarayo cabasho lagu soo gudbiyay si waafaqsan borotokoolkan. Waxaa loo ogol yahay gudiga inuu darso oo la tashado wixii suuragal ah ee dokominti ah ee la xiriira, ayna diyaariyeen hay'adaha Qaramada Midoobay, wakaaladaheeda gaarka ah, santuuqyadeeda, barnaamijyadeeda, iyo qaababkeeda kale. Sidoo kale dukumintiga ay diyaarisay ururada caalamiga ah ee kale, oo ay kujiraan urur goboleedyada xuquuqda aadamaha iyo aragti kasta ama faalooyinka ay soo gudbiyeen Dowladaha qeybta ka ah.

4. Marka loo baarayo cabashooyinka si waafaqsan borotokoolkan, gudigu wuxuu eegayaa maangalnimada talaabooyinka Dowlada qeybta ka ah heshiiskan ay qaadanayso si waafaqsan qeybta 11aad ee heshiiskan. Sidaas awgeed, waa in gudigu maskaxda ku hayaa in Dowlada qeybta ka ah ay suuragal u tahay in ay ansixiso xayn wadiiqado siyaasadeed ah si loofuliyo xuquuqda lagu cadeeyay heshiiskan.

*Qodobka 9aad*

*Dabagalka fulinta aragtida gudiga*

1. Kadib baarista cabashada, gudigu wuxuu ku wareejinaayaa Dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan oo arintu khuseyso, aragtidooda ku saabsan cabashada waana inay la socoto wixi talo ah oo jira.

2. Dowlada qeybta ka ah heshiiskaan waa inay soo gudbisaa waxa ay ka qabto aragtida gudiga, iyo wixi dardaaran ah oo jira, waxaana loo gudbinaa gudiga lix bilood gudohooda jawaab qoraal ah oo ay ku jirto wixii xog ah oo ku saabsan tallaabooyinka laga qaatay aragtida gudiga iyo taladiisa.

3. Gudigu waxa uu leeyahay inuu ugu yeero Dowlada qeybta ka ah inay soo gudbiso wixii xog dheeri ah ee ku saabsan tilaaba kasta oo Dowladu qaadatay si looga jawaabo arigtida gudiga iyo dardaarankiisa hadii uu jiro, oo ay kujirto sida gudigaan u arkaan warbixinada danbe oo ay soo gudbinayso Dowlada qeybta ka ah si waafaqsan qodobada 16-aad iyo 17-aad ee heshiiskaan.

*Qodobka 10aad*

*Isgaarsiinta Dowladaha dhexdooda ah*

1. Dowlad kasta oo qeyb ka ah borotokoolkan waxay waqti kasta ku dhawaaqi kartaa si waafaqsan qodobkan, inay aqoonsan tahay awooda gudiga uu u leeyahay qabashada iyo eegista cabasho Dowlad qeyb ka ah heshiiskan kuna sheegayso in Dowlad kale oo qeyb ka ah aysan ka soo bixin waajibaadkeeda, si waafaqsan heshiiskan. Cabashooyinka ku yimaada si waafaqsan qodobkaan, waxaa la qaban karaa lana eegi karaa oo kaliya hadii ay soo gudbiso Dowlad soo saartay baaq ay ku aqoonsaneyso awooda gudigan u leeyahay arintaan, gudigani ma qaban karo

waraaq khuseysa Dowlad qeyb ka ah heshiiskan oo aan soo saarin baaqaas. Cabashooyinka ku yimaada si waafaqsan qodobkan waxaa loola dhaqmaa habka soo socda:

(a) Hadii Dowlad qeyb ka ah borotokoolkan u aragto in Dowlad kale oo qeyb ka ah aysan fulinaynin waajibaadkeeda si waafaqsan heshiiskan. Waxaa u banaan inay u soo jeediyaan aragtida Dowladaas dhacdooyinkaas oo qoraal ah. Dowladaasuna sidoo kale inay ku wargeliso gudiga dhacdadaas, sadex bilood guduhood ka dib markii ay hesho, cadeymo qoraal ah oo lagu cadeynaayo arintaas, waana in lagu daraa wixi suuragal ah oo xiriir la leh arintaas, ayadoo farta lagu fiiqaayo habka iyo wadiiqadaha garnaqa gudaha ee la qaatay ama laga yaabo in laga qaado, ama loogu talagalay arintaan;

(b) Hadii aan arintaan loo xalin si ay kawada raaliyihiin labada Dowladood ee arintu khuseyso muda lix bilood ah laga bilaabo marki ay la wareegtay Dowlada heshay waraaqda koowaad. Midkasta oo labada Dowlad kamid ah waxay xaq u leedahay inay arintaas ku wareejiso gudiga ayadoo loo maraayo in la wargeliyo gudiga iyo Dowlada kale;

(c) Gudigan waxna ka qaban maayo arinta loo soo gudbiyay ilaa laga hubsanaayo in dhamaan wadiiqadaha garnaqa gudaha laga daalay, lagana quustay. Qodobkan ma sameynayo hadii habka garnaqa guduhu uu qaato muda aan caqli gal aheyn;

(d) Ayada oo la raacaayo xukunka faqrada-hoosaadka (c) ee faqradan, gudigani wuxuu ku bixinaya dadaal xoog leh labada Dowladood si looga gaaro arintaas xal saaxiibtinimo oo ku dhisan dhawrista waajibaadka ku cad heshiiskan;

(e) Gudigu wuxuu qabsanaya fadhiyaal irduhu u laaban yihiin, marka ay baarayaan waraaqadaha loo soo gudbiyay si waafaqsan qodobkan;

(f) Gudigan waxa uu leeyahay marka arin lagu soo wareejiyo si waafaqsan faqrada hoosaadka (b) ee faqradan inay ka codsato labada Dowladood ee qeybta ka ah, arintana khuseyso oo lagu soo sheegay faqrada hoose ee (b) inay u soo gudbiso wixi xog ah ee la xariira arinkan;

(g) Dowladaha qaybta ka ah ee ay quseyso, ee lagu sheegay faqrad-hoosaadka (b) ee faqradan, waxeey xaq u leeyihiin in lagu matalo marka arinta ay qorfeynayaan gudiga iyo in ay keenaan fikrado si af ahaan ah iyo si qoraal ahba;

(h) Gudigan wuxuu soo saaraya sida ugu dhaqsiyaha badan kadib taariikhda uu helo wargelinta si waafaqsan faqrad-hoosaadka (b) ee faqradan warbixin u dhigan sidan:

   (i) Marka la gaaro xal si waafaqsan axkaamta faqrad-hoosaadka (d) ee faqradan, gudigu wuxuu ku soo koobayaa warbixintiisa cadeymo kooban oo ku saabsan dhacdooyinkii iyo xalkii laga gaaray;

(ii) Marka la gaari waayo xal si waafaqsan axkaamta faqrad-hoosaadka (d) gudigaan wuxuu ku soo gudbinaya warbixintiisa, dhacdooyinka xiriirka la leh, arinta dhextaala, labada Dowladood ee qeybta ka ah arintuna khuseyso, waxaana lagu lifaaqaya warbixintaas wixi cadeymo qoraal ah iyo afeed (oral) ee labada Dowladood ay soo gudbiyeen, sidoo kale gudigu waa inuu u diraa labadaas Dowladood ee qeybta ka ah, oo kaliya wixi aragtiya oo ay u arkaan inay xariir la leedahay arinta ka dhextaagan labada Dowladood.

Si kasta oo ay ahaato, waa in warbixinta la gaarsiiyaa labada Dowladood ee arintani khuseyso.

2. Dowladaha qeybta ka ah waxay dhigayaan ogeysiis si waafaqsan faqrada (1) ee qodobkan Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa. Isagoo nuqul kamid ah u diraaya Dowladaha kale ee qeybta ka ah, waxaana la ogolyahay in lala noqdo ogeysiiska waqti kasta, ayada oo lala socod siinayo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. La noqoshadan wax u dhimi meyso eegista arinkasta oo ujeedadeedu tahay waraaq mar hore lagu soo wareejiyay si waafaqsan qodobkan, mana la ogolaanayo qabashada waraaq kale oo ka timid Dowlad qeyb ka ah si waafaqsan qodobkan kadib marka uu helo Xoghayaha Guud warka ah in lala noqday ogeysiintii, hadii aynan Dowlada qeybta ka ah oo arintu khuseyso soo saarin ogeysiis cusub.

### *Qodobka 11aad*

*Habka dabagalka*

1. Waxaa u banaan Dowlad kasta oo qeyb ka ah borotokoolkan inay ku dhawaaqdo waqti kasta inay aqoonsantahay awoodaha gudigan ee lagu cadeeyay qodobkan.

2. Hadii gudigan helo warbixino lagu kalsoonyahay oo tusinaya in uu dhacay xadgudub weyn ama si qorsheysan, oo ka yimid dhinaca Dowlad qeyb ka ah xuquuqda dhaqaalaha, bulshada ama dhaqanka ee lagu cadeeyay heshiiskan. Gudiguna wuxuu ugu yeerayaa Dowladaas qeybta ka ah iskaashi inay kasameyso baarista xogta, isla markaana soo gudbiso aragtideeda ku aadan xogtaas.

3. Ayadoo xisaabta lagu darsanayo ilaalinta aragti kasta oo Dowlad qeyb ka ah ay soo gudbisay, ama xog kale oo sahlan laguna kalsoonaan karo, gudigan wuxuu magacaabi karaa mid ama wax kabadan oo xubnihiisa ah si loo sameeyo baaris looguna soo gudbiyo si deg deg ah gudiga. Waxaana la ogol yahay in lagu soo daro baarista in la sameeyo booqasho lagu aado Dowlada qeybta ka ah. Waase hadii loo baahan yahay booqashadaas isla marknaana ay ogolaato Dawlada ay khusayso.

4. Baaristaas waxaa lagu sameynayaa si qarsoodi ah, waxaana la codsanaya kaalmada Dowladaas qeybta ka ah dhamaan heerarka hawlaha.

5. Kadib marki la daraaseeyo waxa ka soo baxay barista gudigan wuxuu ku wareejinaya waxyaabihii soo baxay Dowlada qeybta ka ah oo ay arintu khuseyso, taa oo la raacsiiyay wixi faalo ama talo ah.

6. Dowlada qeybta ka ah waxay sameynaysa inay u soo gudbiso aragtideeda gudiga lix bilood gudohooda laga bilaabo marka uu helo waxyaabihii soo baxay, faalooyinkii iyo taladii gudigu ku soo wareejiyay.

7. Kadib marka la dhamestiro hawlaha la xariira baarista la sameeyay si waafaqsan faqrada (2) ee qodobkan, gudigan wuxuu xaq u leeyahay inuu qaato kadib marka la sameeyo wadatashi lala yeesho Dowlada qeybta ka ah, oo arintaan khuseyso inay ku soo daraan sharaxaad kooban oo ku saabsan wixii ka soo baxay hawlihi warbixin sanadeedka, laguna cadeeyay qodobka 15-aad ee borotokoolkan.

8. Dowlad kasta oo qeyb ka ah soona saarta ogeysiis si waafaqsan (1) ee qodobkaan, waxay leedahay inay la noqoto ogeysiiskaas waqti kasta ayada oo u mareysa ku wargelin loo soo jeedinaayo Xoghayaha Guud.

## *Qodobka 12aad*

*La socoshada habka dabagalka*

1. Gudigan wuxuu leeyahay inuu ku casuumo Dowlada qeybta ka ah inay ku soo darto warbixinteeda, lagu soo gudbiyay si waafaqsan labada qodob ee kala ah 16-aad iyo 17-aad ee heshiiskan faahfaahin ku saabsan tallaabooyinka la qaaday si looga jawaabo baaris la sameeyay si waafaqsan 11-aad ee borotokoolkan.

2. Gudigan waxaa u banaan hadii loo baahdo kadib marka ay dhamaato xiliga lixda bilood ee lagu sheegay faqrada 6-aad ee qodobka 11-aad inay ku casuunto Dowlada qeybta ka ah ee ay arintaani khuseyso in lagu wargeliyo tallaabooyinka la qaaday si looga jawaabo baaristaas.

## *Qodobka13aad*

*Tallaabooyinka badbaadada/dhawrista*

Dowlada qeybta ka ah heshiiskan waa inay qaadaa dhamaan tallaabooyinka ku haboon si loo hubiyo ineysan dadka raacsan maamulkeeda la kulmin wax dhaqan xumo ah ama cabsi gelin ah, taa oo ka dhalaneysa waxyaabaha ay u gudbinaayaan gudiga oo cabashada ah ayada oo la dhaqan gelinaayo borotokolkan.

## *Qodobka 14aad*

*Iskaashiga iyo wada shaqeynta caalamiga ah*

1. Gudigaan wuxuu ku wareejin doona waxyaabaha uu u arko inay ku haboon yihiin, iyo in la helay ogolaanshaha Dowlada qeybta ka ah oo arintu khuseyso, wakaaladaha gaarka ah ee Qaramada Midoobay, sanduuqyadeeda, barnaamijyadeeda iyo hay’adaha gaarka ah wixii aragti ah ama talooyin ah ee ku saabsan cabashooyinka, iyo baarista, taas oo u tusineysa in loo baahan

yahay wadatashi iyo kaalmo farsamo, ayadoo la raacsiinayo hadii ay jirto aragtida Dowlada qeybta ka ah iyo talo soo jeedin ku saabsan aragtidan iyo talada.

2. Sidoo kale gudigan waa inuu ku soo jeediyaa indhaha hay'adaha marka la helo ogolaashaha Dowlada qeybta ka ah oo ku shaqada leh. Arin kasta oo ka dhalata cabashooyinka uu fiirinayo si waafaqsan borotokoolkan taa oo laga yaabo in ay ka caawiso go'aan ka gaarista mid kasta dhinaca takhasuskiisa, arimaha toosinta, qaadashada tallaabooyinka caalamiga ah ee loogu goleeyahay in laga qeyb qaato kaalmeynta Dowladaha qeybta ka ah si lagu gaaro horumar fulinta xuquuqda la aqoonsan yahay ee ku jira heshiiskan.

3. Waxaa la abuuraya sanduuq dhaqaale si waafaqsan lana xariira habka lagu yaqaan Jamciyada Quruumaha ka dhexeysa. Sanduuqaana waxaa lagu maamulayaa si waafaqsan xeer hoosaadyada iyo qodobada lacagta Qaramada Midoobay lagu maamulo, si loo siiyo kaalmada gaarka ah iyo mid farsamo Dowladaha qeybta ka ah, ayadoo la heysto ogolaashaha Dowlada qeybta ka ah ee arintan khuseyso, taa oo xoojineysa fulinta xuquuqda dhaqaalaha, bulshada, iyo dhaqanka sida uu qabo borotokoolkan.

4. Axkaanta ku qoran heshiiskan waxba uma dhimimayso waajibaadka Dowlada qeybta ka ah ee ka saaran fulinta waxyaabaha laga rabo oo waajibaad ah si waafaqsan heshiiskan.

### *Qodobka 15aad*

*Warbixin sanadeedka*

Gudigan wuxuu ku soo darayaa warbixin sanadeedkiisa war kooban oo looga hadlayo waxqabadkiisa, si waafaqsan borotokoolkan.

### *Qodobka16aad*

*Daabacaada iyo faafinta*

Dowlad kasta waxay ku balanqaadeysa inay u baahiso si ballaaran heshiiskan, iyo borotokoolkan, waana inay fidisaa, oo ay fududeysaa helista xogta ku saabsan arimaha aragtida gudiga iyo dardaarankooda, si gaar ahna waa in loo eegaa arimaha ku saabsan Dowlada qeybta ka ah, waana in la sameeyo arinkaas ayadoo la adeegsanayo qaab u fududeynaaya in ay helaan dadka laxaadka daran.

### *Qodobka 17aad*

*Saxiixa, ansixinta, iyo ku soobiirida*

1. Waxaa loo furayaa Dowlad kasta oo saxiixday heshiiskan ama ku soo biirtay iney saxiixdo borotokoolkan.

2. Waxaa ansixinaya borotokoolkan Dowlad kasta oo ansixisay ama ku soo biirtay heshiiskan. Waraaqaha ansixintana waxaa la dhigayaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa.

3. Ku soo biirista borotokoolkan waxaa loo furayaa Dowlad kasta oo ansixisay heshiiskan ama ku soo biirtay

4. Ku soo biiristu waxay imaaneysa marka la dhigo waraaqaha ku soo biirida xafiiska Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa

*Qodobka 18aad*

*Bilaabashada dhaqangalka*

1. Borotokolkan wuxuu dhaqangalkiisu bilaabmaya kadib sadex bilood laga bilaabo taariikhda la dhigo waraaqaha ansixinta, ku soo biirista Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay agtiisa.

2. Dhaqangalka borotokoolkan wuxuu u bilaabmayaa Dowladaha ansixiyay, ama ku soo biiray, kadib marka la dhigo waraaqaha ansixinta, ku soo biirista tobanaad, taas oo ah marka ay dhamaato sadex bilood laga bilaabo taariikhda la dhigo warqada ansixinteeda ama kusoo biiristeeda.

*Qodobka 19aad*

*Wax ka bedelida*

1. Dowlad kasta oo qeyb ka ah borotokoolkan waxa ay xaq u leedahay in ay soo gudbiso in wax laga bedelo borotokoolkan ayada oo u dhiibeysa mooshinkeeda Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Intaas kadib Xoghayaha Guud waxa uu sameynayaa inuu gaarsiiyo dowladaha qeybta ka ah borotokoolkan isbedel kasta ee la soojeediyo, isaga oo raacsiinaya codsi ah in ay ka talabixiyaan hadii ay jecelyihiin in shir loo qabto dowladaha qeybta ka ah borotokoolkan si loo fiiriyo waxyaabaha la soo jeediyay loona codeeyo. Hadii ay shirkaa qabashadiisa soo dhoweeyaan sadex meelood hal meel ugu yaraan dowladaha qeybta ka ah borotokoolkan, rabaana in shir noocaan ah la qabto afar bilood guduhuud laga bilaabo taariikhda, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu isku yeeraya shir ay qabanqabineyso Qaramada Midoobay, wax ka bedelid kasto oo ay ogolaadan sadex meelood labo meel dowladaha qeybta ka ah heshiiskan kana soo qeybgalay ee codna ka dhiibtay shirka waxaa loo gudbinayaa Golaha Guud ee Jamciyada Qurumaha ka dhaxeysa si ay u ogolaato.

2. Wax ka bedelista lugu ansixiyay laguna ogolaaday si waafaqsan faqrada (1) ee qodobkan waxay dhaqan galeysa laga bilaabo maalinta sodonaad ee taariikhda ay gaarto tirada waraaqaha ogolaanshaha ee la dhigay sadax meelood labo meel tirada Dowladaha qaybta ka ah taariikhda ay ogolaadaan wax ka bedelista. Intaa kadib wax ka belistu waxay dhaqan galeysa marka loo fiiriyo Dowlad kasta maalinta sodonaad ee la xariira marka ladhigo waraaqaha aqbalida ee u gaar ka ah, wax ka bedelistani waxay waajib ku noqoneysa Dowladaha qeybta ka ah ee aqbalay.

*Qodobka 20aad*

*Burinta*

1. Dowlad kasta oo qeyb ka ah waxaa u banaan inay buriso borotokolkan waqti kasta ayada oo u gudbinaysa ogeysiis qoraal ah Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, burintaani waxay dhaqan galeysaa lix bilood kadib laga bilaabo taariikhda Xoghayaha Guud la wareego ogeysiiskaasi.

2. Waxba uma dhibayso burintaas socoshada ku dhaqida qodobada borotokolkan, cabasho kasta ee lagu soo gudbiyo si waafaqsan labada qodob ee 2-aad iyo 10-aad ama tallaabooyin kasta ee loo qaado si waafaqsan qodobka 11aad kahor taariikhda dhaqan galka burinta.

*Qodobka 21aad*

*Ogeysiisyada ka soo baxa Xoghayaha Guud*

(a) Saxiixyada, ansixinta, iyo kusoo biirista kuna timid si waafaqsan borotokoolkan;

(b) Taariikhda dhaqangalka borotokoolkan uu bilaabmay iyo taariikhda dhaqangalka isbedel kasta oo ku yimid si waafaqsan qodobka 19-aad;

(c) Burin kasta oo waafaqsan qodobka 20-aad.

*Qodobka 22aad*

*Afafka rasmiga ah*

1. Waxaa la dhigaya borotokoolkan nuqulo oo ay ku qoranyihiin afafka Carabiga (Arabic), Shiinays (Chinese), Ingiriisi (English), Faransiis (French), Ruush (Russian) iyo Isbaanish (Spanish) kuwaas oo dhamaantood leh awood xigasho oo siman, arshiifka Qaramada Midoobay.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu u diraya nuqulo ansaxsan oo ka mid ah borotokoolkan dhamaan Dowladaha lagu sheegay qodobka 26-aad ee heshiiskan.

# Axdiga Caalamiga ah ee Ciribtirka Dhammaan Noocyada Cunsuriyadda Isirka

***Waxaa lagu qaatay loona furay saxiixa, ansixinta qaraarka Golaha Guud ee Qaramada Midoobay 2106 A (XX) ee 21-kii December 1965***

DHAQAN GALKA HESHIISKA: 4 JANUARY 1969 SIDA WAAFAQSAN QODOBKA 19

*Dowladaha xubnaha ka ah Axdigan,*

Iyaga oo tixgalinaya Dastuurka Qaramada Midoobay ee ku salaysan Mabaadii'da Karaamada iyo Sinnaanta asal ma doorshaanka ah ee aadamaha iyo isku waajibinta si wada jir ah iyo gooni gooni ahaanba in ay dhaqangaliyaan iskaashiga Qaramada Midoobay si loo gaadho mid ka mid ah himilada Qaramada Midoobay oo ah kor u qaadida iyo dhiirigalinta karaamada caamka ah iyo ilaalinta Xuquuqda Aadamaha iyo iyo Xorriyadaha asaasiga ah ee dadka oo dhan, iyada oo aan loo kala soocin qowmiyad, jinsi, luqad iyo diin,

Iyaga oo tixgalinaya Baaqii Caalamiga ahaa ee Xuquuqda Aadamaha kuwaas oo caddeynaya in dhammaan dadku dhasheen iyaga oo xor ah oo leh karaamo siman isla markaasna uu qof kastaa xaq u leeyahay dhammaan xuquuqaha iyo xorriyadaha ku qeexan halkan, iyada oo aan loo kala soocin noockasta sida gaar ahaan Sinji, Midab ama Isir Ummadeed,

Iyada oo la tixgalinaayo in dhammaan Aadamuhu u simanyahay Sharciga oo ay mudanyihiin ilaalinteeda oo loo simanyhay waxii lid ku ah ee dhiirigalinaya Takoorid,

Iyada oo la tixgalinayo in Baaqa Qaramada Midoobay ee cidhibtirka dhammaan noocyada kala soocista ee 20 Nofembar 1963 (Qaraarka Golaha Guud ee Qaramada Midoobay (xviii) si niyada ah oo xoojinaysa baahida dhakhsaha ah ee cidhibtirka Midab kala-sooca Adduunka oo dhan noocyadiisa iyo daliiladiisa iyo xoojinta isfahamka iyo xurmaynta karaamada Qofka Aadamaha ah,

Iyada oo la tixgalinaayo in Qaramada Midoobay cambaareynayaan Gumeysiga iyo dhaqan kala-soocista la xidhiidha halkan nooc kasta oo ay leedahay iyo meel kasta oo ay ka jirto iyo Baaqa ku saabsan in la siiyo madaxbannaanidooda Wadamada iyo dadka la isticmaarsado ee 14 Diisembar 1960, Qaraarka Golaha guud ee Qaramada Midoobay 1514(XV) waxa ay xaqiijisay si adagna ugu baaqday baahida soo afjarida degdegga ah oo shuruud la'aan ah,

Iyada oo la yaqiinsaday in caqiidada kala sarreynta ee ku salaysan faraqa Sinji ay cilmi ahaan tahay mid been ah dammiir ahaana ay tahay mid u qalanta cambaareyn iyada oo Bulsho ahaana ay tahay mid caddaalad darro ah oo khatar leh taas oo ah in aaney jirin sababo daliil u ah Midab kala-sooca fikrad ahaan iyo ficil ahaanba,

Iyada oo dib loo xaqiijinayo kala-soocista Aadamaha dhexdiisa sababo Sinji, Midab, Isir Bulsho ay caqabad ku tahay saaxiibtinimada iyo xidhiidhka nabad ku wada noolaanshaha Ummadaha, iyada oo khalkhal galinaysa nabadda iyo ammaanka dadyowga dhexdiisa iyo saaxiibtinimada lagu wada noolyahay ee wadan kasta,

Iyada oo la xaqiiqsanyahay jiritaanka caqabadaha ay ku naaloonayaan Bulshadu iyada oo laga walwalsanyahay ifafaalaha Midab kala-sooca ee ilaa hadda ka muuqda meelaha qaarkood Dunida iyo siyaasadaha Dowladaha qaarkoodba oo ku saleysan isla weyni iyo naceyb, sida Siyaasadaha Midab kala sooca, kala reebida iyo kala saarida,

Iyada oo ay naga go'antahay in aanu qaadno dhammaan tallaabooyinka loo baahanyahay ee dedejinta cidhibtirka kala sooca Isirka noocyadiisa iyo daliiladiisa oo dhan iyo in aanu ka hor tango lana dagaalano caqiidooyinka Isirka iyo ku dhaqankooda si kor loogu qaado is fahamka Qowmiyadaha dhexdooda, loona dhiso Bulsho Caalami ah oo xor ka ah noocyada kala soocista oo dhan,

Iyada oo aanu maanka ku hayno Axdiga ku saabsan kala soocista ee ku aadan shaqo qorista iyo xirfad yaqaanada ay qaadatey Hay'ada Shaqaalaha Adduunku (ILO) ee 1958 iyo Axdiga lidka ku ah kala-soocista dhinaca waxbarashada Hay'adda Qaramada Midoobay ee Waxbarashada, Cilmiga iyo Dhaqanka ee (UNESCO) ee 1960,

Iyada oo ay naga go'antahay dhaqangelinta Mabaadii'da ay ka koobantahay Baaqii Qaramada Midoobay ee cidhibtirka noocyada Takoorka Qowmiyadeed iyo in la xaqiijiyo sida ugu dhakhsaha badan qaadashada tallaabooyin wax ku ool ah oo lagu soo afjarayo,

*Waxa ay isku raaceen sidan soo socota:*

# QEYBTA I

*Qodobka 1aad*

1. Eraygan kala-soocista ku salaysan 'Cunsuriyada' waxaa loola jeedaa: kala soocis kasta, kala reebis kasta, yarayn kasta, kala qaybin kasta oo ku salaysan Qowmiyad, Midab, Isir, Ummad ama Isir Bulsho oo loola jeedo in lagu baabi'iyo ama lagu daciifiyo aqoonsiga, ka faa'iidaysiga ama ku dhaqanka oo si siman xuquuqaha Aadamaha iyo Xorriyadaha asaasiga ah ee dhinaca Siyaasadda, Dhaqanka iyo Dhaqaalaha

2. Axdigan looma adeegsan karo kala soocis, kala reebid, yarayn, kala saaris ay ku sammeyso Dowlad Xubin ka ah Axdigan Muwaadiniinteeda iyo kuwa aan muwaadiniinteeda ahayn.

3. Wax ka mid ah Axdigan looma fasiran karo si kasta oo saamayn ku yeelanaysa qodobo qaanuuneedka Dowladaha xubnaha ka ah kuna saabsan Sinjiyad, Muwaadinimo ama Jinsiyad bedel iyada oo shardi ay tahay in qodobadaasi aanay sooceyn Jinsiyad gaar ah.

4. Tallaabooyinka gaarka ah ee loo qaado iyada oo loola jeedo oo kali ah in la xaqiijiyo horumarinta ku haboon qowmiyad ama isir kooxeed gaar ah ama shakhsiyaad u baahan ilaalintaas oo ay keentay baahi isir kooxeed ama mid shakhsi in ay ka faa'iideystaan ama ku dhaqmaan Xuquuqaha Aadamaha iyo xorriyadaha asaasiga ah taas oo aan loo qaadan in ay yihiin kala soocis, iyada oo ay shuruud u tahay in aanay keeneyn natiijooyin u horkacaya xuquuqo gaar ah oo qowmiyad gaar ah la siiyo.

*Qodobka 2aad*

1. Dowladaha xubnaha ka ah Axdigan waxa ay cambaareynayaan Isir kala soocis kasta waxayna isku waajibiyeen in ay daba joogaan iyaga oo adeegsanaya hababka ku habboon iyada oo aan la daahin siyaasad lagu cidhibtirayo kala soocista noocyadeeda oo dhan, isla markaana kor loo qaadayo isfahamka qowmiyadaha dhexdooda si taas loo gaadho;

(a) Dowlad kasta oo xubin ka ah heshiiskani waxa ay isku waajibisay in aaney ku kicin fal ama ku dhaqmin kala soocid lid ku ah dad, koox ama shakhsiyaad ama hay'ado iyo in ay xaqiijiso in dhammaan Masuuliyiinta dowladdu iyo hay'adaha dowladda ee qaranka ama kuwa Maxaliga ahi ay ku dhaqmaan si waafaqsan waajibaadkani;

(b) Dowlad kastaa waxa ay damaanad qaadaysaa in aaney kafaalo qaadin, difaacin ama gargaarin Midab kala soocis la xidhiidha dad ama Ururo;

(c) Dowlad kastaa waxa ay qaadeysaa tallaabooyin wax ku ool ah oo ay dib ugu eegayso siyaasadaheeda qaran kuwa dowladeed ama kuwa gudaha ee deegaaneed isla markaana ay wax kaga bedelayso, joojinayso ama baabi'ineysa shuruuc kasta iyo hab kasta oo keenaya saameyn abuureysa ama sii dheeraynaysa midab kala soocid meel kasta oo ay ka jirto;

(d) Dowlad kasta oo xubin ka ah Axdigan waxa ay mamnuuceysaa iyada oo soo afjaraysa hab kasta oo ku habboon, kuwaas oo ay ka mid yihiin Sharci dejin sida ay duruufuhu u baneynayaan midab kala soocista ay ku kacaan Ashkhaas, koox ama hay'ado;

(e) Dowlad kasta oo xubin ahi waxa ay isku waajibisay in ay dhiirigaliso is dhexgelinta qawmiyadaha, ururaddooda iyo dhaqdhaqaaqyadooda iyo hababka kale ee dabar-goynaya carqaladaha qowmiyadaha dhexdooda iyo in aanay dhiirigelin wixii kasta ee keenaya in ay xoojiyaan kala qaybsanaanta qowmiyadaha.

2. Dowladaha xubnaha ka ah marka ay duruufuhu u baneeyaan waxa ay qaadi doonaan tallaabooyin la taaban karo dhinacyada bulshada, dhaqaalaha iyo dhaqanka iyo qaybaha kale oo ay ku xaqiijinayaan kor u qaadida iyo ilaalinta kooxo gaar ah iyo shakhsiyaad ka tirsan koox qowmiyadeed, taas oo loola jeedo in la dammaanad qaado ka faa'iideysiga buuxa ee xuquuqaha iyo xorriyadaha Aadamaha ee loo simanyhay. Tallaabooyinkaasi sinaba ma wataan natiijo joogto ah oo xuquuq aan loo sinnayn oo gooni ah oo ay yeeshaan kooxo qowmiyadeed ka dib marka la gaadho ujeedooyinkii tallaabooyinka loo qaaday.

*Qodobka 3aad*

Dalalka xubnaha ka ah waxay si gaar ah u cambaareynayaan kala soocista cunsuriyadda ku salaysan iyo midab takoorka, iyaga oo isku waajibiyay in ay ka hortagaan mamnuucista iyo dabargoynta dhammaan caadooyinka iyo isticmaalka dabiiciga ah ee dhulalka maamulkooda dadkiisu hoos yimaadaan.

*Qodobka 4aad*

Dalalka xubnaha ka ah Axdigan waxa ay cambaarynayaan dhammaan Dicaayadaha iyo Ururada ku salaysan fikradaha iyo aragtiyaha isla waynida Qowmiyadeed ama mid kooxo shakhsiyado ah oo isku midaba ama isku Isir kooxeed ah, ama kuwaasoo isku daya in ay daliilsadaan ama kor u qaadaan is nacaybka midabtakoorida iyo kala soocista nooc kasta oo ay tahay, iyaga oo isku waajibinaya in ay qaadaan tallaabooyin degdeg ah oo wanaagsan oo loo qorsheeyay in ay dabar gooyaan wax kasta oo dhiirigalinaya ama ficil ah oo ku saabsan soo afjarida kala soocida, iyada oo la waafajinayo Mabaadida uu xanbaarsanyahay Baaqyada Caalamiga ah ee xuquuqda Aadamaha iyo xuquuqaha uu si cad u qeexayo Qodobka 5aad ee Axdigani ee la aqoonsaday, iyo weliba:

(a) In ay ku cadeeyaan sharcigooda in ay dambi yihiin dhamaan fikradaha ku salaysan consuriyada kala saraynta isirada, ama ku salaysan nacaybka, ama baraarujinta xamaasada cunsuriyada isirka. Iyo weliba ficilada lagu colaadinayo ama lagula dirirayo isir-kooxeed ama dad gaara oo lagu colaadinayo midabkooda ama isirkooda. Waxa kale oo dambi noqonaya kaalmo kasta oo la siiyo ficilada cunsuriyada isirka, sida kaalmada dhaqaale;

(b) In ay cadayso in ay sharci ahaan mamnuuc yihiin ururada iyo talaabooyinka boronbagaandada ee lagu holcinayo cunsuriyada isirka. Isla markaana la garawsado in nashadaadka noocaas ahi yihiin dambiyo baalmarsan sharciga oo lagu mudan karo ciqaab sharciyeed;

(c) In aan loo ogolaan waaxaha ama hay'adaha dadweynaha, mid heer qarameed ama goboleed, in ay kobciyaan ama holciyaan xamaasadaha cunsuriyada isirka.

*Qodobka 5aad*

Si waafaqsan waajibaadka asaasiga ah ee uu dhigayo Qodobka labaad ee Axdigan, Dalalka xubnaha ka ah waxa ay isku waajibiyeen in ay mamnuucaan, isla markaasna cidhibtiraan kala soocista cunsuriyada ku salaysan noocyadeeda oo dhan iyaga oo dammaanad qaadaya xaqa qof kasta, iyada oo aan loo kala soocayn qowmiyad, midab, dal ama isir kooxeed, isla markaana u siman sharciga hortiisa gaar ahaan ka faa'iidaysiga xuququuqaha soo socda:

(a) Xaqa u sinnaanta Sharciga oo ay fuliyaan Maxkamado xor ah oo dhex ah iyo waaxayaha kale ee Maamulka Cadaaladda;

(b) Xaqa ammaanka qofka iyo ka ilaalintiisa wixii lid ku ah sida xadgudub iyo jidh-dil ka timaada Masuuliyiinta dowladda ama koox gaar ah ama maamul hay'adeed;

(c) Xuquuqaha Siyaasiga ah gaar ahaan xaqa ka qayb qaadashada doorashooyinka codbixinta iyo isu taagista doorashada ku saleysan ka qayb galka doorashada caam ahaaneed ee loo simanyahay, Dowlada iyo kuwa arrimaha dadweynaha heerkasta oo ka mid ah awood siman oo lagu gaadho u adeegista dadweynaha;

(d) Xuquuqaha Madaniga ah ee khaas ahaaneed:

(i) Xaqa xorriyada degenaanshaha iyo dhaqdhaqaaqa Ddegaanka dalkiisa gudihiisa;

(ii) Xaqa in uu tago Dal kasta oo uu kiisu ka mid yahay kuna soo noqon karo Dalkiisa;

(iii) Xaqa Jinsiyada;

(iv) Xaqa Guurka ee xorriyada rabitaanka labada qof ee isguursanaya;

(v) Xaqa hanti yeelasho iyo in hantidiisa dad kale uu kula shuraakoobi karo;

(vi) Xaqa in uu wax dhaxlo;

(vii) Xaqa xorriyada fikirka, garashada iyo diinta;

(viii) Xaqa xorriyada ra'yigiisa iyo dhiibashada ra'yigiisa;

(ix) Xaqa xorriyada ku biirista Uurur nabadgalyo;

(e) Xuquuqha Dhaqalaha, Bulsho iyo Dhaqan gaar ahaaneed:

(i) Xaqa shaqo uu si xor ah u doorto oo ku habboon noloshiisa, iyada oo laga ilaalinayo shaqo la'aanta iyo in uu helo mushahar u dhigma shaqada uu qabto;

(ii) Xaqa in uu ku biiro Ururo Shaqaale;

(iii) Xaqa in uu helo hoy/Guri uu ku noolaado;

(iv) Xaqa daryeel Caafimaad Dowladeed. Xaqa caymis badbaado iyo mid bulsho;

(v) Xaqa Waxbarasho iyo tababar;

(vi) Xaqa in si siman looga qayb qaato dhaqdhaqaaqyada Dhaqanka;

(f) Xaqa awooda gaadhista/galida meel kasta ama adeeg kasta oo u furan isticimaalista dadweynaha sida gaadiidka dadweyanha, hudheeladda, mukhaayadaha cuntada, makhaayadaha bunka/shaaha, masraxyada iyo jardiinooyinka lagu nasto.

*Qodobka 6aad*

Dalalka xubnaha ka ah Axdigan waxa ay u xaqiijinayaan qof kasta oo Maamulkooda hoos yimaada in uu leeyahay ilaalin wax ku ool ah iyo magdhaw ay fulinayaan Hay'ado Garsoor oo ikhtisaas u leh iyo Hay'ado kale oo Dowladeed iyada oo laga ilaalinayo fal kasta oo Midab takoor ah oo ku xadgudbaya Xuquuqda Aadamaha iyo xorriyadaha asaasiga ah ee lidka ku ah Axdigan, iyada oo ay waliba ka mid tahay in Hay'adahaas Garsoor laga raadiyo magdhaw iyo caddaalad ku filan iyo raali gelin waxyeelo kasta oo ku timid fal Midab-takoor aawgeed.

*Qodobka 7aad*

Dowladaha xubnaha ka ah Axdigan waxa ay isku waajibiyeen in ay qaadaan tallaabooyin wax ku ool ah oo degdeg ah, gaar ahaan qaybaha waxdhigida, waxbarashada, dhaqanka iyo warfaafinta, iyada oo loola jeedo in lagula dagaalamo naceybka keenaya midab-takoorka, isla markaana kor loogu qaadayo is-fahamka, dulqaadka iyo saaxiibtinimada ummadaha dhexdooda iyo kooxaha isir qowmiyadeedka. Lagana hortago dacaayadaha horseeda cunsuriyadaha isirka. Lana kaashado oo la kobciyaa ujeedooyinka iyo mabaadii'da dastuurka Qaramada Midoobay iyo kan Baaqa Caalamiga ah, iyo Baaqa Qaramada Midoobay ee cidhibtirka noocyada Midab-takoorka oo dhan iyo ka Axdigan.

## QEYBTA II

*Qodobka 8aad*

1. Waxaa la aasaasi doonaa Guddi qaabilsan cidhibtirka Midab-takoorka (oo halkan lagu magacaabi doono "Guddi") kana kooban 18 khabiir oo leh dabeecad iyo dammiir sare loona aqoonsaday eexasha la'aan oo ay kasoo doorteen Dowladaha xubnaha ahi Muwaadiniintooda dhexdooda, kuwaas oo ku shaqayndoona kartidooda shakhsi, iyada oo tixgelin la siin doono

sinaanta qaybsanaanta Juquraafi ee xubinnimada iyo wakiilnimada qaababka kala duwan ee ilbaxnimada Caalamka iyo hababka Mabaadii'da Qaanuuneed.

2. Xubnaha Komishanka waxaa lagu dooran doonaa hab qarsoodi ah oo liis dad badan oo ay soo magacaabeen dalalka dhinacyada ka ah Axdigan, iyada oo Dal kasta oo xubin ka ahi uu magacaabayo hal Qof oo ka tirsan Muwaadiniintiisa

3. Doorashada hordhaca ah waxaa lagu qaban doonaa lix bilood ka dib taariikhda Axdigani dhaqangaley. Ugu yaraan seddex bilood ka hor taariikhda doorasho kasta Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu u diri doonaa Dalalka xubnaha ka ah warqad uu ku marti qaadayo in ay soo gudbiyaan magacaabistooda muddo laba bilood ah gudahood. Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu diyaarin doona liis u qoran qaab higaadeed oo ka kooban magacyada dhammaan dadka la soo magacaabay, kaas oo muujinaya Dowladaha xubnaha ka ah ee soo magacaabey, waxaanu u gudbin doonaa Wadamada xubnaha ah.

4. Doorashada xubnaha Guddida waxaa lagu qaban doonaa shir Dowladaha xubnaha ka ah oo uu isugu yeedhay Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, kulankaas oo seddex meelood laba meel ahaan ayuu tirada shirku ugu yaraan ku qabsoomi doonaa, la magacaabayaasha hela tirada u badan ee cododka iyo haldheerida wakiilada Dowladaha xubnaha ka ah Axdigan ee codeeyay ee goob jooga ah.

5. (a) Xubnaha Guddida waxaa la dooran doona muddo afar sanno ah, hasa yeeshee muddada sagaalka xubnood ee la doortay doorashada ugu horreysa waxay dhammaan doonta muddo labo sanno ah, isla markiiba doorashada hore ka dib magacyada sagaalkan xubnood waxa lagu kala dooran doonaa qori tuur uu sameeynayo Guddoomiyaha Guddidu.

(b) Buuxinta jagooyinka caadi ahaan u bannaanaada, Dowladda dhinaca ka ah ee khabiirkeeda ka dhamaatay mudadii howlgalkii xubinnimada Guddida waxa ay soo magacaaban doontaa khabiir kale oo ay ka soo dhexdooratay Muwaadiniinteeda taas oo ku xidhan ansixinta Guddidaas.

6. Dowladaha xubnaha ka ah waxa ay masuul ka noqon doonaan kharashyada xubnaha Guddida inta ay ku guda jiraan waajibaadka Guddida.

### *Qodobka 9aad*

1. Dowladaha dhinaca ka ah waxa ay dammaanad qaadayaan in ay u gudbin doonaan Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay wabixin ku saabsan Sharci-dejinta Garsoorka, Maamulka iyo tallaabooyinka kale ee ay qaadeen kuwaas oo saameynaya qodobada Axdigan:
(a) Sannad gudihii laga bilaabo maalinta dhaqan galka Axdigan ee Dowlada ay khuseyso iyo,
(b) haddana labadii sannoba iyo mar kasta oo Guddigu sidaas codsadaan. Guddigu waxa uu ka codsan karaa xog dheeraada Dowladaha Axdigan xubnaha ka ah.

2. Guddidu waxa ay sannad walba bixin doontaa warbixin ay sii mariso Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, Golaha Guud ee Qaramada Midoobay howlqabadkooda iyaga oo bixinaya tallaabooyin iyo tilmaamo ku salaysan baadhitaanka warbixinta iyo xogta laga helay Dowladaha dhinaca ka ah. Soo jeedinahaa iyo talo-bixinahaas waxaa loo gudbindoonaa Golaha Guud ee Qaramada Midoobay iyada oo ay la socoto faalooyinka laga helay Dowladaha dhinaca ka ah haddii ay jiraan.

*Qodobka 10aad*

1. Guddigu waxa ay dejin doonaan xeer hoosaadkooda.

2. Guddigu waxa ay dooran doonaan Saraakiishooda wakhti laba sanno ah.

3. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu Guddiga siinayaa Xoghayn.

4. Shirarka Guddiga waxaa caadi loogu qaban doona Xarunta Qaramada Midoobay

*Qodobka 11aad*

1. Haddii Dowlad xubin ka ah Axdigan ay u muuqato in Dal kale aanu dhaqan gelin Qodobada Axdigan waxaa u furan in ay dareensiiso Guddiga. Guddigu waxa uu markaa xidhiidh qoraal ah u sii gudbin doonaa Dowladda xubinta ka ah ee ay khuseyso. Muddo Seddex bilood gudahood ah Dowladda hesha qoraalkan waxa ay u gudbindoontaa Guddiga sharaxaad qoraal ah iyo jawaab ay ku caddeynayso arrinta iyo xalkeeda haddii uu jiro, xalkaas oo ay ahayd in ay Dowladaasi qaado.

2. Haddii aan arrinta la isla xallin si ay raali ka yihiin labada dhinac oo ah wada hadal saaxiibtinimo ama hab kale oo kasta oo u furan labadooda muddo lix bilood ah gudaheed ka dib marka ay hesho Dowladda loo gubinaayo xidhiidhka qoraalka ah ee hor dhaca ah. Labada Dowladood mid kastaa waxa ay xaq u leedahay in ay arrinta u gudbiso mar labaad Guddiga ama in ay wargaliso Guddiga iyo Dowladda kale haddana.

3. Guddigu waxa uu ka shaqeyn arrinta si waafaqsan faqrada 2 ee Qodobkan marka ay xaqiijiso in xal magdhaw iyo mid saaxiibtinimo oo maslaxad ah lagu guuleysan si waafaqsan Mabaadida Guud ee Sharciga Caalamiga ah. Ma noqoneyso habka dhaqangelinta Magdhaw in si aan macquul ahayn loo muddo dheereeyo

4. Arrin kasta oo la soo gudbiyo Guddigu waxa uu ugu yeedhi Dalalka ay khuseyso ee xubnaha ka ah in ay bixiyaan xog kasta oo la xidhiidha arrinta.

5. Marka arrin kasta oo ku lug leh Qodobka ay Guddigu ka fiirsanayaan, Dowladaha xubnaha ka ah ee ay khuseyso waxa ay xaq u leeyihiin in ay usoo dirtaan wakiil ka qaybgala xukunka Guddiga isaga oo aan lahayn xaqa codbixinta inta arrinta laga baaraandagayo

*Qodobka 12aad*

1. (a) Ka dib marka Guddigu helaan uruurinta xogta oo dhan ee ay u arkaan in ay tahay lagamamaarmaan, Guddoomiyuhu waxa uu magacaabi doonaa Guddi dhexdhexaadineed (oo halkan lagu magacaabi doono “Komishan”) oo ka kooban Shan xubnood kuwaas oo ka mid noqon kara ama aan ka mid noqon karin xubnaha Guddiga. Xubnaha koomishanka waxaa lagu magaacaabi doonaa ogolaanshaha dhammaan dhinacyada xubnaha ka ah muranka iyada oo xafiisyadeedu ay noqonayaan kuwo u furan Dowladaha ay khuseyso, iyada oo laysla eegayo in ay gaadhaan xal la isku waafaqayo oo ku saabsan arrinta kuna saleysan xurmeynta Axdigan.

   (b) Haddii ay Dowladaha Xubnaha ka ah muranku ay ku guuleysan waayaan in ay ku gaadhaan Heshiis muddo seddex bilood ah gudahood, dhammaan ama qayb ka mida xubnaha Koomishanku ka koban yahay, xubnaha Koomishanka ka mid ah ee aan ku heshiin, ee Dowladaha xubnaha ka ah muranka waxaa lagu dooran doonaa cod qarsoodi ah oo ah 2/3 codka Guddiga oo laga dhexdoorto Guddiga dhexdiisa.

2. Xubnaha Koomishanku waxa ay ku shaqayn doonaan awoodooda Shakhsi. Ma noqon doonaan Muwaadiniin Dalalka xubnaha ka ah Muranka ama Dal aan xubin ka ahyn Axdigan.

3. Komishanku waxa ay iska dhex dooran doonaan Guddoomiyahooda waxaaney sameyn doonaan xeer-hoosaadyada howlgaladooda.

4. Shirarka Komishanka waxa sida caadiga ah lagu qaban doonaa xarunta Qaramada Midoobay ama meel kale oo Komishanku u arkaan in ay ku habboontahay

5. Xoghaynta la siiyay ee waafaqsan Qodobka 10 faqradiisa 3 ee Axdigan waxa ay iyana u adeegi doontaa Komishanka mar kasta oo muran ka dhexdhasho Dowladaha xubnaha ka ah in uu keeno ama sababo in Komishanku dib u abuurmo.

6. Dowladaha xubnaha ka ah is af-garanwaaga si siman ayay u qaybsan doonaan dhammaan kharashyada xubnaha Komishanka si waafaqsan qiyaasta kharashka uu bixiyo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay

7. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu awood u yeelan doonaa in uu bixyo kharashka xubnaha Komishanka, haddii loo baahdo inta aanay soo shubin Dowladaha xubnaha ka ah iska hor imaadka si waafaqsan faqrada 6 ee Qodobkan

8. Warka ay hesho ama la siiyo Guddidu waxaa loo gudbindoonaa Komishanka, Komishankuna waxa uu ugu yeedhi karaa Dowladaha ay khuseyso in ay u keenaan xog kale oo arrinta ku saabsan

*Qodobka 13aad*

1. Marka Komishanku uu si dhammaystiran uga fiirsado arrinta waxa ay diyaarin doonaan

una gubin doonaan Guddoomiyaha Guddida warbixin ka kooban natiijooyinkii Su'aalahii xaqaa'iqa ahaa oo dhan ee khuseeya arrinta ka dhaxaysay labada dhinac iyada oo ay ku jirto faalooyinkooda ay ugu muuqato xalka saaxiibtinimo ee muranka.

2. Guddomiyaha Guddidu wuxuu u diyaarin doonaa xidhiidh qoraal ah oo ku saabsan warbixinta Komishanka mid kasta oo ka mid ah Dowladaha xubnaha ka ah muranka, Dowladahaasi seddex bilood gudahood waxay ku wargelin doonaan Guddomiyaha Guddiga in ay aqbaleen iyo in aanay aqbalin soo jeedinaha ku jira warbixinta Komishanka

3. Ka dib muddada ku xusan faqrada 2 ee qodobkan, Guddomiyaha Guddigu waxa uu u gudbin doonaa warbixinta Komishanka iyo caddaymaha Dowladaha xubnaha ka ah ee ay khusayso iyo Dowladaha kale ee xubnaha ka ah Axdigan.

*Qodobka 14aad*

1. Dowlad kasta oo xubin ka ah waxa ay caddayndoontaa wakhti kasta in ay aqoonsantahay awooda Guddiga ee ah in ay helaan xidhiidhka Qoraalada ah ee ka imanaya shakhsiyaad ama kooxo gaar ah ee maamulkooda hoos yimaada ee sheeganaya in ay yihiin dhibanayaal ay ku xadgudubtay Dowladda xubinta ka ah, xuquuqdooda ku xusan Axdigan. Balse Guddigu ma tixgelin doonaan xidhiidh ama qoraal kasta oo ka yimaada Dawlad aan baaqa ogolaanshaha aan samaynin.

2. Dowlad kasta oo xubin ka ah oo sammaysay caddeyntaas sida ku qeexan faqrada 1aad ee qodobkan waxay dhisi kartaa ama tilmaami kartaa Guddi hab caddaaladeedkeeda ka mid ah, kaas oo awood ikhtisaasi ah u leh in ay helaan oo ay ka baaraandegaan codsiyada ka imanaya shakhsiyaadka ama kooxaha shakhsiyaadka ah ee Maamulkooda hoosyimaada oo ku dacwoonaya in ay yihiin dhibanayaal lagu xadgudbay qaar ka mid ah xuquuqdooda uu Axdigani dhigayo, iyada oo ay ka daaleen xal kale oo kasta oo suurogalinaya daaweynta Dacwadda.

3. Baaqa ay soo saareen ee waafaqsan faqradda 1aad ee Qodobkan iyo magaca cid kasta ee loo aasaasay ama la tilmaamay ee waafaqsan faqrada labaad ee Qodobkan waxaa lagu xafidi doonaa oo Dowladda ay khuseyso u dhiibi doontaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, isaga oo u sii gudbin doona nuqulada Dowladaha kale ee dhinaca ka ah. Baaqaas dib ayaa loola soo noqon karaa iyada oo la wargelinayo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, laakiin dib ula noqoshadu ma saamayneyso xidhiidhka ee markaas horyaala Guddiga wax ka qabashadooda.

4. Diiwaanka araajida lagu qoro waxaa xafidi doona Guddiga loo abuuray ama la tilmaamay taas oo waafaqsan faqrada 2 ee Qodobkan, iyada oo nuqulada ansaxsan ee diiwanka la galayndoono sannadkiiba, lana marin doono ilaha ku habbon ee la xidhiidhsan Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, iyada oo la fahamsanyahay in waxa ay ka koobanyihiin aan dadka daboolka ama daaha looga qaadi doonin.

5. Marka lagu guulaysan waayo in laga helo raali gelin Guddiga la abuuray ama la tilmaayay si waafaqsan faqrada 2aad ee Qodobkan arji soo Qoruhu ahna dacwooduhu waxa uu xaq u yeelan doonaa in uu xidhiidh Qoraal ah oo arrinta ku saabsan Guddiga muddo lix bilood ah gudahood.

6. (a) Guddigu si qarsoodi ah ayuu ula xidhiidhayaa in ay ogaato Dowladda xubinta ah ee ay khusayso ee lagu sheegayo in ay ku xadgudubtay qaar ka mid ah Axdigan, hasayeeshee aqoonsiga shakhsiyaadka ama kooxaha shakhsiyaadka ah lama caddeyn doono kuwa ay yihiin iyada oo isaga ama iyada lagala tashan. Guddigu ma qaban doono waraaqo aan la aqoonsan;

(b) Muddo saddex bilood ah Dowladda hesha Qoraalada waxay u gudbin doontaa Guddida iyada oo faahfaahsan oo sharaxaad dheeraada ka bixinaysa si ay u caddeyso arrinta iyo xalkeeda haddi ay jiraan oo ah kuwa Dowladaasi ay qaadi doonto.

7. (a) Guddigu waxa uu darsi doonaa xidhiidhada Qoraalada ee ku saabsan dhammaan warbinada ay u keentay Dowladda xubinta ka ah ee ay khusayso iyo dacwadahood yimaada dacwoodaha ilaa la hubiyo in ay dacwoodaha ka dhammaatay dhammaan xalalkii suuragalka ahaa ee dhexdooda, Hasa yeeshee tani ma noqon doonto mid xalkeeda si aan caqligal ahayn loo dheerayo;

(b) Guddigu wuxuu gudbin doonaa wixii talooyin iyo tilmaamo iyo faalooyinkooda haddi ay jiraan, Dowlada xubinta ka ah ee ay khusayso iyo dacwoodahaba.

8. Guddigu waxay warbixin sannadeedkooda ku dari doonaan xidhiidh Qoraalo kooban, meeshii ku habboon fasiraad kooban iyo tafaasiilaha ee Dowladda xubinta ah ee ay kusayso iyo wixii tallooyin ah iyo tilmaamaba.

9. Guddigu waxa uu noqon doonaa mid awood ikhtisaasi ah u leh in uu fuliyo waajibaadka ku xusan Qodobkan marka ay ugu yaraan todoba Dowladaha xubnaha ka ahi Axdigan ay xakamaynayso Baaqyada si waafaqsan faqrada 1aad ee qodobkan.

*Qodobka 15aad*

1. Inta aan la gaadhin hanashada ujeedooyinka Qaraarka siinta Madaxbannaanida Wadamada iyo Dadyowga la gumeysto ee uu ka koobanyahay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay 1514 (XV) ee 14 December 1960, Qodobada Axdigani sinaba uma xaddeynayo xaqa dacwadda la siiyo dadkaas, ee ay siinayaan hababka Caalamiga ahi ee kale ama kuwa Qaramada Midoobay iyo kuwa Hay'adaha gaarka ah.

*Qodobka 16aad*

Tilmaamaha lagu hirgalinayo Axdigan waxaa lagu dabaqayaa iyada oo aan lagu xadgudbayn hababka lagu qeexay Mawduucan Xuquuqda Aadamaha ee ku dhigan Qoraaladeeda Qaanuuneed ee asaasiga ah iyo kan Axdiga Qaramada Midoobay iyo Hay'adaheeda gaar ahaaneed. Axdigani ka hor joogsanmaayo Dowladaha xubnaha ka ah in ay yeeshaan imkaaniyaad habab kale oo lagu xalliyo khilaafka oo waafaqsan guud ahaan iyo gaar ahaan Heshiisyada Caalamiga ah ee iyaga u dhexeeya.

## QEYBTA IIIaad

*Qodobka 17aad*

1. Saxiixa Axdigani waxa uu u furanyahay Dal kasta oo xubin ka ah Qaramada Midoobay ama Hay'adaheeda gaarka ah ama dhismaha Maxkamada Caalamiga ah ee Cadaaladda (ICJ) International Court of Justice) xubin ka ah iyo Dowlad kasta oo uu marti qaado Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ama xubin ka noqonaysa Axdigan.

2. Axdigani waxa uu u yaalaa ansixin, Qoraalka aqoonsiga waa in la dhigo Xafiiska Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay

*Qodobka 18aad*

1. Axdigani waxa uu u furanyahay ogolaansho Dowlad kasta oo lagu sheegay Qodobka 17, xubinta 1aad ee Axigan.

2. Ogolaanshuhu waxa uu dhaqangalayaa marka Qoraalka la dhigo Xafiiska Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qodobka 19aad*

1. Axdigani waxa uu dhaqangalayaa maalinta 30aad kadib marka la dhigo Qoraalka Ansixinta ama ogolaanshaha Xafiiska Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ee todoba iyo labaatanaad ee Qoraalka ansixinta ama ogolaanshaha.

2. Dowlad kasta oo ansixinaysa ama ogolaanaysa Axdigan ka dib dhaqan-galkiisa, waxa uu iyada u dhaqan-galayaa 30 maalmood ka dib marka ay Qoraaladeeda ansixinta ama ogolaanshaha dhigto Xafiiska Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qodobka 20aad*

1. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu heli doonaa kuna wargelindoonaa dhammaan Dowladaha xubnaha ka ah Axdigan ama kuwa doonaya in ay xubno ka noqdaan wax ka bedelka ay soo jeediyaan Dowladuhu wakhtigii ansixinta ama ogolaanshaha. Dowlad kasta oo aan ogolaan wax ka bedelka, waxa ay muddo 90 maalmood gudahood ah oo ka bilaabmaysa taariikhda xidhiidhka Qoraalka, ku wergelin doontaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay in aanay ogolaan.

2. Ogolaansho la'aanta aan waafaqsanayn ujeedada iyo Qasdiga Axdigan wuxuu noqon doonaa mid aan la ogolaannayn, isla markaana uu noqonayo mid aan hakinayn hawl socodka mid kasta oo ka mid ah Hay'adaha Axdigan lagu aasaasay. Wax ka bedelka waxaa loo tixgelin karaa in uu yahay mid dabar ah marka 2/3 laba dalool/seddex dalalka Axdigan xubnaha ka ah ugu yaraan ay diidaan.

3. Wax ka bedelka dib ayaa loola noqon karaa markasta iyada oo loo gudbinayo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Wargelintani waxa ay dhaqan galaysaa taariikhda la helo.

*Qodobka 21aad*

Dowladda xubinta ka ah waxa ay ixtijaaj ka bixin kartaa Axdigan iyada oo Qoraal ku wargelinaysa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Wargelintani waxa ay dhaqangalaysaa taariikhda la qabto ama la helo.

*Qodobka 22aad*

Khilaaf kasta oo dhex mara laba ama in ka badan Dowladaha xubnaha ka ah ee khuseeya fasiraada ama dabaqida Axdigan ee aan lagu xallin wadahadal ama habab kale oo lagu xalliyo khilaafaadka oo waafaqsan Axdigan waxa ay iyada oo la tixgalinayo codsi ka yimaada mid kasta oo ka mid dhinacyada khilaafaadku ka dhexeeyo iyada oo loo gudbinayaa go'aanka Maxkamadda Caalamiga ah ee Cadaaladda (ICJ) haddii aanay dhinacyada khilaafaadku uu dhex maray aanay ku heshiin imkaaniyaad kale oo ah habab kale oo xal keenaya.

*Qodobka 23aad*

1. Codsi dib u eegis lagu sameeyo Axdigan waxa ay u furantahay wakhti kasta Dowlad kasta oo xubin ka ah Axdigan, iyada oo Qoraal wargelin ah u gudbinaysa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

2. Golaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu go'aamin doona tallaabooyinka laga qaadi doono arrinta codsiga ah, haddii ay jiraan tallaabooyinkaasi.

*Qodobka 24aad*

1. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu ku wargelindoonaa dhammaan Dowladaha ku qeexan Qodobka 17aad, xubinta 1aad ee Axdigan ee isla Qodobada arrintan:-

(a) Saxiixa ansixinta iyo ogolaanshaha ku sheegan Qodobka 17 iyo 18-aad.

(b) Taariikhda uu dhaqangalay Axdigani ee hoos imanaysa Qodobka 19-aad.

(c) Xidhiidhka Qoraalada, caddeymaha, bayaanada la helay ee hoos imanaya Qodobka 14, 20 iyo 23-aad.

(d) Diidmooyinka hoos imanaya Qodobka 21-aad.

*Qodobka 25aad*

1. Axdigan oo ku daabacan luuqadaha Ingiriisi, Faransiis, Shiine, Ruush iyo Isbaanish oo dhammaantood si isku mid u ansaxsan waxaa la dhigi doonaa Xasuus dhowrka Qaramada Midoobay.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu u gudbin doonaa nuqulada Axdigan oo ansaxsan dhammaan Dowladaha ka midka ah qaybaha ku xusan Qodobka 17 xubinta 1aad ee Axdigan.

# Heshiiska Tirtiridda Dhammaan Qaababka Takoorida Haweenka

***Waxaa lagu ansaxiyay oo saxeexa loogu furay qaraarkii Golaha Guud ee 34/180 ee***

18-KII DECEMBER1979

DHAQAN GALKA HESHIISKA: 3-DII SEPTEMBER 1981, SI WAAFAQSAN QODOBKA 27 (1)

*Dawladaha Xubnaha ka ah Heshiiskan,*

Iyaga oo xusuusan in Axdiga Qaramada Midoobay uu dib u xaqiijinayo xuquuqaha asaasiga ah ee Aadamaha, sharafta iyo karaamada qofka Aadamaha ah iyo xuquuqaha siman ee Ragga iyo Haweenka,

Iyaga oo xasuusan in baaqa caalamiga ah ee xuquuqda aadamuhu uu xaqiijinayo mabda'a kala soocista oo lid ku ah haweenka, iyo in banii aadamka oo dhami dhasheen iyaga oo xor ah, kana siman sharafta iyo xuquuqaha, qof kastaana uu xaq u leeyahay xuquuqaha iyo xorriyadaha ku xusan baaqan iyada oo aan lagu salaynayn kala soocid nooc kasta oo ay tahay, oo ay ku jirto kala soocid ku salaysan sinji.

Iyaga oo xusuusan dawladaha xubnaha ka ah Axdigan, in ay xaqiijiyaan xaqa sinaanta Raga iyo Haweenka ee dhinaca ka faa'iidaysiga xuquuqaha Dhaqaale, Bulsho, Dhaqan, Madani iyo xuquuaha Siyaasadeed.

Iyaga oo tixgalinaya Axdiyada caalamiga ah ee lagu wada galay Qaramada Midoobay iyo hay'adaha takhasuska u leh ee lagu horumarinayo sinaanta xuquuqaha raga iyo haweenka. Sidoo kalana iyada oo xog ogaal loo yahay go'aanada, qaraarada iyo talo bixinaha ay aqbaleen Qaramada Midoobay iyo ha'adaha takhasuska u lehi ee lagu horumarinayo sinaanta raga iyo haweenka,

Iyada oo la aqoonsanyahay in iyada oo ay jiraan heshiisyadaasi badani hadana kala soocida lid ka ku ah haweenku wali si aad ah ayay uga jirtaa dunida oo dhan,

Iyada oo maanka lagu hayo in kala soocida lidka ku ah Haweenka ay xadgudub ku tahay mabda'a sinaanta xuquuqda xoriyadaha iyo sharafta bani'aadamka, ayay hadan wali caqabad

ku tahay haweenka in ay ka qayb qaataan iyaga oo ragga la siman arrimaha siyaasada bulshada iyo dhaqalaha, iyo dhaqanka ee dalkooda, uu na horjoogsanayo korodhka barwaaqada nolosha bulshada iyo qoyska, isla mar ahaantaana sii adkaynayo koboca kartida haweenku ay ugu adeegi lahaayeen dalkooda iyo dadnimadoodaba,

Iyagoo danaynaya in xaaladda saboolnimo ee jirta darted ay yar tahay fursadda ay Haweenku ku heli karaan cunto, caafimaad, waxbarasho, tababar xirfadeed, fursado shaqo-gellineed iyo baahiyo kaleba,

Iyaga oo ku nuuxnuusanaya in baabiinta habka midab-takoorka qaababka jinsi-faquuqa, midab-kala sooca, gumaysiga cusub, xad-gudubka ku dhisan qabsashada shisheeye, amar-kutaaglaynta iyo faro-gelinta arrimaha gudaha ee dawladaha, giddigoodba tirtiridoodu ay lagama maarmaan u yihiin sidii xuquuqda Ragga iyo Haweenka loogu wada noollaan lahaa,

Iyaga oo sii adkaynaya in xoojinta nabadda iyo amniga caalamiga ah, qaboojinta xiisadaha, iskaashiga iyo wax-wada-qabsiga dhex mara dawladaha, si kasta oo nidaamkooda bulsheed iyo dhaqaale u kala duwan tahay, dhimida hubka, si guud iyo si buuxdaba, gaar ahaan hubka halista ah ee nukliyeerka ah oo gacan caalami ah oo adag oo waxtarta lagu qabto, mabaadiida caddaalada sinnaanta iyo faa'iidada la is-weydaarsado, iyo xaqa ay dadyowga Xubnaha ka ah gacan-shisheeye iyo gumaysi u leeyihiin aayo-ka-tashigooda iyo madaxbannaanidooda, iyo in la xurmeeyo haybadooda qaranimo iyo dhawrsanaanta xuduudaha dalkooda, intaasoo dhammiba in ay kor u qaadaan horukaca heerka bulsheed iyo horumarkooda, taasoo natiijadeedu wax tarayso xaqiijinta sinaanta Raga iyo Haweenka.

Iyaga oo ku qanacsan in horumarka buuxa ee dal sameeyo, daryeelka fiican ee dadyowga adduunka iyo qaddiyada nabadu ay u baahan yihiin in Haweenku si Ragga la siman ay dhammaan ilaa heerka u sareeya ka qayb galaan dhinacyada nolosha.

Iyaka oo madaxa ku haya Qaybta weyn ee dumarku ka qaataan nolosha fiican ee qoyska iyo horumarka bulshada, in kasta oo aan weli loo aqoonsan, sidoo kale iyaga oo aan illowsanayn ahmiyadda hooyonimada (maternity) iyo kaalinta ay labada waalid ku leeyihiin qoyska iyo korinta caruurta, isla markaa iyaga oo u dareen leh in aan doorka haweenka ee tarantu asaas iyo sabab u noqon karin in la takooro, balse in ay korinta caruurtu u baahan tahay xil-gudashada Ragga iyo Haweenka iyo bulshada oo ay intuba ka qayb qaataan.

Iyaga oo og in loo baahan yahay is-beddel lagu sameeyo kaalintii soo jireenka (traditional) ahayd ee Ragga iyo Dumarku ku kala lahaayeen bulshada iyo qoyska si loo xaqiijiyo sinaanta buuxda ee Ragga iyo Haweenka,

Iyaga oo ay ka go'an tahay in ay fuliyaan mabaadiida ku qeexan Baaqa Tirtiridda Takooridda ku liddiga ah dumarka iyo taas darted la qaato tallaabooyinka loo baahan yahay si loo tirtiro takooridaa, qaab kasta oo ay leedahay iyo weji kasta oo ay u muuqato.

*Dawladaha xubnaha ka ah Axdigan waxa ay ku heshiiyeen qoddobada soo socda:*

# QEYBTA I

*Qoddobka 1aad*

Marka la eego ulajeedada Heshiiskan, ereybixinta “takooridda ku liddiga ah haweenku ama dumarka” waxaa looga jeedaa gooni-u faquuq kasta, gooni u saarid iyo xayiraada ku salaysan sifaha dhedigaanshaha, kaasoo hor-joogsanaya ama masaxaya xaqa in la aqoonsado haweenka oo la oggolaado in ay, si ragga la siman ugu naalloodaan uguna camal falaan xuquuqda asaasiga ah iyo xorriyadaha siyaasadeed, dhaqaaleed, bulsheed, dhaqan iyo madani iyo dhinac kasta oo nolosha ka mid ah ba, iyada oo aan la eegaynin xaaladdooda haweenimo.

*Qoddobka 2aad*

Dawladaha Heshiiskan Xubnaha ka ah waxay cambaaraynayaan takoorida haweenka ku liddiga ah qaab kasta oo uu yeesho, in ayaga oo adeegsanaya wasiilo kasta, dib-u dhac na aan lahayn, ay ku shaqeeyaan siyaasad ay ku baabiinayaan takooridda haweenka ku liddiga ah, sidaas awgeed, waxay iska xil-saarayaan:

(a) In ay dastuuradooda iyo shuruucdooda kale ee ku haboon ku daraan sinnaanta ragga iyo haweenka haddii aanay hadda ba jirin, iyo in ay Qaanuun iyo farsamo kaleba ku xaqiijiyaan in si dhab iyo ficil ah loo hirgeliyo mabda’aas isaga ah;

(b) In ay qaataan tallaabooyin sharci-dejin ah oo ciqaabtooda leh meeshii ku habboon, taas oo maanacaysa dhammaan ba takooridda haweenka;

(c) In la dejiyo hab ilaalin sharciyeed oo ilaalinaya xuquuqda haweenka si la siman ragga, laguna dhabeeyo taas maxkamad karti leh iyo haya’ado kale oo caam ah oo ka ilaaliya haweenka ficilladda takooridda;

(d) In laga joogsado fal kasta oo lagu faquuqayo haweenka lana hubiyo in hay’adaha suldadda caamka ah lihi u dhaqmayaan si waafaqsan waajibaadka halkan ku xusan;

(e) In tallabooyinka ku haboon loo qaado sidii loo tirtiri lahaa takoorka uu haweenka ku kala kaco qof, urur ama mashruuc;

(f) In la qaado tallaabooyin ku waajahan sidii loo baahin lahaa ama wax looga beddeli lahaa qawaaniinta, Xeer-Nidaamiyayaasha, caadooyinka iyo ficillada aasaaska u ah faquuqa-sooca haweenka;

(g) In la tirtiro dhammaan qodobbada sharciyeed ee asaaska u ah takooridda haweenka.

*Qodobka 3aad*

Dawladaha Xubnaha ka ah Heshiiska waa inay tallaabooyin ku habboon ka qaadaan dhinac kasta, gaar ahaan dhinacyada siyaasadeed, bulsho, dhaqaale iyo dhaqan, taas oo ay ku jirto

Sharci-Dejinta taas oo lagu xaqiijinayo horumarinta iyo taqadumka haweenka, loogana jeedo in la damaano-qaado sidii haweenku ugu camal- fali lahaayeen uguna naalloon lahaayeen xuquuqda Aadamaha iyo xorriyadaha aasaasiga ah ee ku salaysan la-sinnaantooda ragga.

*Qodobka 4aad*

1. Haddii Dawladaha heshiiska Xubnaha ka ah qaataan tallaabooyin ku-meel-gaadh ah oo gaar ah, loogana jeedo xoojinta sinaanta Haweenka iyo Ragga ah oo wax markan ka jiraan (de facto equality), waa in aan taas loo arkin takooridda uu caddaynayo heshiikani balse taas darteed waa in aanu dabada ku wadan sii-jiritaanka sinnaan la'aanshaha iyo cabbirro kala gooni ah oo hore u jiray, qaabaabka sidaas oo kale ahi waa inaanay sii soconin marka la xaqiijiyo fursadaha iyo macaamilka siman.

2. In ay dawladaha heshiiskan Xubnaha ka ah ee qaata tallaabooyin gaar ah, kuwaasi oo ay ka mid yihiin qodobada uu xambaarsan yahay Heshiiskani, ee ujeeddadoodu tahay ilaalinta hooyada, waa in aan loo arkin ama laga dhigin takoorid.

*Qodobka 5aad*

Dawladaha heshiikan xubnaha ka ah, waa inay tallaabooyinka ku habboon ka qaadaan oo ah:

(a) In wax laga bedelo sansaanka bulsheed iyo dhaqan ee fal-dhaqanka Ragga iyo Dumarka si loo gaadho taas tirtiridda takoorka ka- eexashada iyo caadooyinka iyo dhamaanba ficillada ku salaysan kala hoosaynta iyo kala saraynta Ragga iyo Haweenka ama kaalin rag iyo dumar loo kala leeyahay.

(b) In la xaqiijiyo in waxbarashada dhinaca qoyska ku saabsani noqoto tu leh faham hagaagsan oo loo yeesho hooyonimada iyo wax-tarkeeda bulsheed iyo isla-markaana in la aqoonsado xilka ay Ragga iyo Haweenku wadaagaan ee ku saabsan korinta ubadkooda iyo in la fahansan yahay in danaha caruurtu yihiin waxa tix-gelinta u horaysa leh.

*Qodobka 6aad*

Dawladaha heshiiska saxeexay waa inay qaadaan dhamaanba tallaaboyin ku habboon oo ay ku jirto Sharci-Dejintooda, si loo joojiyo dhamaanba qaababka loo tahriibiyo Haweenka loogagana faa'iidaysto ka ganacsiga jidhkooda.

## QEYBTA II

*Qodobka 7aad*

Dawladaha heshiiskan Xubnaha ka ah waa inay qaadaan tallaabooyinka ku habboon si loo

baabbiiyo takoorka ku liddiga ah Haweenka ee la xidhiidha dhinaca Siyaasadda iyo nolosha caamka ah ee Dalka, si gaar ahaaneedna waa in la hubiyo in si Ragga la siman, loo siiyo:

(a) In ay dhamaanba Doorashooyinka iyo Aftiyaha caamka ah ka cod-bixiyaan, xaqna ku yeeshaan in loo dooran karo Hay'adaha sida guud loo soo doorto;

(b) In ay ka qayb-qaadan karaan haweenku dejinta siyaadadda xukuumadda iyo hirgellinteeda, qabana karaan xafiis maamul dan guud ah (public office) ayna fulin karaan hawlaha danaha caamka ah;

(c) In ay ka mid noqon karaan Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo isu-tagyada ku mashquulsan danaha caamka iyo nolosha siyaasadeed ee dalka.

*Qodobka 8aad*

1. Dawladaha heshiiskan Xubnaha ka ah waa in ay qaataan tallaabooyinka ku habboon ee si Ragga la siman oo aan takoor lahayn Haweenku ugu xaqiijinaya fursad ay dawladdooda heerarka caalamiga ah ku matali karaan kagana qayb-gali karaan hawlaha Ururrada caalamiga ah.

*Qodobka 9aad*

1. Dawladaha heshiiskan xubnaha ka ah waa in ay haweenka xuquuq la siman ragga u siiyaan in ay helaan, beddeli karaan oo haysan karaan jinsiyaddooda. Si gaar ah, waa in ay hubiyaan in haddii ay guursato haweenaydu nin shisheeye ah ma uu ninkeedu iska beddelo jinsiyadda inta ay is-qabaan, aanay taasi u keenin is-beddel ku yimaadda iyada jinsiyaddeeda oo ka dhiga qof aan dawlad lahayn ama qasab kaga dhiga jinsiyadda ninkeeda.

2. Dawladaha heshiiskani waa in ay Haweenka siyaan xaquuq la siman tani Ragga ee xaga jinsiyadda caruurtooda.

## QEYBTA III

*Qodobka 10aad*

Dawladaha Heshiiskan Xubnaha ka ah, waa in ay qaadaan tallaabooyinka ku habboon ee ay ku tirtirayaan takooridda Haweenka ay na sidaas darteed u xaqiijiyaan xuquuqdooda ta Ragga la siman ee la xidhiidha waxbarashada, gaar ahaan na in ay ku saleeyaan sinaanta dhinacyadan:

(a) Shuruud isku mid ah oo ku saabsan xirfadda (career) iyo haggidda iyo tilmaan-siinta la xidhiidha waxbarashada xirfadeed, helidda daraaso lagu xaqiiyo shahaado (diploma) laga qaato hay'adaha waxbarasho, nooc kasta oo miyi iyo magaalo ba ka jira, ilaa waxbarashada guud, ta farsamo, ta xirfadaha iyo waxbarashada sare iyo dhammaanba tababbarada xirfadaha kala jaadka ah;

(b) Manhaj isku mid ah, imtixaam isku mid ah, macallimiin heer walba isku heer aqooneed ah iyo dhisme dugsiyo isku mid ah iyo qalab waxbarasho oo isu dhigma;

(c) Dhammaan heerarka waxbarasho oo laga saaro fikradaha laga caadada dhigtay ee ku saabsan kaalinta Ragga iyo Dumarka, qaab kasta oo ay leeyihiin, iyo in la dhiirrigaliyo habka wax-barasho ee meel qudha wax lagu barto iyo qaababka wax-barasho ee kale ee kaabaya sidii loo gaadhi lahaa ujeeddadaas, gaar ahaan, dib-ugu –noqoshada.

(d) U sinaanta fursada ka faa'idaysiga dheeqaha waxbarasho;

(e) U sinaanta fursadaha sii wadashada waxbarashada oo ay ka mid yihiin waxbarashada dadka waawayn, iyo ololaha far-barashada, gaar ahaan kuwaa talagalku yahay in lagu yareeyo faraqa Ragga iyo Haweenka u dhaxeeya;

(f) Yaraynta Tirada ardayda Hablaha ah ee iska dhaafay Dugsiyada, loona abaabulo Barnaamijyo Haweenka iyo Hablaha dhaafay Waxbarashada ee aan dhamaysan;

(g) U sinaanta Fursadaha ka qayb galka Ciyaaraha iyo Jimicsiga;

(h) Helitaanka xog Cilmiyeed oo ka kaabaysa xaqiijinta Caafimaadka iyo fayoobidda qoysaska taas oo ay ka mid yihiin xogta iyo la talinta ku saabsan qorshaha qoyska:

*Qodobka 11aad*

1. Dawladaha Xubnaha ah ayaa qaadi doona talaabo kasta oo haboon si loo tirtiro Takoorida Haweenka ee dhinaca shaqaalaynta, si loo xaqiijiyo iyada oo laga duulaayo sinaanta Haweenka iyo Ragga, Xuquuq isku mid ahna la siiyo, gaar ahaan:

(a) Xaq u lahaanta Shaqada oo ah lama taabtaan qof kastaaba xaq u leeyahay;

(b) U sinaanta xaq u lahaanta Fursadaha Shaqada oo ay ka mid tahay adeegsiga Shuruudo Xulasho oo isku mid ah;

(c) Xaqa lahaanta Xoriyad u doorashada Mihnada iyo Shaqada, xaq u lahaanta waxtarka iyo xaaladaha hawlgal, haboon iyo xaq u lahaanta Tababar Xirfadeed iyo dib-u-tababar oo ay ka mid yihiin ku laylisid shaqo, tababar-xirfadeed heer sare ah, iyo shaqo ku tababarista;

(d) Xaqa Sinaanta mushaharka, gunada, macaamalada, iyo qadarinta Shaqada dhexdeeda iyo qiimaynta tayada shaqo gudashada;

(e) Xaq u lahaanta daryeelka bulsho, gaar ahaan dhinacyada shaqo ka fadhiisiga, shaqo-la'aanta, bukaanka, hawlgabka iyo siyaabo kale oo hawlgabnimo iyo sidoo kale xaq u lahaanta fasax lacag leh;

(f) Xaq u lahaanta hanashada Caafimaadka iyo fayoobida shaqada dhexdeeda oo ay ka mid tahay badbaadinta Taranka;

2. Si looga hortago takoorida Haweenka ee guurka ama hooyanimada isla markaana loo xaqiijiyo xaqooda mudan ee ay Sharciga u leeyihiin, Dawladaha xubnaha ah ayaa qaadi doona talaabooyinkan ku haboon:

(a) In la mamnuuco shaqo ka saaris looga jeedo ciqaab iyada oo sabab looga dhigayo uurka ama fasax dhalmo isla markaana waxaa la mamnuuci doonaa shaqo ka saaris ay sabab u tahay xaalada guur;

(b) Waxaa meesha la soo galin doonaa Fasax dhalmo oo lacag leh, ama waxtar kale oo la mid ah iyada oon la reebin shaqadaas hore, kala saraynta iyo gunooyinka bulshada;

(c) In la dhiiri galiyo helitaanka hawlaha bulsho ee lagama-maarmaanka u ah ee taageeraya in waalidiinta ay u suurto gasho in ay mideeyaan waajibaad ka qoyska iyo masuuliyadaha shaqada iyo ka qaybgal ka nolosha dadweynaha gaar ahaan samaynta iyo horumarinta isku xidhnaanta hawlaha daryeelka caruurta;

(d) In Haweenka, marka ay uurka leeyihiin, si gaar ah looga ilaaliyo shaqooyinka dhibaatada u leh iyaga.

3. Sharci lagu ilaalinayo qodobkan balan qaadyada lagu sheegay ayaa mar marka qaarkood dib-u-eegis lagu samayn doonaa, iyada oo laga duulayo aqoonta sayniska iyo tiknoolajiyada iyada oo wax laga bedali doono ama dhammaan la bedeli doono ama sidaas loo dayn doono.

*Qodobka 12aad*

1. Dawladaha Xubnaha ah ayaa qaadi doona talaabo kasta oo haboon si loo tirtiro takoorida Haweenka ee dhinaca daryeelka caafimaadka si loo xaqiijiyo helitaanka daryeel Caafimaad oo ay Xubnaha ka ah kuwa la xidhiidha qorshaha qoyska, iyada oo laga amba qaadayo sinaanta haweenka iyo ragga.

2. In kasta oo ay jiraan balan qaadyada faqrada kowaad ee qadobkani, Dawladaha xubnaha ahi waxay u xaqiijin doonaan haweenka wax qabad la xidhiidha uurka, nasashada dhalmada ka hor ah iyo dhalmada ka dib, iyada oo la siin doono wax qabad lacag-la'aan ah halka ay lagama maar maan tahay isla markaana la siin doono nafaqayn ku filan xiliga uurka iyo nuujintaba.

*Qodobka 13aad*

Dawladaha Xubnaha ah ayaa ku dhaqaaqi doona talaabo kasta oo suurta gal ah si loo tirtiro takoorida haweenka ee dhinacyada kale ee dhaqaalaha iyo nolosha bulshada si loogu xaqiijiyo haweenka, iyada oo laga ambaqaadayo sinaanta haweenka iyo ragga, xuquuq isku mid ah gaar ahaan:

(a) Xaq u lahaanta faa'iidoonyin ka qoyska waxtarka;

(b) Xaq u lahaanta amaahaha baanka, rananka iyo qaababka kale ee lacag daynsashada;

(c) Xaqa ka qayb qaadashada waxyaalaha loogu talo galay madadaalada, ciyaaraha iyo dhammaan wajiyada dhaqanka Nolosha.

*Qodobka 14aad*

1. Dawladaha Xubnaha ahi waxay tixgalin doonaan dhibaatooyinka gaar ka ah ee haysta Haweenka reer Miyiga iyo doorka weyn ee ay ka qaataan dhaqaale, nololeedka qoysaskooda ee ay ka mid yihiin shaqooyinka lacag la'aanta ah ee qaybaha dhaqaalaha. Dawladaha Xubnaha ahi waxay qaadi doonaan talaabo kasta oo haboon si loo xaqiijiyo dhaqan gelinta balan qaadyada heshiiskan khuseeya ee haweenka reer miyiga.

2. Dawladaha Xubnaha ahi waxay qaadi doonaan dhammaan talaabooyinka Haboon si loo tirtiro takoorida Haweenka reer miyiga ah iyada oo laga duulayo sinaanta Haweenka iyo Ragga, si loogu xaqiijiyo Haweenka reer miyiga ah in ay ka qayb galaan ugana faa'iidaystaan horumarinta reer miyiga si gaar ahaaneed, Dawlada Xubnaha ahi waxay haweenka reer miyiga ah u xaqiijin doonaan xaqa ay u leeyihiin:

(a) In ay ka qayb qaataan faah-faahinta iyo hirgelinta qorshaynta horumarineed heerarkeeda oo idil;

(b) In ay helaan wax qabad daryeel caafimaad ah oo ku filan oo ay Xubnaha ka ahn xog, la talin iyo arrimaha qorshaha qoyska;

(c) Waa in ay si toos ah haweenku uga faa'idaystaan mashaariicda daryeelka bulshada;

(d) Waa inay helaan tababarro, wax-barasho toos ah ama mid dad-ban iyo ololaha wax-barashada siiba far barashada (functional literacy) iyo adeegyada sare u qaaddaya tabaha iyo tayada waxbarasha-dooda;

(e) Waa in haweenku ay isu abaabulaan oo ay samaystaan Guddiyo iskaa-wax-u Qabso ah si ay u suurto gasho inay ka faa'idaystaan fursadda dhaqaale ee shaqo siinkara ama ay u suurto gasho inay iskood u shaqaystaan;

(f) Haweenku waa inay ka qayb galaan dhammaan wax qabadka ama hawlaha Ka socda bulshadadooda;

(g) Waa in loo fidiyo deynta ama amaahda loogu tala-galay horumarinta Beeralayda, suuq geynta iyo farsamada tegnoolajiyada ee ay u baahanyiin;

(h) Waa inay si sinnaan iyo caddaalad leh uga qayb galaan mashaariicda dib u dajinta iyo kuwa hor u marintaba ah.

# QEYBTA IV

*Qoddobka 15aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi (State Parties) waa inay xeerarkooda ku suggaan xeer qeexaya sinaanta ragga iyo Haweenka.

2. Dawladaha xubnaha ah (State Parties) waa inay xeerarkooda ku sugaan in Ragga iyo Haweenku ay u simman yihiin xuquuqda madaniga iyo xeerarkaba.Dawladaha xubnaha ah waxay xeerrarkooda ku sugayaan in Ragga iyo Haweenku ay leeyihiin xuquuq siman marka ay noqoto heshiis samaynta iyo hanti maamulistaba. Ragga iyo Haweenku waa in ay helaan xeer-beeg isleeg dhinaca maxkamadaha.

3. Dawladaha xubnaha ah waa inay xeerrarkooda ku suggaan xeer burinaaya Xeerarka Haween ka ku gabood falaaya.

4. Dawladaha xubnaha ah waa inay xeerrarkooda ku suggaan xeer qeexaya sinnaanta Ragga iyo Haween ka dhinaca Xorriyada dhaq-dhaqaaqa iyo ku noolaanta deegaanka uu doorbido

*Qoddobka 16aad*

1. Dawladaha xubnaha ah waa in ay qaataan tallaabo kasta oo lagu dabar goynayo gabood falka Haweenka gaar ahaan dhinaca guurka iyo arrimaha qoyska iyadoo laga duulayo sinnaanta ragga iyo haweenka waa in la tix-galiyo:

(a) Sinnaanta Ragga iyo Haweenka ee arrimaha guurka;

(b) Inay Haweenku guursan karaan ninka ay doortaan oo aan la khasbin;

(c) Inay Xuquuqda Ragga iyo Haweenku ay isleeg yihiin marka qoysku Jiro iyo marka uu qoysku burbura ba;

(d) Iyadoo mar walba la tix-galinaayo danta caruurta waa inay Ragga iyo Haweenku ay hellaan xuquuq isleeg oo waalidnimo ah;

(e) Inay xaquuq siman u lahaadaan tirada caruurta iyo mudada u kala dhaxaysa caruurta ay dhalayaan, isla markaana loo sahlo helitaanka macluumaadka iyo sahalada ay kasban karaan xaquuqdaas;

(f) Xuquuq iyo masuuliyad siman marka la garsoorayo masuuliyada caruurta, cida haynaysana caruurta, aaminka iyo weliba adhabshanka, iyo weliba aarimaha kale ee u dhigma hadii ay ka jiran sharciga wadankaasi; balse mar kasta waa in danta caruurtu noqoto arinta ugu muhiimsan ee la tixgalinayo;

(g) Xaquuq siman oo qofeed ee ninka iyo naagta qoyska, waxana ka mida xaquuqda doorashada magaca qoyska, xirfada ama shaqada;

(h) In labada qof, ninka iyo naagta qoysku, lahaadan xuquuq sidam oo khusaysa lahaanshaha, maamulka, maarenta, ku raaxaysiga hantifa iyo weliba bixinta hantitada, hadii ay bixin bilaash ah ama mid qiimehaade sareeyo.

2. Sharcigu waa in aanu aqoonsan in ilmo caruura loo guuriyo ama guur loogu balan qaado. Isla markaana waa in la qaadaa dhamaan talaabooyinka lama huraanka ah, sida in xeer loo sameeyo da'ada ugu yare e guurka. Iyo waliba in lama huraan laga dhigo diiwaangalinta guurka oo galiyo diwaan rasmi ah.

## QEYBTA V

*Qodobka 17aad*

1. Iyada oo u jeedadu tahay ku xisaabtanka guusha laga gaadhay hirgalinta heshiishkan maanta jira, waxaa la samayn doonaa guddi qaabilsan tirtirida Takoorida Haweenka (magaceedu waa "Guddi") oo ka koobnaan doona 18 xubnood, marka uu dhaqan galo heshiiskan kadib, marka ay ogolaato ama ku soo biirto dawlada xubinta ee 35aad heshiiskan tirada Guddigu waxay noqon doontaa 23 xeel dheere oo leh damiir fiican oon la loodin karin iyo aqoon waayo-aragnimo iyo awood, waxyaalaha Xubnaha ka ah heshiiskan. Dawladaha Xubnaha ah ayaa xeel dheerayaasha wadaniyintooda ka soo dhex xuli doona, xeel dheera yaashu waxay ku hawl gali doonaan heer qof ahaan, tix galin waxaa yeelan doona isleekaanta qaybinta marka la eego degmada juquraafi ahaaneed, matalaada xadaaradaha kala duwan iyo nidaamyada sharciga ah ee muhiim ka ah.

2. Xubnaha Guddiga xulashadoodu waxay ahaan doonta codayn qarsoodi ah iyaga oo laga dhex xuli doono liis dad ah oo ay soo magacaabeen Dawladaha xubnaha ahi. Dawlad kastaa oo xubin ahi waxay soo magacaabi kartaa hal qof oo dadkeeda ka mid ah.

3. Xulashada hore waxay noqon doontaa Lix bilood ka dib marka heshiis kan hada jiraa dhaqan galo. Ugu yaraan sadex bilood ka hor taariikhda xulasho kasta, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa waraaq u diri doona Dawladaha Xubnaha ah isaga oo ugu baaqaya in ay u soo gudbiyaan cidda ay soo magacaabeen muddo laba Bilood gudahood ah. Xoghayaha Guud waxa uu diyaarin doonaa liis ku salaysan kala horaynta Xuruufta higaada oo dadkii la soo magacaabay oo dhami Xubnaha ka ah kana muuqdaan dawladaha xubnaha ah ee soo magacaabay, Xoghayaha Guud waxa uu u dhiib doonaa liisaska dawladaha xubnaha ah.

4. Xulashada xubnaha Guddiga waxa lagu samayn doonaa shir dawladaha xubnaha ah uu u qaban doono Xoghayaha Guud oo ka dhici doona Xarunta Qaramada Midoobay, shirkaas oo qabsoomi doona marka sadex dalool laba dalool oo Dawladaha xubnaha ahi ka soo qayb galaan,

dadka loo xulay guddiga waxay noqon doonaan kuwa la soo magacaabay ee hela tirada ugu badan ee codadka Iyo aqlabiyad cod dheeri marka la eego codadka wakiilada goob joogayaasha ah ee codeeyeena dawladaha xubnaha ah.

5. Xubnaha guddiga waxa la dooran doonaa muddo afar Sanno ah. Hase ahaatee, muddada sagaalka xubnood ee lagu soo doortay xulashada u horeysa waxa ay mudadoodu dhammaan doonta laba Sannadood ka dib. Markiiba doorashadooda hore ka dib magacyada sagaalkan xubnood ayaa baqtiyaa-nasiib uu ku soo saari doonaa guddoomiyaha Guddigu.

6. Xulashada shanta Xubnood ee dheeraad ka ah ee Guddiga ka mid ah waxa la qaban doonaa iyada oo la raacayo balan qaadyada faqradaha 2aad, 3aad iyo 4aad ee qodobkan iyada oo la raacinayo ogolaansho ama ka qayb galka xubinta dheeraad ka. Mudada laba ka mid ah shanta xubnood ee dheeraad ka ah ee lagu soo xulay munaasabadan waxay dhammaan doontaa laba Sannadood ka dib, magacyada labadan xubnood waxa baqtiyaa nasiib ku soo saari doona Gudoomiyaha Gudiga.

7. Si loo buuxiyo meelaha deg-dega ku banaanaada, dawlada xubinta ah ee Xeeldheeraheedii shaqadii xubinimada Guddiga joojiyey ayaa xeeldheere kale dadkeeda ka dhex keenaysa iyada oo uu ogolaanshaha yeelan doono Gudoomiyaha Gudigu.

8. Xubnaha guddiga marka la ansixiyo mushahar ayey siin doontaa Qaramada Midoobay iyada oo la raaci doono ballan qaadyada iyo xaaladaha uu go'aamiyo Goluhu iyada oo la tixgelinayo ahmiyada Gudiga masuuliyadihiisa.

9. Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay ayaa keeni doona shaqaalaha, Qalabka iyo wax yaalaha kale ee daruuriga u ah meelmarinta shaqo Gudashada Gudiga.

*Qoddobka 18aad*

1. Si ay Guddigu uga baaraan degaan, Dawladaha Xubnaha ah ayaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u soo diyaarin doona war bixin Ku saabsan sharci-dejinta, garsoorka, maamulka, ama tallaabooyin kale, oo ay qaadeen si ay u xoojiyaan ballanqaadyada heshiiskan hadda iyo Horumarka laga gaadhay dhinacan.

(a) Hal sanno gudaheed ka dib marka uu ka dhaqan galo Dawlada la doonayaa;

(b) Intaa ka dib ugu yaraan afartii sannadood ee kasta ka dib iyada oo ay intaa dheer tahay mar kasta oo ay Gudigu codsadaan.

2. War-bixinaha waxa ka muuqan kara sababaha iyo dhibaatooyinka saamaynaya baaxada ka midha dhalinta waajibaadka heshiiskan ku hoos jira.

*Qoddobada 19aad*

1. Gudiga ayaa dejin doonta Xeerarka hab socodkooda shaqo.

2. Gudigu iyagaa dooran doona saraaxiishooda (Officers) mudo-xiliyeed laba sano ah.

*Qoddobka 20aad*

1. Guddigu caadi ahaan waxay kulmi doonaan muddo aan ka badnayn laba todobaad sannadii si ay uga baaraan degaan warbiximaha la soo gudbiyey ee waafaqsan qoddobka 18aad ee heshiiskan hada jira.

2. Kulamada Gudiga waxa caadi ahaan lagu qaban doonaa Xarunta Qaramada Midoobay ama meel kasta oo haboon oo ay go'aan sadaan Guddigu

*Qoddobka 21aad*

1. Guddigu, iyaga soo marinaaya Golaha Dhaqaalaha iyo Bulshada, waxay warbixin sannadeed shaqadooda ku saabsan u keeni doonaan Golaha Guud ee Qaramada Midoobay waxayna soo jeedin karaan fikrado iyo talooyin guud oo ku salaysan odoroskooda, warbixinaha iyo xogta ay ka helaan Dawladaha xubnaha ah. Fikradahaas iyo talo-bixinuhu waxay ku jiri doonan warbixinta Guddiga iyada oo ay weheliyaan faaqidaada Dawladaha xubnaha ah hadii ay jirto.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu warbixinaha Guddiga u soo gudbin doonaa Komishanka Arrimaha Haweenka (Commission on the Status of Women)

*Qoddobka 22aad*

Haayadaha Khaaska ahi waxay u fasaxan yihiin ama loo ogol yahay in cidi uga qayb gasho ka baaraan dega hirgalinta balanqaadyada Xubnaha ka ah Heshiiskan marka ay hawlahooda ka mid yihiin. Guddigu waxay ugu baaqi karaan Hay'adaha khaaska ah in ay u soo gudbiyaan warbixino la xidhiidha hirgalinta Heshiiskan dhinacyada ka mid ah hawlahooda.

## QEYBTA VI

*Qoddobka 23aad*

Haba yaraatee ma jiro wax heshiiskan ka mid ah oo saamaynaya ama burinaya hanashada iyo kobcinta sinaanta raga iyo haweenka, ee ku jiri kara:

(a) Sharciga Dawlad xubin ah; ama

(b) Haba yaraatee heshiis kale oo caalami ah ama mucaahado ka dhaqan gal ah Dawladaas.

*Qoddobka 24aad*

Dawladaha xubnaha ka ah Axdigan ayaa ku dhaqaaqi doona tallaabo kasta oo lagama maarmaan ah oo heer dawladeed oo loola jeedo xaqiijinta xuquuqda la qirsan yahay ee heshiis kan.

*Qoddobka 25aad*

1. Heshiiskan hada jiraa waxa uu u furan yahay in ay saxeexaan dhammaan Dawladaha.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa u xil saaran baylah-tirka Heshiiskan hada jira.

3. Heshiiskan hada jiraa waxa uu u baahan yahay ogolaansho. Qoraalada ogolaanshaha waxa loo gudbinayaa Xoghayaha Guud ee Qaramada midobay.

4. Heshiiskan hada jiraa waxa uu u furan yahay ku soo biirista Dawladaha oo dhan. Ku soo biiridu waxay dhaqan galaysaa marka qoraalka ka qayb galka loo dhiibo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qoddobka 26aad*

1. Codsiga wax ka badalista Heshiiskan waxaa la samayn karaa mar alla markii la doono, waxaana samayn kara Dawlad kasta oo qoraal ahaan ugu soo gudbinaysa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

2. Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa go'aamin doona waxa laga yeelayo Codsigaas haddii ay dhacdaba.

*Qoddobka 27aad*

1. Heshiiskani waxa uu dhaqan gali doonaa maalinta sodonaad marka laga joogo taariikhda Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay uu helo qoraalka rasmiga ah ee ogolaanshaha ama ka mid noqoshada Heshiiskan ee labaatanad (Dawlada labaatanad).

2. Dawlad kasta oo ogolaanaysa Heshiiskan ama ku soo biiraysa qoraalka rasmiga ah ee ogolaanshaha / ka mid noqoshada ee labaatanad la helo ka dib, heshiisku waxa uu ka dhaqan gelidoonaa maalinta sodonaad marka laga joogo taariikhda Xoghayaha Guud helo qoraalkeeda rasmiga ah ee ogolaanshaha ama ka mid noqoshada heshiiskan.

*Qoddobka 28aad*

1. Xoghayaha Guud waxa uu soo dhaweyn doonaa Dawladaha xubnaha ah oo dhan

waxaanu u qaybindoona qoraalka ku saabsan waxyaalaha ay saluugayaan Dawladuhu marka ay ku soo biirayaan ama ka mid noqonayaan Heshiiskan ee ay soo qoraan.

2. Dawladuhu way ka noqon karaan saluugooda, iyaga oo ogeysiis qoraal ah ugu gudbinaaya Xoghayaha Guud.

3. Xoghayaha Guud waxa uu Dawladaha oo dhan ogeysiin doonaa ka noqoshadu inay dhaqan geli doonto maalinta uu helo ogeysiinta qoraalka ah.

*Qoddobka 29aad*

1. Is af-garan waa kasta oo soo dhexgala laba ama in ka badan Dawladaha xubnaha ka ah Axdigan, oo ku saabsan macnaha/fasiraada Heshiiskan hada jira oo wada hadal lagu dhamayn kari waayo, codsi mid ahaani keento ayaa dhex-dhexaadin loogu qaban doonaa, haddii lix bilood gudahood ka dib taariikhda codsiga dhex-dhexaadinta ay isla af-garan waayaan qabashada dhex-dhexaadinta, mid ka tirsan xubnahaas ayaa is afgarasho la'aanta u gudbin karta Maxakamadda Aduunka (International Court of Justice) qoraal ahaan si waafaqsan nidaamka iyo Xeerka Maxkamadda.

2. Dawlad xubin ahi marka ay heshiiskan saxeexayso ama ogolaanayso ka mid noqoshada waxay si badheedh ah halkan uga sheegi kartaa in ay la tahay faqrada 1aad ee qodobkani in aanu iyaga xidhayn. Dawladaha xubnaha ah ee kalena ma xidhayo marka ay Dawlad xubin ahi keento waxyaalo ay ka biyo diidantahay.

3. Dawlad kasta oo xubin ka ah oo reebid/xadid sharci sheegatay, sida ku xusan faqrada 2-aad ee qodobkan, waxa u banaan in ay marka ay doonto ka laabato/ buriso reebaanaanta ay samaysay iyada oo ogaysiis ugu soo gudbinaysa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qoddobka 30aad*

1. Heshiiskan qoraaladiisa rasmiga ah ee ku qoran afafka Carabiga, Shiinaha, Ingiriisiga, Fransiiska, Ruush iyo Isbaanashka waxa loo gudbin/ loo dhiibi doonaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

2. Dawlad kasta oo ka mid ah Heshiiskan oo soo gudbisa waxyaalo ay ka biyo diidayso, waqtiga ay doonto ayey ogeysiis qoraal ah kaga noqon kartaa

# Sharciyada Habka Ikhtiyaariga ee Heshiiska Tirtirida Dhamaan Qaababka Takoorida Haweenka

***Waxaa Ansixayay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Tirsigiisu yahay 54/4 ee 6-dii October 1999, waxana loo furay saxiix, ogolaansho iyo ku biiridba 10-kii December, 1999***

DHAQAN GALKA HESHIISKA: 22-KII DECEMBER 2000, SI WAAFAQSAN QODOBKA 16AAD

*Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan;*

*Iyaka oo xusuusan* in axdiga Qaramada Midoobay uu sugaya rumaysnaanta xuquuqda aasaasiga ah ee bani'aadamka, sharafta iyo qiimaha uu qofka bani aadamka ah leeyahay iyo sinaanshaha raga iyo dumarka,

*Sidoo kalana xusuusan* in Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Bani Aadamku uu ku baaqayo in bani aadamka oo dhan ay dhashaan iyaka oo xora oo ka siman sharafta iyo xuquuqaha, isla markaana ay u sugnaatay qof xuquuqaha iyo xoriyadaha la soo xusay, iyadoo aanu jirin kala sooc noocuu doonayaba ha ahaadee, oo ay ku jirto kala sooc ku dhisan jinsi,

*Iyakoo maskaxda ku haya* in heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda bani aadamka iyo habraacyada xuquuqda aadanuhu ay reebayso kala sooca ku dhisan jinsiga,

*Sidoo kalana maskaxda ku haya* Heshiiska Caalamiga ah ee Dabar Goynta dhamaan Noocyada Faquuqa ah ee Lidka ku ah Dumarka ("Heshiis"), kaasoo dawladaha xubnaha ka ah ay canbaaraynayaan faquuqa lidka ku ah dumarka noocyadiisa oo dhan isla markaana heshiis ku ah in la helo dhamaan hababka ku haboon oo aan dib u dhigid lahayn nidaam lagu dabargoynayo faquuqa lidka ku ah dumarka,

*Iyakoo dib u sugaya rabitaankooda ah* in la xaqiijiyo in dumarku helaan xuquuq iyo xoriyado oo siman oo buuxda in la qaado talaabo wax ku oola oo lagaga hortagayo xadgudubyada xuquuqahaas iyo xoriyadaas,

*Waxay ku heshiiyeen sidan soo socota;*

*Qodobka 1aad*

Dawlada xubin ka ah Habkan ("Dawlad xubin ah") wuxuu aqoonsan yahay awooda Gudiga Dabar Goynta dhamaan Noocyada Faquuqa ah ee Lidka ku ah Dumarka ("Gudigu") inuu helo isla markaana tixgaliyo xidhiidhada loo soo gudbiyay si waafaqsan qodobka 2aad,

*Qodobka 2aad*

Xidhiidhada waxaa soo gudbin kara ama iyakoo matalaya shakhsiyaad ama kooxo shakhsiyaada, oo ku hoos jira xukunka Dawlad xubin ah, kuwaasoo ku andacoonaya inay dhibanayaal u yihiin xadgudub lagula kacay xuquuqahooda ku dhigan Heshiishakan oo ka timid dhinaca Dawladaas Xubinta ah. Meesha uu xidhiidh soo gudbiyo isagoo matalaya shakhsiyaad ama kooxo shakhsiyaada, waxay ku iman kartaa kaliya ogolaanshahooda hadii uu mas'uulku uu awoodi waayo inuu sababeeyo matalaadooda iyadoo aanu jirin ogolaanshahoodu.

*Qodobka 3aad*

Xidhiidhku wuxuu noqonayaa qoraal waana inaanu noqon mid aan sumad lahayn. Gudigu ma qaban doono wax xidhiidha/fariin hadii uu quseeyo Dawlad xubin ka ah Heshiiska laakiin aan xubin ka ahayn Habkan.

*Qodobka 4aad*

1. Gudigu ma tixgalin doono xidhiidh ilaa intuu ka ogaanayo in dhamaan xalalkii/magdhowyadii la heli karayay ee gudaha yaalay laga daalay ilaa hadii ay dhaqan galinta magdhowyadaas ay si aan macquul ahayn u dheeraadeen ama in la helo bogsasho wax ku oolah ay tahay mid aan dhacayn.

2. Gudigu wuxuu ku dhawaaqayaa in xidhiidh uu yahay mid aan ka gudbayn meesha, hadii;

(a) Arin la mida ay Gudigu hore u baadheen ama lagu baadhay habraac Baadhisa caalamiya ama xalin;

(b) Uu yahay mid lid ku ah qodobada heshiiska

(c) Uu si cad u yahay mid aan baadhis saxa ku imaana ama aan si ku filan loo soo sharciyayn.

(d) Uu yahay mid meel ka dhac ku ah xaqa soo gudbinta xidhiidh

(e) Xaqiiqooyinka nuxurka u ah xidhiidhku ay dhaceen ka hor intii aanu ku dhaqan galin Habkani Dawlada Xubinta ah ee ay qusayso ilaa in ay ka ahaayeen xaqiiqooyinkaasi kuwo socday ilaa waqtigaas mooyaane.

*Qodobka 5aad*

1. Xilli kasta ka dib marka la helo xidhiidhka iyo ka hor xalka arinta aan la gaadhin, waxaa laga yaabaa in Gudigu u gudbiyo Dawlada Xubinta ah ee ay qusayso isagoo Gudiga ka doonaya eegis degdeg ah codsi ah inuu Dawladaas Xubinta ah uu qaado taalaabooyin ku meel gaadh ah oo laga yaabo inay lagama maarmaan u yihiin si looga fogaado dhibaato aan ka kabasho lahayn oo ku timaada dhinaha ama dhibanayaasha xadgudubka lagu andacooday.

2. Meesha uu Gudigu ku shaqaynayo awoodiisa sida ku cad faqrada 1aad ee qodobkan, tani kuma jirayso go'aaminta ogolaanshaha ama qiimaha uu leeyahay xiidhiidhku.

*Qodobka 6aad*

1. Hadii aanu Gudigu u tixgalin xidhiidh inuu yahay mid aan la ogolaan isagoon u tixraacin Dawlada Xubinta ah, taasoo ay u dheer tahay in ogolaanshaha qofkii ama shakhsiyaadka ee faafinta haybtooda la siiyo Dawlada Xubinta ah, Gudigu wuxuu hordhigayaa dareenka Dawlada Xubinta ah ee ay qusayso xidhiidh kasta oo loo soo gudbiyay si qarsoon oo waafaqsan Habkan.

2. Mudo lix bilood gudahooda, Dawlada xubinta ah wuxuu u soo gudbin doonaa Gudiga Sharaxaad qoraala ama xog cadaynaysa arinta iyo magdhowga, haday wax jiraan, taasoo uu bixiyay Dawladaasi.

*Qodobka 7aad*

1. Gudigu wuxuu eegi doonaa xidhiidhadii uu helay si waafaqsan Habkan xogta uu hayo kaasoo uga yimid shakhsiyaad ama kooxo shakhsiyaada ama Dawlada Xubinta ah ee ay qusayso, taasoo ay u dheer tahay in loo gudbiyay xogtaas dhinacyada ay qusayso.

2. Gudigu wuxuu qaban doonaa kulamo albaabadu u xidhan yihiin marka ay qiimaynayaan xidhiidhada soo hoos galaya Habkan.

3. Ka dib markuu baadho xidhiidhka, Gudigu wuxuu u gudbin doonaa argatidiisa ku wajahan xidhiidhka, oo ay la jirto tala soo jeedin, haday jirto, dhinacyada ay qusayso.

4. Dawlada Xubinta ah wuxay siin doontaa tixgalin ku haboon aragtiyaha Gudiga, ee ay la socoto tala soo jeedintu, haday jiraan, wuxuuna mudo lix bilood gudahooda ugu gudbin doonaa Gudiga jawaab qoraala, oo ay ku jirto xog ku saabsan wixii talaabo ah ee la qaaday ee waafaqaya aragtiyaha iyo talo soo jeedinta Gudiga.

5. Gudigu waxaa laga yaabaa inay ku marti qaadaan Dawlada Xubinta ah inuu soo gudbiyo xog dheeraad ah oo ku saabsan wixii taalaabooyin ahaa ee uu qaaday Dawlada Xubinta ah ee jawaabta u ah aragtiyihiisa ama tala soo jeedimihiisan, haday jiraan, oo ay ku jiraan sida uu ku haboon ee uu xukumay Gudigu, xogaha ka yimid Dawlada Xubinta ah sida uu dhigayo Qodobka 18 ee Heshiisku.

*Qodobka 8aad*

1. Hadii Gudigu helo xog la isku halayn karo oo tilmaamaya in Dawlad Xubin ah ku kacay tacadiyo ba'an oo nidaamsan oo ku aadan xuquuqo ku dhigan Heshiiska, Gudigu wuxuu ku marti qaadi doonaa Dawlada Xubinta ah inaan iskaashi kala sameeyo baadhista iyo in ujeedadaa iyadoo la raacayo uu soo gudbiyo wixii u kuurgalo ah ee la xidhiidha xogta ay arintu qusayso.

2. Isagoo ku xisaabtamaya u kuurgaladii laga yaabay in looga soo gudbiyay dhinaca Dawlada Xubinta ah, iyo sidoo kale wixii kale ee xog ah ee la isku halayn karayo ee uu hayo, Gudigu, waxaa laga yaabaa, in uu u igmado mid ama ka badan xubnihiisa in ay qaadaan baadhis, isla markaana si degdeg ah ugu soo celiyaan warbixin Gudiga. Halka ay lagama maarmaan noqoto isla markaana ay la socoto ogolaanshaha Dawlada Xubinta ah, baadhistu waxaa laga yaabaa inuu ku jiro booqasho lagu sameeyo dhulkiisa.

3. Ka dib baadhista wixii laga helay baadhitaanadii, Gudigu wuxuu u gudbinayaa xogihii la soo helay Dawlada Xubinta ah ee ay qusayso kaasoo ay la socoto wixii faalo iyo talo soo jeedin ahaa.

4. Dawlada Xubinta ah waxa uu u gudbin doonaa u kuurgaladii uu sameeyay Gudiga mudo lix bilood gudahood ah oo ka bilaabanaya markii uu helo xogihii la soo helay, faalooyinkii iyo tala soo jeedintii uu u soo gudbiyay Gudigu.

5. Baadhistaa waxaa loo samayn doonaa si qarsoodiya iskaashiga Dawlada Xubinta ahna waa la raadinyaa heer kasta oo ay arintu marayso.

*Qodobka 9aad*

1. Waxaa laga yaabaa inuu Guddigu ku marti qaado Dawlada Xubinta ah ee ay qusayso si uu ugu daro warbixintiisa sida uu qodobka 18aad ee Heshiisku uu ku faahfaahinayo talaabo kasta oo la qaaday oo jawaab u ah baadhistii la qaaday taasoo ku xusan qodobka 8aad ee Habkan.

2. Gudigu waxaa laga yaabaa, haday suuragal noqoto, marka ay dhamaato mudada lixda bilood ah ee lagu xusay qodobka 8.4, inuu ku martiqaado Dawlada Xubinta ah ee ay qusayso si uu ugu wargaliyo talaabooyinkii laga qaatay baadhistii.

*Qodobka 10aad*

1. Dawlad kasta oo Xubina waxaa laga yaabaa, marka saxiixa ama ansixinta Habkan ama qaadashadiisa/ku biiristiisa, inuu ku dhawaaqo inaanu aqoonsanayn awooda Gudiga ee lagu xusay qodobada 8 iyo 9.

2. Dawlad kasta oo soo saartay baaq waafaqsan faqrada 1aad, waxaa laga yaabaa, waqti kasta, inay ka laabto baaqa ay soo saaray isayada oo wargalinaysa Xoghayaha Guud.

*Qodobka 11aad*

Dawlad kasta oo Xubin ah waxaa waajib ka saaran yahay inay xaqiijiso in shakhsiyaadka ku hoos nool maamulkeeda aan loola dhaqmin si xun ama aan hanjabaad loo gaysan taasoo ah natiijada xidhiidh uu la sameeyay Gudiga si waafaqsan Habkan.

*Qodobka 12aad*

Gudigu wuxuu ku dari doonaa warbixintiisa sanadlaha ah sida ku xusan qodobka 21aad hawlqabadkiisa la xidhiidha Habkan.

*Qodobka 13aad*

Dawlad kasta oo Xubin ah waxaa saran inuu ka dhigo mid la yaqaano isla markaana uu baahiyo Heshiiska iyo Habkanba si ay u fududaato helista isticmaalka xogta ee ku saabsan aragtiyaha iyo talo soo jeedinta Gudiga, gaar ahaan, wixii la xidhiidha Dawladaas Xubinta ah.

*Qodobka 14aad*

Gudigu wuxuu samaysan doonaa xeerarkiisa habraaca ee uu raacayo marka uu gudanayo shaqooyinkiisa loogu igmaday Habkan.

*Qodobka 15aad*

1. Habdhaqankani wuxuu u furan yahay saxiixa Dawlad kasta oo saxiixday, ansixiyay, ama ku biiray Heshiiska.

2. Habkani wuxuu u yaalaa ansixinta Dawlad kasta oo ansixiyay ama ku biiray Heshiiska. Waraaqaha ansixinta waxaa la dhigayaa/gudbinayaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

3. Habkani wuxuu u furan yahay ku biirista Dawlad kasta oo ansixiyay ama ku biiray Heshiiska.

4. Ku biiristu waxay dhaqan galaysaa dhigista agabka ku biirista Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qodobka 16aad*

1. Habkani wuxuu dhaqan galayaa kadib, sadex bilood, taariikhda dhigista heshiiska ama ku biirista ee dawlada tobnaad, ee loo gudbiyo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

2. Dawlad kasta oo ansixinaysa ama ku biiraysa Habkan ka dib marka uu dhaqan galo, Habkani wuxuu dhaqan galayaa sedex bilood ka dib marka uu gudbiyo heshiiska ama ku biirista.

*Qodobka 17aad*

Wax iska reebis ah oo Habkan lagu sameeyo lama ogolaan doono.

*Qodobka 18aad*

1. Dawlad kasta oo Xubina waxaa laga yaabaa inuu soo jeediyo wax ka bedel lagu sameeyo Habdhaqnkan iyo inuu ka diiwaan galiyo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu markaasi u gudbin doonaa wax ka-bedelada la soo jeediyay Dawladaha Xubnaha ka ah, isla markaana uu la socdo codsi ah inay u soo gudbiyaan isaga/iyada inay doorbidayaan in loo qabto shir ujeedadiisu tahay in la eego iyo in loo codeeyo soo jeedintaas. Haday dhacdo in sedex meelood meel Dawladaha Xubinta ah in ay doorbidaan shir, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu abaabuli doonaa shir hoos imaanaya Qaramada Midoobay. Isbedel kasta oo lagu ansixiyo aqlabiyada Dawladaha Xubnaha ah iyo codaynta shirka ka dhacday waxaa loo gudbin doonaa Golaha Guud ee Qaramada Midoobay si loo ansixiyo.

2. Isbedeladu waxay dhaqan galayaan marka uu ansixiyo Golaha Guud ee Qaramada Midoobay isla markaana ay ogolaadaan sedex meelood laba Dawladalka Xubnaha ka ah Habkan si waafaqsan habraaca Dastuuradooda.

3. Marka ay isbedeladu ay dhaqan galaan, waxay waajib ku noqonayaan Dawladaha Xubnaha ah ee ogolaaday. Balse Dawladaha kale ee Xubnaha ah waxaa wali waajib ka saarnaanayaa Qodobada Habkan iyo wixii kale ee isbadelo ah ee uu horay u aqbalay.

*Qodobka 19aad*

1. Dawlad kasta oo xubina waxaa laga yaabaa inay ka laabtato habkan xilli kasta isagoo qoraal wargali ah ku hagaajinaya Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Ka bixistu waxay dhaqan galaysaa lix bilood ka dib markii uu helay wargalintaas Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

2. Ka bixistu waa in aanay khatar ku ahayn dabaqida socota ee qodobada Habkan xidhiidhkasta oo la soo gudbiyay si waafaqsan qodobka 2aad ama baadhis la soo jeediyay si waafaqsan qodobka 8aad ka hor taariikhda dhaqan galka ka bixista.

*Qodobka 20aad*

Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu ku wargalin doonaa dhamaan Dawladahada ;

(a) Saxiixyada, ansiximaha, iyo ku biirista Habkan hoos yimaada;

(b) Taariikhda dhaqan-galka ee Habkan iyo wixii wax ka-badelid ah sida ku cad qodobka 18aad;

(c) Iyo weliba kabixis kasta oo waafaqsan qodobka 19aad.

*Qodobka 21aad*

1. Heshiiskan qoraaladiisa rasmiga ah ee ku qoran afafka Carabiga, Shiinaha, Ingiriisiga, Fransiiska, Ruush iyo Isbaanashka waxa loo gudbin/ loo dhiibi doonaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu u gudbin doonaa nuqulo tasdiiqsan oo Habkan ah iyadoo loo tixraacayo qodobka 25aad ee Heshiiska.

# Heshiiska Lidka ku ah Jidhdilka iyo Kuwa Kale ee Arrxan Darro Aadaminimada Lid ku ah ama Hab Dhaqan Quudhsasho, ama Ciqaab

***Waxaa Ansixayay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Tirsigiisu yahay 39/46, loo furay saxiix, ogolaansho iyo ku biiridba 10-kii December, 1984***

DHAQAN GALKA HESHIISKA: 26-KII JUNE 1987, SIDA WAAFAQSAN QODOBKA 27 (1)

*Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan,*

Iyaga oo tixgalinaya si waafaqsan mabaadida ku qeexan dastuurka Qaramada Midoobay, aqoonsiga, siinaanta iyo xuquuqaha lama duudsiyaanka ah ee ay leeyihiin dhammaan xubnaha qoyska Aadamaha oo ah asaaska xorriyada, cadaalada iyo nabada dunida,

Iyada oo la aqoonsanyahay in xuquuqahaasi ay yihiin asal-madoorshaanka karaamada qofka Aadamaha ah,

Iyada oo la tixgalinayo isku waajibinta dawladahaas hoos yimaada Axdigan gaarhaana qodobka 55aad in aya kor u qaadaan xurmaynta caamka ah iyo dhawrista xuquuqda Aadamaha iyo xorriyadaha asaasiga ah,

Iyaga oo aqoonsan qodobka 5aad ee baaqa xuquuqda Aadamaha iyo qodobka 7aad ee heshiiska caalamiga ah ee xuquuqaha siyaasada iyo kuwa madaniga ah, kuwaas oo labadooduba qeexaya in aan qofna lagu samayn karin jidhdil, arxandarro Aadaminimada lid ku ah ama habdhaqan quudhsasho ama ciqaab jidheed,

Iyada oo la tixgalinayo baaqa ku saabsan ilaalinta dhammaan dadka in ay mutasystaan jidh dil, arxandarro aadaminimada ka baxsan ama habdhaqan quudhsasho ama ciqaabeed taas oouu dajiyaya Golaha Guud ee Qaramada Midoobay 9 December 1975,

Iyada oo ay ka go'antahay in ay si dheeraada u xoojiyaan halganka lidka ku ah jidhdilka iyo arxandarrada kale ee aadaminimada ka baxsan ama habdhaqanka quudhsashada ama ciqaabeed meel kasta oo dunida ka mida,

*Waxa ay isku raaceen;*

# QEYBTA I

*Qodobka 1aad*

1. Ulajeedada Axdigan, erayga 'jidhdil' waxaa loola jeedaa fal kasta oo xanuun daran ama waxyeelo ay gaadho maskaxda ama jidhka oo si ula kac ah loogu gaystay qof iyada oo loola jeedo in laga helo ama qof sadexaad laga helo xog ama qirasho iyada oo loo ciqaabayo fal uu gaystay ama qof sadexaad uu gaystay ama lagu tuhmay in uu gaystay ama si quudhsi ah ama khasab ah qof sadexaad iyada oo ay ku salysantahay nooc kasta oo kala soocid ah marka xanuunkaasi ama dhibaatadaasi uu gaysto uu horseeday ama ku timi la tashi sarkaal dawladeed ama qof kale oo awood sarkaal falkan ku gaystay ama ku raacay ka aqbalida. Kuma jirto xanuunkan ama dhibaatada haddi ay si lama filaan ah uga hor imanayso shuruucda.

2. Qodabkani kama hor imaanayo nidaam kasta oo caalami ah ama sharci dajin wadan oo leh ama ay ku jiraan qodobo dabiqaadeedu intan ka balaadhan tahay.

*Qodobka 2aad*

1. Dawlad kasta oo xubin ahi waxay qaadi doontaa tallaabooyin meel mar ah oo sharci dejineed, maamul ahaaneed, garsoor ahaaneed ama kuwa kale si ay uga hortagto falal jidhdil ah in lagu gaysto dhulka hoos yimaada awoodeeda maamul ee sharciga ah.

2. Majirto xaalado ka baxsan si kast oo ay tahay, marka ay dawladi xaalad dagaal ku jirto ama cabsi laga qabo dagaal, degenaansho la'aan siyaasadeed oo dalka gudihiisa ah ama amar kasta oo degdeg ah oo lagu sababeeyey in uu keeni karo jidhdil.

3. Jidh-dil uu sarkaal sare ama madax dadwayne bixiyeen sababo loogama dhigan karo gaysashada jidh-dil.

*Qodobka 3aad*

1. Dawlad xubin ahi debeda uma tuuri karto oo gacanta uma galin karto qof dawlad kale oo ay jiraan waxyaalo faro badan oo lagu rumaysanayo in qofkaasi halis u noqon doono in uu la kulmo jidh dil.

2. Ulajeedada go'aan qaadashada haddii ay jiraan sababahaasi masuulka dadwayne ee awooda u lehi waxa uu ku xisaabtami doonaa dhamaan waxii tixgalinaya ee ay khusayso oo ay ka mid tahay hadii la dabaqi karo in uu jiro dalkaas nidaam soo noqnoqonaya oo si badheedha ama ula kac ah u keenaya xadgudubyo ballaadhan ama dad badan saameeya oo lid ku ah xuquuqda Aadamaha.

*Qodobka 4aad*

1. Dawlad kasta oo xubin ahi waxay xaqiijin doontaa in falalka jidhdilku yihiin xad gudubyo marka loo eego xeerka danbiyada. Tan mid u dhiganta ayaa lagu mutaysanayaa isu gaysasho jidh

dil iyana waxa la mid ah fal qof kasta ha ka yimaadee ka beermay gacan ku siin ama ka qaybgal gaysasho jidhdil.

2. Dawlad kasta oo xubin ahi waxay ka dhigi doontaa xad gudubyada noocan ah danbiyo lagu mutaysto ciqaabo u qalama oo dhigaalkooda ah.

*Qodobka 5aad*

1. Dawlad kasta oo xubin ahi waxay qaadi doontaa tallaabooyinka ku haboon inay dejiso sharcigeeda ciqaabeed ee danbiyada ee lagu sheegay qodobka 4aad ee xaaladahan soo socda:

(a) Marka lagu galo danbiyada dhulka sharci ahaan hoos yimaada maamulkeeda;

(b) Marka eedaysanuhu yahay muwaadin dalkeeda ah;

(c) Marka dhibanuhu yahay muwaadin dawladaas ah haddii ay la haboon tahay dawladaas.

2. Dawlad kasta oo xubin ka ah waxay sidoo kale qaadi doontaa tallaabooyinkaas loo baahanyahay ee lagu asaasayo awoodeeda wax xukimada maamul ee ku saabsan gafafkan xaaladaha gaf-gaystaha la sheegay marka uu joogo meelkasta oo xukunkeeda hoos yimaada iyada oo aanay mustaafurin dalkasta oo kale oo ku xusan qodobka 8-aad ee wadamada lagu xusay faqrada 1-aad ee qodobkan.

3. Heshiiskan meesha ka saari maayo danbi sharci ahaan badheedh lagu gaysto sida waafaqsan qaanuunka.

*Qodobka 6aad*

1. Marka lagu qanco baadhis xogeed oo lahelay ka dib waxa u fasax ah dawlad kasta oo xubin ah oo qof lasoo eedeeyay ku galo xad gudub kasta ee lagu sheegay qodobka 4 haddii uu joogo way xidhi doontaa amase waxay qaadi doontaa tallaabooyin sharci oo kale si ay u xaqiijiso joogitankiisa. Xadhiga iyo tallaabooyinka kale ee sharciyeed waxay waafaqasanaan doonaan sida ay dhigayso Qawaaninta dawladaas hase ahaate waa la sii hayn karaa waqti ku filan in danbiile kasta ama lasoo gacan-galiye kasta dacwadiisa loo la fulinayo.

2. Dawladan oo kale waxay samayn doontaa in ay markiiba baadhis hordhac ah samayso oo ay ku ogaato xaqiiqda lahayo.

3. Qof kasta oo jeel ku jira oo waafaqasan faqrada kaw ee qodobkan waxa laga kaalmayn doonaa markiiba xaga xidhiidhinta wakiilka ugu dhaw ee dawlada uu wadiniga ka yahay. Ama haddii aanu dowlad lahayn waxa lala xidhiidhinayaa dawlada uu wadankeeda ku nool yahay.

4. Marka dawladi, si waafaqsan Axdigan, ay qof gacanteeda ku qabato waxa ay si degdeg ah u ogaysiinaysaa dawladaha ku xusan qodobka 5-aad faqrada 1-aad iyada oo u sheegaysa

xaqdiiqada in qofkaas gacanta lagu hayo kuna daraysa duruufaha keenay arrintiisa. Dawlada baadhitaanka hordhaca ah samaysaa, sida waafaqsan Faqrada 2-aad, waa in ay markiiba u gudbisaa natiijooyinka baadhitaanka Dawlada kale, isla markaana xustaa in ay rabto in ay iyadu garsoori doonto iyo in kale.

*Qodobka 7aad*

1. Dhul ka tirsan dawlad xubin ka ah Axdigan oo dhulka ay maamusho la soo sheegay in uu qof ku galay danbi ku xusan qodobka 4aad, isla markaana qofka la helo waxa loo tixgalinayaa/ gudbinayaa dacwadahaas ku qeexan qodobka 5aad, balse haddii aan la-mustaafurin, waxa dacwadiisa loo gudbinayaa masuuliyiinta hay'adaha oogida dacwada.

2. Masuuliyiintani waxay dacwadan u qaadi doonaan sida dacwad kasta oo caadi ah oo danbi culus ah, marka xeerka dawladaas la raaco loo qaado. Dacwadaada lagu sheegay qodobka 5, faqrada 2 tayada /heerka maraga ee laga rabo dacwad fulinta iyo danbi ku cadynta waa in aanay sinaba uga hoosayn kuwa loo adeegsado dacwadaha lagu sheegay qodobka 5, faqrada 1aad.

3. Qofkasta oo dacwadiisa la hoos keeno mid ka mid ah danbiyada lagu sheegay qodobka 4aad waxa uu helidoona ladhaqan fiican inta/mudada dacwadu ay socoto oo dhan.

*Qodobka 8aad*

1. Xadgudubyada ku xusan qodobka afraad waxaa loo qaadan doonaa in ay ka mid yihiin kuwa la mustaafuriyo cidda gaysata iyaga oo loo cuskanayo heshiis kasta oo musaafurin ah oo dhexmera dawladaha xubnaha ka ah Axdigan. Wadamada Axdigan xubnaha ka ah waxaa waajib ku ah in ay ku daraan danbiyaadaasi kuwa danbi falayaasha la isu celin karo xataa hadduu dhammaaday heshiis kasta oo danbiile isku celin ahaa oo u dhexeeyay iyagu.

2. Haddii dawlad xubin ka ah Axdigan oo iyadu shardi ku xidhay danbiile soo celinta in ay jirto heshiis danbiile isku-celin ah oo ay aqbasho codsiga danbiile u celinta dal kale oo Axdigan qayb ka ah, kaasi oo aanu heshiis danbiile isu celin ahi aanu u dhexayan, waa inay tix galisaa in uu axdigani noqdo gundhig Qaanuun ee dib u celinta danbi falaha danbiyaadaasi. Dib u celinta dambi fale waxa kale oo ay ku xidhnaandoontaa shuruudaha kale ee sharciga dalka codsiga loo soo jeediyay.

3. Dawladaha Axdigan xubnaha ka ah ee aan dib u celinta danbiilayaasha aan shuruud ku xidhaynin in uu jiro heshiis waxa ay u aqoonsanayaan danbiyo mudan in kuwa fala la isu gacan galiyo iyaga dhexdooda iyada oo la tixgalinayo shuruudaha sharci ee dawladda codsiga loo jeediyay.

4. Danbiyada sidaasi ah waxaa loola macaamili doonaa, marka muhimadu ay tahay dib isugu celinta danbiilayaasha ee wadamada Axdigan qaybta ka ah dhexdoodda, sidii oo lagu galay kaliya meesha uu ka dhacay uun maahe balse sidoo kale deegaamada wadamada laga doonayo in ay fuliyaan awooda Garsoor si waafaqsan Qodobka 5-aad, faqradiisa 1-aad.

*Qodobka 9aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay isu huri doonaan inta ay karaan isu kaalmayn la xidhiidha dacwadaha danbiyeed ee gaar ahaan ku yimid mid kasta oo ka mid ah xadgudubyada ku xusan qodobka 4aad, oo ay ku jiraan in la keeno dhammaan waxay cadaymo hayaan ee lagama maarmaanka u ah qaadista dacwada.

2. Dawladaha xubnaha ahi waxay gudan doonaan waajibaadkooda ku xusan faqrada 1-aad ee qodobkan iyada oo waafaqsan mucaahado/heshiis kasta oo ku saabsan iskaashi garsoor oo wadajir ah oo dhexmari kara.

*Qodobka 10aad*

1. Dawlad kasta oo xubin ka ah Axdigan waxa ay dadaal u gali doontaa in barashada iyo xogta ku saabsan mamnuucida jidhdilka si buuxda loogu darro manhajka tababarada shaqaalaha maxkamadaha iyo xabsiyada rayidka ama ciidan, shaqaalaha caafimaadka, saraakiisha dawlada iyo shakhsiyaadka kale ee laga yaabo in ay gacan ku yeeshaan haynta, baadhista iyo macaamilada qof kasta oo la qabto, la hayo ama la xidho.

2. Dawlad kasta oo xubin ka ah Axdigan waxa ay reebanaantan ku dari doontaa xeerarka iyo tilmaamaha la bixiyo marka ruuxaa loo sheegayo hawlihiisa iyo waajibaadkiisa.

*Qodobka 11aad*

Dawlad kasta oo xubin ahi waxay si joogta ah u samayn doontaa dib u eegis hab sugan ku socota, xeerarka su'aalo waydiinta, baadhista, amarada, qaababka iyo dhaqamada iyo qabanqaabooyinka loo sameeyay xabsiga iyo la-macaamilka dadka loo gaystay nooc kasta oo ah qabasho, hayn iyo xidhid meelkasta oo dhulkeeda sharci ahaan hoos yimaada, iyada oo ujeedadu tahay ka hortagida (horjoogsiga) xaaladaha jidhdilka ah dhamaantood.

*Qodobka 12aad*

Dawlad kasta oo xubin ahi waxay xaqiijin doontaa in masuuliyiinteeda xeeladaha xirfadeed iyo aqoonta leh sameeyaan baadhis dagdag ah oo eexasho la'aaneed meelkasta oo laga sheego war laqaadan karo oo ku saabsan in lagaysto fal jidhdil meel kasta oo kamida dhulka hoos yimaada maamulkeeda

*Qodobka 13aad*

Dawlad kasta oo xubin ahi waxay xaqiin doontaa in qofkasta oo sheeganaaya in loogaystay jidhdil meel kasta oo ka mid ah dhulka ay sharci ahaan xukunto in uu xaq u leeyahay in uu soo cawdo ama dacwoodo iyada oo ay tahay in kiiskiisa si dagdag ah oo eexasho la'aani ku jirto ay u baadhaan masuuliyiinteeda aqoonta iyo khibrada lehi tallaabooyinka laqaadi doono si loo xaqiijiyo in cowdaha/dacwoodaha iyo makhraatiyaduba laga badbaadiyo macaamilo xumo ama hanjabaad ka timid keenista dacawadiisa ama cadayn lahayo

*Qodobka 14aad*

1. Dawlad kasta oo xubin ka ah Axdigan waa inay cadaaladeeda ku dartaa in dhibane lagu sameeyay jidh-dil uu helo garawshiiyo iyo xuquuq mag dhaw sax ah oo ay kamid tahay sumcad usoo celinta ugu habboon. Haddi dhibanahu uu u dhinto sababo la xidhiidha jidhdilka lagu sameeyay awgiis, qaraabadiisa ayaa xaq u leh dhaxaltooyada ama magdhawaga ruuxaas dhintay.

2. Qodabkani wax saamayn ah kuma yeelanayo waxii xaq ah ee dhibanuhu ama dadkale ay ku heli karaan xuquuqda magdhaw ee ku qeexan nidaamka sharciga wadankooda.

*Qodobka 15aad*

Dawlad kasta oo xubin ah waxay xaqiijijn doontaa in war laga qaaday/laga qoray dhibanahan oo uu u sheegay warkaa jidhdilka dartii in aan loo isticimaali doonin cadayn ahaan go'aan ka gaadhida dacwada marka laga reebo qof lagu soo eedayay in uu gaystay jidhdil oo hadalka laga qoray ama laga qaaday oo loo adeegsado cadayn.

*Qodobka 16aad*

1. Dawlad kasta oo xubin ka ah Axdigan waxay ka hortagaysaa in dhulka ay iyadu ka taliso ay ka dhacaan falal kale oo cadawtinimo ah ama ciqaab iyo macaamil bahdil ah ama ka baxsan banii-aadaminmada, kuwaas oo aan jidhdil ahayn sida ku Qeexan Qodobka 1-aad, marka ficilada noocaas ahi saameeyaan ama dhiiri galiyaan ama raali ka noqdaan saraakiisha dawlada ama dad kale oo adeegsanay awood rasmi ah. Gaar ahaan waajibaadyada ku qoran Qodobada 10aad, 11aad, 12aad iyo 13aad ayaa la raacaya iyada oo meeshii ay ku qornayd jidh-dilka lagu badalayo cadawtinimo, ciqaab ama mucaamilo bahdil ah ama bani' aadanimada ka baxsan.

2. Shuruudaha Axdigan waxba uma dhimayaan shuruudaha Axdi kale oo caalami ama sharci wadan, oo mamnuucaya xaasidnimada ama bahdilka ama mucaamilo Aadaminimada ka baxsan ama la xidhiidha gacan galin danbiile ama mustaafurin.

# QEYBTA II

*Qodobka 17aad*

1. Waxaa la asaasi doonaa guddi ka hortaga jidhdilka (oo hadda ka dib laagu yeeddhi doono Guddiga) oo qaban doona hawlaha halkan lagu caddayn doono. Guddigu waxa uu ka koobnaan doonaa toban xeeldheere oo haybad iyo sumcad wanaagsan ku leh arrimaha xuquuqda Aadamaha iyaga oo ku hawl gali doona kartidooda shakhsiyeed. Xeelsheerayaasha waxaa soo dooran doona dawladaha Axdigan xubnaha ka ah waxaana tixgalin yeelan doonta isku dheelitirkooda xaga deegaanada Juquraafi iyo baahida loo qabo in ay ka qayb qaataan dad leh waayo aragnimo xaga sharciga ah.

2. Xubnaha guddiga waxa lagu dooran doonaa cod qarsoodi ah oo lagala soo bixidoono liiska dad ay soo magacaabeen dawlahada xubnaha ah. Dawlad xubin ah oo kastaa waxay soo magacaabi kartaa hal qof oo dadkeeda kamid ah. Dawladaha xubnaha ah waa in ay xasuusnaadaan muhiimada dadka lamagacaabaayo kuwaas oo sidoo kalana ka mid ah Guddiga Xuquuqda Aadamaha (Human Rights Committee) ee lagu asaasay Axdigii Caalamiga ahaa ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadeed (International Covenant on Civil and Political Rights) isla markaana diyaar u yihiin in ay u adeegaan guddiga ka hortaga jidhdilka.

3. Doorashooyinka guddida waxa lagu qaban doonaa labo shir oo dawladaha xubnaha ah, oo uu qaban qaabiyay Xoghayay Guud ee Qaramada Midoobay. Shirarkaas oo ku qabsoomi doona saddex meelood labo meelood in ay ka qayb galaan (joogaan). Dadka la dooran doona waxay noqon doonaan kuwo hela tirada codadka ugu badan ee codaynta iyo aqlabiyada cod dheeri ee wakiilada dawladaha xubnaha ah ee jooga islamarkaana codaynaya.

4. Doorashada u horaysa waxa la qaban doonaa mudo aan ka yarayn lix bilood ka dib marka uu dhaqan galo heshiiskani. Ugu yaraan afar bilood ka hor taariikhda doorasho kasta, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa waraaq u diri doona dawladaha xubnaha ah isaga oo ku soo marti qaadi doona in ayku keenaan magacaabidooda saddex bilood gudahood. Xogahayaha Guud waxa uu diyaarin doonaa liis u dhigan qaab higaadeed oo magacyada lasoo magacaabay oo dhan ah isla markaasna muujinaya dawladaha xubnaha ah ee soo magacaabay, waxaana uu u dhiibi doonaa dawladaha xubnaha ah.

5. Xubnaha guddida waxa la dooran doonaa muddo afar sanadood ah. Waxa u banaan xubnaha guddida in dib loo soo doorto haddii dib loo soo magacaabo, hase ahaatee mudada shan ka mid ah xubnaha lagu soo doortay doorshada hore waxay dhammaan doontaa labo sano ka dib. Doorashada hore markiiba kadib magacyada shantan xubnood waxa lagu soo saari doonaa bakhtiyaanasiib uu samayn doono guddoomiyaha shirka ee ku xusan faqrada saddexaad ee qodobkan.

6. Haddii uu dhinto xubin Gudida ka mid ah ama si rasmi ah uga tago ama sabab kale awadeed aanu sii wadi karin hawlaha uu uqaban jiray guddida, dawlada xubinta ah ee soo magacawday ayaa soo magaacaabi doonta xeeldheere kale oo dadkeeda ay kala soo bixi doonta si uu ushaqeeyo mudada ka hadhsan wakhtiigiisa isaga oo ku xidhan ansixinta aqlabiyada dawladaha xubnaha ah. Ansixinta waa la heli donaa haddii aanu badh ama in ka badan dawladaha xubnaha ahi diidin muddo lix todobaad gudahood ah ka dib marka uu magacaabida lasoo jeediyay uu ka war galiyo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

7. Dawladaha xubnaha ah iyaga ayaa masuul ka ahaan doona kharashka ku bixi doona marka ay gudanayaan shaqo gudiyeedyada.

*Qodobka 18aad*

1. Guddigu waxa uu dooran doonaa saraakiishiisa muddo laba sanno ah iyaga oo ay u furantahay in mar kale la dooran karo.

2. Guddigu waxa uu dajin doonaa xeer hoosaadyadiisa iyo habka wax qabadkooda oo ay kamid noqon karaan, laakiin waxa xeer hoosaadkaas ka mid noqonaya:

(a) Shirku waxuu ku ansixidoonaa marka ay lix xubnood joogaan;

(b) Go'aanada Guddiga waxaa lagu gaadhayaa codka aqlabiyada xubnaha jooga ee kooramka ah.

3. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa xilqaadi doona keenida shaqaalaha daruuriga ah iyo waxyaalaha kale ee looga baahan yahay gudashada haboon ee hawlaha Gudida ee ku xusan heshiiska.

4. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa qaban qaabin doona shirka hore ee guddida. Hasa yeeshee waxii intaa ka danbeeya waxa uu Guddigu shirkiisa u qabsanayaa sida uu qorayo xeer hoosaadkiisu.

5. Dawladaha xubnaha ah ayaa bixin doona kharashka ku baxa qabashada shirarka dawladaha xubnaha ah iyo kuwa gudida oo ay ka mid yihiin dib usoo celinta Qaramada Midoobay ee kharash kasta sida lacagta shaqaalaha iyo qalabka ee ay bixisay Qaramada Midoobay sida ku xusan faqradda 3-aad ee qodobkan.

*Qodobka 19aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay guddiga u soo gudbin doonaan warbixino ay soo mariyeen Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay oo ku saabsan tallaabooyinka ay qaadeen si ay u dardar galiyaan waxqabadyadooda ay xilqaadeen sida ku xusan heshiiskan, hal sano gudaheed ka dib marka heshiiskani ka dhaqan galo dawlada xubinta ah ee laga hadlaayo. Waxii intaa ka danbeeya dawladaha xubnaha ahi waxay soo gudbin doonaan waxbixino dheeraad ah afartii sanadoodba mar kuwaas oo ku saabsan tallaabooyinka cusub ee ay qadeen iyo warbixino kale oo ay guddigu codsankaraan.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa u gudbin doona warbixinta dhammaan dawladaha xunbnaha ah.

3. Warxbixin kasta waxa eegi doona guddiga, iyaga oo laga yaabo in ay ka bixiyaan faalooyin guud oo la xidhiidha waxbixinta sida ay iyaga la tahay in ay haboon tahay; waxayna ay faalooyinka usoo gudbin doonaan dawlada xubinta ah ee ay khusayso. Dawladaas xubinta ahi waxay ugu soo jawaabi kartaa Gudiga waxay aragtey ama u muuqday ee ay doonto.

4. Guddigu waxa uu awood u leeyahay in uu go'aansado, in faaladii uu sameeyay sida ku cad faqrada 3-aad ee Qodobkan iyo faahfaahintii uu ka helay Dawladaha Axdigan qaybta ka ah ee ay arrintu khusaysay, inuu ku darsado warbixin sanadeedkiisa sida ku cad Qodobka 24aad. Haddii ay sidaasi codsato Dawlada Axdigan qaybta ka ah ee ay arrintu khusayso, waxa uu go'aamin karaa in uu ku daro nuqul warbixintii uu bixiyay sida ku cad faqrada kow ee Qodobkan.

*Qodobka 20aad*

1. Haddii guddigu helaan xog la qaadan karo oo ay u arkaan mid loo qaadan karo raad raac, in si qaab nidaamsan ah loo gaystay jidhdil dhul ay sharci ahaan uga taliso dawlada xubinta ahi, markaa guddigu waxay dawlada xubinta ah ugu baaqi donan in gacan Gudiga ku siiso in si xogta ay helaan looga gun gaadho; dabadeedna ay keento aragtideeda xogta Gudidu heshay ku saabsan.

2. Iyaga oo ku xisaabtamay aragtiyaha ay u keentay dawlada xubinta ah ee ay arrintu khusayso iyo xog kasta oo loo arko waxtar oo Gudigu helaan, Gudigu haddii ay u arkaan in la hubo waxay u qaybin donaan mid ama ka in badan oo iyaga ka mid ah in uu si qarsoodi ah u xuuraamo dabadeedna Gudiga u war keeno.

3. Haddi baadhitaanka loo sameeyo sida waafaqsan faqrada 2aad ee qodobkan, Guddigu waxa uu iskaashi waydiisanayaa Dawladan Axdigan xubinta ka ah ee ay khusayso arrintu. Haday ku heshiiyaan wadankaasi Axdiga qaybta ka ah, baadhitaanka noocaas ah waxaa ku jiri karta booqasho lagu tago dalkiisa.

4. Marka ladarso waxyaalahii ay soo heleen xubinta –xubnaha ee keenis toodu waafaqsan tahay faqrada 2 ee qodobkan, Gudigu waxay dawlada xubinta ah u soo gudbin doontaa helitaankooda ka soo baxay xogahii ay darseen iyaga oo soo raacinaaya waxii ay talo iyo toosin u arkaan marka xaalada la fiiriyo.

5. Dhammaan tallabooyinka Gudiga ee ku xusan faqrada 1 ilaa 4 ee qodobkan waxay noqon donaan qarsoodi, marxalad kastabana waa in la kasbado ka gacan gaysashada dawlada xubinta ah. Marka la dhammeeyo baadhitaanada iyagoo qarsoodi loo sameeyey sida waafasan faqrada 2, giddigu waxa uu karaa, marka uu dawlada xubinta ah la tashado ka dib, in uu gaadhi karo in ay waxbixintooda sandeedka soo raaciyaan war kooban oo ku saabsan tallaabooyinkooda ay qaadeen waxyaalaha ka soo baxay waxbixintan oo waafaqsan qodobka 24.

*Qodobka 21aad*

1. Dawlada xubinta ka ah heshiiskani waxay si cad u sheegi kartaa markay doonto sida ku xusan qodobkan in ay aqoonsantahay in awooda iyo aqoonta guddigan in loo keeno isla markaan meel marin karaan wararka iyo arrimaha lala soo socodsiiyo ee ku siman ilaa xadka in dawlad xubin ahi sheegayso, in dawlad kale oo xubin ahi aanay fulinayn waajibaad ku xusan heshiiskan la socodsiinyaan oo kale waa la qaban karaa waxaana loo wadayaa sida ku xusan tallaaboyinka qodobkan kaliya hadii ay keento warka dawlada xubin ah oo bixisay baaqii in ay aqoonsan tahay iyadu awooda iyo aqoonta Guddiga. Ma jiri doonto in Gudigu tixgaliyo ama fara-gashado war ka yimid dawlad aan samayn baaqan oo kale marka la eego qodobkan warbixina lagu helo ogolaanta qodobkan waxa loo wadi doonaa sida soo socota:

(a) Haddii dawlad xubin ahi ula muuqato in dawlad kale dan ka galayn qadiyada heshiiskan, waxay yeeli kartaa in ay arrinta qaraar ahaan u ogaysiiso dawlada xubinta ah sadex bilood gudahood ka dib helitaanka qoraalkaas, dawlada qoraalka la siiyey

waxay dawladii xubinta ahayd ee qoraalka u soo dirtey siin doontaa fasiraada ama war amase hadal qoraal ah oo arrinta si cad u kala dhigay waana in ay ka mid ahaadaan inta suurto galli karta ka hadalka nidaam deegaaneedka iyo tallaabooyinka daawayn ahaan loo qaaday kuwa dhiman ama jira hada ee arrintan ku saabsan;

(b) Haddii aan arrinta loo maarayn si labada dawladood ee xubnaha ah u cuntanta lix bilood ka dib marka dawlada xubinta ee qoraalka lagu socodsiiyey hesho qoraalkan, mid kasta oo labadooda ka mid ah waxay xaq u leedahay in ay arrinta galiso gacanta guddiga iyada oo u gudbin doonta ogaysiin qoraal ah oo dawlada kale ee xubinta ah ee arrintu khusaysay ogaysiinaaya;

(c) Guddigu waxa uu guda galayaa arrinta loo soo gudbiyay ee khusaysa Qodobkan marka uu hubsado in loo qaaday dhammaan tallaabooyinkii sixitaan ee loo baahnaa ee lagana caalwaayay, si waafaqsan dhammaan mabaadida Qaanuunka Caalamiga ah ee la aqoonsanyahay tani ma noqonayso xeer marka codsiga sixitaanka lagu dalbanayo si aan macquul ahayn dib loogu dhigo ama se uu shaki galayo helitaanka uu gargaar wax tar leh helayo dhibanaha dhibaatadu kasoo gaadhay ku xadgudubka Axdigan;

(d) Guddiga shirarkooda ku saabsan qodobkan waxay noqon doonaan qaar albaabadu u xidhan yihiin;

Iyaga oo daliishanaaya ballan qaadyada ku jira faqrad-hoosaadka (c) ee qodobkan, Guddigu waxay madal-xafiiseed (good offices) u fidin doonaan dawladaha xubnaha ah ee ay khusayso iyada oo ay ujeedadu tahay helitaanka xal saaxiibtinimo oo arrintu ku dhamaato, lagana duulaayo xushmaynta waajibaadka lagu ballanqaaday heshiiskan. Ujeedadan awgeed Guddigu haddii uu doono waxa ay u saari karaan arrintan guddi ku meel gaadh ah;

(e) Arrin kasta oo loo soo gudbiyo oo khusaysa qodobkan, Guddigu waxa ay waydiin karaan dawladaha xubnaha ah ee ay khusayso sida ku xusan faqrad hoosaadka (b) ee qodobkan in ay u soo gudbiyaan guddiga war kasta oo muhiim ah;

(f) Dawladaha xubnaha ka ah Axdigan ee ay khusayso arrintu ee ku xusan faqrad-hoosaadka (b) ee qodobkan waxa ay xaq u yeelanayaan in ay goob-joog ka noqdaan marka ay Guddigu arrintooda falanqaynayso iyaga oo soo jeedimo u gudbin kara af-ahaan iyo qoraal ahaanba;

(g) Muddo 12 bilood gudaheed ah marka laga soo bilaabo taariikhda helitaanka wargalinta ku xusan faqrad-hoosaadkan (b) ee qodobkan, Gudigu waxay dhiibi donaan/keeni doonaan warbixin;

(h) Haddii xal waafaqsan (e) laga gaadho Gudigu waxay warxibintooda ku koobi donaan weedh kooban iyo heshiiska la gaadhay;

(i) Haddii la waayo maslaxadaha ku jira faqrad-hoosaadka (e) Gudidu warbixintooda waxay ku koobi doonaan waxyaalaha dhabta ah, qoraalada la keenay iyo qoraal ahaan iyo waxa af-ahaan labada dhinac sheegaan ayaa la raacinayaa warbixinta.

Si kastaba hana qotee, warbixinta waxa loo diri doonaa dawlada xubnaha ah ee ay khusayso.

2. Shuruucda Qodobkani waxa ay dhaqan galayaan marka shan wadan oo Axdigan xubno ka ahi ay sameeyaan Qoraal hoos tagaya faqrada 1-aad ee qodobkan. Qoraalkaasi waxa loo gudbin doonaa wadamada Axgdigan qaybta ka ah iyo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay kaasi oo u gudbindoona nuqulada wadamada kale ee Axdigan xubnaha ka ah. Qoraalkaas waa lala noqon karaa xilli kasta iyada oo la ogaysiinayo Xoghayaha Guud. La noqoshadaas ma dhaawacayso tixgalinta arrin kasta oo ah mid warbixinteeda mar hore la gudbiyay oo hoos tagaysa Qodobadan. Ma jiri doonto wadan Axdigan xubin ka ah oo laga qabanaayo wax kale oo xidhiidh ah oo hoos tagaya Qodobadan, kadib markii ogaysiinta la noqoshada qoraalku uu soo gaadho Xoghayaha Guud haddi aanu wadanka Axdiga qaybta ka ah ee ay khusaysaa aanu samaynin qoraal cusub.

*Qodobka 22aad*

1. Dawlada xubin ka ah heshiiskan waxay kartaa markii ay doonto sida ku xusan qodobkan in ay ku baaqi karto in ay aqoonsan tahay awooda guddida in loo keeno qoraal xidhiidh oo iyada ka yimid ama cidda ay wakiilka ka tahay oo ku hoos nool dhulka ay sharci ahaan xukunto oo sheeganaaya in loo gaystey xad gudub ay u gaysatey dawlad xubin ka ah ballanqaadyada heshiiskan. Guddigu ma qaban doono qoraal ka yimi dawlad xubin ah oo aan samayn baaqan.

2. Guddigu waxay u qaadan doonaan in aan la ogolayn qoraal lagula soo xidhiidhay sida ku xusan qodobkan kaas oo ah magac la'aan ama mid ay Gudigu u aragto meel ka dhac in ay ku tahay xuquuqda keenista qoraaladan xidhiidh ahaaneed ama aan la socon balanqaadyada heshiiskan.

3. Iyaga oo raacaya ballan qaadyada faqrada 2, Guddigu waxay qoraal kasta oo lagula soo xidhiidhay iyaga, sida ku xusan qodobkan waxay ogaysiin doonaan dawlada xubinta ka ah heshiiskan ee samaysay baaqa ku xusan faqrada 1 ee lagu soo eedeeyey in ay ku xad gudbayso balanqaadyada heshiiskan. Lix bilood gudahood, dawlada helaysa qoraalka wax ay u gudbin doontaa Guddiga qoraal qeexan/cad ama weedho cadaynaya arrinta iyo xalka, haddii uun ay jirto in dawladaasi samaysay sidaas.

4. Guddigu waxa uu tixgalin doonaa qoraalada xidhiidh kasta oo soo gaadha iyaga sida ku xusan qodobkan iyaga oo kaashanaaya dhammaan xogta ay ka helaan dadka ama wakiilada dadka iyo dawlada ay khusayso.

5. Guddigu ma qaban doono/dan kama gali doono qoraal xidhiidh ah oo qof kaliya ah sida ku xusan qodobkan hadii aanay cadaynin:

6. In arrinta lafteeda aan hore iyo haatanba, aan lagu soo garsoorin ama ku jirin baadhitaan hoos tagaya qaab kale oo caalamiya;

7. Shakhsigu in uu kasoo quustay dhammaan imkaaniyaadkii garsoor/waxa-qabad ee dalkiisa ka jiray; hasa yeeshee sababtan laftigeeda lama xeerinayo marka imkaaniyaadka wax qabad si aan macquul ahayn dib uga dhacayso ama daahinayso ama imkaaniyaadkaasi waxqabad ka helaynin wax naruuro ah ruuxa dhibanaha ka noqday ku xadgudbka Axdigan.

8. Guddiga shirarkaasi iridaha ayaa u xidhnaan doona marka ay darsaayaan qoraalada xidhiidhka ee ku xusan qodobkan.

9. Guddigu waxay aragtidooda u soo gudbin doonaan dawlada xubinta ah ee ay khusayso iyo qofkaba.

10. Ballanqaadyada qodobkani waxay dhaqan gali doonaan marka shan dawladood oo heshiiskan xubno ka ahi ay sameeyaan Baaqyo sida ku xusan faqrada 1-aad ee qodobkan. Baaqyada dawladaha xubnaha ahi waxay u gayn donaan Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay oo isna koobbiyo u diri doona dawladaha kale ee xubnaha ah. Baaqyada waa laga noqon karaa iyada oo ogyasiin qoraal ah loo gaynaayo Xoghayaha Guud. Ka noqoshadani wax ceeb ah ama qucdad ah kuma yeelan doonto falan-qaynta arrin mar hore bilaabmay qoraaladeeda xidhiidha sida ku xusan qodobkan. Ma jiri doono waxa xidhiidh ah qoral ahaan iyo af-ba ku saabsan arritan ciday doonto ha ka timaadee sida ku xusan qodobkan marka la helo ogaysiin ka noqosho ee baaqa Xoghayaha Guud la gaadhsiiyo, hadii aanay dawlad xubin ahi samayn baaq kale oo cusub.

*Qodobka 23aad*

Xubnaha Guddiga iyo Guddiga gaarka ah ee dhexdhexaadinta oo loo cuskaday magacaabidoodii qodobka 21, faqrada 1 (e), ayaa iska leh hawla fududaynta, mudnaanta iyo xaq dhawrka ay leeyihiin xeel-dheerayaasha ka socda Qaramada Midoobay sida ay dhigayaan qaybaha la xidhiidha Axdiga mudnaanta iyo xaqdhawrka Qaramada Midoobay.

*Qodobka 24aad*

Guddiga waxay soo gudbin donaan dawladaha xubnaha ah iyo Golaha Guud ee Qaramada Midoobay waxbixin sanadeed ku saabsan dawladahooda sida ku xusan heshiiskan.

# QEYBTA III

*Qodobka 25aad*

1. Heshiiskani waxa uu u furan yahay saxeexa dawladaha dhammaan.

2. Heshiiskani waxa uu u furan yahay ansixin. Qoraalada rasmiga ah ee ansixinta heshiiska ee dawladaha xubnaha ka ah waxa loo gayn doonaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qodobka 26aad*

Heshiiskani waxa uu u furan yahay ka mid noqoshada dawladaha oo dhan. Ka mid noqoshadu waxay ka bilaabmaysaa marka Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay loo geeyo qoaraalka rasmiga ah ee ku biirida.

*Qodobka 27aad*

1. Heshiiskani waxa uu dhaqan gali doonaa maalinta sodonaad marka laga joogo taariikhda Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay loo dhiibo qoraalka rasmiga ah ee labaatanaad ansixinta tan ku soo biirista.

2. Dawlad kasta oo ansixisay ama ku soo biiraysa heshiiskan ka dib marka la dhiibo qoraalada rasmiga ah ee labaatanaad ee ansixinta ama ku soo biirida, heshiiskani waxa uu ka dhaqan gali doonaa maalinta sodonaad marka laga joogo taariikhda qoraalka rasmiga ah ee ku soo ansixinta ama ku soo biirida.

*Qodobka 28aad*

1. Dawlad kasta waxa uu furan markay saxeexaso ama ogolaanayso heshiiskan ama ku soo biirayso in ay halkaa ka cadayso in aanay aqoonsanayn awooda Gudida ee ku xusan qodobka 20aad.

2. Dawlad kasta oo la timaada biyo diidmo waafaqsan faqrada 1 ee qodobkan, waxa uu banaan ka noqoshada biyo diidkeeda marka ay doonto iyada oo qoraal ahaan ogaysiis u diraysa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qodobka 29aad*

1. Dawlad kasta oo xubin ahi waxay soo jeedin kartaa wax ka badelis ay ogaysiinayso Xoghayaha Guud ee Qaradama Midoonay. Xoghayaha Guud waxa uu markiiba gaadhsiin doonaa waxa kabadalida la soo jeediyey dawladaha xubnaha ah isaga oo raacinaaya codsi ah in ay soo ogaysiiyaan hadii ay door bidayaan in ay kulan ka yeeshaan. Shirkaasi oo ujeedadiisu tahay ka baaran degida iyo u codeynta soo jeedinta. Hadii ay noqoto muddo afar bilood ah gudahood ka dib qoraalka taariikhda qoraalkaasi ugu yaraan sadex meelood hal meel oo dawladaha xubnaha ahi ogolaadaan kulankaas Xoghayaha Guud ayaa qaban doona kulan sidaa u ogolaanayaa xeerka Qaramada Midoobay. Kaabis kasta oo ay u codeeyaan Dawladaha xubnaha ka ah ee joogay, isla markaana la ansaxiyo, waxa uu Xoghayaha Guud u gudbin doona dhamaan dawladaha xubnaha ah si ay u ogolaadaan.

2. Waxa ka bedelis/kaabis kasta oo la sameeyay sida waafaqsan faqradda 1-aad ee qodobkan waxay dhaqan gali doontaa marka saddex meelood labo meelood ee dawladaha xubnaha ah ee heshiiskan ay Xoghayaha Guud ee Qarmada Midoobay soo ogaysiiyaan in ay u ogolaadeen sida waafaqsan qaababkooda distooriga ah.

3. Marka bedelaadu dhaqan galaan waxay saamayn doonaan dawladaha xubnaha ah ee ogolaaday bedelaada, kuwa kale wali waxa khusayn doona balan qaadyadii heshiiskan iyo bedela hore loo sameeyay ee ay ogolaadeen.

*Qodobka 30aad*

1. Muran kasta oo dhex mara labo ama ka badan oo dawladaha xubnaha ah ka mid ah oo ku saabsan fasiraada ama adeegsiga heshiiskan oo wada xaajood ku dhammaan waaya, isla markaana codsiga mid ahaantood keento ayaa dhexdhexaadin loogu qaban doonaa. Haddii lix bilood gudahood marka laga soo bilaabo taariikhada coddsiga dhexdhexaadinta dhinacyadaa ay kari waayaan in ay isku gartaan qaban qaabinta dhexdhexaadinta, mid uun ka mida ah xubnahaas ayaa muranka gayn kara Maxkamada Cadaalada ee Caalamiga ah (International Court of Justice), sida codsi ahaan waafaqsan xeerka maxkamada.

2. Dawlad kasta oo xubin ah waxa ubanaan in ay marka ay saxeexayso ama ansixinayso heshiiskan ama ku soo biirista waqtigeeda halkaa kaga baaqdo in ay la tahay in aan iyada aanay khusayn faqrada 1 ee qodobkan. Sidoo kale dawladaha kale ee xubnaha ah ee iyana muujiya ka-biyo-diikooda faqradda 1-aad ee qodobkan ma khusayndoonto.

3. Dawlad kasta oo xubin ah oo ka gaws qabsata sida waafaqsan faqrada2-aad ee qodobkan waxa ubanaan in ay la laabato gaws qabshadooda iyada oo ogaysiin qoraal ah u diraysa xoghayaha guud ee Qaramda Midoobay.

*Qodobka 31aad*

1. Dawlad kasta oo xubin ah way canbaarayn/laali kartaa heshiiska iyada oo ogaysiis qoraal ah ee udiraysa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Laalistu waxay dhaqan gali doontaa hal sannad ka dib marka loo dhiibo Xoghayaha Guud.

2. Laalistu kama saamaxayso dawladaha xubinta ah waajibaakooda ku xusan heshiiskan ee la xidhiidha hawl kasta oo dhacday kahor intii aan laalistu dhaqangalin, mana dhacayso in laalis dabciso tixgelinta ama baadhitaanka arrin socata oo Gudigu bilowday kahor mudada laalistumeel mar noqomnayso.

3. Maalinta laalidu dhaqan gasho ka dib Gudigu ma bilaabi/faro-galin doono arrin kale oo cusub oo khusaysa dawladdaa.

*Qodobka 32aad*

Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu dawladaha xubinta ka ah Qaramda Midoobay iyo dawladaha heshiiskan saxeexay ama ku soo biiray waqtiga soo socda ka wargalin doonaa waxyaabahan soo socda:

(a) Saxeexidda, ansixinta iyo ku soo biiridda sida ku xusan qodobka 25 iyo 26; Taariikhda dhaqan galka heshiiskan ee ku xusan qodobka 27 iyo taariikhda dhaqan galka ee kaabis kasta sida ku xusan qodobka 29;

(b) Laalid sida ku xusan qodobka 31.

*Qodobka 33aad*

1. Heshiiskan qoraaladiisa rasmiga ah ee ku qoran afafka Carabiga, Shiinaha, Ingiriisiga, Faransiiska, Ruushka iyo Isbaanishka waa qoraalo sharci ah oo dhab ah waxana loo dhiibi doonaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

2. Xogahay Guud ee Qaramada Midoobay ayaa u diri doona qoraalada la soo hubiyay ee heshiiskan dawladaha oo dhan.

# Habka Ikhtiyaariga ee Heshiiska Lidka ku ah Jidh Dilka iyo Kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani Aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab

***Waxaa Ansixayay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Tirsigiisu yahay 57/ 199 ee***

18-KII DECEMBER 2002

DHAQAN GALKA HESHIISKA: 22-KII JUNE 2006, SIDA WAAFAQSAN QODOBKA 28-AAD (1)

## GOGOLDHIG

*Dawladaha Xubnaha ka ah Habkani,*

*Iyaka oo dib u xaqiijinaya* in jidhdilka, iyo dhaqamada kale aan bani aadanimada ahayn ama sharaf dilka ah ama ciqaabtu ay yihiin kuwa reeban iyo inay keenayaan xadgudubyo halis ku ah xuquuqda bani aadanka,

*Iyakoo ay ka dhaadhacsan tahay* in taalaabooyin dheeraad ah ay yihiin lagama maarmaan si loo gaadho ujeedooyinka Heshiiska Lidka ku ah Jidh Dilka iyo kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab (oo halkan loogu tixraacay inuu yahay Heshiis) iyo in la xoojiyo laga illaaliyo dadka laga xayuubiyay madax banaanidooda Lidka ku ah Jidh Dilka iyo kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab,

*Iyakoo dib u xusuusanaya* in qodobada 2aad iyo 16aad ee Heshiisku ay waajib ku saarayso Dawlad walba oo Xubin ah inay taalaabooyin wax ku ool ah ka qaato si ay uga hortagto falalka Lidka ku ah Jidh Dilka iyo kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab gudaha dhul kasta oo ku hoos jira awoodeeda,

*Iyakoo aqoonsan* in Dawladaha ay leeyihiin mas'uuliyada koowaad ee hirgalinta qodobadaas, kaasoo xoojinaya illaalinta dadka laga xayuubiyay madax banaanidooda iyo qadarinta buuxda ee

xuquuqda bani aadamku ay tahay mas'uuliyad guud oo ay wadaagaan dhamaan iyo in ururada hirgalinta ee caalamiga ah iyo xoojinta taalaabooyinka qaran,

*Iyakoo dib u xusuusanaya* in ka hortag wax ku oola oo falalka Lidka ku ah Jidh Dilka iyo kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab u baahan yahay aqoon iyo isku darka taalaabooyin kala duwan oo sharci dajineed, maamul iyo talaabooyin kale,

*Iyakoo dib u xusuusanaya* in Shirka Aduunka ee Xuquuqda Bani Aadamku uu si adag u cadeeyay in dadaalada lagu cidhib tirayo jidh dilka ay ugu horaynta ay noqdaan kuwa xooga saaraya ka hortagida waxaanu ugu baaqay meelmarinta habraac raacsan Heshiiska, oo loola jeedo inuu dhiso hab ka hortagida oo booqasho joogto ah ku sameeyay goobaha xadhiga

*Iyadoo ay ka dhaadhacsan tahay* in illaalinta dadka laga xayuubiyay xuriyadooda inaan lagula kacin falal Lidka ku ah Jidh Dilka iyo kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab in la xoojiyo habab aan maxkamadaha ahayn oo ka hortagis ah, kuna dhisan booqashooyin joogto ah oo lagu sameeyo goobaha xadhiga,

*Waxay ku heshiiyeen sidan soo socota;*

## QEYBTA I

*Qodobka 1aad*

Ujeedada Habraacina waa inuu aasaaso nidaam booqashooyin joogto ah oo ay ka fuliyaan hay'ado madax banaan oo caalamiya iyo kuwa qaran meelaha lagu hayo dadka xoriyadahooda laga xayuubay, si looga hortago Jidh Dil iyo kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab

*Qodobka 2aad*

1. Guddi Hoosaas ka Hortagida Falalka Lidka ku ah Jidh Dilka iyo kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab ee ka tirsan Gudiga Jidh Dilka (oo halkan loogu tixraacay Guddi Hoosaadka ka Hortaga) ayaa la aasaasi doonaa waxaanu fulin doonaa shaqooyinka lagu dhigay Habkan.

2. Guddiga ka Hortagu wuxuu ku fulin doonaa shaqadiisa d xayndaabka Axdiga Qaramada Midoobay waxaana hagi doona ujeedooyinka iyo mabaa'diida, sidoo kale Habdhaqanka Qaramada Midoobay ee khuseeya la dhaqmida dadka laga xayuubiyay xoriyadahoodii.

3. Sidoo kale, Guddi Hoosaadka ka Hortaga waxaa hagi doona mabaa'diida dahsoonaanta (confidentiality), eex la'aanta, sooc la'aanta, caalaminimada iyo dhexdhexaadnimada.

4. Guddi Hoosaadka ka Hortaga iyo Dawladaha Xubnaha ah waxay iska kaashan doonaan meel marinta Habkan.

*Qodobka 3aad*

Dawlad kasta oo Xubin ah waxay dajin doontaa, u magacaabi doontaa ama u joogtayn doontaa arimaha gudaha mid ama dhawr hay'ado booqasho oo loogu talagalay ka hortagista Jidh Dilka iyo kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab (waxaa halkan loogu tixraacay Hanaanka Ka Hortagista ee Qaran).

*Qodobka 4aad*

1. Dawlad kasta oo Xubin ah waxay ogolaan doontaa booqashooyinka, si waafaqsan Habkan, iyadoo loo marayo hababka lagu xusay qodobka 2aad iyo 3aad meel walba oo ku hoos jira maamulkeeda iyo gacan ku haynteeda halkaasoo ay dad yihiin ama laga yaabo kuwa laga xayuubiyay xoriyadoodii, ha ahaato amar ay bixisay dawladu ama bilawgeedaba ama rabitaankeeda ama ogolaanshaheeda (waxaa halkan loogu tixraacay Goobaha Xadhiga). Booqashooyinkaas waxaa la samayn doonaa iyadoo loo jeedo sidii loo xoojin lahaa, haday lagama maarmaan noqoto, ka illaalinta dadkaas jidh dil iyo dhaqamada kale ee aan bani aadanimada ahayn ama sharaf dilka ah ama ciqaabta.

2. Ujeedooyinka Habkan, ka xayuubin xuriyadeed waxaa loola jeedaa hab kasta oo xadhig ama xayiraad ama in qofka la dul dhigo illaalin guud ama gaara taasoo qofkaasi aan loo ogolayn inuu rabitaan ku baxo oo ay ku timid amar awood kasta oo garsoore, maamul ama awood kale.

## QEYBTA II

*Qodobka 5aad*

1. Guddi Hoosaadka ka Hortagistu wuxuu ka koobnaan doonaa tobon xubnood. Ka dib ansixinta ama ku biirista kontonaad ee Habkan, tirada xubnaha Guddi Hoosaadka ka Hortagistu wuxuu kor ugu dalacayaa shan iyo labaatan.

2. Xubnaha Guddi Hoosaadka ka Hortagistu wuxuu gudihiisa iska dhex dooran doonaan shakhsiyaad leh habdhaqan sareeya, oo khibrad xirfadeed oo macruuf ah u leh maamulka cadaalada, gaar ahaan xeerka ciqaabta, maamulka xabsiyada ama booliska, ama takhasusyada kala duwan ee xidhiidhka la leh la dhaqmida dadka laga xayuubiyay xoriyadoodii.

3. Samaysanka Guddi Hoosaadka ka Hortagista waxaa fiiro gaar ah la sii doonaa qaybin juquraafiyadeed oo cadaalad ah, oo ka turjumaysa hababka kala duwan ee ilbaxnimo, iyo weliba nidaamyada sharciga ee Dawladaha Xubnaha ah.

4. Samaysankan waxaa sidoo kale fiiro gaar ah la siin doonaa isku dheeli tirka ku jiritaanka jinsiga oo ku dhisan mabaa'diida sinaanshaha iyo kala sooc la'aanta,

5. Laba xubnood oo laga yaabo inay isku Dawlad yihiin kama mid noqonayaan Guddi Hoosaadka ka Hortagista.

6. Xubnaha Guddi Hoosaadka ka Hortagistu waxay ku shaqayn doonaan awoodooda shaqsiyeed, waxay noqon doonaan kuwo madaxa banaan iyo sinaan, waxayna noqon doonaan kuwo u jooga inay ugu adeegaan Guddiga ka Hortagista si hufan.

*Qodobka 6aad*

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxaa laga yaabaa inay u magacawdo, si waafaqsan faqrada ee qodobkan, ilaa laba musharax oo haysta shahaadooyin isla markaana buuxinaya shuruudaha lagu dhigay qodobka 5aad, marka ay sidaa samaynayso waxay keeni doontaa warbixin faahfaahsan oo la xidhiidha shahaadooyinka la magacaabayaasha.

2. (a) La magacaabayaasho waxay haysan doonaan jinsiyada Dawlad Xubin ka ah Habkan;

   (b) Ugu yaraan mid ka mid ah labada musharax wuxuu haysan doonaa jinsiyada Dawlada Xubinta ah ee Magacaabaysa;

   (c) Lama magacaabi doono wax ka badan laba muwaadin ee Dawlad Xubin ah

   (d) Ka hor inta aanay Dawlad Xubin ah magacaabin muwaadin u dhashay Dawlad kale oo Xubin ah, wuxuu raadin doonaa ogolaanshaha Dawladaas.

3. Ugu yaraan shan bilood ka hor taariikhda kulanka Dawladaha Xubnaha ah markaasoo la qaban doono doorashooyinka, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu warqad ku hagaajin doonaa Dawladaha Xubnaha oo ah uu ku marti qaadayo inay soo gudbiyaan magacaabisahooda mudo sedex bilood gudahood ah. Xoghayaha Guud wuxuu u gudbin doonaa liis, u dhigan qaabka kala horaynta xuruufta, dhamaan dadka la soo magacaabay, isagoo tilmaamaya Dawladaha Xubnaha ah ee soo magacaabay.

*Qodobka 7aad*

1. Xubnaha Guddi Hoosaadka ka Hortagistu waxaa loo dooran doonaa habkan soo socda:

   (a) Tixgalinta koowaad waxaa la siin doonaa fulinta shuruudaha iyo sifooyinka qodobka 5aad ee Habkan;

   (b) Doorashada hore waxaa la qaban doonaa iyadoo aan ka danbaynayn lix bilood ka dib dhaqan galka Habkan;

(c) Dawladaha Xubnaha waxay dooran doonaan xubnaha Guddi Hoosaadka ka Hortagista si codayn qarsoodi ah;

(d) Doorashooyinka xubnha Guddi Hoosaadka ka Hortagista waxaa la qaban kulan mudaysan oo Dawladaha Xubnaha waxaana abaabuli doona Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Kulanadaas, kaasoo ay sedex meelood laba Dawladaha Xubnaha ay samayn doonaan kooram, dadka loo doortay Guddi Hoosaadka ka Hortagu waxay noqon doonaan kuwa hela tirada ugu badan ee codadka ah iyo aqlabiyad furan oo codadka wakiilada Dawladaha Xubnaha ah ee jooga isla markaana codaynaya.

2. Hadii inta lagu guda jiro doorashada ay laba muwaadin oo ka soo jeeda Dawlad Xubin ah ay noqdaan kuwa ay u banaan tahay inay u shaqeeyaan xubno ka mid ah Guddi Hoosaadka Ka Hortaga, musharaxa hela tirada ugu badan ee codadka ayaa xubin ahaan ugu shaqayn doona Guddi Hoosaadka ka Hortaga. Hadii muwaadiniintu helaan tiro codad isku mid ah, Habkan soo socda ayaa la marin doonaa:

(a) Meesha mid kaliya laga soo magacaabay Dawlada Xubinta ah ee uu muwaadinka u yahay, muwaadinkaas ayaa xubin ahaan uga shaqayn doona Guddi Hoosaadka ka Hortaga;

(b) Meesha labada musharaxba ay soo magacawday Dawlada Xubinta ah ee ay muwaadiniinta u yihiin, codayn gaara ayaa si qarsoodiya loo qaadi doonaa si loo go'aamiyo muwaadinka xubinta noqonaya;

(c) Meesha aan labada muwaadin midna Dawlada Xubinta ee ay muwaadiniinta u yihiin aanay soo magacaabin, codayn gaara ayaa si qarsoodiya loo qaadi doonaa si loo go'aamiyo musharaxa xubinta noqonaya.

*Qodobka 8aad*

Hadii xubin ka tirsan Guddi Hoosaadka ka Hortaga uu dhinto ama is casilo, ama aanu sabab kale oo jirta awood u lahayn inuu guto waajibaadkiisa ama waajibaadkeeda, Dawlada Xubinta ah ee magacawday xubintaas waxay magacaabi doontaa qof kale oo u qalma haystana shahaadooyinkii oo buuxinaya shuruudaha lagu dhigay qodobka 5aad, iyadoo lagu xisaabtamayo baahida isu dheelitir haboon oo u dhaxayso qaybaha kala duwan ee aqooneed, si uu ugu shaqeeyo ilaa laga gaadhayo kulanka ku xiga ee Dawladaha xubnaha ah, taasoo ku xidhan ogolaanshaha aqlabiyada Dawladaha Xubnaha ah. Ogolaanshaha la bixiyay waxaa la tixgalin doonaa ilaa laga helayo kala badh ama ka badan Dawladaha Xubnaha ah jawaab togan mudo lix todobaad ah ka dib markii la wargaliyay Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ee ku saabsan Magcaabista la soo jeediyay.

*Qodobka 9aad*

Xubnaha Guddi Hoosaadka ka Hortagu waxaa loo dooran doonaa mudo afar sano ah. Waxay noqon doonaan kuwa mudan dib-u-dorasho isla marka la soo magacaabo. Mudada kala badh

xubnaha la doortay doorashada hore waxay dhici doontaa dhamaadka laba sano; isla marka ka danbaysa doorashada koowaad magacyada xubnaha waxaa soo dooran doona si kooxa Gudoomiyaha shirka lagu xusay qodobka 7aad, faqrada 1aad (d).

*Qodobka 10aad*

1. Guddi Hoosaadka ka Hortagu wuxuu dooran doonaa saraakiishiisa mudo labo sano ah. In mar labaad la doortana waa laga yaabaa.

2. Guddi Hoosaadka ka Hortagu wuxuu samaysan doonaa xeerarkiisa Habka. Xeerarkaasi waxay la iman doonaan, iyakoo saldhig u ah, in:

a) Kala badh xubnaha oo lagu daray mid ay buuxin doonaan kooramka;

b) Go'aanada Guddi Hoosaadka ka Hortagu waxaa lagu samayn doonaa aqlabiyada codadka xubnaha jooga;

c) Guddi Hoosaadka ka Hortagu wuxuu ku kulmi doonaa hanaan u furan kamarada.

3. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu qaban doonaa kulanka hore ee Guddi Hoosaadka ka Hortaga. Ka dib kulankiisa koowaad, Guddi Hoosaadka ka Hortagu wuxuu kulmi doonaa xilliyada lagu xusay xeerarkiisa iyo Habka. Guddi Hoosaadka ka Hortagalidka ku ah Jidh Dilka waxay qaban doonaan kulanadooda ugu yaraan hal mar sanadkiiba.

## QEYBTA III

*Qodobka 11aad*

Guddi Hoosaadka ka Hortagu wuxuu:

(a) Booqan doonaa meelaha lagu tixraacay qodobka 4aad wuxuuna u samayn doonaa soo jeedimo Dawladaha Xubnaha ah ee ay khusayso ka illaalinta dadka laga xayuubiyay xoriyadooda Jidh Dil iyo kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab;

(b) Wixii la xidhiidha hababka ka hortaga heer qaran:

(i) Waxay la talin doonaan oo caawina doonaan Dawladaha Xubnaha ah, markay tahay lagama maarmaan, dhismahooda;

(ii) Waxay joogtayn doonaan, hadii ay lagama maarmaan noqotana iyadoo qarsoodi ah, la xidhiidhi doonaan hababka ka hortagista waxayna siin doonaan tababaro iyo kaalmo farsamo iyadoo aragtidu tahay xoojinta awoodahooda;

(iii) Waxay kala talin doonaan kana caawin doonaan qiimaynta baahiyaha iyo hababka lagama maarmaanka u ah in la xoojiyo illaalinta dadka laga xayuubiyay xoriyadooda taasoo ay la socoto Jidh Dil iyo kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab;

(iv) Waxay samayn doonaan talo soo jeedimo iyo u kuurgalid ku wajahan Dawladaha Xubnaha, iyadoo aragtidu tahay xoojinta karaanka iyo awooda hababka ka hortaga qaran si looga hortago Jidh Dilka iyo kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab.

(c) Waxay iskaashi la samayn doonaan, si looga hortago jidhdilka guud ahaan, iyadoo loo marayo waaxaha Qaramada Midoobay ee ku shaqada leh iyo hababka iyo sidoo kale hay'adaha caalamiga ah, kuwa goboleed, iyo kuwa qaran ama ururada ka shaqaynaya xoojinta ka illaalinta dadka Jidh Dilka iyo kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab.

*Qodobka 12aad*

Si awood loogu siiyo Guddi Hoosaadka ka Hortagu inuu u hogaansamo awoodiisa sida lagu dhigay qodobka 11aad, Dawladaha Xubnaha ah waxay samayn doonaan:

(a) Inay ku soo dhoweeyaan Guddi Hoosaadka ka Hortaga dhulkooda isla markaana ugu deeqaan inuu galo meelaha xadhiga sida lagu qeexay qodobka 4aad ee Habkan;

(b) Inuu siiyo dhamaan warbixinta xidhiidhka la leh ee Guddi Hoosaadka ka Hortagu laga yaabo inuu codsado si uu u qiimeeyo baahiyaha iyo talaabooyinkan la qaadayo si loo xoojiyo ka illaalinta dadka laga xayuubiyay xoriyadooda Jidh Dilka iyo kuwa kale ee Arxan Darada ku ah Bani aadanimada ama Habdhaqanka Quudhsasho ama Ciqaab;

(c) Inuu dhiiri galiyo isla markaana fududeeyo xidhiidhada u dhexeeya Guddi Hoosaadka ka Hortagaiyo hababka ka hortaga ee dawladaha;

(d) Inuu baadho talo soo jeedimaha Guddi Hoosaadka ka Hortaga iyo inuu wada hadal kala galo meel marinta talaabooyinkan suura galka ah.

*Qodobka 13aad*

1. Guddi Hoosaadka ka Hortagu wuxuu aasaasi doonaa, marka ugu horaysa si wadar ah, barnaamij booqashooyin joogto ah Dawladaha Xubnaha ah si uu u fuliyo sharciyadiisa sida lagu dhisay qodobka 11aad.

2. Wada tashiyo ka dib, Guddi Hoosaadka ka Hortagu wuxuu ku wargalin doonaa Dawladaha Xubnaha ah barnaamijyadiisa si iyaku, si aan dib dhig lahayn, si ay u sameeyaan diyaarinta farsamo ee lagama maarmaanka u ah in la hirgaliyo booqashooyinka.

3. Booqashooyinka waxaa samayn doona ugu yaraan laba xubnood oo ka tirsan Guddi Hoosaadka ka Hortaga. Xubnahaas waxaa wehelin kara, hadii loo baahdo, khubaro waayo aragnimo xirfadeed oo balaadhan iyo aqoon u leh meelaha uu daboolayo Habkani kuwaasoo laga soo xulan doono shax taxan oo khubaro ah oo lagu soo doorayo hab ay saldhig u tahay soo jeedimo ay sameeyeen Dawladaha Xubnaha ah, xafiiska Madaxa Sare ee Xuquuqul Insaanka ee Qaramada Midoobay, iyo Xarunta Ka Hortaga Danbiyada Caalamiga ah ee Qaramada Midoobay. Diyaarinta shaxda, Dawladaha Xubnaha ah ee ay khusayso waxay soo jeedin doonaan wax aan ka badnayn khubaro wadani ah. Dawlada Xubinta ah ee ay khusayso waxaa laga yaabaa inay diido ku darista khabiir gooni ah oo ku jira booqashada, halkaasoo Guddi Hoosaadka ka Hortagu ay soo jeedin doonaan khabiir kale.

4. Hadii Guddi Hoosaadka ka Hortagu u tixgaliyaan inay tahay mid haboon, waxaa laga yaabaa inay soo jeediyaan booqasho gaaban oo u kuur gal ah ka dib booqasho rasmi ah.

*Qodobka 14aad*

1. Si loogu ogolaado Guddi Hoosaadka ka Hortaga in ay fuliso awoodeheeda, dawlada dhinaca ka ah heshiiskan ee Habkan waxay balan qaaday inay bixiso:

(a) Dhamaan macluumaadka aan xadidnayn ee khuseeya tirade dadka laga qaaday xoriyadooda, meelaha ay ku xidhan yihiin, tirada meelaha wax lagu xidho ee iyo meelaha ay ku yalaan sida ku qeexan qodobka 4aad;

(b) Meelaha aan xadidnayn ee macluumaadka ee ku saabsan la dhaqmida dadkaas iyo weliba xaaladooda xadhig;

(c) Iyadoo loo hogaansamayo faqrada 2aad ee hoose, iyadoo aan la xadidan in la galo dhamaan meelaha wax lagu xidho iyo waxyaabaha ku jira iyo agabkaba;

(d) In fursad loo yeesho waraysiga gaarka ah ee dadka laga xayuubiyey xoriyadooda, taasi oo hadii gidi-hoosaadku muhiim u arko loo waraysan karo si dahsoon, ha noqoto shaqsiyan, ama laga waraysto qof kale oo guddi hoosaadku u arko inuu siinayo macluumaad warbixin oo la xihdiidha oo ay doonayso inay hesho.

(e) Xoriyada lagu dooranayo meelaha ay rabaan inay booqdaan iyo dadka ay doonayaan inay wareystaan.

2. Ujeedadu waa inay booqdaan meelaha gaarka ah ee loo sameeyey keliya sababo deg deg ah oo khasbaya difaaca dalka, aminga guud, masiibooyinka dabiiciga ah ama amni darada khasabka ee meelaha laga celinayo si ku meel gaadha loo booqdo. Tasoo ay jirto masiibo dabiici ah oo qaran, waa inaan loo diidin dawlada heshiiskan dhinaca ka ah hadii ay sababayso diidmadaas.

*Qodobka 15aad*

Dawlada ama saraakiil ma ogolaan karto inay adeegsato, u dul qaadato cunaqabatayn kasta oo ka dhan qof kasta ama urur ee xidhiih la yeesha guddi hoosaadka ee ku saabsan ka hortaga ama hadii ay cid u wakiilato maclumaadkaas ha noqdo mid run ama been ah, qofkaas lama cabsi gelin karo si kastaba ha noqotee.

*Qodobka 16aad*

1. Guddi hoosaadka ku hawlan ka hortaga waa inay kala xidhiidhaa talo bixinteeda iyo indho-indhayn-teeda si sir ah dawlada dhinaca ka ah heshiiska, hadii ay haboon tahay ina la timaado talaabooyin qaran oo ka hortageed.

2. Guddiga ka hortagu waa inay daabacdaa warbixinteeda iyadoo ay la socoto falaada/ warbixinta dawlada dhinaca ka ah heshiiskan, markasta oo ay codsato dawladu sidaas, hadii dawladu ka qayb tahay warbixinta, guddi hoosaadka ka hortagu way daabici karaan warbininta qayb ahaan iyo gebi ahaanba, inkastoo aan la daabici karin warbixin qofeed hadii aanu sidaas raali ka ahayn.

3. Guddi hoosaadka ka hortagu waa inay si caam ah u soo bandhigaan warbixin sanadeed ku saabsan shaqadooda oo ay u gudbiyaan Guddiga ka dhanka ah jidh-dilka.

4. Hadii ay dawladu diido inay iskaashi la samayso Guddi Hoosaadka ka Hortagasi waafaqsan qodobada 12aa iyo 14aad ama ay tahay inay qaado talaabooyin kor loogu qaadayo xaaladaha la xidhiidha talabixinta guddi hoosaadka ka hortaga, guddiga ka hortagu waxay ku go'aamin kartaa cod aqlabiyad ah, kadib marka dawlada dhinaca ka ah heshiiskan ay fursad u hesho in la ogaado fikirkeeda, inay ka sameyso qoraal caam ah arimaha ama daabacado guddi hoosaadka ka hortagu.

# QEYBTA IV

*Qodobka 17aad*

Dawlad kasta oo dhinac ka ah heshiiskan waa inay xafidaa, u xilsaarta ama daabacdaa, ugu yaraan hal sano ama kadib dhaqan galka Habkan ama ansixinta ama ku biiridda, ha noqoto mid ama dhowr talaabo oo lagaga hortegayo jidh-dilka heer dawladeed. Waa in habab loo sameeyaa iyadoo la raacayo qaybo dhexe oo loo xilsaarayo sidii talaabooyin ka hortageed oo looga gon leeyahay ujeedada hab raacan hadii ay la jaan qaadayaan qodobadiisa.

*Qodobka 18aad*

1. Dawlada Xubin ka ah heshiiskan waa inay damaanad qaadaa shaqo ahaan talaabooyin ka hor tageed ee qaran sidoo kale shaqaalahooda.

2. Dawlada Xubin ka ah heshiiskan waa inay qaadaa talaabo kasta oo lagu hubinayo in khabiirada qaran ee ay leeyihiin ee ka hortaga ay haystaan awooda iyo xirfada loo baahan yahay. Waa inay isku dayaan inay miisaamaan jinsiga, ayna ogolaadaan in si ku filan loo metelo bulshada kala duwan iyo bulshada ku badan dalkaas.

3. Dawlada Xubin ka ah heshiiskan waa onay samaysaa wax kastoo suurtag u ah khayraadka lagu shaqaynayo ee talaabooyinka ka hor tageed ee qaran.

4. Marka la aasaasayo talaaboyin qaran oo ka hortageed, dawlada dhinaca ka ah waa inay siisaa taxadar maabaadiidaa la xidhiidha xaaladaha hay'adeed ee qaran ee kor loogu qaadayo dhowrida xuquuqaha aadamaha.

*Qodobka 19aad*

Hababka ka hortaga ee qaranka waa in lagu gutaa awooda ugu yar;

(a) Inay si joogto loo baadho la dhaqanka dadka xoriyada laga qaaday iyo meelaha ay ku xidhan yihiin sida ku cad qodobka 4-aad iyadoo looga gon leeyahay kor u qaadida, hadii ay suurtogal tahay, in laga ilaaliyo jidh dil ka dhan iyo cadawnimo, naxariis daro ama hab dhaqan yasid ah ama ciqaab;

(b) In la siiyo talo bixin dawladaha ay khusayso iyadoo kor loogu qaadayo hagaajinta xaaladaha dadka laga qaaday xoriyadooda si looga fogaado jidh dil, cadawnimo, naxariis daro iyo hab dhaqan xun oo bani'aadanimo ama ciqaab, iyadoo tixgelinta la siinayo xeerarka Qaramada Midoobay;

(c) In la gudbiyo soo jeedino iyo u kuur gal xeerarka jirey iyo kuwa cusuba.

*Qodobka 20aad*

Si loo suurtgaliyo talaabooyinka ka hortaga ee qaran si loo fuliyo awoodahooda, dawladaha dhinaca ka ah hab raacan waa inay fuliyaan inay balan qaadaan:

(a) In la helo dhamaan macluumaadka ku saabsan tirada dadka xoriyada laga qaaday iyo meelaha ay ku xidhan yihiin sida ku qeexan qodobka 4aad, sidoo kale tirada goobaha iyo goobta;

(b) In la helo dhamaan macluumaadka ku saabsan la dhaqanka dadka iyo weliba sidoo kale xaaladaha xadhigooda;

(c) Inay galaan dhamaan meelaha xadhiga, waxyaabaha ku rakiban iyo qalabka;

(d) In loo siiyo fursad inay si gaar ah ula kulmaan dadka xoriyada laga qaaday marag la'aan, ama qof kale oo kasta oo ay u arkayaan talaabooyinka qaran ee ka hortageed inay ka helayaan macluumaad;

(e) Xoriyada in ay doortaan goobaha ay doonayaan inay booqdaan dadka ay doonayaan inay waraystaan;

(f) Xaqa in lala xidhiidho Guddi Hoosaadka ka Hortagasi ay maclumaad ugu diraan ama ay la kulmaan.

*Qodobka 21aad*

1. Dawladana ama sarkaalna waa inaanu amrin, adeegsan ama u dul qaadan cunaqabatayn/xayiraad kasta oo ka dhan ah qof ama urur, iyada oo sabab looga dhigayo in ay maclumaad siiyeen hanaanka ka hortageed ee qaran, ha noqdo mid run ama been ah ama si kastaba ha ahaatee, qofkaasna ama hay'adahaas waa inaan si kale loogu xadgudbin.

2. Macluumaadka sirta ah ee ay soo ururiyeen talaaboyinka ka hortageed ee qaran waa in la ixtiraamaan. Xogta qofna lama daabici karo iyadoon ogolaansho laga haysan dadka ay khusayso.

*Qodobka 22aad*

Madaxda awooda u leh ee dawladaha heshiiskan dhinaca ka ah waa inay baadhaan talo bixinta talaabooyinka ka hortageed ee qaran, wada hadalna la yeeshaan talaabooyinka suurtagalka ah ee la hireglinayo.

*Qodobka 23aad*

Dawladaha dhinaca ka ah hab raacan waa inay daabacaan, baahiyaan warbixin sanadeedka talaabooyinka ka hortageed ee qaran.

# QEYBTA V

*Qodobka 24aad*

1. Marka la ansaxiyo, dawladaha dhinaca ka ah waxay samayn karaan baaqyo dib loogu dhigayo hirgelinta waajibadkooda ee ku cad mid qaybta III ama qaybta IV ee hab raacan.

2. Dibu dhigaasi waxaa u ansax noqonayaa ugu yaraan sadex sanadood. Kadib marka si haboon ay u metelaan dawladaha dhinac ka ahi kadib marka ay la tashadaan guddi hoosaadka ka hortaga, guddiga ka dhanka ah jidh dilka waxay dheerayn kartaa muddada laba sanadood oo dheeraad ah.

# QEYBTA VI

*Qodobka 25aad*

1. Kharashka ay galeen Guddi Hoosaadka ka Hortaga marka ay hirgelinayaan hab raacan waxaa bixinaya Qaramada Midoobay.

2. Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay waa inuu siiyaa shaqaalaha lagama maarmaanka u ah iyo waxyaabaha ay si haboon ugu gudanayaan shaqadooda ee guddi hoosaadka Habkan.

*Qodobka 26aad*

1. Lacag dheeraad ah waa in la qoondeeyaa si waafaqsan hab dhaqanka Golaha Qaramada (General Assembly), si loogu maamulo oo waafaqsan xeer hoosaadka maaliyadeed iyo xeerarka Qaramada Middoobay ee loogu talagalay in lagu meelmariyo talabixinta ay sameeyeen Guddi Hoosaadka ka Hortaga kadib marka ay booqdaan dawladaha xubnaha, sidoo kale qoryashayaasha waxbarasho ee talaabooyinka ka hortageed ee qaran.

2. Lacag khaas ah waa in loo qoondeeyaa iyadoo ka imanaysa qaadhaan ay sameeyen dawladaha rabitaankoodu, uru goboleedyada, ururuda aan dawliga ahayn iyo dadka kale ee gaarka iyo dadweynaha.

# QEYBTA VII

*Qodobka 27aad*

1. Habkan wuxuu u furan yahay inay saxeexaan dawlad kasta ee saxeexday Xeerkan.

2. Habkan dawlad wuxuu ku xidhan yahay ansixin dawlad kasta ee ansixisay ama ku biirtay xeerkan. Xeerka la ansixiyey waa in loo gudbiyaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

3. Habkan wuxuu u furan yahay inay ku biiraan dawlad kasta ee ansixisay ama ku biirtay.

4. Ku biiridu waxay dhaqangelaysaa marka dhigo xeerka la ansixiyey Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay.

5. Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay waa inuu ku wargeliyaa dhamaan dawladaha saxeexay Habkan ama ku biiray, si loo dhigo mid kasta oo ka mid ah xeerka la ansixiyey ama lagu biiray.

*Qodobka 28aad*

1. Habkan waxaa uu dhaqan gelayaa maalinta sodonaad kadib maalinta lagu kadiyo Xafiiska Xoghayha Guud ee Qaramada Midoobay.

2. Dawlad kasta oo ansixisay Habkan ama ku biirtay isaga kadib marka lagu kaydiyo xafiiska Qaramada Midoobay maalinta labaatanaad ee xeerka la ansixiyey ama lagu biiray, Habkan waxaa uu dhaqan gelayaa maalinta labatanaad kadib maalinta lagu kaydiyo aaladeeda la ansixiyey ama lagu biiray.

*Qodobka 29aad*

Qodobada Habkan waxaa kordhin kara dhamaan dawladaha federaalka ah iyadoon wax xadayn ah lagu samayn ama reebanaan.

*Qodobka 30aad*

Wax reebis/xadeyn ah lagama samayn karo Habkan.

*Qobobka 31aad*

Qodobada Habkan ma saamanayaan waajibaadyada dawladaha dhinaca ka ah ee ku cad xeerarka goboleed ee kasta marka ay samaynayaan nidaam lagu booqdo goobaha wax lagu xidho. Guddi Hoosaadka ka Hortaga ee dadka loo asaasay ee ku cad xeer goboleedka waxaa lagu dhiiri gelinayaa inay la tashadaan, iskaashina la sameeyaan iyagoo iska ilaalinaya inay dheegtaan/qishaan ama kor u qaadaan si haboon ujeedooyinka Habkan.

*Qodobka 32aad*

Qodobada Habkan ma saamaynayaan waajibaadyada, dawladaha dhinacayada ka ah Heshiiskan, ee ‘Four Geneva Conventions ee 12 August 1949’ iyo weliba Baratakoolada dheeraadka ah ee 8-dii Juun 1977, Sidoo kale ma saamaynayso fursadana in Dawladahu u ogolaadaan Hay’ada Laanqaynta Cas inay booqato goobaha wax lagu xidho ee ka baxsan xeerka caalamiga ah ee bani’aadanimada.

*Qodobka 33aad*

1. Dawlad kasta oo xubin ka ah heshiiskan way ka bixi kartaa Habkan wakhti kasta iyadoo ogeysiin qoraal ah u gudbinaysa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, kasoo kadib ogeysiinaya dawladaha kale ee dhinac ka ah heshiiskan iyo xeerkan. Ka bixidu waxay dhaqangelaysaa hal sano kadib taariikhda ay helaan wargelinta Xoghayaha Guud;

2. Ka bixidaasi kama saamaxayso dawaladuhu inay ka baxaan waajibaadkooda ku cad Habkan marka ay ka bixidu meel marto, ama ficilka Guddi Hoosaadka ka Hortagag’aan ka gaadhaan ma la go’aansadaan inay ka qaadan dawlada ay khusayso ama kama bixi karaan

waxyeelo kasta ama arin kasta oo horey tixgelin ay siinaysay guddi hoosaadku kahor taariikhda ay ka bixidu dhaqan gasho.

3. Kadib taariikhda ay ka bixidu dawlada dhinaca ka ah Habkan ayaa dhaqan gasho, Guddi Hoosaadka ka Hortagama bilaabi karto arinta cusub oo kasta ee la xidhiidha dawladaas.

*Qodobka 34aad*

1. Dawlad kastoo dhinac ka ah Habkan waxay soo jeedin kartaa wax ka bedel, waxaanay ka fayl gareynasaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Xoghayaha Guud waa inu halkaas kala xidhiidha wax ka bedelka ay soo jeediyeen, iyo codsiga ay isaga wargeliyeen haddii ay taageersan yihiin shirka dawladaha dhinaca ka ah taasoo looga gon leeyahay in la tixgeliyo loona codeey soo jeedinta. Hadii ay dhacdo afar bilood gudahood oo ka bilaabmaysa maalinta xidhiidhkaas ugu yaraan sadex meelodoow meel dawladaha dhinaca ka ah Habkan ay yeelaan shirkaas, Xoghaya Guud, waa inuu qabtaa shirkaas iyadoo ay qaban qaabinayso Qaramada Midoobay. Wax ka bedel kasta ee ay cod aqlabiyad ah sadex meeloodoow meel ku aqbalaan dawladaha dhinac ka ah codaynta shirkaas waxaa u gudbinaya Xoghayaha Qaramada Midoobay dhamaan dawladaha aqbalay.

2. Wax ka bedel kasta oo lagu aqbalay si waafaqsan tuduca 1aad ee qodobka sare waxaa uu dhaqan gelayaa marka ay aqbalaan sadex meeloodow laba dawladaha saxeexay Habkan cod aqlabiyad ah si waafaqsan habka dastuuradooda.

3. Marka wax ka bedelku dhaqan galo, dawladaha aqbalay way ku khasban yihiin, dawladaha kale ee dhinaca ka ah weli way ku khasban yihiin qodobada Habkan iyo wax ka bedel kasta oo hore ee ay aqbaleen.

*Qodobka 35aad*

Guddi Hoosaadka ka Hortaga ee xubnaha ka ah iyo hababka ka hortageed ee qaran waa ka heshiiyaan xuquuqahaas gaarka ah iyo xasaanadaas sida lagama maarmaanka u ah madax banaanida gudashada hawshooda. Xubnaha Guddi Hoosaadka ka Hortagawaxaa ay ka heshiinayaan xuquuqaha gaarka ah iyo xasaanadaha ku cad qaybta 22aad ee Xeerka Xuquuqaha iyo Xasaanadaha ee Qaramada Midoobay ee 13-kii February 1946, iyadoo loo hogaansamayo qaybta 23aad ee Xeerka.

*Qodobka 36aad*

Marka la booqanayo dawladaha heshiiskan saxeexay, xubnaha Guddi Hoosaadka ka Hortagu waa inay, iyagoon ku xadgudbayn qodobada iyo ujeedooyinka Habkan iyo xuquuqaha gaar ahaaneed iyo xasaanadaha ay ku naaloodaan:

(a) Waa inay xaq dhowraan qaanuunka iyo xeerarka dawladaha la booqday;

(b) Inay ka fogaadaan fal kasta ama hawl cadaalad daro oo aan waafaqsanayn waajibaadkooda caalami.

*Qodobka 37aad*

1. Qoraalka Habka ee Carabiga, Faransiiska Shiinaha, Ingriisiga, Ruushka iyo Isbaanishku waa isku mid, waxaana la dhigayaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

2. Xogahaya Guud ee Qaramada Midoobay waa inuu u gudbiyaa nuqulka saxda ah ee Habkan dhamaan dawladaha oo dhan.

# Heshiiska Xuquuqda Caruurta

***Ee Lagu Qaatay looguna Furay saxiixa, Ansixinta iyo ku Biirida Qaraarka Golaha Guud ee 44/25 ee Noofember 1989***

DHAQAN GALKA HESHIISKA: 2-DII SEPTEMBER, 1990, SIDA WAAFAQSAN QODOBKA 49

## GOGOLDHIG

*Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan,*

*Iyaga oo tixgelinaya in,* sida waafaqsan mabaadida daaha lagaga qaaday Axdiga Qaramada Midoobay, Aqoonsiga sharafta nolosha laga dhaxlay iyo sinaanta iyo Xuquuqda lama taabtaanka ah ee dadka aadamaha ah oo dhami leeyihiin ee Aasaaska u ah xorriyada, Caddaalada iyo Nabadda Adduunka;

*Iyaga oo xasuusan* in dadyawga Qaramada Midoobay ay Axdigan marlabaad shaaca ka qaadeen rumayntooda xuquuqda dadka ee aasaasiga ah, sharafta iyo karaamada qofka Banii'aadamka ah, ayna go'aansadeen in ay kor u qaadaan horumarinta bulsho, iyo heerarka Nololeed ee xorriyada inta ka ballaadhan;

*Iyaga oo aqoonsanaya* in Qaramada Midoobay ay, Baaqa Caalamiga ah ee xorriyada Aadamaha iyo isla marka mucaahadooyinka caalamiga ah ee xuquuqda daaha lagaga qaaday layskuna raacay in qof kasta mudan yahay in uu helo dhammaan xuquuqaha iyo xorriyadaha halkan lagu cadeeyay iyada oo aanay jirin kala saaris nooc kasta ha ahaatee, sida farac, midab, nooc, luuqad, diin, siyaasad ahaan ama isir bulsho, hanti, dhalasho ama arrimo kale;

*Iyaga oo xusuusan in,* baaqa caalamiga ah ee xuquuqda dadka, Qaramada Midoobay daaha ka qaaday in Carruurnimadu mutaysatay daryeel gaar ah iyo kaalmo;

*Iyaga oo ku qancay* in qoyska uu yahay koox bulsheedka aasaasiga ah isla markaana ah deegaanka dabiiciga ah ee koritaanka iyo fayoobida dhammaan xubnihiisa iyo gaar ahaan Caruurta, in la siiyo badbaadada lama huraanka u ah iyo caawimo si uu qoysku u karo in uu si buuxda u guto kaalinta masuuliyadaha uu ku leeyahay bulsha dhexdeeda;

*Iyaga oo aqoonsanaya* in ilmuhu, si uu u helo koritaan shakhsiyadeed oo dhammaysn ah oo xasiloona, ku koro deegaanka qoyska oo ah mid leh jawi farxadeed, jacayl iyo isfaham,

*Iyaga oo tixgelinaaya* in ay tahay caruurta in si taaba gal ah loogu diyaariyo si uu nolol gaar ah bulshada ugu dhex helo; isla markaana lagu barbaariyo niyada tilmaamaha lagu cadeeyay Axdiga Qaramada Midoobay, iyo gaar ahaan ruuxiyadeed, xoriyadeed, sinaaneed iyo midnimo/ iskaashi;

*Iyaga oo xusuusan* baahida ah in daryeel gaar loo fidiyo ilamaha waxa lagu caddeeyay Baaqii Janeefa ee Xuquuqda Caruurta ee 1924 iyo Baaqii Xuquuqda ee ka soo baxay Golaha Guud 20 Nofamber, 1959 isla markaana lagu aqoonsaday Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Medenimo iyo Siyaasadeed (gaar ahaan qodobada 23 iyo 24), oo ka mid ah baaqii Caalamiga ahaa ee xuquuqda dhaqaale, Bulsho iyo dhaqan (gaar ahaan qodobka 10) iyo xeerarka iyo qoraalada sharciga ah ee hayadaha hawlaha khaaska ah haya,

*Iyaga oo xasuusan in,* sida ku cad Baaqa Xuquuqda Caruurta, Ilmahu, dhicisnimada koritaanka jidheed iyo maskaxeed awgeed, u baahan yahay ilaalin iyo daryeel gaar ah oo ay ka mid yihiin badbaadin haboon oo sharci ah, dhalashada ka hor iyo ka diba,

*Iyaga oo xasuusan* ballan qaadyada Baaqii mabaadida Bulsho iyo sharci ee la xidhiidha badbaadinta iyo daryeelka guud ee caruurta, khaas ahaan dhinacyada xannaano gaynta iyo korsashada qaran ahaan iyo caalami ahaanba; Qaramada Midoobay heerbeegyada ugu hooseeya ee xeerarka loogu tala galay maamulida sharciga Caruurta dayacani iyo baaqa badbaadinta Haweenka iyo Caruurta ku dhex nool xaalad degdeg ah iyo iska hor imaad hubaysan, iyaga oo aqoonsan in ay jiraan Caruur ku nool xaalado xad dhaaf ahaan u adag dalalka aduunka oo dhan, iyo isla markaa Caruurtaas oo u baahan in ay tahay tixgelin gaar ah

*Iyaga oo qadarinaaya* ahmiyada caadooyinka iyo qiimaha dhaqan ahaaneed ee dad kasta ee badbaadinta koritaanka Caruurta ee ku fadhiya nabad iyo kalgacayl,

Iyaga oo aqoonsanaya ahmiyada wadajirka caalamiga ah ee horumarinta nolosha Caruurta ee dal kasta, gaar ahaan dalalka soo koraya,

*Waxay isla qaateen sida soo socota:*

## QEYBTA I

### *Qodoka 1aad*

Iyada oo ula jeedadu tahay Heshiiskan uun, erayga ilmo macnihiisu waa qof kasta oo da'diisu ka yartahay sideed iyo toban sannadood, Balse waa hadii xeerka caruurta ee wadankaasu aanu laga helin aqlabiyad qaangaarnimo oo mar hore ah.

*Qodoka 2aad*

1. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan ayaa xushmayn doona isla markaana xaqiijin doona xuquuqda ku xusan Heshiiskan ee ilmo kasta oo ku nool dhulka awoodooda sharci ahaan hoos yimaada in aanay jirin haba yaraatee wax takoorid awlaadeed ahi, iyada oon la eegayn caruurta ama waalidiintiisa, ama koriyahiisa sharciyeed, isirkiisa, midabka, nooca, afka, diinta, siyaasad ahaan, ama fikrado kale, qaran ahaan, ama bulsho ahaan halka uu ka soo jeedo, hanti, dhalasho ama duruufta uu ku jiro.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah heshiiskan ayaa qaadi doona tallaabooyinka ku habboon in ay xaqiijiyaan in caruurta ay ka badbaadiyaan qaab kasta oo takoorideed ama ciqaab ku salaysan duruufta, hawlaha (shaqada), fikrad la cabiray, ama waalidiinta, koriyaha sharciga ah ama xubnaha qoyska.

*Qodobka 3aad*

1. Hawlo kasta oo ku lug leh caruurta, haddii ay fulinyaan dadweynuhu ama Hayadaha caalamiga ah ee daryeelka guud ee bulsheed, maxkamadaha sharciga, madaxda maamulka ama gudi xeer dejineed, tex gelinta kowaad waxa leh danta muhiimka ah ee caruurta.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan ayaa xil qaadi doona in ay ilamha u xaqiijiyaan Badbaadinta iyo daryeelka uu uga baahan yahay fayodhawrkiisa, iyada oo la tixgelinaayo xuquuqda iyo hawlaha waalidiintooda, koriyahiisa sharciyeed, ama cidda kale ee sharci ahaan uga masuulka ah isla markaana iyaga oo ka duulaya ujeedaden, waxay qaadi doonaan tallaabo kasta oo ku haboon oo sharciyeed iyo maamuleed.

3. Dawladaha Xubnaha ahi waxay xaqiijin doonaan in hay’adaha, shaqooyinka iyo meelaha xilku ka saaran yahay daryeelka iyo badbaadinta caruurta in ay ku dhaqmaan heerbeegyada ay madaxda aqoonta u lihi dejisay, gaar ahaan dhinacyada ilaalinta, caafimaadka, tirada iyo tayada shaqaalohooda iyo weliba kormeerid u qalanata.

*Qodobka 4aad*

Dawladaha Xubnaha ahi waxay xil qaadi doonaan tallaabooyinka ku haboon ee sharciyeed, maamuleed iyo kuwo kale oo ku saabsan hirgelinta xuquuqda iyo kuwa kale ee lagu aqoonsan yahay Heshiiskan ee la xidhiidha dhinacyada dhaqaalaha iyo xuquuqaha bulsho iyo dhaqanba.

*Qoddobka 5aad*

Dawladaha Xubnaha ah ayaa xushmayn doona xuquuqda, xilalka iyo hawlaha waalidiinta, ama halka ay ku habboon tahay, xigtada ama bulshada kolba sida ay ogoshahay caadada deegaameed, barbaariyaha ama dadka kale ee sharci ahaan masuulka uga ah caruurta si waafaqsan koritaankooda, toosinta iyo tusaalaynta jidka toosan, sida ku cad Xuquuqda Caruurta ee loogu aqoonsaday heshiiskan.

*Qoddobka 6aad*

1. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qirayaan in ilma kastaa uu leeyahay xaqa uu ka dhaxlay nolosha oo ah in uu noolaado.

2. Dawladaha Xubnaha ahi waxay, inta karaankooda ah xaqiijin doonaan nolosha iyo korintaanka Caruurta.

*Qoddobka 7aad*

1. Caruurta waa in la diinwaan galiyaa marka ay dhashaan waxaanay yeelan doonaan xaqa ay la soo dhasheen oo ah in magac loo bixiyo. Waxay xaq u leeyihiin magac qarameed dalka ay ka mid yihiin iyo inta ay karaan waalidiintu in ay ku tabcaan.

2. Dawladaha Xubnaha ah ayaa xaqiijin doona hirgalinta xuquuqdan iyada oo waafaqsan Qawaaniinta Qaramadooda iyo waajibaadkooda ay ku leeyihiin Hay'adaha Caalamiga ah ee arrinta ku lug leh; gaar ahaan halka uu Ilmuhu noqonayo Dawlad la'aan.

*Qoddobka 8aad*

1. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay masuul ka noqon doonaan Xurmaynta xaqa Caruurtaasi ee in loo ilaaliyo sharaftooda oo ay ka mid tahay, wadaninimada, magaca iyo xidhiidhka qoyska si waafaqsan Qawaaniinta iyada oo aanay meelnaba ka galin wax qaanuunka ka baxsani.

2. Kolka Caruurta si sharci darro ah looga lumiyo badh ama dhammaan aqoonsigooda, Dawladaha xubnaha ah ayaa suurta galin doona kaalmada iyo badbaadinta iyado oo la doonayo in si deg-deg ah loogu soo celiyo aqoonsiga.

*Qoddobka 9aad*

1. Dawladaha xubnaha ka ah Axdigan, ayaa ka dhabeyn doona in aan waalidiinta caruurtooda khasab lagaga qaadin, marka laga reebo Madax aqoon iyo awood arrinta u leh, Sharci yaqaana ahi ay go'aamiso iyaga oo waafajinaya Qawaaniinta lagu dhaqmo, in kala xayntani tahay mid lama huraan u ah caruurtaa noloshooda. Go'aankani waxa uu lama huraan noqon karaa xaalad gaar ah oo caruurta la fara xumeeyey ama waalidkii ka dan baxay, ama marka labada waalid kala maqan yihiin ee ay timaado halkii ilmuhu gali lahaa ama ku noolaan lahaa.

2. Dacwad kasta oo ka timaada Faqrada Kowaad ee Qoddobkan hada la joogo cid kasta oo danaynaysa way u furan tahay in ay ka qayb gasho Dacwada soona jeediyaan aragtidooda.

3. Dawladaha xubnaha ka ah Axdigan waxay xushmayn doonaan xaqa ay u leeyihiin Caruurta laga faquuqay Waalidkooda mid ahaan ama labadaba, xidhiidh qof ahaaneed oo toos ah in ay la yeeshaan si joogto ah hadii aanay tani ka hor imanayn danta Caruurta ee muhiimada leh.

4. Meesha kala faquuqidani ka dhalatay, fal ay ku kacday dawlad xubin ahi sida xabsi ku hayn, xadhig, mastaafurin, ama dhimasho (oo ay ka mid tahay dhimasho sidii la doonaba ha ku timaadee mudada qofku ku jiro jeelka dawlada) mid ama labada waalidba ama caruurta laftigooda. Dawladaha xubnaha ahi waxay marka laga codsado waalidiinta ama caruurta ama haddii ay habboon tahay xigtada qof ka mid ah siin doonaan xogta dhabta ah ee muhiimka ah ee ku saabsan meesha uu jiro qofka (dadka) maqani ee qosyka haddii aan helida xogtaasi halis galineyn fayoobida ilamaha. Dawladaha xubnaha ahi waxay xaqiijin doonaan in dhiibista codsiga aanay u keenin dhibaato cida codsiga samaysay iyo xubnaha qosykooda.

*Qoddobka 10aad*

1. Sida waafaqsan waajibaadka Dawladaha xubnaha ah ee ku jira qodobka 9aad faqrada koowaad, codsiga ilmo ama waalidkii in ay tagaan dawlada xubin ah si ay meel kaliya isugu tagaan mar labaad xubnaha qosyku, dawladaha xubnaha ka ah Axdigan waxay ku qaabili doonaan niyad samaan dadnimo iyo soo dhawayn deg-deg ah. Dawladaha xubnaha ahi waxa intaa u dheer oo ay xaqiijin doonaan in aan codsigaasi u keenin cawaaqib-xumo codsadayaasha iyo xubnaha qoysaskooda toona.

2. Caruurta labadiisa Waalid laba dal oo kala duwan ku kala nool yihiin waxa uu yeelanayaa xaqa in uu si joogto ah oo dhibaato aan lahayn ula yeesho xidhiidh qof ahaaneed si toos ah labada Waalidba. Ujeedadan iyo sida waafaqsan waajibaadka dawladaha xubnaha ah ee ku jira qoddobka 9aad ee faqrada koowaad, dawladaha xubnaha ahi waxay xushmayn doonaan xaqa caruurta iyo ka waalidkoodu in ay ka tagaan dalkay doonaan koodaba ha ahaadee isla markaana soo gali karaan dalkooda. Xaq u lahaanta ka tagis dal waxa kaliya ee ka hor iman karaa waa shuruudaha Qaanuunka hanashada xasiloonida Qaranka, nidaamka dadwaynaha, Caafimaadka dadwaynaha, damiirkooda, ama kuwa kale ee la mid ka ah xuquuqdooda la aqoonsan yahay ee heshiiskan ka mid ka ah.

*Qoddobka 11aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay la dagaalami doonaan dhoofinta iyo soo celid la'aanta, sharci darada ah, ee caruurta debeda loo dhoofiyo.

2. Ujeedadan awgeed, Dawladaha Xubnaha ahi waa in ay ku dadaalaan dhamaystirka heshiisyada laba/darafyada-badan, isla markaana ku biiraan heshiisyada kale ee jira.

*Qoddobka 12aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay caruurta aragtidooda cabiri kara u xaqiijin doonaan in ay fikradooda si xoriyad ah uga dhiibtaan arrimaha iyaga khuseeya, iyada oo la tixgalin doono sida kolba ku haboon da'da iyo bislaanshaha Ilmaha.

2. Marka ay noqoto ujeedadan, caruurta waxa gaar ahaan laga siin doonaa fursadii lagu maqli lahaa dacwad kasta oo garsoor iyo maamul oo saamaynaysa Caruurta si toos ah ama cid

wakiil ka ah. Ururada haboon iyada oo la tixgalinayo sida waafaqsan ku dhaqanka xeerarka Qaranka.

*Qoddobka 13aad*

1. Ilmuhu waxa uu yeelan doonaa xaqa xorriyad u hadalka, xaqan waxa uu noqon doonaa xorriyad u raadinta, helida iyo sheegista xogta iyo fikrad ahaan nooc kasta, loona cayimin, xaga af-ahaan, qoraal, ama daabicid, qaab sawir, ama qaab kasta oo war-baahineed oo ilmuhu doono.

Hirgelinta xaquuqdan waxa laga yabaa in xidhan tahay sharuudo gaar ah oo xadidi kara, hase ahaatee waa in ay ahaadaan kuwa sharciga waafaqsan oo lagamamaarmaan ah:

(a) Khuseeya xaquuqda ama sharafta dadka kale; ama

(b) Khuseeya badbaadinta amaanka qarabka ama qaynuunka dadweynaha (public order), ama caafimaadka ama mooralka dadweynaha.

*Qoddobka 14aad*

1. Dawladaha Xubnaha ahi waxay xushmayn doonaan xaqa ilmuhu u leeyahay Xorriyad u fikirka, xoriyada damiirka iyo diinta.

2. Dawladaha xubnaha ahi waxay xushmayn doonaan xuquuqda iyo shaqooyinka waalidiinta iyo markay habboon tahay koriyaha sharciga ah ee ku banaan jidka toosan ee hirgalinta ama ku dhaqan ka xuquuqdiisa/iyo xuquuqdeeda si ku haboon awooda caruurta ee kobcaysa.

3. Xorriyad ugu dhaqanka diinta ama waxyaabaha kale ee la rumaysan yahay waxay la kulmi karaan ama kahor imaan kara oo kaliya shuruudaha qawaaniintu ogoshahay ee lagama marmaanka u ah in la dhawro fayoobida dadweynaha, nidaamka, caafimaadka, ama damiirada ama xuquuqda aasaasiga ah ee kuwa kale

*Qoddobka 15aad*

1. Dawladaha Xubnaha ahi waxay aqoonsan yihiin xuquuqda ilmuhu u leeyahay xorriyada urur iyo shirar nabad ah.

2. Ma jiraan cadaadisyo la saari karo hirgelinta ama ku dhaqanka xuquuqda oo ka baxsan qawaaniinta lagama maarmaanka u ah bulsho dimquraadi ah dantana u ah masaaliixda badbaadinta qaranka ama badbaadada dad weynaha ama, nidaamka dadweynaha, ilaalinta caafimaadka dadweynaha, ama damiirada ama ilaalinta xuquuqda iyo xoriyadaha kale.

*Qodobka 16aad*

1. Caruurta waa in aan si sharciga ka baxsan fara gelin loogu samayn noloshiisa khaaska ah, qoyskiisa, hoyga, ama cida kale ee korinaysa; loomana gaysan karo duulaan sharci darro ah sharaftiisa iyo sumcadiisa;

2. Ilmuhu waxa uu xaq u leeyahay in sharcigu ka difaaco farogelintan oo kale amase weerarba.

*Qodobka 17aad*

Dawladaha Xubnaha ahi waxay aqoonsan yihiin hawsha muhiimka ah ee ay gutaan warbaahinaha dadweynuhu, waxayna xaqiijin doonaan in ilmuhu helo xogta iyo waxyaalaha kale ee ka soo baxa ilaha kala duwan ee heer qaran iyo heer caalamiba, gaar ahaan kuwa loola jeedo kor u qaadida caruurta bulsho ahaan, ruux ahaan, iyo damiir ahaan bedqabkiisa iyo jidh iyo maskax ahaan caafimaadkiisa. Ujeedadan awgeed Dawladaha Xubnaha ahi waxay:

(a) Dhiiri galin doonaan warbaahinta dadweynaha in ay baahiso xogta iyo waxyaalaha xag bulsho iyo mid hido-dhaqanba faa'iidada u leh caruurta oo waafaqsan nuxurka qoddobka 9aad;

(b) Ku dhiiri galin doonaan munaasabadaha (Shirkadaha) Caalamiga ah soo saarista is dhaafsiga iyo baahinta xogta iyo walxaha kale ee ay soo saaraan ilo kala duwan oo hido-dhaqan oo heer Qaran iyo mid caalamiba ku siman;

(c) Dhiiri galin doonaan soo saarista iyo baahinta buugaagta Caruurta;

(d) Ku dhiiri galin doonaan warbaahinta in ay tixgelin gaar ah u lahaadaan baahida luqo ee caruurta ka mid ah qolooyinka laga tirada badan yahay ama kuwa caadiga ah ee wadaniga ah;

(e) Dhiiri galin doonaan horumarinta hagayaasha ku saabsan ka ilaalinta caruurta xogta warka waxyeelo gaadhsiinaya badbaadadiisa iyada oo la xasuusanayo balan qaadyada qoddobada 13aad iyo 18aad.

*Qoddobka 18aad*

1. Dawladaha Xubnaha ka ah heshiiskani waxay awoodooda isugu gayn doonaan in ay xaqiijiyaan aragtida ah in labada waalid leeyihiin masuuliyada ka dhaxaysa oo ah caruurta korintiisa iyo barbaarintiisa. Waalidka iyo kobciyaha sharciga ah ayaa leh masuuliyada kowaad ee korinta iyo barbaarinta caruurta. War-warkooda kowaad waa maslaxada kama danbaysta ah ee caruurta.

2. Si loo siiyo korna loogu qaado xuquuqda caruurta ee ku qoran heshiiskan, dawladaha xubnaha ka ahi waxay siin doonaan waalidka iyo kobciyaha sharciga ah-ba kaalmo si ay u

qaataan waajibaad kooda dhiqida caruurta waxayna xaqiijin doonaan dhismaha Hay'ado, imkaaniyaad iyo waxqabad iyo daryeelka caruurta ah.

3. Dawladaha xubnaha ahi waxay xaqiijin doonaan in caruurta waalidiintood shaqaysaa Xaq-u leeyihiin in ay ka faa'idaystaan waxqabadyada daryeelka caruurta iyo imkaaniyaadka ay xaq u leeyhiin.

*Qoddobka 19aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay qaadi doonaan talaabo kasta oo sharci, maamul, Bulsho, iyo waxbarasho oo haboon si ay uga ilaaliyaan caruurta dhammaan qaab kasta oo handidaad ama gacan qaad ah, dhaawac, ama xumayn/cay, wadeecayn, mucaamalo xun, ama ku danaysi, ay ka mid tahay fara-xumayn, inta uu ku jiro gacanta waalidka ama koriyaha sharciga ah, ama cid alla cidii caruurta xannaanaynaysa.

2. Tallaabooyinkan badbaadinta caruurta waxa ka mid ah hanashada nidaam iyo mashaariic bolsho oo wax-ku-ool oo lagu kobcin karo sahalada daruuriga u ah caruurta iyo cida xanaanaynaysaba, isla markaana in uu ilmuhu helo qaababka kale ee badbaadinta iyo ogaanshaha, ka warbixinta, gudbinta, baadhista, meel marinta iyo la socoshada noocyada si xun ula dhaqanka caruurta halkan lagu soo cadeeyey iyo haday haboon-tahay, in lala socodsiiyo garsoorka.

*Qoddobka 20aad*

1. Caruurta si ku meel gaadh ah ama joogtaba ah looga kaxeeyo degaanka qoyskooda amase loo arko in aanay ilmaha dantiisu ku jirin in uu la joogo qoyskiisa, waxa uu xaq u yeelan doonaa in dawladu siiso kaalmo iyo ilaalin gaar ah.

2. Dawladaha xubnaha ahi waxay si waafaqsan xeer qarameedyadooda ku xaqiijin doonaan qaab kale oo lagu xannaaneeyo caruurtaas oo kale.

3. Xannaanaynta noocaas ah waxa ka mid ah, ilma kale ku darida, cid u dhiibis, kafaalaqaadid, ilmo ka dhigasho mid aanad dhalin, ama loo dhiibo hay'adaha sharciga ah ee ku hawlan daryeelida Caruurta. Marka laga baaraan degayo xalalka, waxa tixgalin weyn la siin doonaa rabitaanka joogtaynta korinta caruurta iyo caruurta qabiil ahaan, diin ahaan, dhaqan iyo hido ahaan, iyo luqo ahaan ka soo jeedkiisa.

*Qoddobka 21aad*

1. Dawladaha xubnaha ah ee ictiraafa ama ogolaada habka ilma-kale ilmo ka dhigashad (adoption) waxay xaqiijin doonaan in danaha ilmahu ahaan doonto mudnaanta kawaad, waxayna:-

(a) Xaqiijin doonaan in caruurta kale ilma ka dhigashada ay ogolaan doonaan madax aqoon iyo awood lihi kuwaas oo go'aaminaya in caruurta kale ilmo ka dhigashada la ogol yahay marka la eego xaalka caruurta ee khuseeya waalidkiisa, qaraabadiisa, iyo

koriyaha sharciga ah iyada oo dad ay khusaynayso la helo ogolaanshahooda marka loo waramo korsashada ilmahooda cid kale iyada oo ku salaysan la talinta noocaas ah, iyada oo dhammaan waafaqsan Qawaaniinta la isticmaalo iyo nidaamada lagu dhaqmo iyo dhammaan xogta la xidhiida ee lagu kalsoon yahay;

(b) Ictiraafayaan in korsashada iyo ilmo ka dhigashada ilmo aan la dhalin ka dhacda laba dal gudahood loo arki karo in ay tahay si kale oo loo yeeli karo daryeelka caruurta haddii aan caruurta reer kale loo dhiibin/ama ciddii naasnuujin lahayd, ama qoys korsan ama aan haba yaraatee si haboon aan caruurta looga daryeeli karin dalka uu ka soo jeedo;

(c) Xaqiijin doonaan caruurta korsashadiisa laba dal ka dhexeeya tahay uu helo badbaadin iyo sargooyooyin heer beegaal oo la mid ah kuwa loo adeegsado Caruur korinta -nocan ah ee dalkaas ka jira;

(d) Qaadi doonaan tallaabo kasta oo haboon si ay u xaqiijiyaan (korsashada caruurta laba dalka dhexeeyaha ah) in aanay dhiibista noocaas ahi keenin si aan habboonayn looga raadiyo faa'ido dhaqaale oo ay helaan kuwa arrinta ku lugta lihi;

(e) Dawladaha xubnaha ahi waxay dhiirigelin doonaan ujeedoyinka qoddobkan aynu joogno iyada oo aqoonsan doona qaban-qaabooyin laba geesood ah ama dhinacyo badan ah ama heshiisyo, isla markaana isku deyi doona, iyaga oo ku xayndaaban, in ay xaqiijiyaan in gaynta caruurta dal kale ay sameeyaan madaxda iyo maamulada qaabilsan oo aqoon iyo xirfadba leh.

*Qoddobka 22aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay qaadi doonaan tallaabo kasta si ay u xaqiijiyaan caruurta doonaya aqoonsi qaxoontinimo ama loo aqoonsan yahay qaxoonti ee waafaqsan Qawaaniinta la adeegsado/isticmaalo ee Caalamiga ah ama gudaha ah iyo hab-raacyada hawl gal,haddii aanay la socon ama ay la socdaan waalidiintiisu//teedu ama cid kale, waxa uu heli doonaa ilaalin haboon iyo kaalmo bini'aadmino oo uu ku heli doono dhaqan galka xuquuqda lagu siiyay heshiiskan iyo Xuquuqda kale ee Caalamiga ah ee dadka ama qaab-dhismeed yada sharciga ah ee ku hawlan waxqabadyada aademenimo ee ay dawladahani ka mid yihiin.

2. Tan awgeed, dawladaha xubnaha ahi waxay taageero siin doonaan dedaal kasta oo Qaramada Midoobay iyo ka hay'ada dawliga ah ee wada jira ee aqoonta xirfada iyo waayo-aragnimada leh ama kuwa aan dawliga ahayn ee ay is kaashanayaan Qaramada Midoobay si ay u badbaadiyaan caruurta caynkan ah iyo in ay raacdeeyaan waalidiinta ama xigtada kale ee qoyska ilmo kasta oo qaxoonti ah si loo helo xog lama huraan u ah dib ugu soo celinta qoyskiisa/keeda. Xaalada cid laga waayo qoyska ama xigtada, caruurta waxa la siin doonaa badbaadin la mid ah tan uu leeyahay ilmo kasta oo si joogto ah ama ku qaab ah u waayey jawigii Degaan ee qoyskooda/keeda sabab kasta ha ahaatee, sida uu dhigayo heshiiska hada jira.

*Qoddobka 23aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay aqoonsan yihiin ilmo kasta oo maskax ahaan ama jidh ahaan naafo ahi in uu helo nolol dhamaystiran oo fiican kuna jiro jawi xaqiijinaya sharafta, dhiirigalinaya isku filaasho caawinayana in ilmuhu si firfircoon uga qayb qaato bulshada.

2. Dawladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxay aqoonsanyihiin xuquuqda caruurta naafada ahi u leeyahay daryeel gaar ah waxayna dhiirigelin doonaan xaqiijina doonaa ufidinta, iyada oo ku xidhan waxa la hayo, caruurta iyo kuwa ka masuulka ah daryeelkiisa/keeda mucaawano laga faa'idaysto oo u qalanta xaalada ilmuhu ku jiro iyo duruufta waalidiinta ama kuwa kale ee daryeela caruurta.

3. Iyada oo la aqoonsan yahay baahiyaha gaarka ah ee caruurta naafada ah, mucaawanada la siiyey, iyada oo waafaqsan faqrada 2aad ee qoddobkan aynu joognaa, waxa ay noqondoontaa, mar kasta oo ay suurta gal tahay, iyada oo la qaderinayo haynta dhaqaale ee waalidiinta ama cidaha kale ee caruurta daryeelaysa waxaana la qorshayn doonaa si loo xaqiijiyo caruurta naafada ah in uu si saameyn leh u helo waxbarasho, tababar, daryeel, Caafimaad, dib u dejin, shaqo u diyaarin, si ku haboon in ilmuhu si buuxda oo suurta gal ah u helo dhex-galka bulsho, iyo korintaan qof ahaaneed iyo kan ruux ahaaneed ba.

4. Dawladaha xubnaha ahi waxay kor u qaadi doonaan is-dhaafsiga xogta la xidhiidha kobcinta caafimaadka, daaweynta, saykoolijiyadeed iyo daaweenta awood-kaabka ee caruurta naafada ah ee ay ka mid yihiin baahinta iyo helitaanka xogta dib-u-dejinta, waxbarashada, iyo siinta shaqo xirfadeedyo. Taasi oo ujeedadu tahay in dawladaha xubnaha ahi ay wanaajiyaan awooda waxqabadka iyo xirfadaha caruurta iyo weliba in la balaadhiyo waayo-aragnimadooda dhinacaas. Tani marka la eego waxa tixgelin gaar ah la siin doonaa dawldaha soo-koraaya.

*Qoddobka 24aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay aqoonsan yihiin xuquuqda ilamaha uu u leeyahay ka ciil beelka jaangooyin ka Caafimaad heerka u sareeya ee la gaadhi karo si ay u caawiyaan daaweynta cudurada iyo dib u dejinta Caafimaadka. Dawladaha xubnaha ahi waxay u halgami doonaan in ay xaqiijiyaan in aan caruurta laga lumin xaqa uu u leeyahay helitaanka waxqabadka Caafimaadka ee sidan ah.

2. Dawladaha xubnaha ahi waxay xoog aad ah saari doonaan hirgelinta xaqan waxayna, gaar ahaan, qaadi doonaan tallaabooyinka ku haboon:

(a) In la yareeyo dhimashada caruurta;

(b) In la xaqiijiyo helintaanka mucaawino dawo ahaaneed ee daruuriga ah iyo daryeelka Caafimaadka ee Caruurta oo dhan iyada oo xooga la saarayo daryeelka caafimaad ee aasaasiga ah;

(c) Si loola dagaalamo cudurada iyo nafaqo darada, oo ka mid ah daryeelka Caafimaad

ee asaasiga ah, oo la soo marin doono cida caruurta haysa, adeegsiga farsamooyin hore u jira iyo bixinta cunto ku fillan oo nafaqo leh iyo biyo nadiif ah oo la cabo iyada oo la tixgelinayo dhibaatooyinka iyo halisaha ka iman kara dadka deegaanka;

(d) In hooyooyinka loo xaqiijiyo daryeelka caafimaad dhalmada ka hor iyo kadib;

(e) In la xaqiijiyo dhammaan qaybaha bulshada, gaar ahaan waalidiinta iyo caruurta in loo sheego, in ay helayaan waxbarasho isla markaana lagu kaabayo isticmaalka aqoonta aasaasiga ah ee caafimaad iyo nafaqada caruurta, waxtarka naas-nuujinta, sixida iyo nadaafada deegaanka iyo ka hortaga shilalka;

(f) In la sameeyo daryeel caafimaad oo ka hortag ahaaneed, hagitaan waalidiineed iyo wacyi gelin qorshaha qoyska iyo waxqabadyada.

3. Dawladaha xubnaha ahi waxay qaadi doonaan tallaabo kasta oo meel mar ah kuna habboon mamnuucida/joojinta falalka iyo caadooyinka lidka ku ah caafimaadka caruurta.

4. Dawladaha xubnaha ahi waxay xilqaadi doonaan in ay kor u qaadaan dhiirigeliyaana iskaashiga caalamiga ah iyaga oo qaba in tartiib tartiib guuleysigu keeni doono xaqiijin buuxda oo ah xaqa lagu aqoonsaday qoddobkan aan hada joogno wajigan waxa ogaal gaar ah la siin doonaa dalalka soo koraya.

*Qoddobka 25aad*

Dawladaha xubnaha ahi waxay aqoonsan yihiin xaqa caruurta, madax aqoon iyo xirfad lihi u qabatay muddo, iyada oo ujeedadu tahay xannaanayn, badbaadin ama daaweyntiisa//teeda jidheed ama maskax ahaaneed ee Caafimaad, daaweynta la siiyey in si aan xidhiidh lahayn kolba dib loo fiiriyo daaweynta iyo duruufah kale ee lagama maarmaanka u ah mudo siinta.

*Qoddobka 26aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay ilmo kasta u aqoonsan doonaan in uu ka faa'idaysto daryeelka bulsho, ee ay ka mid yihiin caymiska bulshada, waxayna qaadi doonaan tallaabooyin ku haboon si loo helo xaqiijin buuxda ee xaqan si waafaqsan xeer Qarameed kooda.

2. Manfacyada la siinayo, meeshay ku haboon tahay, waxa ay noqon deeqo iyada oo lagu xisaabtamayo haynta iyo duruufta caruurta iyo cida haysa masuuliyada nolosha. Iyo weliba in sidan oo kale loo tixgaliyo codsiyada faa'ido ay sameeyaan wakiilada caruurtu.

*Qoddobka 27aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay aqoonsan yihiin xaqa ilma kasta uu u leeyahay jangooyo nololeed oo ku filan caruurta jidh ahaan, maskax ahaan, qalbi ahaan/niyad ahaan, damiir ahaan iyo koritaan bulsho ahaaneed.

2. Waalidiinta ama kuwa kale ee masuulka ka ah caruurta masuuliyadooda kowaad waa in ay xasiliyaan inta awoodooda ah iyo karitaanka lacageed, xaalada nolosha caruurta ee daruuriga u ah koritaanka caruurta.

3. Dawladaha xubnaha ahi sida waafaqsan xaalad qarameedka iyo awoodooda waxay qaadi doonaan tallaabooyinka ku haboon si ay u caawiyaan waalidinta iyo kuwa kale ee masuulka ka ah caruurta si ay u hirgeliyaan xaqan, waxayna haddii loo baahdo ls siin doonaan kaalmo maadi ah, gaar ahaan xaga nafaqeynta, dharka iyo hoy.

4. Dawladaha xubnaha ahi waxay qaadi doonaan tallaabo kasta oo ku habboon in ay waalidka ama cida kale ee masuuliyada dhaqaale ka saaran tahay caruurta dib u sameeyaan wixii ilmuhu noloshiisa ku maamuli lahaa isla gudaha dawlad xubinta ah ama dabeda ah. Gaar ahaan, marka cida masuuliyada dhaqaale ee ilmahu saarantay ku noolyahay dawlad/dal ka duwan ka caruurta, dawladaha xubnaha ah waxay taageeri doonaan ka mid noqoshada heshiisyada caalamiga ah ama go'aamada heshiisyadaas iyo weliba samaynta qaban qaabooyin kale.

*Qoddobka 28aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay aqoonsan yihiin xaqa ilmuhu u leeyahay waxbarasho iyo aragti, hanashada xaqan waxay ku iman kartaa is daba jog ahaan iyo fursado siman, waxay gaar ahaan:

(a) Ka dhigidoonaan waxbarashada aasaasiga ah khasab lacag la'aan ah;

(b) Dhiirigelin doonaan samaynta, dugsiyo sare oo kala duwan, oo ay ka mid tahay aqoonta waxbarasho ee guud ahaaneed iyo tan xirfadeed, oo ah kuwo u furan dhammaan ilmo kasta, iyo in laga dhigo waxbarasho lacag la'aan ah iyo in la siiyo kaalmo lacag ah haddii baahidu tidhaahdo//keento;

(c) In waxbarashada sare laga dhigo mid u furan dhammaan marka lagu xisaabtamo awood si dhinac kastaba;

(d) In laga dhigo xogta aqooneed iyo xirfadeed iyo hagida/tusmada kuwo la heli kara ee ilmo kastaana uu gaadhi karto;

(e) In la qaado tallaabooyin si loo dhiiri geliyo joogtaynta dhigashada iyo yaraynta dhaafida waxbarasho.

2. Dawladaha xubnaha ahi waxay qaadi doonaan talaabooyinka ku haboon si loo xaqiijiyo hab-dhaqanka iskuul loo maamulo si u qalanta sharafta aadaminimo ee caruurta isla markaana waafaqsan heshiiskan hada jira.

3. Dawladaha xubnaha ahi waxay caawin doonaan oo dhiirigelin doonaan taageerida caalamiga ah ee dhinacyada waxbarasho, gaar ahaan iyada oo laga rajo qabo tirtirida jaahilnimada wax qoris la'aanta aduunyada oo dhan iyo taageerida helitaanka aqoonta sayniska iyo farsamada

iyo hab dhigis oo casri ah. Waana in aragtidan lasii tixgaliyaa marka la tixgalinayo baahiyaha dawladaha soo koraaya.

*Qoddobka 29aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay ogol yihiin in waxbarashada ilmuhu ku aadan tahay:

(a) Koritaanka shakhsiyada, awoodiisa/kartidiisa, iyo awoodiisa jidheed iyo maskaxeed ee kama dambaysta ah;

(b) Korida xushmaynta xuquuqda dadka iyo xoriyadaha aasaasiga, iyo aragtiyaha lagu qaderin yeelay Axdiga Qaramada Midoobay;

(c) Kor u qaadida xushmada caruurta waalidkiisa/keeda aqoonsi dhaqameedkiisa, luqadiisa iyo qiimayntiisa/teeda, qiimaynta qaran ahaaneed ee dalka uu ku nool yahay ilmuhu dalka uu/ay ka soo jeedo asal ahaan iyo xadaaradaha ilbaxnimooyin ka kala duwan kuwiisa/weeda;

(d) U diyaarinta caruurta nolol masuul qaad leh ee bulsho xor ah oo leh niyad, is afgarasho, nabad gelyo, dulqaad, sinaan (raga iyo haweenka) iyo saaxiibtinimo dadka oo dhan ah, qabiilo, qaran, kooxo diineed, iyo dad ka soo jeeda cid isku mid ah;

(e) Kor u qaadida xurmaynta degaanka dabiiciga ah.

2. Ma jirto qayb ka mid ah qoddobkan ama qoddobka 28aad oo loo fasiri doono in farogelin ay ku sameeyaan xoriyada/madax banaanida qofka ama ururo in ay sameeyaan una jiheeyaan qaab dhismeedyo waxbarasho had iyo jeer u furan ilaalinta aragtiyaha ku cad faqrada ee qoddobkan hada aan joogno iyo shuruudaha waxbarashada lagu bixinayo mu'asasadahan/qaabdhismeedyadan oo kale waxay waafaqsanaan doontaa heerka jaangoynta u hoosaysa ee dawladu u dhigta.

*Qoddobka 30aad*

Dawladaha qabiil ahaanta, diin ahaanta, af ahaan kuwa laga tirada badan yahay ama dadka meel kasoo wada jeeda ee isku degaan ka ahi ay jiraan, caruurta ka midka ah dadka laga badanyahay ama kuwa kale deegaanka ah is kuna mid ka ah, aan laga lumin xaqa beesha dhexdeeda ee kooxda uu ka midka yahay in uu jeclaysto dhaqan kiisa in uu cadeysto kuna camal falo diintiisa//teeda ama ku hadlo luqadiisa/teeda.

*Qoddobka 31aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay aqoonsan yihiin xaqa uu ilmuhu u leeyahay nasashada iyo faxaaxsiga/in uu ka qayb qaato ciyaaraha iyo maaweelooyinka ee ku haboon da'da caruurta iyo in uu uga qayb qaato si madax banaani ah nolol dhaqameedka iyo fanka.

2. Dawladaha xubnaha ahi waxay xushmayn doonaan xaqa ilmuhu u leeyahay in uu si buuxda uga qayb qaato nolol dhaqanka iyo fanka waxayna dhiirigelin doonan helitaanka fursado haboon oo isleeg oo dhaqan ahaan, fan ahaan, madadaalo ahaan, iyo hawlaha faxaaxsiga.

*Qoddobka 32aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay aqoonsan doonaan xaqa ilmuhu u leeyahay in laga badbaadiyo ku danaysiga dhaqaale iyo in ay qabtaan shaqo la arko in ay noloshooda halis gelinayso ama saamayn ku yeelan karta waxbarashada ama se dhibaato u leh Caafimaadka caruurta ama se kobcinta jidh ahaan, maskax ahaan, qalbi ahaan, damiirahaan, ama se bulsho ahaaneed.

2. Dawladaha xubnaha ahi waxay qaadi doonaan tallaabooyin sharci ahaaneed, maamul ahaaneed ama bulsho ahaaneed si ay u xaqiijiyaan hirgelinta qoddobkan. Ujeedadan iyo xurmaynta balanqaadyada qaab dhismwedyada caalamiga ah, dawladaha xubnaha ahi gaar ahaan waxay:

(a) Samayn doonaan da'da ugu hoosaysa ee ogolaanta shaqo;

(b) Samayn doonaan joogtaynta saacadaha shaqo;

(c) Samayn doonaan khasiraado ama ciqaabo kale si loo xaqiijiyo dhaqan gelin meel mar ah oo hada aan joogno.

*Qoddobka 33aad*

Dawladaha xubnaha ahi waxay qaadi doonaan tallaabooyin ay ka mid yihiin kuwo tacliimeed, sharciyeed iyo bulsheed si caruurta looga badbaadiyo isticmaalka mukhaadaraadka mamnuuca/xaaraanta ah iyo maandooriyayaasha sida lagu qeexay mucaahadooyinka Caalamiga ah, iyo in Caruurta laga ilaaliyo samaynta iyo dhoofinta mukhaadaraadka mamnuuca ah.

*Qoddobka 34aad*

Dawladaha xubnaha ah ayaa masuul ka ahaan doona in caruurta ay ka badbaadiyaan nooc kasta oo ka faa'idaysi iyo kufsi ah. Ujeedooyinkan awgeed, dawladaha xubnaha ahi waxay gaar ahaan qaadi doonaan tallaabooyin ku habboon ee qarameed, Laba geesood, dhinacyo badan si ay uga hortagaan.

(a) In ilmaha lagu qasbo ama lagu khiyaameeyo in uu galmo sharci-daro ah sameeyo;

(b) Ka faa'idaysiga caruurta ee dhilanimo ama galmo noocyo kale oo aan sharci ahayn;

(c) Ku danaysi caruurta ee jilida sawirada-galmada iyo wixii la mida.

*Qoddobka 35aad*

Dawladaha xubnaha ahi waxay qaadi doonaan tallaabooyinka ku haboon ee qaran ahaaneed, laba geesood iyo dhinacyo badan si loo hor joogsado, af-duubka iibinta iyo dhoofinta caruurta u jeedo kasta ama qaab kasta oo ay leedahay.

*Qoddobka 36aad*

Dawladaha xubnaha ahi waxay caruurta ka ilaalin doonaan dhammaan qaab kasta oo kale oo ku danaysi ah lid ku ah dhinac kasta oo caruurta wanaagooda ah iyo habsamidiisa guud.

*Qoddobka 37aad*

Dawladaha xubnaha ahi waxay xaqiijin doonaan:

(a) In aanu jirin wax lagu sameeyo cadibaad/jidh-dil, ama si kale oo cadownimo ahaaneed, dadnimo xumo, ama macaamilo xumo dheg-dil ah, ama ciqaabid. Dil iyo xabsi daa'in aan lahayn suurta galnimo siidayneed midna laguma fulin doono dembiyada ay galaan dadka sideed iyo toban sano ka yari;

(b) Ma jiridoono ilmo laga xarrimo xoriyadiisa/teeda si sharci la'aan ah ama se xukun ahaaneed ama haligaadeed. qabashada, xabsi u dirista xukun la'aaneed ama xidhista ilmo waxay waafaqsanaan doontaa qaanuun ka waxaana loo adeegsan doonaa in ay ahaato keliya tallaabada u danbaysa ee la adeegsado iyo mudada ugu gaaban ee ku haboon;

(c) Ilmo kasta oo la weysiiyey xoriyadiisa/teeda waxa loola dhaqmi doonaa si dadnimo iyo xushmad leh, sharafta nolosha uu ka dhaxlay ee dadnimo awgeed, iyo in loo tixgeliyo baahiyaha da'diisa/da'deeda ah. Gaar ahaan, ilmo kasta oo laga qaaday xoriyadiisa waxay ka sooci doonaan dadka waaweyn hadii aan loo arag in ay dan weyn u tahay caruurta in aan sidaa loo yeelin, waxaana uu yeelan doonaa xaqa in uu la xidhiidho qoyskiisa/keeda, isaga oo adeegsanaya qoraalo iyo booqashooyin, marka laga reebo duruufo aan caadi ahayn;

(d) Ilmo kasta oo laga qaaday xorriyadiisa/teeda waxa uu yeelan doonaa xaqa helitaanka mucaawano sharci ah, isla markaa waxa uu leeyahay xaqa in uu daba galo sharci ahaanta xornimada xaqiisa/xaqeeda maxkamad horteed taas oo aqoon u leh, madax bannaan, eexashana aan lahayn, ama meel awood, aqoon, madax banaani iyo eexasho la'aan ah go'aan deg-deg ahna ka qaadan karta ficiladan oo kale.

*Qoddobka 38aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay xil qaadayaan in ay xushmeeyaan isla markaana xaqiijiyaan korna u qaadaan xushmaynta qawaaniinta caalamiga ah ee bani'aadnimo ee khuseeya dagaalada hubaysan, gaar ahaan kuwa khuseeya caruurta.

2. Dawladaha xubnaha ahi waxay balanqaadi doonaan inta suurta gal ah si ay u xaqiijiyaan dadka aan gaadhin shan iyo toban jir in aanay ka qayb qaadan dagaalada.

3. Dawladaha xubnaha ahi waxay joojin doonaan in askar loo qaato dadka aan gaadhin shan iyo toban sano. Iyada oo ay ku jiraan kuwa shan iyo toban ee aan gaadhin sideed iyo toban, sida loo loo kala da’ weyn yihiin ayaa loo qadarinayaa.

4. Sida waafaqsan waajibaad ka Dawladaha Xubnaha ahi ku leeyihiin xeerka bin Aadminimo ee Caalamiga ah in ay badbaadiyaan/dhawraan dadka medeniyiinta ah ee ku dhex nool iska horimaad hubaysan, dawladaha xubnaha ahi waxay qaadi doonaan tallaabo kasta oo suurta gelin karta in ay xaqiijiyaan badbaadinta caruurta uu saameeyey iska horimaad ka hubaysani.

*Qoddobka 39aad*

Dawladaha xubnaha ahi waxay qaadi doonaan tallaabo ku haboon in ay kor u qaadaan dibu kabida jidhka, niyada, dhaqan-celinta, ee caruurta waadasha u noqday nooc kasta oo wadeeco ah, ku danaysi, haligaad ah (dagaal af), jidh dil ah, ama qaab kasta oo kale oo arxan la’aan ah, dadnimo xumo ah, ama ciqaabid ama dagaal/hiif. Bogsiintan oo kale waxay ka dhici doontaa soo daweynaya caafimaadka, xushmaynta qof ahaaneed iyo sharafta caruurta.

*Qoddobka 40aad*

1. Dawladaha xubnaha ahi waxay aqoon sanayaan xaqa ilmo kasta oo lagu eedeeyey in uu jebiyey xeer ciqaabeed kii in loola dhaqmo si waafaqsan kor u qaadida dareenka sharafeed, iyo qiimayneed, kaas oo xoojinaya xurmada ilmahu uu u hayo xuquuqda dadka iyo xorriyada aasaasiga ah ee kuwa kale iyo iyada oo tixgelinaysa da’da caruurta iyo xiisaha loo qabo kor u qaadida dhaqan celinta caruurta ee kaalin waxtar leh ka gelida bulshada.

2. Ula jeedadan iyo xushmaynta loo hayo kaalmaha hay’adaha caalamiga ah, dawladaha xubnaha ahi waxay, gaar ahaan xaqiijin doonaan in:

(a) Aanu jiri doonin ilmo la soo eedeeyaa (dacweeya) amase loo aqoonsan doono in uu ku xad gudbay xeer ciqaabeedkii sabab fal ahaaneed awgeed, amase burino aanu mamnuucin xeer ciqaabeedka ama xeer caalamiyeedku markii la geystay ama la galay;

(b) Ilmo kasta oo lagu soo eedeeyey (dacweeyey) in uu jebiyey xeer ciqaabeedka waxa uu leeyahay dammaanad qaadyadan dhammaan.

(i) In loo arko in uu denbi-la’aan yahay ilaa qaanuun ahaan loo caddeeyo in uu yahay dembiile;

(ii) Markiiba loo sheego waxa lagu heysto iyo in, hadii ay haboon tahay loo mariyo sheegista Waalidkii/keed ama koriyaha sharciga ah iyo in la siiyo caawimo sharciyeed amase mid kale oo haboon xiliga diyaarinta iyo bandhigida dacwadiisa/deeda;

(iii) In ay kayska sida ugu dhakhso badan u garsooraan waaxda garsoorka ama maamul karti u leh oo madaxbanaan, loona garsooro si cadaalad aha oo waafqsan sharciga. Waana in ay goobjoog ka yihiin wakiilada sharciga ama kaalmooyinka kale, waase hadii aan ay ku jirto danta ilmahu, gaar ahaan iyada oo la tixgalinayo da'ada iyo xaalada ilmaha, iyo weliba waalidka ama masuulada sharciga ah ee daryeela ilmaha;

(iv) Aan lagu khasbin markhaati ama dembi qirasho, itixaamid ama cid lidi ku ah markhaatigeed, iyo in loo ogolaado su'aalo weydiinta cida isaga/iyada ka wakiil ah in uu ka qayb galo sida waafaqsan sinaanta;

(v) Hadii go'aanku noqdo ku xad gudub sharci, Dawladaha xubnaha ahi waxay samayn doonaan in go'aan ka iyo tallaabo kasta oo ay dib u eegis ku sameeyaan suldad sare, aqoon iyo karti u leh, eexla', madax banaan ama gudi garsoor sida kolba Qaanuunku yahay;

(vi) Turjubaan lacag la'aan ah in uu helo hadii aanu ilmuhu aqoon afka lagu hadlayo;

(vii) Si buuxda loo xurmeeyo noloshiisa/sheeda khaaska ah inta dacwadu socoto.

3. Dawladaha xubnaha ahi waxay taageeri doonaan dejinta sharciyada, nidaamka la raacayo (procedures) awoodaha (madax maamuleed yada) iyo dhaqaale iyo hay'adaha ku haboon Caruurta la eedeeyo ama loo aqoon saday in ay ku xad-gudbeen xeer ciqaabeedka, gaar ahaan:-

(a) In la dejiyo da'da ugu yare ee caruurta intaa ka yar la xisaabinayo in aanu awood u lahayn in uu ku xad gudbo xeerka ciqaabta;

(b) Markii ay ku haboon in aan caruurta sharciga lala tiigsan, balse loola macaamilo si haboon oo lagu xisaabtama in xuquuqdooda iyo badbaadinta sharciyeed si buuxda ah loo xushmeeyo.

4. Noocyo badan oo isku dhafan, sida daryeel, tusid iyo habka kormeerada, la Talinta, tijaabinta, daryeel ka naas nuujinta cida kale, waxbarashada iyo Barnaamijyo tababar xirfadeed iyo siyaabo kale oo bedeli kara daryeel hay'adeed Ayaa la heli doonaa si loo xaqiijiyo in caruurta loola dhaqmo si ku haboon fayoobidooda iyo isu dheelitirta duruufta caruurta iyo dembiga.

*Qoddobka 41aad*

Ma jiro wax ka mid ah Heshiiskan oo saamaynaya balan qaadyada oo kaga haboon xaqiijinta xuquuqda caruurta oo laga yaabo in uu ku jiri karo:

(a) Xeerarka Dawladaha xubnaha ah;

(b) Xeerarka Caalamiga ah oo ka dhaqan gashan dawladaas.

# QEYBTA II

*Qoddobka 42aad*

Dawladaha xubnaha ah ayaa xil ka qaadi doonaan sidii ay mabaadi'da iyo balanqaadyada heshiiskan ay si baaxad leh ugu fidin lahaayeen iyaga oo adeegsanaya dhammaan siyaalaha ugu habboon ee fir-fircoonidu ku dheehan tahay si uu Caruur iyo Ciroolaba ugaadho warku.

*Qoddobka 43aad*

1. Iyada oo ujeedadu tahay in la ogaado horumarka ay dawladaha xubnaha ahi ka gaadheen hanashada xaqiijinta waajibaadka ay xilqaadeen ee heshiiskan, waxa la dhisi-doonaa gudi qaabilsan xuquuqda caruurta; taas oo qaban doonta hawlaha halkan lagu xusay.

2. Guddigu waxa uu ka koobnaan doonaa sideed iyo toban* xeeldheere oo leh dammiir fiican oon laga loodin Karin iyo tabo aqoon shaqo oo loo aqoon sanyahay oo ay u leeyihiin arrimaha heshiiskan ku jira/qoran. Xubnaha Gudiga waxa dadkooda ka soo dhex xuli doona Dawladaha xubnaha ah waxayna ku shaqayn doonaan heer iyo awood qof ahaaneed; tixgelin waxaa la siin doonaa isleegaan qaybineed oo ku salaysan deegaan juquraafiyeed iyo isla marka habdhismeedyada sharciga ah ee muhiim ka ah.

3. Xubnaha Gudiga waxaa lagu dooran doonaa cod qarsoodi ah iyada oo laga soo dhex dooran doono liisaska taxanaha ah ee ay soo magacaabeen Dawladaha xubnaha ahi. Dawlad kasta oo xubin ahi waxay magacaabi kartaa hal qof oo dadkeeda ka mid ah.

4. Xulashada hore ee Guddigu waxay dhici doontaa lix bilood ka dib taariikh uu heshiiskani dhaqan galo iyo wixii intaa ka danbeeyana sannad dhaaf. Ugu yaraan afar bilood ka hor taariikhda xulasho kasta, Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay ayaa u diri doona Dawladaha Xubnaha ah.

5. Doorashada xubnaha Guddigu waa in ay ku qabsoontaa baaq Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay uu u diro dawladaha xubnaha ka ah axdiga si ay isugu yimaadan kulan ka dhaca xarumaha Qaramada Midoobay. Shirkaas waxa uu qabsooma haddii saddex meelood oo labo dawladaha xubnaha ka ah soo xaadiraan, dadka loo doorto guddiga waa musharixiinta hela tirada ugu badan codadka iyo codka aqlabiyadda mudlaqa ah (51%) ee codadka dawladaha xubnaha ka ah axdiga ee goobta jooga codkana dhiibta.

6. Xubnaha Guddigu waxa ay xilka haynayaan muddo afar sano ah. Waxa kale oo ay xaq u leeyihiin in dib loo soo doorto. Hase yaashee, waqtiga shan ka mid ah xubnaha lagu doortay doorashada hore waxa uu ku egyahay labo sano; isla marka doorashadu dhammaatona, magacyada shantaan xubnood waxaa qori tuur kusoo doorta guddoomiyaha kulanka.

7. Haddii xubin ka mid ah guddiga uu dhinto, ama is casilo ama sabab kale darted uu ku dhawaaqo in aanu gudan karin hawsha guddiga loo igmaday, dawladda ku jirta heshiiska ee iyadu soo sharraxday khabiirkaan waa in ay kasoo dhex magacawdaa mawadiniinteeda khabiir

kale oo hawsha sii qabta inta waqtiga ka dhiman, waxaana magacaabidaas dambe ku xirnaan doontaa ogolaanshaha Guddiga.

8. Gudidu iyada samaysan doonta hanaanka xeer-hoosaadkeeda.

9. Gudidu iyada ayaa dooran doonta saraakiisheeda mudo labo sano ah.

10. Kulamada Gudidu waxa caadi ahaan lagu qaban doonaa Xarumaha Dhexe ee Qaramada Midoobay, ama meelaha kale ee ku haboon ee ay isla gartaan Gudidu. Waxana ay gudidu caadi ahaan kulmi doonaan sanadkiiba hal mar. Mudada kulamada ee Gudida waxa, hadii ay lama huraan noqoto. go'aamin doona oo dib-uga fiirsan doona kulamada Dawladaha xunbaha ka, balse wixii go'aan ah waa in uu anxasiyaa Golaha Guud ee Qaramada Midoobay.

11. Xoghaya Guud ee Qarama Midoobay waa in uu siiyaa guddiga wixii shaqaale iyo agabka ah ee lagama maarmaan u ah in guddigu si haboon u gutaan xilkooda.

12. Sida uu kolba ansaxiyo Golaha Guud ee Qaramada Midoobay, Gudiga lagu aasaasay axdigan waxa ay xaq u leeyihiin tasiilaadka iyo mudnaanaha ergooyinka Qaramada Midoobay.

*Qoddobka 44aad*

1. Dawlada xubnaha ah ayaa masuul ka ah in ay Gudiga u keenaan warbixino, iyaga oo u soo marinaya Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, ku saabsan tallaabooyinka ay qaadeen ee dardar gelinta siinaya xaqiijinta xuquuqaha lagu aqoonsaday heshiiskan iyo horumarka laga gaadhay u riyaaqa Xuquuqdaas.

 (a) Laba sanadood gudohood marka uu ka dhaqan galo heshiiskani Dawlada laga hadlayo;

 (b) Intaa ka dib shan sanno oo kasta.

2. Warbixinaha la soo qoro ee waafaqsan qodobkan aan hada joogno waxaa lagu muujin doonaa sababaha iyo dhibaatooyinka, haday jiraan, saamaynaya heerka hirgelinta waajibaadka ku cad heshiiskan. Warbixinaha waxaa kale oo ku jiri doona xog ku filan inay gudiga siiso faahfaahin ku saabsan hirgelinta Heshiiskan ee dalka markaa laga hadlayo.

3. Dawladaha xubnaha ah ee hore ugu keenay warbixinaha wajiyo badanta ah Gudiga uma baahna in ay warbixino dambe ku soo daraan sida ay sheegayso faqrada 1aad (b) ee qodobkan aan joognaa.

4. Gudigu waxa uu Dawladaha Xubnaha ah weydiin karaa xog dheeraad ah oo muhiim u ah hir-gelinta Heshiiskan.

5. Iyaga oo soo marinaya Golaha Bulshada iyo dhaqaalaha, Gudigu waxay xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay u soo gudbin doonaan labadii sanno mar warbixin shaqadooda ku saabsan.

6. Dawladaha Xubnaha ahi waxay dadkooda u ogolaan doonaan in warbixinaha ay soo gudbiyaan akhriyaan.

*Qoddobka 45aad*

Si loo taageero hirgelinta meelmarka ee Heshiiskan iyo in la dhiiri geliyo iskaashiga caalamiga ah ee ku wajahan arrimaha ku jira Heshiiskan:

(a) Hay'adaha shaqooyinka gaarka ah haya, Sanduuqa Caruurta ee Qaramada Midoobay iyo kuwaa kale ee ka midka ah ee Qaramada Midoobay laamaheeda ayaa loo ogol yahay in ay wakiilo ka joogaan marka laga baaraan degayo hirgelinta balanqaadyada ku jira heshiiskan inta ay hoos timaado hawlaha ay u xilsaaranyihiin. Gudigu waxay ku casuumi karaan hay'adaha/ laamaha hawlaha khaaska ah haya, sunduuqa Caruurta ee Qaramad Midoobay iyo ururo kale oo ka bixi kara iyo ururo kale oo ka bixi kara, hadii ay u arkaan in ay haboon tahay, inay siiyaan latalin xeel dheerenimo oo khusaysa hirgelinta Heshiiskan qaybaha ay ku leeyihiin ee xilku ka saaran yahay sida ay u kala leeyihiin; Gudigu waxay ku casuumi karaan hay'adaha hawlaha khaaska haya, Sanduuqa Caruurta ee Qaramada Midoobay, iyo qaybaha kale ee Qaramada Midoobay, in ay warbixin ku saabsan hirgelinta Heshiiskan u soo gudbinayaan iyago kaga warbixinaya hawlaha inta ay ku leeyihiin;

(b) Gudigu, hadii ay la haboonaato, waxay hay'adaha hawlaha khaaska ah haya, Sanduuqa Caruurta ee Qaramada Midoobay iyo kuwa ururada ee kartida iyo aqoonta leh, u gudbin doonaa warbixin kasta oo ka timaada Dawladaha Xubnaha ka ah Heshiiskan ay ku jiraan Codsiyo, ama muujinaya baahi, loo qabo talo farsamo ahaaneed oo ay soo raacinayaan guddigu siday codsiyadaas iyo tusmaynuhuba la yihiin iyo talooyinkoodaba;

(c) Guddigu waxa uu soo jeedin karaa Golaha Guud in ay Xoghaya Guud ka codsadaan in wakiilnimo magacooda ah daraasad khaas ku ah caruurta lagu sameeyo;

(d) Gudigu waxa uu samayn karaa soo-jeedino iyo talo bixino guud oo ku saabsan xog ay heleen oo ku saabsan qodobada 44 iyo 45 ee Heshiiskan. Soo jeedinahaas iyo talo bixinahaas guud waxa loo gudbin doonaa Dawlad kasta oo xubin ah oo ay khuseeyaan iyada oo la wargelinaayo Golaha Guud iyada oo ay la socoto faalooyinka Dawladaha xubnaha ahi, haday jiraan.

# QEYBTA III

*Qoddobka 46aad*

Heshiiskani waxa uu u furnaan doonaa xaseexa Dawladaha dhammaan.

*Qoddobka 47aad*

Heshiiskan wuxuu ufuran yahay ansixin. Qoraalka rasmiga ah ee ansixinta waxa loo gayndoonaa Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qoddobka 48aad*

Heshiiskani waxa uu u furan yahay ka mid noqosho.

Qoraalka rasmiga ah ee ka mid noqoshada waxa loo dhiibi doona Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qoddobka 49aad*

1. Heshiiskani waxa uu dhaqan geli doonaa maalinta sodonaad kadib taariikhda qoraalka rasmiga ah ee labaatanaad ee ansixinta loogeeyo Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay

2. Dawlad kasta oo ogolaanaysa ama ku soo biiraysa Heshiiskan ka dib qoraalka rasmiga ah ee labaatanaad ee ogolaanshaha ama ku soo biirista ah, waxa uu heshiiskani dhaqan gelidoonaa maalinta sodonaad marka laga joogo taariikhda qoraalka rasmiga ah ee ogolaanshaha ama ku soo biirista, ee dawladaas la dhiibay.

*Qoddobka 50aad*

1. Dawlad kasta oo xubin ka ah Heshiiskan waxay soo jeedin kartaa wax ka bedelid heshiiskan ah iyaga oo qoraalka u gayn doona Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay. Xoghaya Guud waxa uu markiiba soo-jeedintaas wax ka bedelida ah gaadhsiin doona dhammaan dawladaha Xubnaha ka ah Heshiiskan iyada oo ay la socoto codsi ah in ay muujinayaan haddii ay doonayaan in shir la qabato ay ka qayb galaan Dawladaha Xubnaha ahi oo ujeedeedu tahay ka baaraan dega iyo codqaadida soo jeedintaas. Haddii afar bilood gudohood oo ka bilaabma taariikhda wargelinta aanay ugu yaraan Sadex meelood laba meelood Dawladaha xubnaha ahi ogolaan kulankan, Xoghaya Guud ayaa qaban qaabin doona kulan isaga oo cuskanaya xaqa uu siinayo xeerka Qaramada Midoobay. Wax ka bedelis kasta oo aqlabiyada Dawladaha goob jooga ah isla markaa codaynta ka qayb gashay, waxaa la horgayn doonaa Golaha Guud ee Qaramada Midoobay si loo ansixiyo.

2. Wax ka bedelis la sameeyay oo waafaqsan faqrada 1-aad ee qodobkan 50-aad ee Heshiiskan waxay dhaqan geli doontaa marka golaha guud ansixiyo laguna ogolaado sadex meelood laba meelood ahaan aqlabiyada Dawladaha xubnaha ah

3. Marka wax ka bedelidi dhaqan gasho, waxa ay khusaynaysaa Dawladaha Xubnaha ah ee ogolaaday iyada oo dawladaha Xubnaha ah weli ay xidhayaan balan qaadyada kale ee Heshiiskan ka midka ahi iyo weliba dhammaan wax ka bedelidii la sameeyay mar hore ee ay ogolaadeen.

*Qoddobka 51aad*

1. Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay waxa loo keeni doonaa oo uu u qaybin doonaa dhammaan dawladaha qoraalka ay soo qoreen dawladaha ka biyo diiday markii ay ogolaanayeen ama ku soo biiriyeen heshiiskan.

2. Gowsqabsi aan la jaanqaadayn ujeedooyinka Heshiiskan lama ogolaan doono.

3. Ka biyo diidka waa laga noqo karaa marka la doono iyada oo ogaysiis qoraal ah la siinayo Xoghayaha Guudee Qaramada Midoobay isaga oo ka dib gaadhsiin doona dawladaha. Ogaynsiintani waxay dhaqan geli doontaa taariikhda uu ogaysiisku soo gaadho Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qodobka 52aad*

Dawladaha Xubnaha ahi way ka bixi karaan heshiiskan iyaga oo qoraal rasmi ah ku ogaysiinaya Xoghayaha Guud ee Qaramadqa Midoobay. Ka bixidu waxay dhaqan geli doontaa hal sanno ka dib marka Xoghayaha Guud helo ogaysiiska.

*Qodobka 53aad*

Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa u xil saran wadeeca tirka Heshiiskan.

*Qodobka 54aad*

Qoraalka rasmiga ah ee Heshiiskan ee ku qoran afafka Carabiga, Shiinaha, Ingiriisida, Faransiiska, Ruushka iyo Isbaanashka waa rasmi sharci ah waxana loo gayn doonaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

# Sharciyada Habka Ikhtiyaariga ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Caruurta ee Ka-qaybgalka Caruurta ee Dagaalada Hubaysan

***Waxaa Ansixayay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Tirsigiisu yahay 54/263, loona furay saxiix, ogolaansho iyo ku biiridba 25-kii May 2000***

DHAQAN GALKA HESHIISKA: 12 FEBRAAYO 2002, SIDA WAAFAQSAN QODOBKA 10-AAD

*Dawladaaha Xubnaha ka ah Habkani,*

*Iyagoo ay dhiirigalinayso* taageerada Heshiiska Xuquuqda Caruurta, muujiniya u heelanaanta baahsan ee jira kaasoo si adag loogu dadaalayo taageerida iyo illaalinta xuquuqda caruurta.

*Iyakoo mar kale adkaynaya* in xuquuqda caruurtu ay u baahan tahay illaalin gaara, iyo iyakoo ku baaqaya in si joogto ah kobcin loogu sameeyo xaalada caruurta si aan kala sooc lahayn, sidoo kalana horumarkooda iyo waxbarashadooda ay ku helaan xaalad nabad iyo amaan ah,

*Iyadoo ay dhibayso* dhaawaca iyo dhibaatada baahsan ee dagaalada hubaysan u leeyihiin caruurta, iyo raadka xilliga fog ee ay tani ku leedahay nabad waarta, amaan iyo horumar,

*Iyakoo canbaaraynaya* bartilmaameedsiga caruurta markay ay jiraan xaaladaha dagaalada hubaysan iyo weerarka tooska ah ee lagu qaado dadka uu illaaliyay sharciga caalamiga ah, kuwaaso ay ku jiraan meelaha si guud leh joogis caruureed oo muuqata, sida dugsiyada iyo goobaha caafimaadka,

*Iyakoo xusaya* in ogolaanshaha Xeerka Maxkamada Danbiyada Caalamiga ah (Statute of the International Criminal Court) iyo, si gaar ah, ku daristeeda inay tahay danbi dagaal in la raafo/ qafaalo ama ciidan loo qorto wax ka hooseeya da'ada 15 sano ama in iyaka loo isticmaalo inay si firfircoon uga qayb galaan cadaawadaha dagaalada hubaysan ee caalamiga ah iyo kuwa aan caalamiga ahayn,

*Iyakoo tixgalinaya,* sidaa daraadeed, in si dheeraad ah loo xoojiyo fulinta xuquuqaha lagu aqoonsaday Heshiiska Xuquuqda Caruurta inay jirto baahi ku saabsan kor u qaadista ka ilaalinta caruurta in laga qayb galiyo dagaalada hubaysan,

*Iyakoo xusaya* in qodobka 1aad ee Heshiiska Xuquuqda Caruurtu uu si gaar ah u xusayo, iyadoo la raacayo ujeedooyinka Heshiiskaas, in ilmo loola jeedo bani'aadam kasta oo ka hooseeya da'da 18 sano ilaa, si waafaqsan sharciga lagu dabaqo ilmuhu, uu sheegay in qaangaadhka lagu gaadhayo ka hor,

*Iyadoo ay ka dhaadhacsan tahay* in habraac ikhtiyaari ah oo raacsan Heshiisku uu kor u soo qaadi karo da'da ay suuragalka tahay in qof loo qorto ciidamada iyo ka qaybgalkooda cadawaadahu ay wax ku oola ugu soo biirin doonto fulinta mabda'a ah in sida ugu wanaagsan danta ilmuhu ay tahay mudnaanta koowaad dhamaan taalaabooyinka khuseeya caruurta,

*Iyakoo xusaya* in Heshiiska Caalamiga ah ee lix iyo labaatanaad ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas ee December 1995 (International Conference of the Red Cross and Red Crescent in December 1995) uu soo jeediyay, iyakoo dhinac iska dhigaya, in dhinacyada dagaal ka dhexeeyo ay qaadaan talaabo kasta oo suuragal ah si loo hubiyo in caruurta ka yar da'da 18 sano aanay qayb ka noqon cadaawadaha,

*Iyakoo soo dhowaynaya* ogolaanshaha loo dhan yahay, ee June 1999, ee Heshiiska Ururka Shaqaalaha Caalamiga ah Tr. 182 ee ku saabsan Mamnuucida ka Qaadista Talaabo Degdeg ah Cidhibtirida Noocyada ugu Xunxun ee Shaqaalaynta Caruurta (International Labour Organization Convention No. 182 on the Prohibition and Immediate Action for the Elimination of the Worst Forms of Child Labour), kaasoo mamnuucaya, in dhinac la iska dhigo, shaqaalaynta qasabka ama xooga ah ee caruurta si loogu adeegsado dagaalada hubaysan,

*Iyakoo canbaaraynaya inta ugu badana ka werwersan* shaqaalaynta, tababarida isu adeegsiga caruurta colaadaha gudaha wadanka iyo meelaha ka baxsan xuduudaha ee kooxaha hubaysan ee aan ka tirsanayn ciidamada qalabka sida ee dal, iyo iyakoo aqoonsanaya mas'uuliyada kuwa shaqaalaysiista, tababara una isticmaala caruurta ujeedadan,

*Iyakoo maskaxda ku haya* waajibka saaran dal kasta oo xubin ka ah dagaal hubaysan inuu u hogaansamo qodabada ku jira sharciyada caalamiga ah ee dagaalada,

*Iyakoo adkaynaya* in Habkani waxyeelo ku ahayn ujeedooyinka iyo mabaa'diida ku jira Axdiga Qaramada Midoobay, uu ku jiro qodobka 51aad, iyo caadooyinka sharciga dagaalada,

*Iyakoo xusuusan* in xaaladaha nabada iyo amaanku ay ku dhisan yihiin xaqdhawrida buuxda iyo mabaa'diida ku jira Axdiga iyo u-hogaansanaanta heshiisyada la dabaqo ee xuuquuqda bani'aadamku ay muhiim u yihiin amaanka caruurta, gaar ahaan xilliyada lagu gudo jiro dagaalada hubaysan iyo qabsashada shisheeyaha,

*Iyakoo aqoonsan* baahiyaha gaarka ah ee caruurtaas kuwaasoo si gaara ugu nugul shaqaalaynta ama u isticmaalida colaadaha kuwaasoo lid ku ah Habkan kuwaas oo ay keenayaan heerkooda dhaqaale ama bulshadeed ama jinsi,

*Iyakoo maskaxda ku haya* baahida iyadoo la eegayo saldhiga sababaha dhaqaale, bulshadeed, iyo siyaasadeed ee ka qaybgalinta caruurta dagaalada hubaysan,

*Iyakoo ay ka dhaadhacsan tahay* baahida loo qabo xoojinta caalamiga ah ee fulinta Habkan, sidoo kalana dib u dajinta jidheed iyo nafsadeed iyo dib u dhexgalinta caruurta ee bulshada kuwaasoo ah dhibanayaasha dagaalo hubaysan,

*Iyakoo dhiirigalinaya* ka qaybgalka bulshada iyo, si gaar ah, caruurta iyo caruurta dhibanaha ah faafinta barnaamijyo warbaahineed iyo aqooneed ee khuseeya fulinta Habraaca,

*Waxay ku heshiiyeen sidan soo socota:*

### *Qodobka 1aad*

Dawladaha Xubnaha ah waxay qaadi doonaan dhamaan talaabooyinka suura galka ah si loo hubiyo in xubnaha ciidamadooda ee aan gaadhin da'da 18 sano aanay si toos ah uga qayb qaadan colaadaha,

### *Qodobka 2aad*

*Dawladaha Xubnaha* waxay xaqiijin doonaan in dadka aan gaadhin da'da 18 sano aan si qasaba loogu qoran ciidamada qalabka sida,

### *Qodobka 3aad*

1. Dawladaha Xubnaha ah waxay soo jeedin doonaan da'da ugu yare e shaqaalaynta mutadawacnimada ah ee dadka ku biiraya ciidamada dawladaha kaasoo lagu dhigay qodobka 38aad, faqrada 3aad, ee Heshiiska Xuquuqda Caruurta, iyadoo lagu xisaabtamayo mabaadii'da ku jira qodobkaas isla markaana aqoonsanaya sida ku cad Heshiiska in dadka ka hooseeya 18 sano ay xaq u leeyihiin illaalin gaar ah.

2. Dawladaha Xubnaha ah waxay dhigi doonaan qoraal waajib ah marka la ansixiyo ama lagu biiro Habkankaasoo jaan goynaya da'da ugu hooseeysa taasoo ogolaan doonta shaqaalaysiin mutadawacnimo ah ee ciidamadooda xooga iyo cadaynta Heshiisyada Waaweyn ee Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha ee la xidhiidha cadaymaha la qaatay si loo hubiyo in shaqaalaysiintaa aan xoog ama qasab lagu samayn.

3. Dawladaha Xubnaha ah ee ogol shaqaalaysiin mutadawacnimo ah oo lagu galayo ciidamadooda qaranka ee ka hooseeya da'da 18, ugu yaraan waxay ogolaanayaan:

   (a) In shaqaalaysiintaasi tahay mid si sax ah oo mutadawcnimo ah;

   (b) In shaqaalaysiintaasi tahay mid ku dhacday ogolaanshaha waalidka qofka ee la wargaliyay ama illaaliyihiisa sharci;

   (c) In dadka sidaas oo kale ah si buuxda looga wargaliyay waajibaadka ku jira adeega ciidan ee sidaas oo kale ah.

(d) In dadka sidaas oo kale ah ay keenaan cadayn la isku halayn karo oo da'da ah, kahor ogolaanshaha galista adeega ciidan qarameed.

4. Dawlad kasta oo xubina waxaa laga yaaba inay xoojiso ogolaanshaheeda xilli kasta, waxayna arintaas wargalin ahaan ku hagaajinaysaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, kaasoo ku wargalin doona dhamaan Dawladaha Xubnaha ah. Wargalimaha sidaas ah waxay dhaqan gali doonaan taariikhda uu helay Xoghayaha Guud.

5. Shardiga ah in la soo qaado da'da ee ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan kuma dabaqmayo dugsiyada ku hawlgala ama ku hoos jira gacan ku haynta ciidamada Dawladaha Xubnaha ah, si illaalinaysa qodobada 28 iyo 29 ee Heshiiska Xuquuqda Caruurta.

*Qodobka 4aad*

1. Kooxaha hubaysan ee ka duwan ciidamada Dawladaha waa in aanay, duruuf kasta oo jirta, shaqaalaysiin ama u isticmaalin colaadaha dadka ka hooseeya da'da 18 sano jir.

2. Dawladaha Xubnaha ahi waxay qaadi doonaan dhamaan taalaabooyinka suura-galka ah si ay uga hortagaan shaqaalaynta iyo adeegyada noocan oo kale ah. Waana in ay qaadaan taalaabooyinka sharci ee laga maarmaanka u ah mamnuucida iyo danbiyaynta falalka sidaas oo kale ah.

3. Dabaqida qodobkan ku hoos jira Habkan raad kuma samayn doono xaalada sharci ee xubin kasta oo qayb ka ah dagaal hubaysan.

*Qodobka 5aad*

Ma jiro Habkan wax loo qaadan doono inuu yahay mid ka hor imanaya qodobada ku jira sharica Dawlad Xubin ah ama Sharci Bani aadanimada oo Caalami ah kaasoo taageeraya ka dhabaynta xuquuqda caruurta.

*Qodobka 6aad*

1. Dawlad kasta oo Xubin ah waxay qaadi doontaa dhamaan talaabooyinkan sharci, maamul iyo talaabooyinkan kale si loo hubiyo fulinta wax ku oolka ah iyo dhaqangalinta qodobada Habkan ee uu awooda ku dhex leeyahay.

2. Dawladaha Xubnaha ah waxay xil iska saarayaan inay ka dhigaan mabaa'diida Habkan mid si baahsan loo yaqaano iyo inay sida ugu haboon ugu dhiirigaliyaan, dadka waaweyn iyo caruurta si isku mid ah.

3. Dawladaha Xubnaha waxay qaadi doonaan dhamaan talaabooyinka suura galka ah si loo hubiyo in dadka ku hoos jira maamulkooda, ee si lidi ku ah Habkan, loo galiyay ciidamada ama loo adeegsaday colaado, in laga ruqseeyo ciidamada ama in loo daariyo hawlo kale. Dawladaha

Xubnaha ah, markay suuragal noqoto ee ay tahay lagama maarmaan, u fidin doonaan dadkaas dhamaan kaalmada ku haboon kabashada/ baxnaaninta jidhkooda iyo dhimirkoodaba iyo soo dhexgalkooda bulshada.

*Qodobka 7aad*

1. Dawladaha Xubnaha ah waxay iska kaashan doonaan meel marinta Habkan, oo ay ku jirto ka hortagida fal kasta oo lid ku ah Habkaniyo dib u dejinta iyo dib u dhexgalka bulshada ee dadka dhibnayaasha u ah falalka lidka ku ah Habkan, oo ay ku jirto in loo maro iskaashi farsamo iyo taageero maaliyadeed. Taageerada sidaasoo kale ah iyo iskaashiga waxaa qaban doonaa iyadoo iskaashi lala yeelanayo Dalalka Xubnaha ah ee khusayso iyo ururada kale ee caalamiga ah ee xidhiidhka la leh.

2. Dawladaha xubnaha ee taagan meel ay arintaas ka sameeyaan waxay u fidin doonaa iyakoo u maraya barnaamijyada dhinacyada badan iyo kuwa laba dhinaclaha ah, ama, salka u dhigaya, iyakoo u maraya taageero maaliyadeed si waafaqsan xeerarka Golaha Guud ee QM.

*Qodobka 8aad*

1. Dawlad kasta oo Xubin ah wuxuu u gudbin doonaa, laba sano gudahood marka uu ku dhaqan galo Habraacina Dawladaas Xubinta ah, warbixin ku so socota Guddiga Xuquuqda Caruurta, isagoo siinaya xog buuxda oo ku saabsan talaabooyinkan uu qaaday si uu u fuliyo qodobada Habkan, oo ay ku jiraan talaabooyinkan la qaaday si loo meelmariyo qodobada ka qaybgalka iyo shaqaalaysiinta.

2. Gudbinta warbixintaas buuxda waxa ay Dawlad kasta, oo xubin ahi, ku dari doontaa warbixinada [iyadu] ay u gudbinayso Guddiga Xuquuqda Caruurta, si waafaqsan qodobka 44aad ee Heshiiska, warbixin kasta oo dheeraada oo la xidhiidha meelmarinta Habkan. Dawladaha kale ee Xubnaha ah Habkanwaxay u gudbin doonaan warbixin shan sano oo kasta.

3. Guddiga Xuquuqda Caruurtu waxaa laga yaabaa inuu ka codsado Dawladaha Xubnaha ah warbixin dheeraad ah oo la xidhiidha meelmarinta Habkan.

*Qodobka 9aad*

1. Habraacani wuxa uu u furan yahay saxiixa Dawlad kasta oo qayb ka ah Heshiiska ama saxiixday.

2. Habraacin wuxuu u yaalaa ansixin, waxa kale oo uu u furan yahay ku biirista Dawlad kasta. Waxana xeerarka ogolaanshaha iyo ku biirista la dhigayaa xafiiska Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

3. Xoghayaha Guud, awoodiisa ah dhigaha Heshiiska iyo Habraaca, wuxuu ku wargalin doonaa dhamaan Dawladaha Xubnaha ka ah Heshiisku iyo dhamaan Dawladaha saxiixay Heshiiska qayb kasta oo cadayn ah taasoo waafaqsan qodobka 3aad.

*Qodobka 10aad*

1. Habkani wuxuu dhaqan gali doonaa sedex bilood ka dib marka la dhigo habka tobnaad ee ogolaansho ama ku biiris ah.

2. Dawlad kasta oo ansixisa Habkan ama ku biirta ka dib marka uu dhaqan galo, Habraacina wuxuu ku dhaqan gali doonaa bil ka dib taariikhda dhigista habkiisa ansixineed ama ku biiris.

*Qodobka 11aad*

1. Dawlad kasta oo xubin ah way ka laaban kartaa Habkan xilli kasta iyadoo taas ku samaynaysa wargalin qoraal ah oo ku socota Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, kaasoo ka dib ku wargalin doona Dawladaha kale ee Xubnaha ka ah Heshiiska iyo dhamaan Dawladaha saxiixay Heshiiska. Ka laabashadu waxay dhaqan gali doontaa sanad ka dib helistii wargalinta Xoghayaha Guud. Hadii, si kastaba ha ahaatee, marka uu dhamaado sanadkaasi Dawlada Xubinta ah ee ka laabanaysa ka qayb gasho colaad hubaysan, ka laabashadu ma dhaqan gali doonto ka hor inta aanay dhamaan colaada hubaysan.

2. Ka-laabashadaasu raad kuma yeelan doonto in laga dhaafo Dawlada Xubinta ah waajibaadkeeda ku jita Habkan wixii khuseeya fal kasta oo dhaca ka hor taariikhda ka laabashadu dhaqan gasho. Mana noqonayso ka laabashadaasi mid khatar ku ah si kastoo ay noqoto tixgalinta socotay ee arin kasta taasoo hore tixgalin uga haysatay Guddiga taariikhda ay ka laabashadu noqoto mid dhaqangal ah.

*Qodobka 12aad*

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxaa laga yaabaa inay soo jeediso wax ka badal isla markaana ay ka diiwaan galiso Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Isla markaana, Xoghayaha Guud wuxuu u gudbin doonaa wax ka badalka la soo jeediyay Dawladaha Xubnaha ah, oo ay la socoto codsi ah inay tilmaamaan inay doonayaan shir Dawladaha Xubnaha ah ka yeeshaan ujeedaduna tahay tixgalinta iyo u codaynta soo jeedimahaas. Haday dhacdo, mudo afar bilood gudahood ah oo ka bilaabanaysa taariikhdii xidhiidhka, in sedex meelood meel ee Dawladaha Xubnaha ah ay danaynayaan shir sidaas ah, Xoghayaha Guud wuxuu isugu yeedhi doonaa shirkaas oo hoos imanaya Qaramada Midoobay. Wax ka badel kasta oo ay qaataan inta badan Dawladaha Xubnaha ah ee jooga kana codeeyay shirka waxaa loo gudbin doonaa Golaha Guud si uu u ansixiyo.

2. Wax-ka-badal la qaatay loona ansaxiyay si waafaqsan faqrada 1aad ee qodobkan wuxuu dhaqan gali doonaa marka uu ansixiyo Golaha Guud ee Qaramada Midoobay isla markaana ay aqbalaan laba meelood meel Dawladaha Xubnaha ah.

3. Marka kaabidu dhaqan-gasho, waxay waajib ku noqonaysaa Dawladaha Xubnaha ka ah ee aqbalay wax baladkan. Balse Dawladaha kale ee xubnaha ah waxa ku waajibaya oo kaliya qaynuunada kale ee Habraacan hada, iyo kaabid/wax ka badal kasta oo ay hore u aqbaleen.

*Qodobka 13aad*

1. Habkani, oo qoraaladiisu ay yihiin carabi, shiinays, ingiriisi, faransiis, rush, iyo isbaanish waa kuwo si siman oo sax ah, waxaana la dhigo doonaa aarkiifiyada Qaramada Midoobay.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu u gudbin doonaa nuqulo tasdiiqsan oo Habkan ah dhamaan Dawladaha Xubnaha ka ah Heshiiskan iyo dhamaan Dawladaha Saxiixay Heshiiska.

# Sharciyada Habka Ikhtiyaariga ee Heshiiska Xuquuqda Caruurta ee La Xidhiidha Iibka Caruurta, Ka Ganacsiga Jidhka Caruurta, iyo Caruurta loo Adeegsado Sawirada Jinsiga

***Waxaa Ansixayay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Tirsigiisu yahay 54/263, loona furay saxiix, ogolaansho iyo ku biiridba 25-kii May 2000***

DHAQAN GALKA HESHIISKA: 18 JANAAYO 2002, SIDA WAAFAQSAN QODOBKA 14-AAD

*Dallka Xubnaha ka ah Habdhaqankan iyakoo,*

Tixgalinaya, si in badan loo gaadho ujeedooyinka Habraaca Xuquuqda Caruurta iyo fulinta qodobadiisa 1, 11, 21, 32, 33, 34, 35, iyo 36, waxaa haboonaan lahayd in la balaadhiyo taalaabooyinka ay Dalalka Xubnaha ah inay qaadaan si ay u xoojiyaan ka illaalinta carruurta iibka caruurta, ka ganacsiga jidhka carruurta iyo caruurta loo adeegsado filimada jinsiga,

Sidoo kale isagoo tixgalinaya in Habraacka Xuquuqda Caruurtu uu aqoonsan yahay in xaqa carruurta laga illaaliyo duudsi dhaqaale iyo inuu qabto shaqo kasta oo u muuqata inay tahay mid khatara ama in la faragaliyo waxbarashada carruurta, ama khatarta ku ah jidhka ama caafimaadka carruurta, maskaxiyan, nafsad ahaan, niyad ahaan ama horumar bulashadeed,

Si adag uga werwersan korodhka baaxada dhoofinta caalamiga ah ee caruurta ujeedeeduna tahay iibka caruurta, ka ganacsiga jidhka caruurta, iyo caruurta loo adeegsado filimada jinsiga,

Si qoto dheer u danaynaya faafitaanka iyo sii socoshada dalxiiska jinsiga/galmada, kaasoo ay caruurtu si gaar ah ugu nugul yihiin, uuna ka dhigan yahay mid kor u sii qaadaya iibka caruurta, ka ganacsiga jidhka caruurta, iyo caruurta loo adeegsado filimada jinsiga,

Aqoonsanaya in tiro ka mid ah gaar ahaan kooxaha nugulka ah, oo ay ku jiraan hablaha caruurta ah, ay khatar weyn ugu sugan yihiin ku xadgudub jinsi, iyadoo aan hablaha caruurta ah aan si sugan loogu darin dadka tacdiga jinsi loo gaysto,

Dareensan helitaanka sii kordhaya ee filimada jinsiga caruurta ee aalada internetka iyo tiknoolajiyadaha kale ee socda, isla markaana xusuusan Shirka Caalamiga ah ee la Dagaalanka

Filimada Jinsiga Caruurta ee aalada internetka (Vienna, 1999) (International Conference on Combating Child Pornography on the Internet (Vienna, 1999), iyo, gaar ahaan, gabagabadiisa oo ugu baaqaya aduunka oo dhan in danbi laga dhigo soo saarista, qaybinta, dhoofinta, gudbinta, soo dejinta, haysiga si ula kaca, iyo xayaysiinta filimada jinsiga caruurta, isla markaana ku nuuxnuuxsanaya muhiimada iskaashi dhow iyo wadshaqayn dhex marta Dawladaha ganacsiga Internetka,

Rumaysan in dabargoynta iibka caruurtka, ka ganacsiga jidhka caruurta, iyo caruurta loo adeegsado filimada jinsiga la fududeeyo iyadoo la qaadanayo hab loo dhamaystiran, waxna laga qabanayo arimaha keena, oo ay ku jirto horumar la'aanta, saboolnimada, kala tagsanaanta dhaqaalaha, dhismaha aan sinaanta ahayn ee bulsho-dhaqaale, burburka qoyska, aqoon la'aanta, hayaanka magaalo-miyi, jinsi faquuqa, dhaqan jinsiyeedka dadka waaweyn ee mas'uuliyad la'aanta ah, hababka caadada ah ee waxyeelada leh, dagaalada hubaysan iyo dhoofinta caruurta,

Rumaysan in dadaalada kor loogu qaadayo wacyiga dadku ay yihiin kuwo loo baahan yahay si loo yareeyo dalabka iibsadayaasha ee iibka caruurta, ka ganacsiga jidhka caruurta, iyo caruurta loo adeegsado filimada jinsiga, iyo iyagoo rumaysan muhiimada xoojinta iskaashi ay dunida ah oo u dhexeeya dhamaan jilayaasha iyo in kor loo qaado dhaqan galinta sharciga heer qaran,

Xusaya qodobada ku jira habraacyada sharci ee caalamiga ee la xidhiidha illaalinta caruurta, oo ay ku jiraan Habraacka Hague ee Illaalinta Caruurta iyo Iskaashiga la Xidhiidha Sharciyada Dawladaha, iyo Habraacka Caalamiga ee Hague ee Dhinacyada Madaniga ah ee Afduubashada Caalamiga ah ee Caruurta, Habraaca Hague ee Awoodaha Sharciyada, Sharciga la Dabaqayo, Aqoonsiga, Fulinta iyo Iskaashiga ee Dhinaca Masuuliyada Waalidnimo, iyo Talaabooyinka Illaalinta Caruurta, iyo Habraacka Ururka Caalamiga ah ee Shaqaalaha Tirsigiisuna yahay 182 ee Reebista iyo Taalbooyin Degdeg ah in laga Qaado Dabargoynta Hababka ugu Xun ee Shaqaalaha Caruurta.

*Ayaa waxaa la isku raacay:*

### *Qodobka 1aad*

Dawladaha Xubnaha ka ahi waa inay mabnuucaan iibka caruurta, ka dhilaysiga ganacsiga iyo sawirada jinsi ee ku cad Habkan.

### *Qodobka 2aad*

Iyadoo loola gon leeyahay ujeedada Habkan:

(a) Iibka caruurta waxaa loola jeedaa fal kasta ama dhaq-dhaqaaq carruurta lagu wareejinayo qof kasta ama qos kasta oo qof kale ku wareejinayo iyadoo ujeedadu tahay lacag ama arin kasta oo kale.

(b) Ka dhilaysiga carruurta waxaa loola jeedaa u adeegsiga illmo hawl galmo oo laga helayo lacag ama arin kale oo kasta.

(c) Sawirada jinsi waxaa loola jeedaa muujin kasta, wax kastaba hala isticimaalee, taasoo carruurta u ka qayb qaadanyo mid dhan ama mid mala awaal ah oo la soo bandhigayo hawl galmo ama muujin kasta ee qaybta jinsiga galmada ee carruurta oo looga gon leeyaay ujeedo galmo.

*Qodobka 3aad*

1. Dawlad kastaa waa inay xaqiijisaa, sida ugu yar xeerarkan hoos ku qoran, taasoo ay tahay in si buuxda loogu qoro xeerka ciqaabta ha noqoto in denbiyadaas lagu galay wadanka guddihiisa ama mid ka baxsan wadanka ama ay galeen shaqsiyaad ama kooxo;

(a) Iyadoo loo eegayo iibka caruurta sida ku qeexan qodobka 2aad:

(i) U bandhiga, keenida, aqabalida, si kastaba ha ahaatee, carruurta iyadoo ujeedadu tahay:

(ii) Ka ganacsiga jinsi ee carruurta;

(iii) In laga wajeejiyo xubnaha caruurta faa'iido darteed;

(iv) In la gelyo carruurta shaqo qasab ah;

(v) Si aan haboonayn in loogu qalqaaliyo si uu uga noqdo dilaal una korsado caruur si uu ugu xadgudbo xeerarka caalamka ee loo adeegsado korsiga carruurta;

(b) U bandhiga, helida, siinta ama in caruur loo adeegsado sidii loogu galmoon lahaa (galmo-caruureed) sida ku cad qodobka 2aad;

(c) Soo saarista, qaybinta, baahinta, soo dejinta, dhoofinta, u bandhiga, iibka ama haysashada ujeedooyinka sare ee sawirada jinisga ee ku cad qodobka 2aad.

2. Iyadoo loo hogaansamayo qodoboda dawladaha dinaca ka ah ee sharciga dalka, sidoo kale waxaa loo adeegsnayaa isku day lagu doonayo in lagu galo fal kasta oo xeerarkan ama caawinta ama ka qayb qaadashada falal kasta oo heshiiskan ah.

3. Dawlad kastaa waa inay suurto galisaa inay ku ciqaabto denbiyadaas iyadoo marinaysa ciqaabta ku haboon, tixgelinaysana culayska denbiga.

4. Iyadoo la waafaqayo qodobada xeerka dalka, dawlad kasta oo dhinac waa inay talaabooyin ka qaadaa, hadii ay haboon tahay, inay aasaasto masuuliyadaha dadka sharciga ah ee galay denbiyada sida ku cad faqrada 1aad ee qodobkan hada. Iyadoo la waafaqayo mabaadiida sharci ee aasaasiga ee dawlada dhinaca ka ah, loo qasban karo masuuliyada dadka sharciga ah mid ciqaabeed, medeni ama maamul.

5. Dawlada dhinac ah waa inay qaadaa talaabooyinka ku haboon ee sharci, maamul si loo hubiyo in dhamaan dadka lugta ku leh ee korinta carruurta si waafaqsan heshiiskan ee loo adeegsanayo xeerarka caalmiga ah sharciga ah.

*Qodobka 4aad*

1. Dawlad kastaa waa inay talaabooyinkaas ka qaadaa sida lagama maarmaanka u ah si loo aasaaso awoodeeda ay ku leeday denbiyada ee lagu soo sheegay qodobka 3aad, tuduciisa 1aad, marka denbiyada lagu galo xudeeda ama markab dushiisa ama diyaarad ka diiwaan gashan dalkaas.

2. Dawlad kastaa waxay ka qaadi kartaa talaabooyin suurtagalka ah si loo sugo awoodeeda ku aadan denbiyada lagu soo sheegay qodobka 3aad, faqrada 1aad ee xaaladahan soo socda:

(a) Marka denbiilaha lasoo eedeeyey uu yahay muwaadin dalkaas ama qof si joogto ah u degan xuduuda dalkaas;

(b) Marka dhibanuhu uu yahay muwaadinka dawladaas.

3. Dawlad kastaa waa inay ka qaadaa talaabooyinkaas sida ugu suurtogalka ah si loo sugo awoodeeda ay ku leedahay sida denbiyada kor lagu soo sheegay marka denbiilaha lasoo eedeeyey uu ku sugan yahay xuduudeeda, balse aanay dib ugu celin dambiilaha dawlad kale oo dhinac ka ah Habkan, sababtoo ah in denbiilahu yahay muwaadin ka mid ah muwaadineenteeda.

4. Habkan xaadirka ah meesha kama saarayo denbi ciqaabeed kasta ee loo adeegsaday si waafaqsan sharciga gudaha.

*Qodobka 5aad*

1. Denbiga lagu soo sheegay qodobka 3aad, faqrada 1aad, waxaa loo qaadanayaa in uu ku jiro denbiyada dambiilayaasha la isku celin karo, kana mid noqonaya heshiis kasta oo khuseeya isku-celinta dambiilayaasha oo ay wada galaan Dawladaha Xubnaha ka, isla markaana waa in sidan oo kale loogu tixgaliyo heshii kasta oo ay dawladahu gadaal ku heshiiyaan, sida waafaqsan shuruudaha ku cad habraacyada.

2. Hadii ay dawlada dhinaca ka ahi ay ku xidho shuruud jiritaanka Habka kana hesho codsi dibu celin dawlad kale taasoo aan lahayn Habka dibu celin, waxay tixgelin kartaa heshiiskan sidii sabab sharci oo ay dib ugu celinayso denbiyadaas. Dib u celintu waa inay waafaqdaa shuruudaha uu qaanuunku u dhigay ee ay dawladi codsato.

3. Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan kuma xidhi karaan isu celinta denbiilayaasha shuruud ku aadan jiritaanka heshiis sugaya in dambigaasu yahay dambi ka mid ah kuwa dambiilayaasha la isku celiyo oo u dhexeeya labada dawladood, isla markaana waafaqsan sharuudaha sharciga ee wadankaasi soo codsaday.

4. Marka la tixgalinayo isu celinta dambiilayaasha ee dawladaha, waa in dambiyadan loo tixgaliyaa, maaha halkii ay ka dhaceen oo kaliya balse xuduud/dhul kasta oo laga rabo in dawlada garsoorkeedu gaadho sida waafaqsan qodobka 4-aad.

5. Hadii isu celinta denbiilayaasha loo sameeyo si la xidhiidha denbiga lagu soo sheegay qodobka 3aad, tuduca 1aad, hadii aanay dawladu dib u celin ama aanay celin doonin iyadoo ku denbiile qaran, dawladu waa inay qaadaa talaabooyinka ku haboon si ay ugu gudbiso dacwada masuuliyiinta awooda u leh si denbiga loogu oogo.

*Qodobka 6aad*

1. Dawlada habraaca dhinaca ka ahi waa inay u samaxaan midba midka kale talaabada ugu weyn ee ay u taageerayaan baadhista ama isu celinta dacwadaha la xidhiidha denbiilayaasha ee loo keenay denbiyada ku cad qodobka 3aad, tuduca 1aad, oo ka mid yihiin ka caawinta si loo helo cadaymo marka lasoo bandhigayo dacwadaha lagama maarmaanka u ah.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan waa inay fuliyaan waajibaadyada ku cad tuduca 1aad ee qodobkan si waafqsan habraac kasta ama taloobooyinka kale iyagoo iskaashi iyaga u dhexeeya arintaas ka samaynaya. Haddii uu habraacyadaasi meesha ka maqan yahay. Dawladaha Xubnaha ka ah waa inay ogolaadaan inay iska kaashaadan si waafaqsan xeerarkooda.

*Qodobka 7aad*

Dawladaha Habkan dhinaca ka ah waa inay, u hogaansamaan si waafaqsan qodobada xeerka dalkooda:

(a) Waa inay talaabooyin ay geysanayaan ka qaadaan qabashada ama la wareegida ku haboon ee:

  (i) Alaabada sida walxaha, hantida iyo aqabka kale ee loo adeegsaday in lagu galo ama lagu fududeeyo denbiyada ku cad Habkan;

  (ii) Faa'iida laga dheefay/kasoo baxday denbigaas;

(b) Inay fuliyaan codsiyada ka yimaada dawladaha kale ee dhinaca ka ah Habkan ee ku saabsan qabashada, la wareegida alaabada ama faa'iidooyinka lagu sheegay tuduc hoosaadka sare ee (a);

(c) Inay talaabooyin ka qaadaan sida xidhida, ha noqoto mid ku meel gaadha ama joogto ah taasoo ah goobaha lagu galay denbiyadaas.

*Qodobka 8aad*

1. Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan waa inay aqbalaan/ansixiyaan talaabooyinka ku haboon ee lagu ilaalinayo xuquuqaha iyo danaha caruurta dhibanaha ah ee leh dhaqadama

lagu manuucayo sida ku cad heshiiskan heer kastaba ha ahaadee ee maraya habka cqiaabta, gaar ahaan inay:

(a) Aqoonsadaan u nuglaanta caruurta dhibnaha xaaladaha uu qabatimayo si loo aqoonsado baahida gaar ka ah oo ka mid tahay baahida khaaska sidii marag oo kale inuu noqdo;

(b) In carruurta dhibanaha ah laga wargaliyo xuquuqdooda, doorkooda iyo xadkoodaba, lana mudeeyo si loo wado dhegeysiga dacwadooda;

(c) In loo ogolaado fikirkooda, baahidooda ku saabsan carruurta dhibanaha ah si loo dhegeysto loona tixgelyo dacwada gudaheeda hadii danaha carruurta la waxyeelayo si ku haboon hab dhaqanka xeerka dalka;

(d) In loo fidiyo adeegyo taageero ah oo ku haboon caruurta dhibanaha ah ee dhamaan hanaan-socodka sharciga;

(e) In la ilaaliyo, hadba sida ay ku haboon tahay, ee dhinaca sirta ah iyo aqoonsiga carruurta dhibanaha ah, iyadoo la qaadayo talaabooyinkaas si waafaqsan xeerka dalka si looga fogaado baahinta macluumaadka ee keeni kara aqoosiga carruurta dhibanaha ah;

(f) In la siiyo, marka ay haboon tahay, nabagelyada carruurta dhibnaha ah iyo qooskoodaba iyo maragyada metelayaba si looga ilaaliyo cabsi gelin;

(g) In laga fogaado in la habsaamiyo go'aanada dacwadaha iyo fulinta amarada ama qaraarada ee siinaya magdhaw carruurta dhibnaha ah.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan waa inay xaqiijiyaan sugnaan la'aanta da'da dhabta ah ee dhibanaha, waa inaanay ka celin in lagu oogo denbi ciqaab, oo ay ku jiraan baadhitaano laaga gon leeyahay in lagu sugo da'da dhibanaha.

3. Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan waa inay xaqiijiyaan, marka ay mariniyaan nidaamka ciqaabeed caruurta kuwaasoo ah dhibanayaal denbiyo ku cad Habkan, danta carruurta waa inay noqotaa mundaanta koowaad.

4. Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan waa inay qaadaan talaabooyinka lagama maarmaanka u ah tababarka, gaar ahaan tababarka sharci iyo nafsiyeed, dadka la shaqeeya caruurta dhibanaha u ah denbiyada lagu mabnuucay sida ku cad habraacan.

5. Dawladaha Xubnaha ka ah, waa inay xaaladaha ku haboon, ku ansixiyaan/aqbalaan si loo dhowro nabad-qabka iyo sharafta dadka ama ururada ku hawlan ka hortigida, dhowrida iyo dhaqan-celinta carruurta dhibnaha u ah denbigaas.

6. Looma turjumi karo qodobkan si khatar ku ah ama aan la jaan qaadayn xuquuqaha eedaysnaha ee ku wajahan dhegeysi cadaalad ah oo eex la'aan ah.

*Qodobka 9aad*

1. Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan waa inay anxsixiyaan ama kor u qaadaan, hirgeliyaan, faafiyaana qaanuunka, talaabooyinka maamul, siyaasadeed iyo qorshayaasha lagaga hortegayo denbiyada lagu soo sheegay Habkan. Taxadar dheeraad ah waa in la siiyaa ilaalinta caruurta u nugul dhaqanadan.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan waa inay kor u qaadaan wacyigelinta dadweynaha dhamaantii oo ay ku jiraan caruurtu, iyadoo macluumaadka loo sii marinayo wado kasta oo jirta, waxbarashada, tababarka, ee ku saabsan talaabooyinka saamaynta xun ku leh denbiyada lagu soo dheegay heshiiskan. Marka ay fulinayaan waajibaadkooda ku cad qodobkan. Dawladaha Xubnaha ka ah waa inay dhiiri geliyaan ka qayb qaadashada bulshada, gaar ahaan, caruurta iyo carruurta dhibnaha ah, macluumaadkaas waa inay noqdaan mid waxbarasho, qorshayaal tababar oo ku jiraan heer caalami.

3. Dawladaha Xubnaha ka ah waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka muuqda ee looga gon leeyahay dhamaan taageerada la siinayo dhibanayaasha denbiyadaas oo ay ku jiraan dib ugu celinta buuxda ee bulshada iyo dibu kabasho buuxda oo jidheed iyo maskaxeed.

4. Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan waa inay xaqiijiyaan carruurta dhibanaha u ah denbiyada ee ku qeexan heshiiskan inay helaan habab ku haboon oo ay ku raadsanayaan iyagoo aan la takoorin, lagana siiyo magdhaw waxyeelada ka soo gaadha kuwa masuulka ka ah.

5. Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan waa inay qaadaan taloobooyinka ku haboon ee laga gon leeyahay in si wax ku ool ah lagu mabnuucayo soo saarinta, baahinta waxyaabaha lagu xayeeysiinayo denbiyada ku xusan Habkan.

*Qodobka 10aad*

1. Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka lagama maarmaanka ah ee kor loogu qaadayo iskaashiga caalamiga ah ee dhinacyo badan leh, goboleed iyo kuwo laba dhinac ah ee loogu talagalay ka hortaga, baadhista iyo baadhista, oogida iyo ciqaabida kuwa masuulka ka ah falalka ku saabsan iibka caruurta, ka-dhilaysiga caruurta, sawirada jinsiga iyo galmada carruurta ee dalxiisayaasha. Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan waa inay xoojiyaan iskaashiga u dhexeeya dawladaha, ha noqto mid qaran, caalami, hay'adaha aan dawliga ahayn iyo ururada caalamiga ahba.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan waa inay xoojiyaan iskaashiga caalamiga ah ee ay ku taageerayaan carruurta dhibanaha ah si ay uga soo kabtaan jidh-ahaan iyo nafsad ahaanba, dibna loogu celiyo looguna mideeyo bulshada.

3. Dawladahaa dhinaca ka ah waa inay kor u qaadaan iskaashiga caalamiga ah si loo wajaho sababta saldhiga u ah fakhrigaas iyo horumar la'aanta ee keenaysa inay caruurtu u nuglaadaan iibka caruurta, ka dhilaysiga caruurta, filimada jinsiga iyo ka dhilaysiga caruurta ee dalxiiska.

4. Dawladaha Xubnaha ka ah Habkan ee awooda u leh inay bixiyaan deeq maaliyadeed iyo kaalmooyin kale waa inay u sii mariyaan habraacyadii dhinacyada badnaa, goboleed, labada dhinac ama qorshayaal kaleba.

*Qodobka 11aad*

Waxba kama maanacayaan Habkan inuu saameyso qodobo kasta kuwaasoo aad ugu haboon in la xaqiijiyo xuquuqaha carruurta ee ay ku jiri karaan:

(a) Qaanuunka dawlada dhinaca ka ah Habkan;

(b) Xeerka caalamiga ah ee dhaqangalka ku ah dalkaas.

*Qodobka 12aad*

1. Dawlad walba oo dhinac ka ah Habkan waa inay gudbisaa laba sanadood gudahood kadib dhaqangalka Habkan ee dawlada gashay Habkan, waa inay warbixin u diraan guddiga ku saabsan xuquuqaha caruurta iyagoo siinaya warbixin dhamaystiran ee ku saabsan talaabooyinka ay ka qaaday hergelinta Habkan.

2. Kadib marka ay soo gudbiso warbixin dhamaystiran, dawlad kastaa waa inay ku dartaa warbxintaas loo gudbiyey guddiga xuquuqaha caruurta si waafaqsan qodobka 44aad ee Xeerka, warbxin kasta ee la xidhiidha hirgelinta Habkan. Dawladaha kale ee dhinaca ka ah Habkan waa inay soo gudbiyaan warbixin shantii sano ee kasta.

3. Guddiga xuquuqaha caruurtu waxa ay ka codsan karta Dawladaha Xubnaha ka ah warbixin dheeraad ah ee la xidhiidha hirgelinta/meel marinta Habkan.

*Qodobka 13aad*

1. Habkan waxaa uu u furan yahay saxeexa dawlad kasta taasoo qayb ka ah Heshiiskan ama saxeexday.

2. Habkan waa la ansixin karaa, waxaanu u furan yahay inay dawladuhu aqbalaan taasoo lagu kaydin doono xafiiska Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qodobka 14aad*

1. Habkani waxaa uu dhaqan gelayaa sadex bilood marka lagu kaydiyo maalinta tobnaad ee ansixinta ama dawlada dib kagaga biirtay.

2. Dawlad kasta oo ansixiysa Habkan ama aqabashaa isaga kadib marka uu dhaqan galo, Habkan waxaa uu dhaqangelyaa kadib hal bil maalinta ansixintiisa ama dib kaga biiridiisa la kaydiyo.

*Qodobka 15aad*

1. Dawlad kasta oo dhinac ka ah way ka bixi kartaa Habkan wakti kasta iyadoo ogeysiin qoraal ah siinaysa Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay kasoo kadib wargelinaya Dawladaha Xubnaha ka ah heshiiskan ka hor taariikhda ay ka bixidu noqoto dhaqangal.

2. Ka bixistaasi waxba ma yeelayso si kastaba ha noqotee arin kastoo mar hore ay tixgelinaysay guddidu ka hor taariikhda ka baxu noqonayso dhaqan gal. Sidoo kale ka-bixistaasi waxba uma dhimayso in lasii baadho/imtixaamo arin kasta oo Guddidu baadhiteenkeeda ku gudo jirtay kahor ka-bixitaanka.

*Qodobka 16aad*

1. Dawlad kastaa way soo jeedin kartaa wax ka bedel waxaanay ka diiwan gelinaysaa Xogahaya Guud ee Qaramada Midoobay. Xoghaya Guud waa inuu halkaa kala xidhiidhaa wax ka bedelka lasoo bandhigay iyadoo ay la socoto dawladaha xubnaha ka ah si loo tixgeliyo inay muujiyeen inay taageerayaan shirka dawladaha xubnaha ka ah si loo tixgeliyo u codaynta soo jeedinta. Hadii ay dhacdo, laga bilaabo afar bilood gudahood maalinta xidhiihkaas, ugu yaraan hal meelood oo sadex dawladaha xubnaha ka ah shirkaas, Xoghaya Guud ayaa hogaaminaya shirka kasoo hoos imanaya Qaramada Midoobay. Wax ka bedel kasta ee ay qabatimaan aqlabiyada Dawladaha Xubnaha ka ah ee kasoo xaadiray, isla markaana looga codeeyay shirka waa in loo gudbiyaa Xoghaya Guud si uu u ansixiyo.

2. Badalaad/ kaabid kasta oo la qabatimo sida waafaqsan faqrada 1-aad ee qodabkan hada, waxa uu dhaqan-gal noqonayaa marka uu ansaxiyo Golaha Guud ee Qaramada Midoobay, isla markaana ay aqbalaan aqlabiyada sadex meelood oo laba Dawladaha Xubnaha ka ah.

3. Marka kaabidu dhaqan-gasho, waxay waajib ku noqonaysaa Dawladaha Xubnaha ka ah ee aqbalay wax baladkan. Balse Dawladaha kale ee xubnaha ah waxa ku waajibaya oo kaliya qaynuunada kale ee Habraacan hada, iyo kaabid/wax ka badal kasta oo ay hore u aqbaleen.

*Qodobka 17aad*

1. Habkan, qaybtiisa Carabiga, Shiinaha iyo Ingiriisiga, Faransiiska, Ruuska iyo Isbaanishka waa isku mid, waana in la dhigaa xusuus dhowrka Qaramada Midoobay.

2. Xoghaya Guud ee Qarmada Midoobay waa inuu u gudbiyaa nuqulka saxda ah ee Habkan dhamaan dhamaan Dawladaha Xubnaha ka ah Heshiiskan iyo dhamaan Dawladaha saxeexay Heshiiskan.

# Axdiga Caalamiga ah ee Ilaalinta Xuquuqda Dhamaan Shaqaalaha Soogalootiga ah iyo Xubnaha ka-tirsan Qoysaskooda

***Waxaa lagu qabatimay Qaraarkii Golaha Guud ee Tirsigiisu yahay 45/158 EE 18 December 1990***

DHAQAN GALKA HESHIISKA: 1-DII JULY 2003, SIDA WAAFAQSAN QODOBKA 87 (1)

## GOGOLDHIG

*Dawladaha qaybta ka ah axdigan hadda ah,*

Iyadoo la tixgalinayo xeerarka ku xusan qoraalada rasmiga ah ee Qaramada Midoobay ee quseeya xuquuqda aadanaha, gaar ahaan Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha, Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka, Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda, Axdiga Caalamiga ah ee Dabar Goynta Dhammaan Noocyada Takooridda isirka ku dhisan, Axdiga Caalamiga ah ee Tirtiridda Dhamaan Noocyada Tagooridda lidka ku ah Dumarka iyo Axdiga Ilaalinta Xuquuqda Caruurta,

Iyadoo la tixgalinayo haddana dhammaan mabaadiida iyo halbeegyada ku xusan qoraalada quseeya ee u yaal Ururka Shaqaalaha Aduunka, gaar ahaan axdiga ka hadlaya Soogalootiga Shaqa doonka ah (No.97), axdiga quseeya soogalootiga ay soo wajahdo duruuf qallafsan iyo dhiirigalinta in loola dhaqmo hab u ogolaanaya (soo galootiga shaqeeya) in ay helaan fursado (shaqo) iyo la-macaamil wanaagsan oo loo siman yahay (No.143), talo soo jeedinta qusaysa soogalootinimada shaqo doonka ku salaysan (No.86), talo soojeedinta qusaysa soogalootiga shaqeeya (No.151), axdiga quseeya shaqada khasabka ah (No. 29) iyo axdiga quseeya joojinta shaqada khasabka ku dhisan (No. 105),

Iyadoo mar labaad hoosta laga xariiqayo muhiimadda ay xambaarsanyihiin xeerarka ku jira axdiga (caalamiga ah) ee la dagaalanka takooridda ka dhaca goobaha waxbarashada ee kasoo baxay ururka Qaramada Midoobay u qaabilsan Waxbarashada iyo Dhaqanka (UNESCO),

Iyadoo la tixraacayo axdiga la dagaalanka jirdilka iyo hab dhaqan kasta oo naxariis darro ah, kana baxsan insaaniyadda, ama meel ka dhac ku ah sharafta qofka bini aadamka ah, ama ciqaab

ku ah, baaqii afraad ee kasoo baxay shirkii Qaramada Midoobay ee ku saabsanaa ka hortagga danbiyada iyo lataacalidda danbiilayaasha, xeerarka qabanaya hab dhaqanka madaxda ama saraakiisha u xilsaaran sharci fulinta iyo axdiyada (heshiisyada) ka xeeran adoonsiga,

Iyadoo la xusayo in mid ka mid ah ulajeedooyinka Ururka Shaqaalaha Adduunka, sida ku xusan dastuurkooda, uu yahay ilaalinta danaha shaqaalaha marka laga shaqaalaysiiyo wadamo aan ahayn kuwii ay u dhasheen, isla mar ahaantaana maanka ku haya waaya aragnimada uu ururku uleeyahay arrimaha kusaabsan shaqaalaha soo galootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda,

Iyadoo la garwaaqsanyahay muhiimadda ay leedahay hawsha ay ka qabteen ururada kala duwan ee Qaramada Midoobay arrimaha quseeya shaqaalaha soo galootiga ah iyo xubnaha qoysaskooda, gaar ahaan hawsha uu qabtay guddiga uqaabilsan Qarama Midoobay xuquuqda aadamiga iyo Guddiga u-qaabilsan hurumarinta bulshada, iyo sidoo kale Ururka Qaramada Midoobay uqaabilsan Cunada iyo Beeraha (FAO), Ururuka Qaramada Midoobay uqaabilsan Waxbarashada iyo Dhaqanka (UNESCO) iyo Ururka Qaramada Midoobay uqaabilsan Caafimaadka (WHO), iyo ururada kale ee caalamiga ah,

Iyadoo oo la garwaaqsanyahay horumarka ay dawladaha qaar ka sameeyeen heer gobol, ama xiriirka heer labo dawladood u dhexeeya, dhanka ilaalinta xuquuqda shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskooda, iyo muhiimadda iyo faaiidada ay heshiisyada dhexmara labo dawladood ama dawlado badan uu arrinkan u leeyahay (ilaalinta xuquuqda shaqaalaha soogalootiga ah),

Iyadoo la ogsoon yahay muhiimadda iyo baaxadda ay leedahay ifi-faalaha soogalootinimada, taas oo taabanaysa malaayiin dad ah, saamayna ku yeelanaysa dawlado badan oo adduunka ah,

Iyadoo la ogsoon yahay saamaynta qulqulka shaqaalaha soogalootiga ah uu ku yeelanayo dawladaha iyo dadka ay qusayso, iyo dadaalka loogu jiro in la sameeyo xeerar horseedi kara is waafajinta (isu soo dhawaynta) fikirka dawladaha iyadoo loomarayo aqbalidda xeerarka asaasiga ah ee quseeya habka loola dhaqmayo shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskooda,

Iyadoo xisaabta lagu darsanayo xaaladda dayacanka ama nugaylka ah ee ay marar badan la kulmayaan (shaqaalaha soogalootiga ah) taas oo ay keenayso sababo dhawr ah oo ay ka mid tahay ka dheeraanshaha dalkii hooyo iyo caqabado kaga yimaada joogitaanka ay joogaan dalka markaas ay ka shaqaystaan,

Iyadoo la garawsanayo in xuquuqda shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskooda aan si ku filan loo aqoonsan waxna looga qaban meel kasta (adduunka), saasna loogu baahanyahay ilaalin caalaami ah si loo xaqiijiyo dawrista xuquuqda shaqaalaha noocaan ah,

Iyadoo xisaabta lagu darsanayo xaqiiqda ah in badi soo galootinimadu ay tahay tan usoo jiida dhibaatooyin halis ah qoysaska shaqaalaha soo galootiga ah iyo naftoodaba, gaar ahaan kala haantaawilifka (kala burburka) ku kala dhaca qoysaska,

Iyadoo la ogsoon yahay in dhibaatooyinka bini-aadamnimo ee soogalootinimadu ay sababto ay badi ugu halis badan tahay tan ay keento soogalootinimada sharci darrada ah, isla mar kaasna iyadoo lagu qanacsanyahay sida ay lagama maarmaan u tahay in la dhiiri galiyo qaadidda tallaabooyin habboon si looga hortago ama loo ciribtiro dhaq dhaqaaqyada qarsoon iyo tahriibta shaqaalaha soogalotiga ah loo tahriibiyo waddamo kale, iyadoo isla mar ahaantaana la iska xilsaarayo ilaalinta iyo dhawrista xuquuqda asaasiga ah ee ay shaqaalahaas leeyihiin.

Iyadoo la ogsoon yahay in shaqaalaha sida sharci darrada ah ku jooga dal aysan u dhalan marar badan lagu shaqaalaysto duruufo ka liita sida shaqaalaha kale loo shaqaaleeyo, taas oo ku qalqaalisa dadka shaqaalaha u baahan in ay baadi goob u galaan sidii ay ku heli la haayeen shaqaalaha noocaan ah ee jaban si ay faaiido badan oo xaq darro ah u helaan,

Iyadoo la ogsoon yahay in waxa joojin kara ku shaqaysiga xaq darrada ah ee loo gaysto shaqaalaha sharci darrada ku jooga dal kale, uu yahay in si wayn loo aqoonsado xuquuqda bini- aadamnimo ee asaasiga ah ee ay leeyihiin shaqaalaha soogalootiga ah, iyo in bixinta xuquuq dheeraad ah oo ay yeeshaan shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda sida sharciga ah dal kale ku jooga ay ku dhiirigalindoonto dhammaan shaqaalaha soogalootiga ah iyo dadka loo shaqeeyoba in ay xushmeeyaan xeerarka iyo hababka ay ansixiyeen, una hoggaansameen dawladaha ay qusayso (arrinta shaqaalaha soogalootigu),

Hadaba iyagoo ku qanacsan baahida loo qabo in la helo ilaalin caalami ah oo ku aadan xuquuqda dhammaan shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskooda, isla mar ahaantaana, hoosta ka xarriiqaya muhiimadda ay lee yihiin xeerarka gun dhigga ah iyadoo lagu qorayo axdi loo dhanyahay oo aduunyada oo dhan wada fuliso,

*Waxay dawladaha heshiiskan ku jiraa ku heshiiyeen qodobadan soo socda:*

# QEYBTA I

*Qodobka 1aad*

1. Axdigan waxa loo adeegsanayaa (ku fulayaa), marka laga reebo wixii kale oo khilaafsan oo gadaal laga xuso, dhammaan shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda iyadoo aan loo eegayn jinsi, midab, isir, diin iyo caqiido, mabda' siyaasadeed ama fikrad ay aaminsanyihiin, isirka ama dawladda ay ka soo jeedaan, da'da ay jiraan, xaaladdooda dhaqaale, hantiyeed, guur, halka ay ku dhasheen, ama xaalad kasta oo kale.

2. Axdigani waxa uu dhaqan galayaa (la adeegsanyaa) inta shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu ku guda jiraan hawsha soo galootinimada, taas oo ay ku jirto xilliga isu diyaarinta soo galootinimada, safarka, xilliga sii gudbidda (taraansitka), iyo gabi ahaan inta dalka ay u haajireen ay joogaan shaqaalaha soo galootiga ah, ayna shaqo mushaari ah ka hayaan dalka shaqada, sidoo kale waxa axdigan la adeegsanayaa ilaa inta ay kaga noqonayaan (shaqaalaha soogalootiga ah) dalkii ay ka soo jeedeen ama deganaanshaha rasmiga ku la haayen.

*Qodobka 2aad*

*Ula jeedada heshiiskaan:*

1. Weedha "Shaqaale Soogalooti ah" waxay u taagan tahay qof qaban doona, ama hadda la rabo in uu qabta, ama horay iyo haddaba ka qabta shaqo mushaari ah dal aan ahayn dalkii uu u dhashay.

2. (a) Weedha "Shaqaale ka shaqaysta Xuduudka" waxay u taagan tahay qof kasta oo shaqaale ah kaas oo ku leh iqaamad (dal ku joog) dawlad daris ah taas oo uu sida caadiga ah ku noqdo maalin walba ama ama ugu yaraan isbuucii hal mar;

(b) Weedha "Shaqaale Waqtiyeed" waxay u taagan tahay shaqaale kasta oo soogalooti ah kaas oo shaqadiisu tahay dabeecad ahaan mid ku xiran waqtiyo cayiman oo sanadka ka mid ah;

(c) Weedha "Bad Maax" oo uu soo hoos galayo qofka badda ka kaluumaysta, waxay u taagan tahay shaqaale soogalooti ah oo ka shaqeeya markab ka diiwaan gashan dal aanu bad-maaxuhu u dhalan;

(d) Weedha"Shaqaale ka shaqeeya Warshad ku taal Xeebta" waxay u taagan tahay shaqaale soo galooti ah oo ka shaqeeya warshad laga yagleelay xeeb taas oo sharci ahaan hoos tagta madax banaanida dawlad aanu u dhalan;

(e) Weedha "Shaqaale Guur Guura" waxay u taagan tahay shaqaale soogalooti ah kaas, oo in kasto oo deegaankiisa joogtada ahi uu ku yaal dawlad kaliya, haddana safar waqti gaaban ah ugu baxa dawlad ama dawlado dhawr ah oo kale maadaama dabeecadda shaqadiisu ama xirfaddiisu ku xiran tahay (safarka noocaan ah);

(f) Weedha "Shaqaale ku xiran Mashruuc" waxay u taagan tahay shaqaale kasta oo soogalooti ah oo dawlad u ogolaato in uu dalkeeda ka shaqeeyo muddo cayiman isagoo ka shaqaynaya mashruuc qura (kaliya) oo laga fulinayo dawladda shaqada;

(g) Weedha "Shaqaale Hawl Cayiman Qabanaya" waxay u taagan tahay shaqaale soogalooti ah:

(i) Kaas oo cidda uu u shaqeeyaa ay u dirsatay muddo qeexan in uu kasoo qabto hawl cayiman ama waa jibaad kale dawladda shaqada; ama

(ii) Kaas oo ku lug leh qabashada hawl loo jaan gooyay in uu ku qabto muddo cayiman, hawshaas oo ah mid u baahan xirfad shaqo iyo takhasus sare hadii ay ahaan lahayd mid ganacsi ama farsamo; ama

(iii) Kaas, oo isaga oo raacaya codsiga hadba uga yimaada cidda shaqaalaha uu uyahay ee joogta dawladda shaqada, qabta hawl muddo cayiman ku eg, hawshaas oo

dabeecad ahaan ah mid muddo kooban ku eg, ama ku meel gaar ah; iyadoo looga baahan yahay in uu ka tago dalkaas marka mudada loo ogolaaday joogitaanka ka dhaco, ama isaga tago xilligaas ka hor haddii markaas aanu qabanayn hawshii loo soo jaangooyay in uu qabto.

(h) Weedha "Shaqaale iskii Ushaqaysta" waxay u taagan tahay shaqaale kasta oo qabanaya hawl mushaari ah haddii kalena ku jira heshiis shaqaalaysiin oo uu ka helo noloshiisa isaga oo kaligiis ah ama ay weheliyaan xubno qoyskiisa ka tirsan, iyo shaqaale kasta oo soogalooti ah kaas oo iskiis u shaqaysta sida uu qabo (ogolyahay) sharciga dalka shaqadu, ama ay qabaan heshiisyada laba dawladood ama dawlada badan u dhexeeya;

*Qodobka 3aad*

Axdigani ma aha mid loo adeegsan karo (ku fulaya):

(a) Dadka iyaga ay soo diraan ama shaqaaleeyaan ururada caalamiga ah iyo haya'adaha ama dadka iyaga ay usoo dirto ama ka shaqaalayso dawlad meelo ka baxsan dhulkeeda si ay uga fuliyaan hawlo rasmi ah, kuwaas oo ogolaanshohooda iyo xaaladdooda ay yihiin kuwa uu xeerinayo sharciga guud ee caalamiga ah ama ay xeerinayaan heshiisyada caalamiga ah;

(b) Dadka ay u dirto ama ay ka shaqaalayso dawladi ama cid ka wakiil ahi, meel ka baxsan dhulkeeda si ay uga qaybqaataan barnaamij horumarineed ama barnaamijyo kale oo iskaashi, kuwaas oo ogolaanshohooda iyo xaaladooda ay xeerinayaan heshiis lala galay dawladda ay hawsha ka qabanayaan, kuwaas, oo sida heshiiskaas ku cad, aan loo tixgalin karin in ay yihiin shaqaale soogalooti ah;

(c) Dadka iyagu ka samaysta deganaansho dawlad aan ahayn dawladdii ay u dhasheen iyagoo ah maal gashi yayaal;

(d) Qaxootiga iyo dadka dawlad ay ka tirsanyihiin aanay jirin, haddii aan markaas sharciga dawladda arrintu qusaysaa aanu sidaas qabin (dhigayn), ama aanu sidaas qabin qoraal caalami ah oo dawladaas iyada arintaas ka dalbanaya;

(e) Ardayda iyo dadka la tababarayo;

(f) Bad maaxyada iyo shaqaalaha ka hawl gala warshad xeebeed kuwaas oo aan loo ogolaan deganaansho iyo shaqo mushaari ah toona in ay ka qabtaan dalka shaqada;

*Qodobka 4aad*

Ula jeedada heshiiskan, ereyadan "Xubnaha Qoyska" waxay u taagan tahay shakhsiyaadka xaaska u ah qofka soogalootiga ah ama uu ka dhexeeyo xiriir,sida uu qabo sharciga dalkaas ka

jira, uu ka dhalanayo xiriir la mid ah xiriirka guurka, sidoo kale waxaa soo galaya caruurta iyo dadka kale ee ku tiirsan soo galootiga, iyo sidoo kale haddii ay jiraan dad kale oo ku tiirsan sida uu dhigayo sharciga dalka markaas ay joogaan, ama heshiisyada ka dhexeeya labo dawladood ama dawlado badan oo ay arintu qusayso.

*Qodobka 5aad*

Ula jeedada heshiiska, shaqaalaha soo galootiga ah iyo xubanaha ka tirsan qoysaskooda:

(a) Waxa loo tixgalinayaa kuwa haysta waraaqaha looga baahan yahay ama kuwa xaaladoodu nidaamka waafaqsantahay, marka ay helaan fasax u ogolaanaya in ay joogaan, shaqo mushaari ah ka qaban karaan dalka shaqada si waafaqsan sharciga dawladdaas iyo heshiisyada caalamiga ah ee ay ku jirto dawladaasi;

(b) Waxa loo tixgalinayaa kuwa aan haysan waraaqaha looga baahan yahay, ama kuwa xaaladoodu aanay waafaqsanayn sharciga, marka aanay u hogaansamin shuruudaha ku cad faqradda (a) ee isla qodobkaan.

*Qodobka 6aad*

Ula jeedadan axdigan hadda ah:

(a) Weedha " Dawladda uu kasoo Jeedo" waxay u taagan tahay dawladda qofka laga hadlayaa uu ka tirsanyahay (uu u dhashay),

(b) Weedha "Dawladda Shaqada" waxay u taagan tahay dawlad kasta taas oo qofka shaqaalaha soogalootiga ah uu ka qaban doono ama hadda ka qabto, ama ka qaban jiray shaqo mushaari ah, hadba sida xaalku yahay,

(c) Weedha "Dawladda laga sii Gudbo" waxaa laga wadaa dawlad kasta taas oo qofka laga had layaa uu sii maro marka uu u socdo dawladda shaqada ama uu kasoo socdo dawladda shaqada ama uu u sii jeedo dalka uu u dhashay, ama dalka uu rasmiga u degan yahay.

# QEYBTA II

*Qodobka 7aad*

Dawladaha qaybta ka ah heshiiska waa in ay ballan qaadaan, sida ku cad qoraalada caalamiga ah ee quseeya xuquuqda aadanaha, in ay xushmaynayaan oo ay xaqiijinayaan sidii dhamaan shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda ee ku sugan dhulkooda ama hoos taga sharcigooda ay u heli lahaayeen xuquuqda ku xusan axdigan hadda ah iyadoo aan loo tagoorin jinsiga, isirka, midabka, luqadda, diinta, fikradda ay rumaysanyihiin, hadii ay

ahaan lahayd mid siyaasadeed, mid qaran, mid qawmiyadeed ama mid bulsho ama mid kaleba, asalka ay kasoo jeedaan bulsho ahaan ama qaran ahaan, da'dooda, dhaqaalahooda, hantidooda, xaaladdooda guur, goobta ay ku dhasheen ama xaalad kaloo ay ahaatoba.

## QEYBTA III

*Qodobka 8aad*

1. Shaqaalaha soogalotiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu waxa ay xaq u leeyihiin in ay isaga tagaan dawlad kasta, oo ay ku jirto dawladda ay u dhasheen. Xaqaan waa in aan wax xayiraad ah lagu soo rogin, marka laga reebo xayiraadaha sharciga ku cad, kuwaas oo lagama maarmaan u ah ilaalinta xasiloonida qaran, nidaamka guud, fayo- dhawrka iyo caafimaadka guud, anshaxa guud ama ilaalinta xuquuqda iyo xoriyadda dadka kale taas oo waafaqsan xuquuqda kale ee uu aqoonsanyahay qaybtan axdigan hadda ka mid ah.

2. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu waxa ay xaq u leeyihiin waqtiga ay doonaan in ay galaan kuna negaadaan dawladda ay kasoo jeedaan.

*Qodobka 9aad*

Sharcigu waa in uu ilaaliyaa xaqa ay u leeyihiin shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu in ay noolaadan.

*Qodobka 10aad*

Ma bannaana in shaqaale soogalooti ah ama xubin ka tirsan qoyskiisa uu la kulmo jirdil ama hab dhaqan qallafsan oo ka baxsan bini-aadamnimada ama ciqaab adag oo sharaftiisa wax loogu dhimo.

*Qodobka 11aad*

1. Ma bannaana in shaqaale soogalooti ah ama xubin qoyskiisa ka tirsan loo qabsado addoonsi.

2. Ma bannaana in shaqaale soogalooti ah ama xubin qoyskiisa ka tirsan lagu sunduleeyo (khasbo) shaqo.

3. Faqradda 2aad ee qodobkaan waa mid ay diidi karaan dawladaha xarigga (xabsiga) qofka danbiilaha ah ugu dara shaqada culus iyadoo qayb ka ah ciqaabta u degsan danbiilaha, haddii markaa xukunka ciqaabtan ay gaartay maxkamadda awoodda u leh.

4. Ula jeedada Heshiiska, weedha "Shaqo Khasab ah ama Jajuub ah" kuma jirto:

(a) Shaqa kasta ama hawl kasta oo aan lagu xusin faqradda 3aad ee qodobkan taas oo caadi ahaan u baahan qof xabsi loogu hayo amar sharci oo maxkamad soo saartay awgiis ama qof xilligaa ku jira xabsi - ka -siidayn shardi ku xiran oo uu kaga baxo xabsiga;

(b) Shaqo kasta oo loo baahdo haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah ama masiibo khatar gelinaysa nolosha ama daryeelka bulshada;

(c) Shaqo kasta oo ah qayb ka mid ah waajibaadka shaqada qaran maadaama ay tahay mid ku waajibta muwaadiniinta dawladda laga hadlayo.

## *Qodobka 12aad*

1. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskoodu waxa ay xaq u leeyihiin xoriyadda fikirka, damiirka iyo diinta. Xaqaani waxaa ku jira xoriyadda ay u leeyihiin in ay ikhtiyaarkooda ku qaataan diinta ay doonaan ama ay rumaysnaadaan diintooda iyo xoriyadda ah in ay diintooda si muuqata ugu soo bandhigi karaan haddii ay cibaadaysanayaan ama baranayaan.

2. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu waa in aanay la kulmin wax khasab iyo jajuub ah oo wax u dhimi kara xorriyadda ay u leeyihiin in ay iskood u qaataan (rumeeyaan) diin ama caqiido ama ay sii haystaan diintooda ama caqiidadooda.

3. Xorriyadda uu qofku u leeyahay in uu muujin karo waxa uu rumaysan yahay waxaa xaddidi kara oo kaliya sharciga iyo hadba wixii looga maarmiwaayo in lagu ilaaliyo nabadda guud, nidaamka guud, caafimaadka, anshaxa ama xorriyadda iyo xuquuqda asaasiga ee dadka kale.

4. Dawldaha qaybta ka ah axdigan hadda ah waxa ay ballan qaadayaan in ay xushmeeyaan xoriyadda ay u leeyihiin waalidka, ugu yaraan mid uu yahay shaqaale soogalooti ah, iyo haddii ay jiraan dad sharci ahaan mas'uul kanoqon kara, in loo xaqiijiyo in ay u helaan dhallaankooda waxbaarasho anshax iyo diimeed oo waafaqsan caqiidadooda.

## *Qodobka 13aad*

1. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu waxa ay xaq u leeyihiin in ay rumeeyaan fikirka ay doonaan iyada oo aan wax faragalin ah loo gaysan.

2. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskoodu waxa ay xaq u leeyihiin xoriyadda hadalka; xaqaan waxaa ka mid ah xorriyadda ay u leeyihiin, iyadoo aan la tixgalinayn wax xayiraad ah, in ay baadi-goobaan, helaan oo gudbiyaan wixii xog iyo aragtiyo ah nooc kasta oo ay yihiin, haddii ay ahaan lahayd mid hab oraah ah lagu cabiro, la qoro, la daabaco, hab faneed loo soo bandhigo, ama lagu muujiyo hab kasta oo kale oo ay iyagu doorbidaan.

3. Waxaa la socda adeegsiga xaqa ku xusan faqradda 2aad ee qodobkaan, waajibaadyo iyo

masuuliyaad qofka laga doonayo. Saa awgeed waxa xaqan isticmaalkiisa ka hor imaan kara xayiraado dhawr ah, waxaase shardi ah in xayiraadahaas ay yihiin kuwa sharcigu qabo lagama maarmaana u ah:

(a) Xushamaynta iyo ilaalinta xuquuqda dadka kale iyo sumcadooda;

(b) Ilaalinta iyo dhawrista nabad galyada qaran, nidaamka guud ama caafimaadka iyo anshaxa dawladaha ay qusayso arrintu;

(c) In looga gol leeyahay in lagaga hortago dacaayad dagaal lagu oogayo;

(d) In looga gol leeyahay ka hortagga olole lagu kicinayo nacayb umadeed, isir iyo diimeed kaas oo abuuri kara fitmo, cadaawad shaqaaqo ama fawdo.

*Qodobka 14aad*

Waxaa reeban in shaqaale soogalooti ah ama xubin ka tirsan qoyskiisa la gula kaco faragelin sharci daro ah ama aan laga fiirsan taas oo lid ku ah noloshiisa gaarka u ah (khusuusiyad), ama arrimihiisa qoys ahaaneed, xiriiradiisa gaarka ah iyo wax kasta oo wax u dhimi kara sharafta iyo sumcadda qofka shaqaalaha soogalootiga ah. Shaqaale kasta oo soogalooti ah iyo xubin kasta oo qoyskiisa ka tirsan waa in ay xaq u yeeshaan in sharcigu ka ilaaliyo faragalin noocaas ah ama weerar xaqa aan soo sheegnay lid ku ah.

*Qodobka 15aad*

Waxaa reeban in shaqaale soogalooti ah ama xubin ka tirsan qoyskiisa si aan sharci ahayn looga qaado hanti, haddii ay tahay mid uu qof ahaan u leeyahay ama mid uu cid kale lawadaago. Haddii ay dhacdo in qofka shaqaalaha soogalooti ah hanti uu leeyahay lagala wareego si buuxda ama si qayb ahaana oo sharciga dalka shaqada waafaqsan, qofka soo galootiga ah waxa uu xaq u yeelanayaa in la siiyo magdhaw macquul ah oo u dhigma hantida lagala wareegay.

*Qodobka 16aad*

1. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoyskoodu waa in ay xaq u helaan xorriyad iyo naftooda oo loo ammaan galiyo.

2. Shaqaalaha soo galootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu waxa ay xaq u leeyihiin in la siiyo ilaalin wax ku ool ah oo laga ilaasho in loo gaysto shaqaaqo, dhaawac jir ahaaneed, hanjabaado ama caga-juglayn, hadii ay ahaan lahayd mid ay gaysteen saraakiil dawladeed ama shakhsiyaad shacab ah, kooxo ama mu'asasad (haya'ad).

3. Hubin kasta oo shaqaalaha sharci fulintu ay kusamaynayaan aqoonsiga shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda waa in ay noqotaa mid loo maro habka sharcigu dhigayo.

4. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskooda waa in aan loogu gaysan xarig ama xirid sharci daro ah ama aan laga fiirsan qof ahaan iyo wadar ahaan ba; loomana diidi karo xorriyadooda haddii aanay jirin sababo ama aanay waafaqsanayn habab sharicigu dhigayo.

5. Shaqaalaha sogalootiga ah iyo xubnaha qoyskoodu kawaas oo xabsiga loo taxaabayo waa in loogu shegaa sida ugu dhaqsaha badan luqad ay fahmayaan sababaha loo soo xiray iyo eedaymaha loo haysto.

6. Shaqaalaha sogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoyskooda kuwaas oo xabsiga la dhigo ama lasoo xiro iyadoo loo haysto eedaymo danbi ay galeen ah, waa in muddo macquul ah gudaheed la horgeeyaa qaadi (garyaqaan) ama sarkaal kale kaas oo sharcigu awood usiinayo in uu hawl maxkamadeed galo, ama la siidaayaa haddii aan wax danbi ah loo hayn . Ma bannaana sida xeer guud dhigayo in shaqaalaha soogalootiga ah rummaan ahaan (gar suge ahaan) xabsi loogu hayo, Laakiin waxa dhici karta in lagu sii daayo dammaanad ah in eedaysanuhu marka loo baahdo maxkamadda hor-imaanayo, soona xadirayo inta lagu guda jiro marxaladaha kale ee tallaabooyinka maxakamadaynta iyo dammaana qaadka in uu imaanayo si xukunka maxkamadda loogu fuliyo.

7. Haddii shaqaale soogalooti ah ama xubin qoyskiisa ah lasoo xiro, ama xabsiga loo dhaadhiciyo ama xabsiga rummaan ahaan loogu hayo ama hab kale lagu soo xiro:

(a) Qunsulka ama diblomaasiyiinta matalaya danaha dawladda uu shaqaalaha soogalootiga ah kasoo jeedo waa in si dhaqsa ah loogu sheegaa haddii uu sidaas codsado xabsiga loo gaystay qofkaas iyo sababaha loo xiray;

(b) Qof aan ka hadlaynaa waxa uu xaq u leeyahay in uu xiriir la sameeyo madaxda lasoo xusay. Wixii farriin ah ee qofka laga hadlayaa uu udiro madaxda lasoo xusay waa in si dhaqsa ah loogu gudbiyaa, waxaana qofku xaq u leeyahay in lasoo gaarsiiyo wixii farriin ah ee ay soo diraan madaxda lasoo sheegay si dhaqsa ah;

(c) Qofka laga hadlayo waa in si dhaqsa ah loogu wargaliyaa xaqa uu leeyahay iyo haddii ay jiraan xuquuq kale oo laga soo dheegan karo heshiisyada kale oo isla arrinta quseeya, kuwaas oo u dhexeeya dawladaha arrintu qusayso, si uu ula sameeyo xiriir ulana kulmo saraakiil ka socota madaxda kor ku xusan iyadoo madaxdaas lala qorshaynayo tallaabooyinka qofkaan laga hadlayo loogu xaqiijinayo cid sharci ahaan u matasha marka maxkamadda la horgaynayo.

8. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoyskooda kuwaas oo xorriyadoodii lagaga qaaday xabsi dhigid waxa ay xaq u yeelanayaan in si dhaqsa ah maxkamad loo horgeeyo, si maxkamadaasi si dhaqsa ah go'aan uga gaarto haddii xarigga loo gaystay uu sharci yahay iyo haddaanu sharci ahayn oo ay markaas saas amar ugu bixiso in la sii daayo. Waqtiga shaqaalaha soogalootiga la horgaynayo maxkamadda waa in ay helaan qof turjumaan ah oo aan jeeb kooda ahayn, hadii ay lagama maarmaan noqoto, oo aanay markaas fahmi karin ama ku hadli karin luqadda dacwadu kusocoto.

9. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda kuwaas oo wax yeelo kasoo gaartay xabsi dhigid sharci darro ah waxa ay xaq sharci ah u leeyihiin in ay helaan magdhaw.

*Qodobka 17aad*

1. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda kuwaas oo loo diiday xoriyadooda waa in loola dhaqmaa si bini-aadanimo ah iyo iyadoo la xushmaynayo sharafta uu qofka bini-aadamka ah ku dhashay iyo aqoonsigiisa dhaqan.

2. Shaqaalaha soogalotiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda ee lasoo eedeeyo waa in lagu xiraa meel ka baxsan halka lagu xiro dadka iyagu danbiga lagu helay, haddii aanay markaas duruuf aan caadi ahayn jirin, waana in loola dhaqmaa si gaar ah oo ku habboon xaaladooda ah in ay yihiin dad aan wali wax danbi ah lagu helin. Caruurta iyagu lasoo eedeeyo waa in aan iyaga iyo dadka waawayn isku meel lagu wada xirin waana in sida ugu dhaqsaha badan loo dadajiyaa xukun ka gaaridooda.

3. Shaqaale kasta oo soogalooti ah iyo xubnaha ka tirsan qoyskiisa kaas oo loogu xiro dalka uu ka gudbo ama dalka shaqada arimo laxiriira xad gudub uu ku sameeyay sharciga socdaalka waa in lagu xiraa, inta ay suurta gal tahay, meel ka baxsan halka lagu hayo dadka la xukumay iyo kuwa maxkamad sugayaasha ah.

4. Danta ugu muhiimsan ee laga leeyahay muddada xabsi ku haynta ay maxkamad sharci ah ku xukunto shaqaale soogalooti ah ama xubin qoyskiisa katirsan, waa in ay noqotaa mid lagu dhaqan celinayo. Danbiilayaasha aan qaan gaarin waa in aan meel la gula xirin dad qaan gaar ah iyadoo caruurtaas loola dhaqmayo hab ku haboon da'da ay ku jiraan iyo xaaladooda sharci ahaaneed.

5. Xilliga xabsiga, shaqaale kasta oo soogalooti ah iyo xubnaha qoyskiisu waa in ay helaan xuquuq la mid ah xuquuqda ay helaan dadka dalka u dhashay dhanka u ogolaanshaha booqashooyinka ay ugu yimaadan xubnaha katirsan qoysaskooda.

6. Markasta oo shaqaale soogalooti ah loo diido xaqiisa ah in uu helo xorriyad, madaxda dawladda arrintu qusayso ee awoodda u leh waa in ay u dhug yeeshaan dhibaatooyinka ka hor imaankara xubnaha ka tirsan qoyska soogalotiga ah, gaar ahaan xaasaskooda iyo caruurtooda.

7. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskoodu kuwaas oo kala kulma xabsi galin uu qabo sharcigu dalka shaqada ama dalka ay ka sii gudbaan, waa in ay helaan xuquuq la mid ah midda ay helaan dadka dalalkaas u dhashay ee ay isku xaaladda yihiin.

8. Haddii shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskooda xabsiga loogu taxaabo si loo hubiyo in ay ku xad-gudbeen sharciga socdaalka iyo in kale, qofkaasi shaqo kuma leha wixii kharash ah ee arrintaa ka dhasha.

*Qodobka 18aad*

1. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda waxa ay xaq u leeyihiin in ay dhanka xuquuqda ula sinnaadaan dadka wadanka u dhashay marka la horgeeyo maxkamadaha dalkaas noocay doonaan ha ahaadeene. Marka lagu soo oogayo eedaymo shaqaalaaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda waxa ay xaq u helayaan in ay helaan in dacwadooda si furan oo cadaalad ah ay u dhegaysato maxkamad awood u leh kiiska, madaxbanaan, dhex-dhexaadna ah taas oo sharcigu yagleelay.

2. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu kuwaas oo ku eedaysan gelidda danbiyo, waxa ay xaq u leeyihiin in laga soo qaado sidii kuwa danbi laawayaal ah ilaa inta lagaga soo caddaynayo danbiga lagu eedaynayo in ay galeen si sharciga waafaqsan.

3. Marka lagu soo oogayo wax eedaymo danbi gelid ah oo ka dhan ah shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskooda waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan ugu yaraan dammaanadaha soo socda:

(a) In loogu sheego luqaddooda si dhaqsa ah oo faah-faahsan dabeecadda iyo sababta keentay eedda loo haysto;

(b) In ay waqti kufilan iyo tasiilaad ba u haystaan soo diyaarsiga difaacooda iyo xiriir ay ikhtiyaarkooda kula sameeyaan garyaqaano u qareema;

(c) In la maxkamadeeyo iyadoo aanay jirin dib u dhigis aan markaas loo baahnayn;

(d) In la maxkamadeeyo iyagoo xaadir ah, loona suurta-galiyo in ay is difaacaan ama loo sameeyo taakulayn sharci ay iyagu doorteen, waana in lagu wargaliyaa in ay xaq u leeyihiin gargaar sharci, loona sameeyo gargaar sharci haddii markaa ay tahay danta caddaaladda, iyadoo aan marna wax qarash ah dusha looga tuurin shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodaba, haddii markaas aanay awoodin in ay kharashka difaaca iyo gargaarka sharciga iska bixiyaan;

(e) In su'aalo waydiiyaan ama dalbadaan in loo waydiiyo su'aalo markhaatiyada dhanka ka ah iyaga iyo in la helo keenista iyo su'aal waydiinta markhaatiyaasha ay iyaguna haystaan si la mid ah sida markhaatiyasha iyaga kasoo horjeeda laga rabo;

(f) In loo qabto turjumaan aan lacag ahayn hadii aanay fahmi karin ama ku hadli karin luqadda maxkamadda laga isticmaalayo;

(g) In aan lagu khasbin in ay naftooda ku markhaati furaan ama danbi qirtaan;

4. Haddii dacwadu tahay mid caruur lagu qaadayo, habka dacwadu waa in ay noqotaa mid xisaabta ku darsata da'dooda iyo dhaqan celintooda;

5. Shaqaalaha soogalootiga iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda ee maxkamadi danbi ku

hesho waxa ay xaq u leeyihiin in xukunkooda ay dib u eegto maxkamad sare sida sharcigu dhigayo.

6. Marka shaqaale soogalooti ah ama xubin ka tirsan qoyskiisa lagu xukumo danbi, laakiin ay dhacdo in ka dib maxkamadi buriso xukunkaas ama cafis loo fidiyo qofkii iyadoo laga duulayo in xaqiiqada la helay muujinayso in caddaaladda meel lagaga dhacay markii xukunka lagaarayay, qofkaas dhibanaha ah ee xukunkaasi ku dhacay waxa uu xaq u leeyahay magdhaw sharciga waafaqsan, haddii aanay markaas muuqan in sababta xaqiiqdaas loo ogaan kari waayay gabi ahaan iyo qayb ahaan ba ay tahay mid loo aanayn karo gabood fal uu qofka laf ahaantiisu ku kacay.

7. Ma bannaana in shaqaale soogalooti ah ama xubin ka tirsan qoyskiisa maxkamad loogu soo taago ama lagu ciqaabo mar labaad danbi horay loogu eedeeyay ama lagu waayay si sharciga waafaqsan iyo habka ciqaabta ee dawladda arintu qusayso.

*Qodobka 19aad*

1. Ma bannaana in shaqaale soogalooti ah ama xubin qoyskiisa ka tirsan la gaga dhigo danbiile in uu galay darteed fal kasta oo xilligii uu galayay aan ahayn mid danbi ku ah sharciga qaranka iyo kan caalamiga ah amase dusha looga tuuro ciqaab ka culus tii xilligii danbiga la galayay ka xeernayd. Hadii uu soo baxo sharci danbe oo qeexaya ciqaab ka fudud tii hore ka-gadaal markuu danbiiluhu danbiga galay, waa in qofkaasi ka faa'iidaystaa xeerkaasi ciqaabeed ee dambe ee fudud lagu xukumaa.

2. Waxaa la siinayaa tixgalin bini-aadamnimo, marka lagu ciqaabayo soogalootiga ama xubin qoyskiisa ka tirsan danbi uu galay, iyada oo la qaddarinayo in uu yahay shaqaale soogalooti ah, gaar ahaan xaqa uu u leeyahay deganaansho iyo shaqo.

*Qodobka 20aad*

1. Ma bannaana in lagu ciqaabo shaqaale soo galooti ah ama xubin qoyskiisa ka tirsan in uu ku fashilmay awgeed fulinta waajibaad heshiis uu galay.

2. Ma bannaana in loogu diido shaqaale soogalooti ah ama xubin qoyskiisa katirsan ogolaanshaha deganaanshaha ama shaqada ama la masaafuriyo iyada oo sabab looga dhigayo in uu ku guul daraystay in uu kasoo dhalaalo waajibaadka heshiis shaqo uu ku jiro haddii aanu fulinta waajibadkaasu aanu ahayn mid ku xirnaa ogolaanshaha (shaqada) ama fasaxa (deganaanshaha ama dal ku galka).

*Qodobka 21aad*

Waxaa sharci daro ku ah qof kasta, marka laga yimaado sargaal dawladeed oo sharci u haysta arrintaa, in uu la wareego, burburiyo, ama isku dayo in uu burburiyo waraaqo aqoonsi, ama waraaqo qofka u ogaalnaya dal ku gal, ama joogitaan, deganaansho, ama u fasaxaya in uu dalka

kaga shaqaysto. Mana bannaana in la wareegid sharciyaysan oo noocaas ah lagu dhaqaaqo iyadoo aan la hayn waraaq faahfaahsan oo arrintaa sharci ahaan uga hadlaysa. Sina looma ogolaan karo in la burburiyo baasaboorka ama waraaqaha u dhigma ee qofka shaqaalaha soogalootiga ah ama xubin ka tirsan qoyskiisa wato ama sito.

*Qodobka 22aad*

1. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda waa in aanay la kulmin tallaabooyin loo qaado cayrin wadareed. Xaalad walba (oo lagu cayrinayo shaqaalaha soogalootiga ah) waa in si shakhsi ah loo baaraa ama loola tacaalaa.

2. Ma bannaana in shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda laga cayriyo dulka dawlad xubin ka ah axdigaan, haddii aan markaas la fulinayn go'aan ay qaadatay cid awood sharci u leh sida uu dhigayo sharciga (dalkaas u degsan).

3. Go'aankaas waa in loogu sheegaa shaqaalaha soo galootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda luqadda ay fahmayaan. Waana in loogu sheegaa, haddii aanay markaas waajib ahayn (amar), go'aanka qoraal, haddii markaas aanay jirin duruuf aan caadi ahayn oo loo qaadayo nabadgalyada qaran, sidoo kale waa in la caddeeyaa sababaha loo cuskaday gaaridda go'aanka. Waa in loo sheegaa dadka arrintu qusayso in ay lee yihiin xuquuqdaas ka hor ama ugu damayn xilliga go'aanku soo baxay.

4. Waxa uu xaq u leeyahay qofka arrintu qusaysaa, haddii aan markaa go'aan maxkamadeed oo kama danbays ah soo bixin, in uu soo gudbiyo sababta aanu kumutaysan in dalka laga cayriyo iyo in maamulka awoodda u lihi dib u eego dacwadiisa, haddii aanay markaa jirin sababo aan laga fursan karin oo loo qaadayo nabad gelyada qaranka .Ilaa inta laga samaynayo dib u eegista dacwada, qofka arrintu qusaysaa waxa uu xaq u leeyahay in uu ku dacwoodo in la hakiyo go'aanka cayrinta.

5. Haddii markaa go'aanka cayrinta wax kama jiraan laga soo qaado, qofka arrintu qusaysaa waxa uu xaq u helayaa in uu dalbado magdhaw waafaqsan sharciga, mana bannaana in go'aanka hore loo isticmaalo mid loogu diido qofka in uu kusoo noqdo dawladda arrintu qusayso (dawladda shaqada).

6. Haddii markaas arrintu kusoo biya shubato cayrin, qofka ay arrintu qusayso waa in la siiyaa fursad macquul ah ka hor iyo ka dib intaanu tegin si uu ugu xaliyo wixii mushaaraad ama xuquuq kale uu sheeganayo amase xuquuq lagu leeyahay ah.

7. Iyadoo aan meel lagaga dhacayn go'aanka cayrinta, shaqaalaha soogalotiga ah ama xubinta qoyskiisa ka tirsan kuwaas oo uu saamaynayo go'aanka cayrintu waxa u bannaan in ay ka raad sadaan dal ku gal dawlad aan ahayn dalka ay kasoo jeedaan.

8. Haddii ay timaado in lacayriyo qofka soogalootiga ah ama xubin qoyskiisa ka tirsan, kharashka cayrinta waa in aanu noqon mid iyaga saaran. Waxaa bannaan in laga dalbado qofka ay arrintu qusayso oo kaliya in uu baxsho kharashka safarka.

9. Cayrinta qofka laga cayrin dalka shaqada waa in aanay wax u dhimin wixii xuquuq shaqaalaha soogalootiga ah ama xubin ka tirsan qoyskiisa uu xaq u yeeshay sida sharciga dawladaas dhigaayo, oo ay ka mid tahay xaqa uu u leeyahay in uu helo wixii mushaaraad ama xuquuq kale ah oo uu yeesho.

*Qodobka 23aad*

Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu waxa ay xaq u leeyihiin in ay ka helaan dhawris ama difaac iyo taageero qunsuliyadda ama maamulka safaaradda ee dawladda ay kasoo jeedaan markasta oo xuquuqda ku xusan axdigan meel lagaga dhaco. Gaar ahaan, xaaladda cayrinta, dadka ay arrintu qusayso waa in loo sheegaa in ay xaqaan leeyihiin si dhaqsa ah, iyadoo xaq loogu leeyahay dawladda wax cayrinaysa in ay fududayso sidii xaqaas ay dadkaas la-cayrinayaa u heli lahaayen (in lala xiriirsiiyo safaaradahooda).

*Qodobka 24aad*

Shaqaale kasta oo soogalooti ah iyo xubin kasta oo qoyskiisa ka tirsan waxa ay xaq leeyihiin in loo aqoonsado sidii qof sharciga hortagi kara (hadii xaq laga wado ama uu isago xaq wado).

*Qodobka 25aad*

1. Shaqaalaha soogalootiga ah waa in loola dhaqmaa si la mid ah sida loola dhaqmo dadka u dhashay dalka shaqada marka ay timaato mushaaradka iyo:

(a) Shuruudaha kale ee shaqada, sida saacadaha shaqada dheeraadka ah, nasashada isbuuca, fasaxyada lacagta lagu baxsho, badbaadada shaqaalaha, caafimaadka, soo afjaridda xiriirka shaqada iyo wixii kale ee shuruuda shaqo ah kuwaas oo ku xusan sharciga iyo hab dhaqanka dawladda shaqada;

(b) Shuruudaha kale ee shaqo, sida da'da ugu yar ee lagu shaqeeyo, xayiraadda shaqada iyo wixii kale oo shuurada shaqo ah ee ku xusan sharciga qaranka iyo habdhaqanka dawladda shaqada.

2. Ma bannaana sharci ahaan heshiiyada gaarka ah ee shaqo kuwaas oo dhanka u sinnaanta xuquuqda ka hooseeya sida ku xusan mabda'a sinnaanta (shaqaalaha soogalootiga ah iyo kuwa dalka u dhashay) ee ku cad faqradda 1aad ee qodobkaan hadda.

3. Dawladaha qaybta ka ah (axdigaan) waa in ay qaadaan dhammaan tallaabooyinka ku habboon si loo xaqiijiyo in shaqaalaha soogalootiga ah aan loogu diidin wax xuquuq ah oo laga soo dheegan karo mabda'a (sinnaanta) iyada oo lagu marmarsoonayo in soogalootigu si aan sharci ahayn dalka ku joogan ama shaqo u qabteen. Gaar ahaan, dadka shaqada siiyay shaqaalaha soo galootiga ah arintani ma aha mid ka cafin karta wax alla iyo wixii waajibaadyo heshiis ah oo sharci ah, arrinta joogitaanka sharci darada ah ma noqon karto mid hoos u dhigi karta xuquuqda ay ku yeelanayaan shaqaalaha soogalootiga ah dadka shaqaalaystay ama ku shaqaystay.

*Qodobka 26aad*

1. Dawladaha qaybta ka ah axdigan waa in ay aqoonsadaan xaqa uu shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha katirsan qoysaskooda ay u leeyihiin:

(a) In ay ka qayb gali karaan kulamada iyo hawlaha ururada shaqaalaha iyo urur kale oo kasta oo samayntiisa sharcigu qabo, ururadaas oo looga gol leeyahay ilaalinta danahooda dhaqaale, bulsho, dhaqan iyo dan kale oo kasta, taas oo ku xusan oo kaliya xeer hoosaadyada ururada ay qusayso;

(b) In ay si xor ah ugu biiri karaan urur shaqaale iyo urur kale oo kasta kii ay doonaan sida horay loo soo sheegay, iyagoo u hoggaansamaya oo kaliya xeer hoosaadyada u degsan ururka ay qusayso;

(c) In ay kaalmo waydiisan karaan urur shaqaale oo kasta iyo urur kasta oo kuwii lasoo sheegay ah.

2. Ma bannaana in wax xayiraad ah lagu soo rogo adeegsiga xuquuqdaan marka laga reebo xayiraadaha sharcigu qabo, kuwaas oo looga maarmi waayay ilaalinta danaha nabadgelyada qaranka, nidaamka guud, ama ilaalinta xuquuqda iyo xorriyadda dadka kale ee bulsho dimuquraadi ah.

*Qodobka 27aad*

1. Arrinta ku saabsan damaanaqaadka bulsho, shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda waa in ay ka helaan dawladda shaqada macaamil la mid ah kan lasiiyo dadka wadanka u dhashay hadba inta ay kaga soo dhalaalaan (fuliyaan) wax yaalaha uu uga baahan yahay sharciga dalka ka jira iyo heshiisyada arrintan ka hadlaya ee laba dawladood ama dawlado badan u dhexeeya. Madaxda awoodda u leh ee ka tirsan dawladda ay shaqaalaha soogalootiga ah kasoo jeedaan iyo dawladda shaqadu waxa ay mar kasta meel isla dhigi karaan wadada loo marayo meelmarinta xeerkaan;

2. Mararka ay dhacdo in sharciga lagu dhaqmaa aanu u ogolaanayn shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda in ay helaan xaq ay leeyihiin, dawladaha ay qusaysaa waa in ay raadiyaan suurtagalnimada in wax lagu siiyo dadka arrintu qusayso hadba heerka uu gaarsiisan yahay ka qayb galkooda ay ku leeyihiin xaqaan, iyada oo lagu salaynayo hab dhaqan la mid ah kan la gula dhaqmo dadka dalka u dhashay ee ay isku duruufta yihiin.

*Qodobka 28aad*

Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha katirsan qoysaskoodu waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan daryeel caafimaad oo kasta kaas oo si deg deg ah loogu baahdo dhawridda noloshooda ama baajinta dhib aan la daaweyn karin oo ku dhacda caafimadkooda iyada oo lagu salaynayo in ay daaweynta ula simanyihiin dadka muwaadiniinta ah ee dawladda ay qusayso. Daryeelka

caafimaad ee noocaan ah waa in aan loogu diidin soogalootiga shaqaalaha ah iyada oo sabab looga dhigayo khalad ka jira joogitaankooda ama shaqada ay dalka ka hayaan.

*Qodobka 29aad*

Ilma kasta oo uu dhalay shaqaale soogalootiga ah waxa uu xaq u leeyahay in uu yeesho magac, diiwaangalinta dhalashadiisa, iyo jinsiyad.

*Qodobka 30aad*

Ilma kasta oo uu dhalo shaqaale soogalootiga ah waxa uu xaq asaasi ah u leeyahay in uu waxbarasho helo uu ula siman yahay dadka u dhashay dalka ay qusayso. Mana bannaana in loo diido ama xayiraad laga saaro in uu wax ka barto ilmahaasi goobaha waxbarasho ee dawladdu leedahay ee waxbarashada iskuulka ka horaysa ah iyadoo sabab looga dhigayo in waalidka ama ilmuhu aanu ahayn mid si sharci ah ku jooga dalka shaqada.

*Qodobka 31aad*

1. Dawladaha ku jira heshiiskaan waa in ay dammaana qaadaan xushmaynta haybta dhaqan ee shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskooda ay leeyihiin, iyo in aanay ka horistaagayn dadkaas in ay sii wataan xiriirkooda dhaqan ee ay la leeyihiin dawladda ay kasoo jeedaan.

2. Dawladaha qaybta ka ah axdigan waxaa ay qaadi karaan tallaabooyin ku habboon si gacan looga gaysto loona dhiirigaliyo dadaalada lagu bixinayo arrintan.

*Qodobka 32aad*

Marka uu dhammaado waqtiga joogitaankooda dawladda shaqada, shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu waxa ay xaq u leeyihiin in ay u xawishaan lacagta ay shaqaysteen iyo kaydadkoodaba, sidoo kale waxa ay xaq u leeyihiin in ay qaataan alaabooyinka iyo wixii shakhsi ahaan mulkiyadooda ah ee markaas sharciga lagaga dhaqmo dawladda ay qusaysaa uu dhigayo (qaadashadiisa ama xawilashadiisa).

*Qodobka 33aad*

1. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu waxa ay xaq u leeyihiin in dawladda ay kasoo jeedaan ama dawladda shaqada ama dawladda ay kasii gudbaan kuwargaliso iyaga hadba sida xaalku yahay wax yaalaha soo socda:

(a) Xuquuqda ka dhalaynaysa axdigan hadda ah;

(b) Shuruudaha gelitaanka, xuquuqdooda iyo waajibaadka saaran sida uu qabo sharciga iyo habdhaqanka dawladda ay qusayso iyo haddii ay jiraan arrima kale oo ka caawin kara in ay u hoggaansamaan hababka maamul ee dawladaas lagaga dhaqmo.

2. Dawladaha qaybta ka ah axdigan hadda ah waa in ay qaadaan dhammaan tallaaboyinka ay is leeyihiin waa kuwa ku habboon si loo baahiyo xogta lasoo xusay ama in la xaqiijiyo in dadka loo shaqeeyo, ururada shaqaalaha ama haya'adaha kale ee u xilsaaran ay bixiyaan xogtaan, iyaga oo iskaashi arrintan kala samaynaya dawladaha kale ee ay qusayso haddii duruuftu keento.

Xogtan oo dhammaystiran waxa lagu siinayaa shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda codsigooda iyada oo bilaash ah (lacag la'aan) iyo sida ugu suurta gashan, iyada oo loogu gudbinayo luqad ay fahmi karaan.

*Qodobka 34aad*

Majiraan wax ka mid ah qaybtan axdigan hadda ah oo ay ka dhalan karto in laga dhaafo shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda waajibaadka saaran ee ah in ay u hoggaansamaan sharciga iyo xeerarka dawlad kasta oo ay kasii gudbayaan ama ay ka shaqaystaan iyo waajibaatka ka saaran soogalotiga in ay xushmeeyaan haybta dhaqan ee ay leeyihiin dadka degan dawladaha noocaas ah.

*Qodobka 35aad*

Majiraan wax ka mid ah qaybtan axdigan hadda ah oo loo fasiran karo in uu xeerinayo xaaladda soogalootiga shaqaalaha ah ama xubnaha katirsan qoysaskooda ee iyagu aan wadan waraaqaha looga baahaan yahay ama sharci daro ku jooga, mana jiro xaq kale oo xeerinaya xaalad sharci daro ah ama wax u dhimi kara tallaabooyinka loo qaadayo in lagu xaqiijiyo in la abuuro duruuf badbaado oo caddaalad ku dhisan si loo maareeyo soogalootiga caalamka si wafaqsan qodobada ku xusan qaybta lixaad ee axdigan hadda ah.

# QEYBTA IV

Xuquuqda kale ee ay leeyihiin Shaqaalaha Soogalootiga ah iyo Xubnaha ka-tirsan Qoysaskooda ee Sharciga ku Jooga (Dalka Shaqada)

*Qodobka 36aad*

Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu ee iyagu sida sharciga ah ku jooga dawladda shaqada waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan xuquuqda ku xusan qaybtan hadda ee axdigan marka lagu laro (lagu daro) xuquuda iyana ku xusan qaybta saddexaad ee isla axdigan.

*Qodobka 37aad*

Waxa ay xaq u leeyihiin shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda in inta aanay gelin dalka shaqada ama xilliga loo aqbalayo gelitaanka, si buuxda dawladda ay u

dhasheen ama dawladda shaqada ay ugu sheegto dhammaan shuruudaha dal ku galka, gaar ahaan shuruudaha quseeya joogitaankooda iyo shaqada ay qabanayaan iyo shuruudaha ay ka doonayso dawladda shaqadu in ay buuxiyaan iyo cidda maamul ka ah ee ay la xiriirayaan markasta oo ay u baahdaan in wax laga bedelo shuruudahaas.

*Qodobka 38aad*

1. Dawladaha shaqadu waa in ay dadaal kasta ku bixiyaan sidii loogu ogolaan lahaa shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda in ay muddo kooban dalka shaqada ka maqnaan karaan iyadoo aan saamayn u gaysan ogolaanshaha ay u haystaan in ay joogaan ama shaqaystaan, hadba xaalku suu yahay. Waana in dawladaha shaqadu ay xisaabta ku darsadaan baahiyaha gaar ka ah iyo waajibaadyada kaga aadan shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda, gaar ahaan dalalka ay kasoo jeedaan.

2. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha katirsan qoysaskoodu waxa ay xaq u leeyihiin in si buuxda loogu wargaliyo shuruudaha loogu ogolaado maqnaanshaha kooban ee ay dalka shaqada ka maqnaanayaan.

*Qodobka 39aad*

1. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskooda waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan xorriyad ay meeshay doonaan aadi karaan oo dalka shaqada ka mid ah iyo xorriyadda ay u leeyihiin in ay doortaan meesha ay ka degayaan dalka shaqada.

2. Xuquuqda ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan hadda ah waa in aan lagu soo rogin wax xayiraad ah marka laga reebo kuwa sharcigu qabo, lagama maarmaan kana u ah ilaalinta nabad gelyada qaran, nidaamka guud, caafimaadka iyo anshaxa, ama dhawrista xuquuqda iyo xorriyadda dadka kale taas oo waafaqsan xuquuqda lagu aqoonsaday axdigan hadda ah.

*Qodobka 40aad*

1. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda waxa ay xaq u leeyihiin in ay ka sameeyaan ururo shaqaale dalka shaqada kuwaas oo u xilsaaran dhiirigalinta iyo ilaalinta danahooda dhaqaale, bulsho, dhaqan iyo wixii dana kale ah ee ay leeyihiin shaqaalaha soogalootiga ahi.

2. Wax xayiraad ah laguma soo rogi karo xuquuqdaan in qofku adeegsado marka laga yimaado xayiraado sharcigu dhigayo oo lagama maarmaan u ah dal dimuquraadi ah in uu qaato si loo ilaaliyo danaha nabad gelyada, nidaamka guud, ama dhawrista xuquuqda iyo xorriyadda dadka kale .

*Qodobka 41aad*

1. Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu waxa ay xaq u leeyihiin in

ay ka qayb galaan arrimaha guud ee ka jira dawladda ay kasoo jeedaan iyo in ay codkooda dhiiban karaan laguna dooran karo iyaga doorashooyinka dalkaas, si waafaqsan sharciga uyaal (dalkaas).

2. Dawladda ay qusayso waa in ay si ku habboon oo waafaqsan shuruucdeeda, ay fududeeyaan ku dhaqanka xuquuqdaan.

*Qodobka 42aad*

1. Dawladaha qaybta ka ah axdigaan waa in ay ka fekeraan samaynta haya'ado iyo habab kuwaas oo iyaga loo maro sidii la isaga xilsaari lahaa, hadii ay ahaan lahayd dawladda ay kasoo jedaan shaqaalaha soogalootiga ah ama dawladda shaqada, baahiyaha gaar ka ah, hididiilooyinka iyo waajibaadyada shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda, taas oo sawir ka sii bixin karta suurtagalnimada ah in shaqaalaaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu ay yeelan karaan dad u matala haya'adahaas oo ay si xorriyad ah usoo xushaan.

2. Dawladaha shaqadu waa in ay gacan ka gaystaan, iyadoo waafaqsan shuruucdooda, in laga talo galiyo ama laga qaybgaliyo shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda go'aamada quseeya nolosha iyo maamulka bulshooyinka dalka shaqada.

3. Shaqaalaha soogalootiga ah waxaa suurta gal ah in ay ka helaan xuquuq siyaasadeed dawladda shaqada, hadii markaas dawladaasi, iyadoo madaxbanaan, garato in ay xuquuqdaa siiso dadkaas.

*Qodobka 43aad*

1. Shaqaalaha soogalootiga ah waxa ay xaq u leeyihiin in loola dhaqmo si la mid ah sida loo la dhaqmo dadka u dhashay dawladda shaqada wixii ku saabsan:

(a) In ay fursad u heli karaan haya'adaha iyo adeegyada waxbarasho iyaga oo u hogaansamaya shuruudaha aqbalaadda iyo xeerarka kale ee u degsan haya'adahaas;

(b) In ay fursad u heli karaan adeegyada jihaynta xirfadlayaasha iyo shaqaalaysiintooda;

(c) In ay fursad u heli karaan haya'adaha bixiya tababarada iyo jihanyta xirfadeed iyo agabka tababarada, hadii ay buuxiyaan shuruudaha lagaga qayb qaadan karo (adeegyadaas);

(d) In ay fursad u heli karaan deegaan, ay ka mid tahay in ay ka faaiidaysan karaan mashaariicda guryaynta bulshada iyo in laga ilaasho in lagu dhiig miirto kirooyinka guryaha;

(e) In ay fursad u heli karaan adeegyada bulshada iyo caafimaadka, taas oo ku xiran in ay buuxiyaan marka hore shuruudha ay kaga mid noqon karaan dadka ka faaiidaysan kara adeegyadaas;

(f) In ay fursad u heli karaan in ay ku biiraan iskaashatooyinka iyo haya'adaha iskood isku maamula, kuwaas oo aan laga dheegan karin in ay bedelayan xaaladoodii soogalootinimo, waafaqsana xeerarka iyo sharciyada hay'adaha ay qusayso;

(g) In ay fursad u heli karaan ka qaybgalka nolosha dhaqanka iyo hiddaha.

2. Dawladaha qaybta ka ah axdigaan waa in ay dhiirigaliyaan duruufo lagu xaqiijin karo mucaamil loo siman yahay si loogu suurta galiyo shaqaalaha soogalootiga ah in ay helaan xuquuqda ku xusan faqradda 1aad ee qodobkaan hadda ah, marba hadii ay buuxiyaan shuruudaha dawlada shaqadu ku siin karto fasaxa joogitaanka.

3. Dawladaha shaqadu waa in aanay ka hor istaagin cid shaqaalaysay shaqaale soogalooti ah in ay u samayso iyaga xaruumo deegaan, ama dhaqan ama bulsho. Iyadoo la dhawrayo qodobka 70aad ee ku xusan axdigan hadda ah, dawladda shaqada waxaa u bannaan in ay samaynta adeegyadaas ay ka dhigto kuwa ku xiran buuxinta shuruudaha guud ahaan laga dhaqan galiyo dawladaas.

*Qodobka 44aad*

1. Dawladaha qaybta ka ah axdigaan, waa in ay aqoonsadaan in qoysku yahay unug kooxeed dabiici ah, oo lagama maarmaan u ah bulshada iyada oo xaq loogu leeyahay bulshada iyo dawladduba in ay dhawraan unugaas, dawladduna waa in ay qaadataa tallaabooyin ku habboon si loo xaqiijiyo dhawrista wada jirka qoysaska shaqaalaha soogalootiga ah.

2. Dawladaha qaybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaataan wixii ay awood u leeyihiin oo ah qaadidda tallaabooyin ku habboon si ay u fududeeyaan in shaqaalaha soo galootiga ah ay dib-ula midoobaan xaasaskooda ama dadka la leh xiriir ka qaraabo, kaas oo sida sharcigu qabo, ay ka dhalanayso qaraabo u dhiganta kan guurka, iyo sidoo kale in ay dib ula midoobaan caruurtooda aan qaan gaarka ahayn, ee aan guursan kuwaas oo iyagu nolol ahaan ku tiirsan (waalidkood).

3. Dawladaha shaqadu, iyagoo ku salaynaya sababo bini-aadanimo, waa in ay il naxariis ah ku eegaan xubnaha kale ee qoyska ee shaqaalaha soogalootiga ah iyagoo siinaya mucaamil loo simanyahay sida ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan hadda ah.

*Qodobka 45aad*

1. Xubnaha ka tirsan qoysaska shaqaalaha soogalootiga ah waa in ay ka helaan dawladda shaqada mucaamil la mid ah kan la siiyo dadka wadanka muwaadiniinta ka ah wixii la xiriira arrimaha soo socda:

(a) In ay fursad u heli karaan hay'adaha iyo adeegyada waxbarasho iyaga oo u hoggaansamaya shuruudaha aqbalaadda iyo xeerarka kale ee u degsan haya'adahaas;

(b) In ay fursad u heli karaan adeegyada jihaynta xirfadlayaasha iyo shaqaalaysiintooda; haddii ay buuxiyaan shuruudaha lagaga qayb galo (adeegyadaan);

(c) In ay fursad u heli karaan adeegyada bulshada iyo caafimaadka, taas oo ku xiran in ay buuxiyaan marka hore shuruudaha ay kaga mid noqon karaan dadka ka faaiidaysan kara adeegyadaas;

(d) In ay fursad u heli karaan ka qaybgalka nolosha dhaqanka iyo hiddaha;

2. Iyaga oo la kaashanaya wixii suurtagal noqon kara dalalka ay dadka ay qusaysaa ka soo jeedaan, dawladaha shaqadu, waa in ay qaataan siyaasad, looga gol leeyahay in la fududeeyo ku dhex darka (gelinta) caruurta shaqaalaha soogalootiga ah goobaha wax barasho ee dalka shaqada, gaar ahaan arrinta ku saabsan in la baro caruurtaas luqadda dalka ay joogaan lagaga hadlo.

3. Dawladaha shaqadu waa in ay dadaal ugalaan in ay u suurta gashaan caruurta shaqaalaha soogalootiga ah barashada afkooda hooyo iyo dhaqankooda, waxaana ay arrintaan, inta suurta gal ah, iskaashi kala samaynayaan dawladaha ay dadka ay qusaysaa ka soo jeedaan.

4. Dawladaha shaqadu waxa ay bixin karaan, barnaamijyo waxbarasho oo gaar ah oo caruurta shaqaalaha soogalootiga ah lagu barayo afkooda hooyo, iyada oo haddii ay lagama maarmaan noqoto dawladaha shaqadu iskaashi kala samaynaya arrintaan dawladaha dadka ay qusaysaa ka soo jeedaan.

*Qodobka 46aad*

Shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu waxa ay xaq u leeyihiin, sida uu dhigayo sharciga dawladaha ay qusayso, iyo sidoo kale heshiisyada caalamiga ah ee arrintooda quseeya iyo waajibaadka dawladaha ay qusaysaa ay qaadaan ee ka dhasha xubinta ay ka yihiin midaw canshuura ah, in loo sameeyo canshuur dhaaf wixii la dhoofinayo ama lasoo dajinayo sida alaabooyinka qofka shaqaalaha soogalootiga ah shakhsi ahaan u sito ama alaab guri ah, iyo sidoo kale wixii qalab ah ee qofka shaqaalaha soogalootiga ah uu u sito (wato) in uu ku qabto shaqo mushaari ah taas oo loo ogolaaday in uu ka qaban karo dawladda shaqada, arintaani waxa ay imaan:

(a) Marka uu qofka shaqaalaha soogalootiga ah ka tegayo dawladda uu ka soo jeedo ama dawladda uu deganaanshaha rasmiga ah ku leeyahay;

(b) Bilawga hore ee qofka shaqaalaha soogalootiga ah loo aqbalayo in uu geli karo dawladda shaqada;

(c) Marka uu si kama damays ah uu uga soo baxayo dawladda shaqada;

(d) Marka si kama damays ah dib ugu noqonayo qofka shaqaalaha ah dawladda uu u dhashay ama dawladda uu ku leeyahay deganaanshaha rasmiga ah.

*Qodobka 47aad*

1. Shaqaalaha soogalootiga ah waxa ay xaq u leeyihiinin in ay waxa ay shaqaysteen ama kayd ay haystaan ah ay ka xawili karaan dalka shaqada iyaga oo u diraya dalka ay u dhasheen ama dawlad kasta oo kale, gaar ahaan lacagaha lagama maarmaanka ah ee ay ku taageerayaan qoysaskooda. Lacag xawilidda noocaas ah waa in qaabka loo dirayaa noqotaa mid waafaqsan hababka uu qabo sharciga ka dhaqan gashan dawladda ay qusayso iyo sida ay dhigayaan heshiisyada caalaamiga ah ee dhaqan gal ka ah.

2. Dawladaha ay qusaysaa waa in ay qaadaan tallaabooyin ku habboon si loo fududeeyo xawilaadda noocaas ah

*Qodobka 48aad*

1. Iyadoo aan wax loo dhimayn heshiiyada dhaqan galka ah ee canshuuraha labo jeer qaadka ah, shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskoodu, marka ay timaato dakhliga ay ka shaqaysteen dawladda shaqada waxaa imaanaya arrimahan soo socda:

(a) Ma bannaana in shaqaalaha soogalootiga dusha looga tuuro wax canshuur ah noocay doonto ha ahaatee taas oo aanay la wadaagin dadka wadanka u dhashay ee ay isku xaaladda yihiin;

(b) Shaqaalaha soogalootiga ah waxa ay xaq u yeelan in iyagana loo sameeyo wixii canshuur dhimis ama canshuur dhaaf ah ee loo sameeyo dadka u dhashay dalka shaqada ee ay isku duruufta yihiin, waxaa ku jirta canshuur dhimista loo sameeyo dadka la biilo ee qoysaskooda ka tirsan.

2. Dawladaha qaybta ka ah axdigan waa in ay guntiga dhiisha isaga dhigaan in ay qabatimaan tallaabooyin ku habboon si meesha looga saaro labo jeer la canshuuro dakhliga kaydadka shaqaalahaas soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda.

*Qodobka 49aad*

1. Haddii markaas sharciga dal u yaal uu dhigayo in labo fasax (ogolaansho) oo kala duwan qofku uqaato shaqada iyo joogitaanka dalka, dawladda shaqadu waa in ay u soo saartaa shaqaalaha soogalootiga ah fasax joogitaan oo aan ka yarayn muddada uu fasaxa u haysto qofka shaqaalaha soogalootiga ah in uu ka shaqaysan karo dalka shaqada.

2. Shaqaalaha soogalootiga ah ee iyagu ku sugan dalka shaqada, kuwaas oo si xorriyad ah loogu ogol yahay in ay doortaan shaqada mushaariga ah ee ay qabanayaan ma noqon karaan kuwa lagu tiriyo in ay xaalad aan nidaam ahayn dalka ku joogaan ama kuwa waayi kara fasaxa joogitaanka (iqaamadda) ka dib marka dhab ahaan shaqadii ay hayeen lasoo afjaray ka hor intaanu ka dhicin fasixii ay u haysteen in ay dalka shaqada ka shaqaynsan karaan.

3. Si loo siiyo shaqaalaha soogalootiga ah ee ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan hadda ah, waqti ku filan oo ay ku heli karaan shaqooyin cusub, waa in aan laga qaadin fasaxa ay u haystaan joogitaanka dalka shaqada ugu yaraan inta laga gaarayo muddo ay ku gudan karaan xuquuqda shaqa la'aanta (ama dadka shaqa la'aantu la degtay).

*Qodobka 50aad*

1. Haddii ay dhacdo in uu geeriyoodo qof shaqaale soogalooti ah ama uu kala tag (furriin) ku yimaado dadkii is qabay, dawladda shaqadu waxa ay iyada oo il naxariiseed ku eegaysa xubnaha ka tirsan qoyskaas siinaysaa fasax joogitaan oo dalkaas ay ku joogaan, iyada oo ku salaynaysa dib-u-midaynta xubnaha qoyska, waxayna dawladda shaqadu ay tixgalin siinaysaa dhererka muddada ay dadkaasi horay dalka u joogeen.

2. Xubnaha ka tirsan qoyskaas oo aan iyaga la siin fasax joogitaan oo noocaas ah waa in loo ogolaadaa bixidda ka hor waqti macquul ah si loogu suurta galiyo in wixii arrima ah ee dalka shaqada kaga harsan ay uga dhammaystaan.

3. Ma bannaana in loo fasiro axkaamta ku xusan faqradaha 1aad iyo 2aad ee qodobkan hadda ah hab dhibaato u keeni kara xaq joogitaan iyo shaqo oo xubnaha qoysaskaas heli lahaayeen, haddaanu jireen axkaamta faqradahaasi, xuquuqdaas oo ay ku heli lahaayeen sida uu dhigayo sharciga dalka shaqada u yaal ama heshiis markaas labo dawladood u dhexeeya ama heshiis dawlado badan u dhexeeya oo ka dhaqan gashan dalkaas.

*Qodobka 51aad*

Shaqaalaha soogalootiga ah kuwaas oo aan loo ogolayn in ay si iskood ah ay u doortaan shaqada ay doonaan, sina looguma tirin karo kuwa sharci daro ku jooga (dalka shaqada), ama kuma waayi karaan fasaxa joogitaanka oo kaliya in shaqadii ay hayeen la soo gaba gabeeyay ka hor intaanu dhicin muddadii fasaxa ay ugu haysteen in ay shaqo dalkaas ka qaban karaan, waxaase taas aan ku jirin, haddii markaas fasaxa joogitaanku uu si cad ugu xiran yahay shaqada cayiman ee awgeed awalba fasaxa joogitaanka loo siiyay qofka shaqaalaha ah. Shaqaalaha soogalootiga ah ee noocaas ah waxa uu xaq u yeelanayaa in uu baadi goob u galo shaqo kale ama in uu ka qayb galo hawlaha guud ama in uu dib tababar u galo inta ka harsan muddada fasaxa shaqada, iyada oo la dhawrayo shuruudaha ku cad fasaxa shaqada.

*Qodobka 52aad*

1. Shaqaalaha soogalootiga ah ee ku sugan dawladda shaqadu waxa ay xaq u leeyihiin in ay si iskood ah u doortaan shaqada ay doonaan, iyada oo la dhawrayo shuruudaha iyo xayiraadaha soo socda:

2. Dawladda shaqadu marka ay la dhaqmayso shaqaale kasta oo soogalooti ah waxaa u bannaan in ay:

(a) Xayiraad saarto fursadda soogalootigu u heli karaan noocyo cayiman oo shaqo ah, adeegyo ama hawlo ah, kuwaas oo lagama maarmaan u ah danaha dawladaas laguna qeexay shuruucda qaranka;

(b) Xayiraad saarto doorashada madaxa banaan ee shaqaalaha soogalootiga ah u leeyihiin in ay shaqada ay rabaan iyagu doortaan, hab waafaqsan sharciga u yaal ee ka hadlaya aqoonsiga aqoonta xirfadeed ee lagu sameeyay dalkaas dibaddiisa. Hase ahaatee, dawladaha qaybta ka ah axdigaan hadda ah waa in ay guntiga dhiisha isaga dhigaan sidii ay u aqoonsan la haayeen aqoonta noocaas ah.

3. Sidoo kale, dawladda shaqada, waxa u bannaan in marka ay la tacaalayso shaqaalaha soogalootiga ah kuwaas oo ogolaanshaha joogitaankooda muddo ku eg yahay in ay :

(a) Ka dhigto xaqa doorashada shaqo ee madaxa banaan ee shaqaalaha soogalootiga ah ku dooran karaan shaqooyin mushaari ah, hab waafaqsan shardiga uu shaqaalaha soogalootiga ah ku mutaystay in la siiyo sharciga joogitaanka, isaga oo dantiisu tahay in uu shaqo mushaari ah ka qabto dalkaas muddo ku cad sharciga qaranka kaas oo aan ka badnaan karin muddo 2 sano ah;

(b) Yarayso ama xadiddo fursadda uu shaqaale soogalooti ah u heli karo shaqooyin mushaari ah iyadoo fulinaysa siyaasaddeeda ku aadan in mudnaan la siiyo muwaadiniinteeda ama shakhsiyaad iyagu u matalaya danahaan sida sharcigu dhigayo ama uu qabo heshiisyada labo dawladood ama dawlado badan u dhexeeya. Kuma fulayo shardigaani shaqaalaha soogalootiga ah kaas oo isagu si sharci ah ku deganaa dawladda shaqada isaga oo dantiisu ahayd in uu shaqo mushaari ah ka qabto muddo ku cad sharciga qaranka oo aan dhaafsiis nayn 5 sano.

4. Dawladaha shaqadu waa in ay qeexaan shuruudaha uu qofka soogalootiga ah ku heli karo fasax sharci ah oo uu ku qaban karo shaqo gaar u ah. Shaqadaas gaar ka ah waa in laga tiriyaa muddadii uu horay shaqaalaha soogalootiga ah ugu sugnaa dawladda shaqada.

### *Qodobka 53aad*

1. Xubnaha ka tirsan qoyska shaqaale soogalootiga ah kuwaas oo laf ahaan toodu haysta fasax degenaansho ama ogolaansho aan muddaysnayn ama iskiis loo cusboonaynsiin karo waa in si xorriyad ah loogu ogolaadaa in ay doortaan shaqadooda mushaariga ah si waafaqsan isla shuruudaha loo adeegsado (ku fulaya) shaqaalaha soogalootiga ah ee ku xusan qodobka 52 ee axdigan hadda ah.

2. Arrinta ku saabsan xubnaha ka tirsan qoyska shaqaale soogalooti ah kuwaas oo aan loo ogolayn in ay si xorriyad ah u dooran karaan shaqooyinkooda mushaariga ah, dawladaha qaybta ka ah axdigan waxa ay il naxariiseed ku eegayaan shaqaalahaas iyaga oo mudnaan ka siinaya shaqaalaha kale ee doonaya ogolaansho ay shaqo mushaari ah kaga qaban karaan dawladda shaqada, taas oo waafaqsan heshiisyada laba dawladood ama dawlado badan dhex mara.

*Qodobka 54aad*

1. Iyadoo aan wax u dhimayn shuruudaha fasaxooda deganaanshaha ama ogolaanshaha ay u haystaan in ay shaqeeyaan iyo xuquuqda ku cad qodobada 25 iyo 27 ee axdigan hadda ah, shaqaalaha soogalootiga ah waxa ay xaq u leeyihin in ay helaan mucaamalo ay ula siman yihiin muwaadiniinta dawladda shaqada wixii ku saabsan :

(a) Ka ilaalinta ka cayrinta shaqada

(b) Xuquuqda ama faa'iidooyinka la siiyo dadka shaqa la'aantu soo wajahdo

(c) Fursad u helidda mashaariicda hawlaha guud ee la gula dagaalamo shaqo la'aanta

(d) Fursad u helidda shaqo kale haddii markaas shaqo ay hayeen lumiyaan ama uu soo afjarmo shaqo mushaari ah oo ay hayeen, sida ku xusan qodobka 52 ee axdigan hadda ah.

2. Haddii shaqaale soogalooti ah uu sheegto in shuruudaha ku qoran heshiiskiisa shaqadu uu ku xad gudbay ama jabiyay qofkuu u shaqaynayay, shaqaalahaasi waxa uu xaq u yeelanayaa in uu u gudbiyo dacwadiisa madaxda awoodda u leh ee dawladda shaqada, isaga oo raacaya shuruudaha ku xusan qodobka 18aad, faqraddiisa 1aad, ee ka mid ah axdigan hadda ah.

*Qodobka 55aad*

Shaqaalaha soogalootiga ah kuwaas oo la siiyay ogolaansho ay ku qaban karaan shaqo mushaari ah, iyada oo la dhawrayo shuruudaha ku lifaaqan ogolaanshahaas, waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan mucaamil ay ula siman yihiin muwaadiniinta dawladda shaqada marka ay shaqada mushaariga ah qabanayan.

*Qodobka 56aad*

1. Ma bannaana in shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda ee ku xusan qaybtaan hadda ah ee axdigan laga cayriyo dalka shaqada, haddii aanay markaa jirin sababo cayrintooda loo cuskaday oo ku qeexan sharciga dalka u yaal, iyada oo la dhawrayo wixii dammanad ah oo lagu go'aan shay qaybta 3aad .

2. Waa in aan cayrinta loo samayn iyadoo danta laga leeyahay tahay in loo diido shaqaale soogalooti ah iyo xubin ka tirsan qoyskiisa xuquuqda ka dhalanaysa fasaxa deganaanshaha iyo shaqada.

3. Marka laga fekarayo eryidda shaqaale soogalooti ah ama xubin ka tirsan qoyskiisa, waa in xisaabta lagu darsadaa wixii tix galin bini aadam-nimo ah iyo dhererka muddada uu horay dawladda shaqada u deganaa.

# QEYBTA V

*Qodobka 57aad*

Qaybaha gaarka ah ee ka tirsan shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda ee lagu caddeeyay qaybtaan axdiga hadda ah kuwaas oo iyagu haysta waraaqaha looga baahnaa ama si sharci ah ku jooga, waaxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan xuquuqda ku xusan qaybaha 3aad iyo 4aad, iyadoo la dhawrayo qaybaha wax laga bedelay ee hoos ku xusan.

*Qodobka 58aad*

1. Shaqaalaha xuduudaha ka shaqaysta, sida ay ugu qeexan yihiin qodobka 2aad, faqraddiisa 2aad (a), waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan xuquuqda ku xusan qaybta 4aad ee iyaga ku fulaysa ama lagu dabakhayo madaama ay joogaan kana shaqaystaan ciidda dawladda shaqada, iyadoo maanka lagu haynayo in aanay shaqaalahaasi ku lahayn deegaan joogto ah dawladdaas.

2. Dawldaha shaqadu waa in ay ka fiirsataa iyaga oo il naxariiseed ku eegaya in ay siiyaan shaqaalaha xuduudaha xuquuq ay si xorriyad ah ugu dooran karaan shaqada ay doonaan waqti cayiman ka dib. Siinta xaqaasuna waa in aanu saamayn xaaladdooda ah in ay yihiin shaqaale xuduudka ka shaqaysta.

*Qodobka 59aad*

1. Shaqaale xilliyeed ku, sida ay ugu qeexan yihiin qodobka 2aad, faqraddiisa 2aad (b), ee axdigan hadda ah, waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan xuquuqda lagu xusay qaybta 4aad ee iyaga ku fulaysa ama ku dabakh maysa maadaama ay joogaan kana shaqaystaan ciidda dawladda shaqada, xuquuqdaas oo la jaan qaadi karta xaaladooda ah in ay yihiin shaqaale xilliyeed, iyada oo xisaabta lagu darsanayo xaqiiqda ah in shaqaalahaasi oo kaliya ay joogaan dawladda shaqada qayb sanadka ka mid ah.

2. Dawladda shaqadu, iyadoo dhawraysa faqradda 1aad ee qodobkan hadda ah, waa in ay ka fiirsataa suurtagalnimada in ay siiso shaqaale xilliyeedka dalkeeda ka shaqaynayay waqti dheer, ogolaansho ay qaban karaan shaqooyin kale oo mushaari ah oo aan ahayn oo kali ah kuwa fasaxa shaqada uun loogu qoro in ay qabtaan iyo in shaqaalahaas mudnaanta laga siiyo shaqaalaha kale ee iyagu doonaya in ogolaansho ay ku shaqaqaystaan laga siiyo dawladdaas, iyadoo la dhawrayo wixii heshiisya ah ee labo dawladood ama dawlado badan u dhexeeya ee arrintan qusaysa.

*Qodobka 60aad*

Shaqaalaha wareega, sida loogu qeexay qodobka 2aad, faqraddiisa 2(a), ee axdigan hadda, waxa uu xaq u yeelanayaan xuquuqda lagu sheegay qaybta 4aad taas oo ay helayaan inta ay joogaan kana shaqaystaan ciidda dawladda shaqada taas oo la jaan qaadi karta xaaladdooda ah in ay ku yihiin shaqaale wareega dawladdaas.

*Qodobka 61aad*

1. Shaqaalaha iyo xubnaha qoysaskooda ku xiran shaqo mashruuc, sida loogu qeexay qodobka 2aad, faqraddiisa 2aad ee axdigan hadda ah, waxa ay xaq u yeelan in ay helaan xuquuqda ku xusan qaybta 4aad, marka laga reebo axkaamta ama qodobada ku qoran faqradaha 1 (b) iyo (c) ee qodobka 43 aad, iyo faqradda 1(d) ee qodobka 43 aad, ee ka hadlaysa guryaynta bulsho, iyo faqradda 1(b) ee qodobka 45 iyo qodobada 52 ilaa 55.

2. Haddii shaqaale mashruuc ku xiran uu ku dacwoodo in shuruudihii heshiiska shaqadiisa uu ku xad gudbay qofkii uu shaqaynayay, waxa uu xaq u yeelan in uu u gudbiyo dacwadiisa madaxda awoodda u leh ee dawladda kuwaas oo iyagu awood sharci u leh ay ku xukumi karaan loo shaqeeyaha, iyada oo la raacayo shuruudaha ku xusan qodobka 18 ee axdigan hadda ah.

3. Iyadoo la dhawrayo heshiisyada labo dawladood ama dawlado badan u dhexeeya ee arrinkan la xiriira, dawladaha qaybta ka ah axdigan ee ay qusaysaa waa in ay guntiga dhiisha isaga dhigaan in ay u suurta-galiyaan shaqaalaha mashaariicda ku xiran in ay noqdaan kuwa uu ilaalinayo hababka damaanaqaadka bulsho ee ka jira dalka ay kasoo jeedaan ama ay caadi ahaan u degan yihiin inta ay hawsha mashruuca ku guda jiraan. Dawladaha shaqadu ee ay qusaysaa waa in ay qaadaan tallaabooyin ku habboon oo lagu baajinayo wax alla wixii keeni kara diididda xuquuqda shaqaalahaas ama keeni karta soo cel celin lacag bixin oo arrinkan ka dhacda.

4. Iyadoo aan meel lagaga dhicin axkaamta qodobada 47 ee axdigan hadda ah iyo heshiisyada labo dawladood ama dawlado badan u dhexeeya, dawladaha ay qusayso ee qaybta ka ah axdigan waa in ay ogolaadaan bixinta mushaaraadka ay shaqaystaan shaqaalaha mashaariicda ku xiran ee ku sugan dalkooda ama dalalka ay rasmi ahaan u degan yihiin.

*Qodobka 62aad*

1. Shaqaale hawl cayiman loo idmaday sida lagu qeexay faqradda 2aad (g) ee qodobka 2aad ee axdigan hadda ah, waxa ay xaq u yeelanayaan in ay helaan xuquuqda ku cad qaybta 4aad, marka laga reebo axkaamta qodobada faqardda 1(b) and (c) ee qodobka 43 aad, iyo faqaradda 1 (d) ee qodobka 43 aad, ee ka hadlaya mashaariicda guryaynta, qodobka 52, iyo qodobka 54, faqraddiisa 1(d).

2. Xubnaha ka tirsan qoysaska shaqaalaha hawsha cayiman loo idmaday waxa ay xaq u yeelanayaan xuquuqda la xiriirta xubnaha qoyska ee ku xusan qaybta 4 aad ee axdigan hadda, marka laga reebo axkaamta qodobka 53 aad.

*Qodobka 63aad*

1. Shaqaalaha iskood u shaqaysta, sida lagu qeexay qodobka faqradda 2aad (h) ee qodobka 2aad, ee axdigan hadda ah, waxa ay xaq u yeelan in ay helaan xuquuqda ku cad qaybta 4aad, marka laga reebo xuquuqda sida gaarka ah ay u yeelanyaan shaqaalaha iyagu haysta heshiis shaqo.

2. Iyadoo aan meel laga ga dhacayn qodobada 52-aad iyo 79-aad ee Axdigan hadda ah, lagama wado soo afjaridda hawsha dhaqaale ee uu qabto shaqaalaha iskood u shaqaysta in laga qaado fasaxa ay u haystaan iyaga iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda in ay ku negaadaan ama ka qabtaan shaqo mushaari ah dalka shaqada, haddii markaas aanu fasaxa deganaanshuhu si cad ugu xirnayn shaqada cayiman oo iyada darted loogu ogolaaday fasaxa shaqada.

# QEYBTA VI

*Qodobka 64aad*

1. Iyadoo aan wax loo dhimin qodobka 79 aad ee axdigan hadda ah, dawladaha axdiga qaybta ka ah ee ay qusaysaa waa in ay sida ugu habboon uga wada tashadaan isagana kaashadaan sidii loo xoojin lahaa duruufta nabad gelyo, bini aadam-nimo iyo sinnaan ee laxiriirta soogalootinimada caalamiga ah ee xoogsatada ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda.

Waxaa habboon, arrintan marka la joogo, in aan xoogga la isugu gayn oo kaliya daboolidda baahiyaha shaqaalaha iyo waxqabadka shaqaalaha, laakiin sidoo kale tixgalin la siiyo baahiyaha kale ee dhaqaale, dhaqan iyo bulsho ee shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskooda ay qabaan, iyo sidoo kale in la tixgaliyo cawaaqibka soogalootinimda noocaani ay ku yeelan karto bulshooyinka ay qusayso.

*Qodobka 65aad*

1. Dawladaha qaybta ka ah axdigan hadda ah waa in ay meel mariyaan adeegyo ku hubboon oo ay kula tacaalaan arrimaha quseeya soogalootinimada caalamiga ah ee shaqaalaha iyo xubnaha qoysaskooda. Waxaana hawlahooda ka mid ah, arrima dhawr ah sida :

(a) Qaabaynta iyo meel marinta siyaasado ka hadlaya soogalootinimada noocaan ah;

(b) Xog is dhaafsi wada tashi iyo wada shaqayn ku dhisan oo lala sameeyo madaxda awoodda u leh ee dawladaha kale kuwaas oo qaybta ka ah axdigan ayna qusayso arintan soogalootinimadu;

(c) Siinta xog ku habboon, oo si gaar ah loo siiyo dadka loo shaqeeyo, shaqaalaha iyo ururadooda iyadoo lagu wargalinayo siyaasadaha, shuruucda iyo xeerarka la xiriira socdaalka iyo shaqada, iyo sidoo kale heshiisyada lala gaaray dawladaha kale ee la xiriira socdaalka iyo arrimaha kale ee la xiriira;

(d) Siinta xog iyo taageero ku habboon shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda arrimaha la xiriira fasaxyada, hababka iyo tallaabooyinka rasmiga ah ee tegidda, safarka, joogidda iyo soo gelitaanka, shaqooyinka ay qabanayaan ee mushaariga ah, soo gelidda iyo bixidda, sidoo kale duruufaha shaqada iyo nolosha

ee ka jira dawladda shaqada iyo canshuuraha, lacagta, iyo wixii kale oo shuruuc iyo xeerar ah ee dawladaas ka jira.

2. Dawladaha qaybta ka ah axdigaan waa in ay fududeeyaan sida ugu habboon ee ay ku bixin lahaayeen adeegyada qunsuliyadeed (safaaradeed) iyo adeegyo kaleba oo lagama maarmaan u ah daboolidda baahiyaha bulsho iyo dhaqan ee shaqaalaaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda.

*Qodobka 66aad*

1. Iyadoo la dhawrayo faqradda 2aad ee qodobkaan, awoodda ama xaq uyeelashada qorasho shaqaale la doonayo ay shaqo ka qabtaan dal kale waa mid arintaasu ku kooban dhinacyada soo socda:

(a) Hawlaha guud ama haya'adaha dawladda ee hawlaha noocaasu ka socdaan;

(b) Hawlaha guud ama haya'adaha dawladda u qaabilsan shaqada iyada oo sal looga dhigayo heshiis u dhexeeya labada dawladood ee ay arrintu qusayso;

(c) Haya'ad kasta oo ka dhalatay heshiis labo dawladood ama dawlado badan u dhexeeya.

2. Iyadoo la dhawrayo ogolaansho kasta oo kasoo baxa haya'adaha guud ee dawladaha ay qusayso ee qaybta ka ah axdigaan, iyo ogolaan shahooda iyo kormeerkooda waafaqsan hab dhaqanka iyo sharciga u degsan dawladahaas, waxaa bannaan in loo ogolaado in hawlaha lasoo sheegay (shaqaale qorashada) ay ku dhaqaaqi karaan wakaaladaha, dadka ay dhici karto in ay shaqaaleeyaan ama dad iyaga matalaya.

*Qodobka 67aad*

1. Dawladaha qaybta ka ah axdigaan waa in ay sida ugu habboon uga wada shaqeeyaan qabatinka tallaabooyin ku taxaluqa in si nidaam ah shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskooda ugu laabtaan dalka ay u dhasheen marka ay kasoo go'do ama fasaxa ay u haystaan deganaanshaha ama shaqadu uu ka dhaco ama duruufta ay dalka shaqada kaga xoogsadaan ay tahay mid aan sharci ahayn.

2. Arrinta ku saabsan shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda ee si sharci ah ku jooga dalka shaqada, dawladaha heshiiskan ku jira ee ay qusaysaa waa in ay sida ugu habboon uga wada shaqeeyaan, iyadoo la waafajinayo shuruudaha ay isku afgartaan dawladahaasi, ee looga gol-leeyahay in loogu xaqiijiyo shaqaalaha soogalootiga ah duruufo dhaqaale oo macquula oo ka hana qaada dulalkooda iyo sidii gacan looga gaysan lahaa is dhexgal bulsho iyo dhaqan oo shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskoodu ku yeeshaan dalka ay kasoo jeedaan.

*Qodobka 68aad*

1. Dawladaha qaybta ka ah axdigaan, oo ay ku jiraan dawladaha laga sii gudbo, waa in ay iska kaashadaan sidii loga hortagi lahaa loona cirib tiri lahaa ku shaqaysiga loogu shaqaysto xoogsatada soogalootiga ah si aan sharciga waafaqsanayn iyo tahriibta. Dawlad kastaana waa in ay qaadaa tallaabooyin lagu xaqiijinayo sidii loo gaari lahaa yoolkaas, dhulka ay gacanta ku hayso, tallaabooyinkaasina waa ku wan soo socda:

(a) Qaadidda tallaabooyin ku habboon si loo joojiyo faafinta xog ama macluumaad marin habaabin ah oo la xiriirta socdaalka;

(b) Tallaabooyin loo qaado sidii lagu ogaan lahaa loona cirib tiri lahaa tahriibta sharci darada ah ee shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda iyadoo ciqaab adag lagu qaadayo shakhsiyaadka, kooxaha ama cid kasta oo abaabusha, ka shaqaqaysa ama gacan siisa isku duba ridka ama ka shaqaynta tahriibta noocaas ah;

(c) Tallaabooyin loo qaado sidii ciqaab adag loo marin lahaa shakhsiyaadka, kooxaha iyo cid kasta oo si sharci daro ah kula kacda gacan kahadal, hanjabaad ama caga juglayn shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda.

2. Dawladda shaqadu waa in ay qaadaa tallaabo wax ku ool ah si ay uga cirib tirto dhulkeeda ku shaqaysiga sharci darada ah ee lagula kaco xoogsatada soogalootiga ah, iyadoo ay tallaabadaas ku jirto, in mar kasta oo ay suurta gal tahay la ciqaabo dadka ku shaqaysta xoogsatadaas, iyadoo tallaabadaasi aanay wax u dhimin wixii xuquuq ah ee ay shaqaalaha soogalootiga ah ku yeeshaan dadka habkaan aan sharciga ahayn u shaqaalaystay.

*Qodobka 69aad*

1. Dawladaha qaybta ka ah axdigaan waa in ay tallaabo ku habboon ka qaadaan, mar kasta oo ay dhacdo in shaqaale soogalooti ah iyo xubno ka tirsan qoysaskooda ay ku sugan yihiin dhulkooda, si loo xaqiijiyo in xaaladda noocaas ah aanay noqon mid sii jirta.

2. Mar kasta oo dawladaha ay qusayso ee ku jira axdigaan ay eegayaan suurtgalnimada in xaaladda dadka noocaas ah xal loo helo si waafaqsan sharciga dalka u yaal iyo heshiisyada labo dawladood ama dawlado badan u dhexeeya, waa in ay xisaabta ku darsadaan duruufta ay dadkaasi wadanka ku soo galeen, waqtiga ay joogayaan dawladaha shaqada iyo wixii kale oo la xiriira oo u baahan in tixgalin la siiyo, gaar ahaan arrimaha ku saabsan xaaladda qoysaska xoogsatadaas.

*Qodobka 70aad*

Dawladaha ku jira axdigaan waa in ay qaadaan tallaabooyin ay ugu xaqiijinayaan shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda ee sharciga dalalkooda ku jooga sidii ay u heli lahaayeen daryeel waafaqsan hal beegyada caalamiga ee caafimaadka, ammaanka iyo dhawrista karaamada qofka bini-aadamka ah, daryeelkaasuna waa in aanu ka liidan daryeelka ay dawladahaasu siiyaan muwaadiniintooda.

*Qodobka 71aad*

1. Dawladaha ku jira axdigaan waa in ay gacan ka gaystaan, mar alla marka ay lagama maarmaan noqoto, in maydka shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha qoysaskooda dib loogu celiyo dakii ay u dhasheen.

2. Wixii ku saabsan arrimo la xiriira magdhawga dhimashada qof shaqaale soogalooti ah ama xubin ka tirsan qoyskiisa, dawladaha qaybta ka ah axdigaan waa in ay, sida ugu habboon, gacan ugu siinayaan dadka ay qusayso in ay si dhaqsa ah arrimahan xal ugu helaan. Xalinta arrimahani waa in ay noqdaan kuwa lagu saleeyo sharciga wadanka u yaal, kaas oo waafaqsan axkaamta ku xusan axdigan hadda ah iyo heshiis kasta oo labo dawladood ama dawlado badan u dhexeeya oo arintan quseeya.

# QEYBTA VII

*Qodobka 72aad*

1. (a) Si loo xaqiijiyo sii jiritaanka meel marinta axdigaan hadda ah, waxaa la-yagleelay Guddiga Ilaalinta Xuquuqda Dhammaan Shaqaalaha Soogalootiga ah iyo Xubnaha ka tirsan Qoysaskooda (Protection of the Rights of All Migrant Workers and Members of Their Families), waxana hadda ka dib loogu yeerayaa "Guddiga");

   (b) Marka ay dhaqan galka heshiiskaan bilaamo, Guddigu waxa uu ka koobnaan doonaa 14 khabiir oo lagu yaqaan akhlaaq sare, dhexdhexaad nimo, aqoon iyo karti ay u leeyihiin hawsha uu axdigani ka hadlayo.

2. (a) Dawladaha ku jira axdigaan ama heshiiskaan waxa ay ku dooranayaan xubnaha guddiga habka cod bixinta sirta ah iyagoo kasoo dooranaya liis shakhsiyaad ah oo ay soo magacaabaan dawladaha qaybta ka ah axdigan, doorashada waa in ay noqotaa mid tixgalisa sidii qaybinta (tirade guddigu) u noqon lahayd mid si caddaalad ah loogu qaybsho deegaan ahaan (juquraafi ahaan), iyadoo si siman loogu qaybinayo xubnaha dawladaha shaqaalaha soogalootigu ka so jeedaan iyo kuwa shaqada loo soo doonto, sidoo kalena tixgalin la siinayo in hababka sharci ee adduunwaynaha ka jira la matalo, dawlad walbina waa in ay qof kasoo magacawdaa dadka dalkeeda;

   (b) Xubanaha guddiga waa la soo doortaa waxayse ku shaqeeyaan awoodooda qof ahaaneed.

3. Doorashada ugu soo horaysa waa in laqabtaa muddo aan dhaafsiisnayn lix bilood ka dib taariikhda axdigu dhaqan galo, wixii intaa ka damaysa doorashada waa in ay qabsoontaa labadii sano oo kasta mar. Afar bilood ka hor intaanay qabsoomin doorasha kasta, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa in uu waraaq u diraa dhammaan dawladaha qaybta ka ah axdigan isagoo ugu yeeraya in ay magacyada dadka u sharraxan labo bilood gudohood kusoo gudbiyaan. Xoghayaha Guud waa in uu diyaariyaa liis habka xarfaha alifeetada u kala horeeya oo ay ku

qoran yihiin dadka musharixiinta ah iyo waddamada soo sharraxay, waana in uu u dhiibaa liiska oo ay lasocdaan CV-yada (taariikh nololeedka) musharixiinta dawladaha ku jira axdiga bil ka hor taarikhda doorashada la qabanayo.

4. Doorashada xubnaha guddigu waa in ay ku qabsoontaa baaq Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay uu u diro dawladaha xubnaha ka ah axdiga si ay isugu yimaadan kulan ka dhaca xaruumaha Qaramada Midoobay. Shirkaas waxa uu qabsooma haddii saddex meeloodoo labo dawladaha xubnaha ka ah soo xaadiraan, dadka loo doorto guddiga waa musharixiinta hela tirada ugu badan codadka iyo codka aqlabiyadda mudlaqa ah (51%) ee codadka dawladaha xubnaha ka ah axdiga ee goobta jooga codkana dhiibta.

5. (a) Xubnaha guddigu waxa ay xilka haynayaan muddo afar sano ah. Hase ahaatee, waqtiga shan ka mid ah xubnaha lagu doortay doorashada hore waxa uu ku egyahay labo sano; isla marka doorashadu dhammaatona, magacyada shantaan xubnood waxaa qori tuur kusoo doorta guddoomiyaha shir gudoominaya kulanka dawladaha qaybta ka ah axdiga;

(b) Doorashada xubnaha afarta dheeraad ka ah ee guddiga waa in la qabtaa iyadoo oo la waafajinayo axkaamta 2, 3 iyo 4 ee qodobkan hadda ah, ka dib marka uu ka dhaqan galo dawladda afartan iyo koowaad ee xubinta ka noqon axdigan . Labada xubnood ee dheeraadka ah ee munaasabadaas lagu soo doortaa waa in waqtigoodu ku egyahay labo sano; waxaana magacyada labadaas xubnood si qori tuur ah u soo doorta guddoomiya shirka dawladaha ku jira heshiiska;

c) Xubnaha guddigu waxa ay xaq u leeyihiin in dib loo soo doorto haddii la soo sharraxo.

6. Haddii xubin ka mid ah guddiga uu dhinto, ama is casilo ama sabab kale darted uu ku dhawaaqo in aanu gudan karin hawsha guddiga loo igmaday, dawladda ku jirta heshiiska ee iyadu soo sharraxday khabiirkaan waa in ay kasoo dhex magacawdaa mawadiniinteeda khabiir kale oo hawsha sii qabta inta waqtiga ka dhiman, waxaana magacaabidaas dambe ku xirnaan doonta ogolaanshaha guddiga.

7. Xoghaya Guud ee Qarama Midoobay waa in uu siiyaa guddiga wixii shaqaale iyo agabka ah oo lagama maarmaan u ah in guddigu la yimaadaan hawlo wax ku ool ah.

8. Xubnaha guddigu waa in ay abaal marino ka helaan hantida Qaramada Midoobay si waafaqsan shuruudaha uu go'aamiyo Golaha Loo Dhan yahay.

9. Xubnaha guddigu waxa ay xaq u leeyihiin tasiilaadka, mudnaanaha iyo xasaanadaha ay lee yihiin khubarada iyo ergooyinka Qaramada Midoobay sida ku qeexan qaybaha la xiriira ee axdiga xasaanadda iyo mudnaanta ee Qaramada Midoobay.

*Qodobka 73aad*

1. Waxa ay ballan qaadayaan dawladaha ku jira heshiiskaan in ay usoo gudbiyaan Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay warbixin ku saabsan tallaabooyinka sharci dajin, sharci, maamul

iyo wixii tallaabooyin kale ah oo loo qaaday dhaqan gelinta qodobada heshiiskan hadda ah iyadoo laga doonayo arintaa (in ay ku dhaqaaqaan):

(a) Ka dib marka heshiisku ka dhaqan galo dawladaha laga hadlayo sanad gudihiis;

(b) Markaa ka dibna waa shantii sano oo kasta mar iyo mar kasta oo guddigu sidaas codsado.

2. Warbixinada la gudbinayaa sida uu dhigayo qodobkaan waa in ay kaloo tilmaan ka bixiyaan caqabadaha iyo sababaha, haddiiba ay jiraan, saamaynta ku leh dhaqan gelinta heshiiska oo ay ku jirto xog ama macluumaad ku saabsan sifaatka ama muqaalada qulqulka qaxa ah ee soo wajahaya dawladda ay qusayso.

3. Guddigu waa in uu go'amiyaa wax kasta oo talo iyo tusaalooyin ah oo ku habboon in uu ku jiro warbixinta.

4. Dawladaha ku jira heshiiska waa in ay warbixinadaan ka dhigaan kuwa ay si ballaaran u heli karaan dadwaynaha dalalkooda ku nool.

*Qodobka 74aad*

1. Guddigu waa in u kuur galaa warbixinada ay usoo gudbiso dawlad kasta oo heshiiska ku jirtaa, waana in ay ay u gudbiyaan wixii faallo ah ee ay ka bixinayaan warbixinta, oo macquul ah dawladda heshiiska ku jirta ee laga hadlayo. Dawladdanuna waxa ay soo gudbin kartaa wixii faaloo ama mulaaxadaad ah ee ay ka qabto faallooyinkii uu guddigu bixiyay iyada oo la raacayo qodobkan. Marka uu eego warbixinada, guddigu waxa uu ka codsan karaa dawladaha heshiiska ku jira macluumaad ama xog dhamaystir ah.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa in uu u gudbiyaa Maamulaha Guud ee Xafiiska Shaqaalaha Adduunka, waqti ku habboon ka hor furitaanka fadhi kasta oo caadi ah oo guddigu yeelanayo, koobiyada (nuqulada) warbixinada ay soo gudbiyaan dawladaha heshiiska ku jira ee laga hadlayo, iyo xogta la xiriirta eegidda warbixnadaan, si xafiisku ugu taageero guddiga wixii farsamo waaya aragnimo ah ee uu u leeyahay arrimaha heshiikan hadda ah uu ka hadlayo kuwaas oo soo galaya awoodda iyo takhasuska Ururka Shaqaalaha Adduunka. Guddigu waa in uu il gaar ah ku eegaa xilliga doodihiisa wixii mulaaxadaad ama farsamooyin ah ee xafiisku siiyo.

3. Ka dib marka uu latashado guddiga, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa kale oo uu u gudbin karaa nuqulo ka mid ah warbixinada, haya'adaha hawlaha gaarka ah qabta ee kale iyo sidoo kale urur goboleedyada kuwaas oo awoodooda shaqo wax ka qusayn karaan waxyaalaha warbixinadaan ka hadlayaan.

4. Guddigu waxa uu ugu yeeri karaa haya'adaha hawlaha gaarka ah qabta iyo qaybaha ay ka kooban tahay Qaramada Midoobay, iyo sidoo kale urur goboleedyada iyo haya'adaha kale ee ay qusayso, in ay qoraal kusoo gudbiyaan wixii macluumaat ah ee ay ka hayaan arrimaha

heshiiskaan ka hadlayo ee iyaga hawlohooda soo gali kara, si guddigu u eego (ama xisaabta ugu darsado).

5. Guddigu waa in uu casumaa Xafiiska Shaqaalaha Adduunka si uu u soo magacaabo khubaro talooyin bixin kara (ama talo loogu irkado) oo u matala shirarka guddigu yeelanayo.

6. Guddigu waxa uu casumaad u fidin karaa haya'adaha hawlaha gaarka ah qabta (takhasusiga ah) iyo qaybaha kale ee Qaramada Midoobay, iyo sidoo kale urur goboleedyada, si ay shirarka goob joog uga ahaadaan fikradahoodana loo dhegaysto markasta oo arrimaha shirku khuseeyo hawlo ay iyagu wax ka qabashadeeda awood u leeyihiin.

7. Guddigu waa in uu u gudbiyaa warbixin sanadeed ka hadlaysa fulinta heshiiskaan Golaha Loo Dhan yahay ee Qaramada Midoobay, iyadoo warbixinta ay ku jiraan talooyinka guddiga iyo fikradahooda, ay u cuskanayaan waxyaalaha ay ka dheehdeen darsidda iyo u guurgalka warbixanada iyo mulaaxadaadka ay iyaga u soo gudbiyaan dawladaha ku jira heshiiska.

8. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa in uu u gudbiyaa warbixinada sanadlaha ee guddigu diyaariyo dawladaha, qaybta ka ah heshiiskan hadda, iyo weliba Golaha Dhaqaalaha iyo Bulshada, Guddiga Qaramada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha, Maamulaha Guud ee Xafiiska Ururka Shaqaalaha Aduunka iyo ururada kale ee arrintani qusayn karto.

*Qodobka 75aad*

1. Guddigu waa in uu cuskadaa xeer hoosaadkiisa.

2. Guddigu waa in uu soo doortaa madaxdiisa muddo labo sano ah.

3. Guddigu waa in si caadiyan ah u kulmaa sanad kiiba mar.

4. Guddigu waa in uu sida caadiga ah kulamadiisa ku qabsadaa xarunta Qaramada Midoobay

*Qodobka 76aad*

1. Dawlad kasta oo ku jirta heshiiskaan hadda ah waxa ay waqti kasta ku dhawaaqi kartaa iyadoo raacaysa qodobkaan in ay aqoonsan tahay awoodda guddigu u leeyahay in uu helo oo eego wixii waraaqo ama dukumeenti ah oo dawlad heshiiska ku jirtaa ku dacwaynayso dawlad kale in aanay fulin waajibaadkeeda kaga aadanaa heshiiskaan hadda. Ma bannaana in la qabto lana eego waraaqaha iyo dukumeentiyada aanay soo gudbin dawlad heshiiska ku jirta oo iyadu ku dhawaaqday in ay qirayso (aqoonsan tahay) in ay hoostagyso awoodda (ikhtisaaska) guddiga. Ma bannaana in guddigu guddoomo ama qabto waraaqo quseeya dawlad heshiiska ku jirta haddii aanay markaas soo saarin baaqaas. Waraaqaha la guddoomo ama la qabto iyadoo la raacayo qodobkaan waa in loola dhaqmaa sida ku cad tallaabooyinka soo socda:

(a) Haddii dawlad ku jirta heshiiskan hadda ah u aragto in dawlad kale oo heshiiska ku jirta aanay fulinayn waajibaadkeeda kaga aadan heshiiskan, waxa ay farriin qoraal ah ugu sheegi kartaa arrinta jirta dawladaas kale ee heshiiska qaybta ka ah. Sidoo kale dawladda qaybta ka ah heshiisku waxa ay la socodsiin kartaa arrinta guddiga. Dawladda qaybta ka ah heshiiska ee qoraalka heshay waa in ay muddo saddex bilood gudohood ah ugu gudbisaa dawladda waraaqaha so dirtay, sharraxaad, ama qoraal caddayn ka bixinaya arrinta, waana in qoraalka uu ku jiraa, wixii macluumaat suurta gal ah ee arrinta quseeya, iyadoo tilmaan ka bixinayo hababka iyo xeer hoosaadyada sharci ee la qaatay, ama la qaadan doono ama xeer ahaan ka yaal arrintaan;

(b) Haddii arrinta aan lagu xalin hab ay ku qancaan labada dawladood ee arrintu qusayso muddo lix bilood gudahood ah oo ka bilaamaysa xilliga dawladda waraaqda loo diray ay guddoontay qoraalka hore, dawlad kastaa waxa ay xaq u leedahay in ay arrinta u gudbiso guddiga iyada oo la socodsiinaysa dawladda kale (ee ay wax isku hayaan);

(c) Guddigu waxa uu geli karaa arrinta loo soo gudbiyay oo kaliya marka uu hubiyo in dhammaan xeer hoosaadyada iyo sharciyada ka yaalay arrintaa ee waafaqsan mabaadiida guud ee sharciga caalamiga ah la adeegsaday oo lagala quustay (in lagu xaliyo arrinta). Guddigu ma raacayo xeerkaa, haddii uu arko (ula muuqato), in xeerarka sharci ee arrrinta lagu dhayay uu yahay mid dhererkiisu (badnaantiisu) aanu caqli gal ahayn;

(d) Iyadoo la dhawrayo axkaamta ku xusan faqradda (c) ee isla faqraddaan hadda, guddigu waa in uu u diyaariyaa xafiisyadiisa wanaagsan sidii uu isugu keeni lahaa dawladaha heshiiska ku jira ee aarintu qusayso si arrinta loogu xalliyo si saaxiibtinima ah iyadoo sal looga dhigayo xushmaynta waajibaatka ku xusan heshiiskan hadda ah;

(e) Guddigu waa in uu ka yeeshaa fadhiyo albaabadu u xiranyihiin marka uu u kuurgalayo waraaqaha iyo dukumeentiyada sida uu dhigayo qodobkaan;

(f) Arrin kasta oo loo soo gudbiyo guddiga sida ku cad faqradda (b) ee isla faqraddan, guddigu waxa uu ugu baaqi karaa labada dawladood ee arrintu qusayso, in ay wixii xog ah ee arrinta la xiriira u soo gudbiyaan guddiga;

(g) Dawladaha heshiiska ku jira ee ay qusayso, ee ku xusan faqardda faraca ah (b) ee isla faqraddan, waa in ay xaq u yeeshaan in cid matasha ay u joogto arrintooda guddigu eegayo iyo in ay wixii bayaanna ah ee ay hayaan ku gudbiyaan qoraal ama hadal;

(h) Toban iyo labo bilood gudohood ka dib taariikhda uu qoraalka ogaysiisnta arinta soo gaartay, Guddigu waa in uu ku gudbiyaa iyada oo la raacayo faqradda (b) ee heshiika hadda, warbixin sida soo socota u qoran:

(i) Haddii xal la gaaro waafaqsan shuruudaha ku xusan faqradda (d) ee isla faqraddaan, guddigu waa in uu ku soo goobaa warbixintiisa qoraal kooban oo ka hadlaya xaqaaiqa ama dhacdooyinka uu ka kooban yahay xalka la gaaray;

(j) Haddii aan xal la gaarin waafaqsan shuruudaha ku xusan faqradda (d), guddigu waa in uu warbixintiisa ku xusaa xaqaaiqa ama dhacdooyinka la xiriira ee quseeya arrinta u dhexaysa labada dawladood ee heshiiska ku jira ee arrintu qusayso. Fikradaha qoraalka ah iyo cajladaha laga duubo fikradaha ay soo jeediyaan labada dawladood ee arrintu qusayso waa in lagu lifaaqaa warbixinta. Guddigu waxa uu xaq u leeyahay in uu u diro labada dawladood ee arrintu qusayso ee heshiiska ku jira oo kaliya, aragtiyadiisa uu qabo taas oo uu u arko in ay xiriir la leedahay arrinta labada dawladood ka dhaxaysa.

Arrin kasta oo jirta, waa in warbixinta loo diraa labada dawladood ee heshiiska ku jira ee arrintu qusayso.

2. Axkaamta qodobkaan hadda ah waa in uu dhaqan galaa marka toban dawladood ay soo saaraan baaq iyadoo la raacayo faqradda 1aad ee qodobkaan. Dawladaha soo saara baaqaan ee heshiiska ku jira waa in ay baaqyadooda dhigaan xafiiska Xoghayaha Guud ee Qarama Midoobay, kaas oo usii gudbin doona nuqulo ka mid ah baaqyadaan dawladaha kale ee qaybta ka ah heshiiskaan. Waxaa bannaan in dawladuhu la baxaan (la noqdaan) waqti walba baaqyadaan iyadoo la ogaysiinayo Xoghayaha Guud. Baaqa la bixidda noocaan ah waa in aanay wax u dhimin in la eego arrin walba oo lagaga hadlay waraaq horay loo gudbiyay iyadoo la raacayo qodobkaan hadda ah, waraaqo dambe oo dawladda heshiiska ku jirtaa ay soo dirto lama qaban karo iyadoo la raacayo qodobkaan ka gadaal marka ogaysiiska la bixidda baaqa ay gaartay Xoghayaha Guud, haddii aan markaas dawladda arrintu qusaysaa ee heshiiska ku jirta soo saarin baaq cusub.

*Qodobka 77aad*

1. Dawlad walba oo qayb ka ah heshiiskaan waxaa u bannaan in ay ku dhawaaqdo sida uu dhigayo qodobkaan in ay aqoonsanayso awoodda guddigu u leeyhay in uu qabto oo eego waraaqaha ay soo diraan shakhsiyaad ama cid ka wakiil ah kuwaas oo hoos taga awoodda (sharci) ee guddiga iyaga oo ku dacwoonaya in xuquuqdooda qof ahaaneed ee heshiiskaan dhigayo ay ku xad gudubtay dawladdaas heshiiska ku jirta. Guddigu waa in aanu qaban ama guddoomin waraaqaha quseeya dawlad heshiiska ku jirta taas oo aan soo saarin baaqa noocaan oo kale ah.

2. Guddigu waa in uu u tixgaliyaa (ka soo qaadaa) waraaq kasta oo aan saxiix wadan ama si xun loogu adeegsado xuquuqda gudbinta waraaqahaas ama aan waafaqsanayn axkaamta heshiiskaan hadda ah, mid aan la ogolaan karin sida uu dhigayo qodobkaan.

3. Guddigu waa in aanu eegin waraaq kasta oo ka socota shakhsi sida qodobkaan dhigayo haddii aanay xaqiijin:

(a) In isla arrintaan aan horay baaritaan loogu samayn ama aan hada baaritaankeeda socon iyadoo la raacayo hab ka mid ah hababka caalamiga ah ee baaritanka ama xallinta ismaan-dhaafka;

(b) In qofku soo dhameeyay (soo wada maray) dhammaan hababka sharci ee xaqiisa uu dib ugu soo dhacsan karo ama uu ku qaan dhaban karo ee ka jira dalka uu ku sugan yahay; tani xeer la adeegsan karo maaha, haddii guddigu sida ay ula muuqato, fulinta xeerku uu yahay mid si aan macquul ahayn u dheer (daahsan) ama ay u badan tahay in xeerkaasi aanu usoo dhicin karin qofkaan xaqa ka maqan;

4. Iyadoo la dhawrayo axkaamta faqradda 2aad ee qodobkaan, Guddigu waa in uu ogaysiiyaa waraaqo kasta oo uu qabtay sida uu dhigayo qodobkaan dawladda heshiiskaan ku jirta ee iyadu soo saartay baaqa ku xusan faqradda 1aad laguna eedaynayo in ay jabinayso qodoba heshiiska. Dawladda ogaysiiskaan Guddiga ka heshaa waa in ay muddo lix bilood gudohood ah ay Guddiga usoo gudbisaa sharraxaad ama qoraal ay ku daah-saarayso arrinta iyo hadday jirto tallaabo ay u qaaday si ay u dhaydo ama u xalliso arrintaas.

5. Guddigu waa in uu eegaa waraaqaha uu helo sida uu dhigayo qodobkaan isaga oo ka duulaya xogta uu siiyay qofka dacwoonaya ama cidda magiciisa ugu dacwoon iyo dawladda heshiiska ku jirta ee arrintu qusayso.

6. Guddigu waa in uu yeeshaa kulamo albaababadu u xiran yihiin marka uu baarayo ama lafagurayo waraaqaha loo soo gudbiyo sida uu dhigayo qodobkaan hadda ah.

7. Guddigu waa in uu u gudbiyaa aragtidiisa ku aadan arrinta uu baaray ama lafaguray dawladda heshiiska ku jirta ee arrintu qusayso iyo qofkaba.

8. Shuruudaha ama axkaamta qodobkaan hadda ah waa in uu dhaqan galaa marka toban dawladood oo kuwa heshiiskaan ku jira ah ay soo saaraan baaq sida uu dhigayo qodobkaan faqraddiisa 1aad. Baaqaas waa in ay dawladaha soo saaray ee heshiiska ku jiraa u dhiibaan Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, kaas oo nuqulo ka mid ah baaqaas u sii gudbin doona dawladaha kale ee heshiiska ku jira. Baaqa waa mid lala bixi karo ama la laali karo waqti kasta iyadoo lala socodsiinayo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Dib ula noqoshada baaqaasi waa in aanu wax u dhimin eegidda arrin kasta taas oo soo hoos galaysa waraaqo horay loo gudbiyay sida uu dhigayo qodobkaan; lama qaban karo waraaqo kale oo uu soo diro qof ama cid qofkaas magiciisa ku hadlin ka dib marka ogaysiiska dib ula noqoshada baaqu uu gaaray Xoghaya Guud, haddii aanay dawladda heshiiska ku jirtaa soo saarin baaq cusub.

### *Qodobka 78aad*

Shuruudaha ku xusan qodobka 76aad ee heshiiskaan waa in la fuliyaa iyadoo aan wax loo dhimin mid ka mid ah hababka xallinta khilaafaadka iyo cabashooyinka ee soo galaya waxyaalaha uu ka hadlayo heshiiskaan hadda ah kuna xusan qoraalada dastuuriga ah ee lagu asaasay Qaramada Midoobay ama heshiisyada ay qabatintay Qaramada Midoobay iyo haya'adeheeda hawlaha gaar

ka ah qabta, waana in aanu ka hor-istaagin dawladaha heshiiska ku jira in ay ku xalliyaan hababka xallinta khilaafaadka ee waafaqsan heshiisyada caalamiga ah ee u dhexeeya dawladahaas.

## QEYBTA VIII

*Qodobka 79aad*

Ma jiraan wax ku jira heshiiskaan oo saamaynaya xaqa ay dawlad walba u leedahay in ay degsato halbeeg xaddidaya soo gelitaanka shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda. Arrimaha la xiriira xaaladda sharci iyo habka loola dhaqmayo shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda, dawladaha heshiiska ku jiraa waa in ay u hoggaansamaan shuruudaha ku xusan heshiiskaan hadda.

*Qodobka 80aad*

Ma jiraan wax ka mid ah heshiiskaan oo loo fasiran karo in ay wax u dhimayso qodobada ku xusan Axdiga u yaal Qaramada Midoobay iyo dastuurka u degsan haya'adaha hawlaha gaarka ah qabta taas oo qeexaysa mas'uuliyaatka haya'ad walba gaarkeeda u saaran oo ka mid ah qaybaha kala duwan ee ay ka kooban tahay Qaramada Midoobay marka laga hadlayo arrimaha uu ka hadlayo heshiiskaan hadda.

*Qodobka 81aad*

1. Kuma jiraan heshiiskaan wax saamaynaya xuquuq dheerad ah ama xorriyad la siiyay shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda oo uu dhigayo:

(a) Sharciga ama dhaqanka dawlad heshiiska ku jirta u yaala; ama

(b) Heshiis u dhexeeya labo dawladood ama dawlado badan kaas oo ka dhaqan gashan dawladda heshiiska ku jirta ee arrinta qusayso.

2. Wax ka kamid ah heshiiskaan hadda looma fasiran karo in uu si dahsoon ugu ogolaanayo dawlad, koox, ama shakhsi xaq uu ku samayn karo fal noocuu doono ha ahaadee wax u dhimi kara xuquuq kasta iyo xorriyad ku xusan heshiiskaan hadda ah.

*Qodobka 82aad*

Ma bannaana in ay ka tanaasulaan shaqaalaha soogalootiga ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda xuquuqda ay leeyihiin ee ku xusan axdigan ama heshiiskan hadda. Mana bannaana in cadaadis la saaro shaqaale soogalooti ah iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda noocuu doono ha ahaadee iyadoo looga gol-leeyahay in lagu kallifo in ay katanaasulaan ama iska daayaan xaq ka mid ah xuquuqdooda horay loo soo sheegay. Mana suuroobi karto in heshiis (contract) la galaa uu nuqsaamiyo ama hoos

u dhigo xuquuqaha lagu aqoonsaday heshiiskaan hadda ah. Dawladaha ku jira heshiiska waa in ay qaadaan tallaabooyin habboon si loo xaqiijiyo in mabaadiidaan la xushmeeyo.

*Qodobka 83aad*

Dawlad kasta oo ku jirta heshiiskan hadda ah waxa ay ballan qaadaysaa:

(a) In ay xaqiijiso in qof walba oo xuquuqdiisa ama xorriyadiisa heshiiskaan lagu aqoonsaday oo la jabiyaa uu helayo dhayid ama shafshafo sharci oo wax ku ool ah, xitaa haddii kuwa xad gudubkaas sameeyay ay yihiin saraakiil markaas awood ka haya dawladda;

(b) In ay xaqiijiso in awoodeheeda maamul, garsoor ama xeer dajin ama ciddii kale ee sharcigu awood u siiyo, ay dib u eegto, go'aana ka gaarto dacwadaha uu soo gudbiyo qof kasta oo dalbanaya shafshafo sharci (maxkamadeed) iyo in loo helo dacwadda qofkaas dhayid ama shafshafo maxkamadi u xukunto;

(c) In ay xaqiijiso in marka madaxda ay qusayso la siiyo awood ay ku xukumi karaan arrintaan, ay fulinayaan dhayidda noocaan ah (ee qofka dhibanaha ah loo xukumayo)

*Qodobka 84aad*

Dawlad kasta oo ku jirta heshiiska waa in ay ballan qaaddaa in ay ku dhaqaaqdo tallaabooyin xeer dajin iyo kuwa kaleba kuwaas oo lagama maarmaan u ah meelmarinta qodobada heshiiskaan ama axdigaan hadda ah.

## QEYBTA IX

*Qodobka 85aad*

Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu u xilsaaran yahay in uu yahay kan haynaya heshiiskaan hadda.

*Qodobka 86aad*

1. Heshiiskaan hadda waa mid u furan in ay saxiixaan dhammaan dawladuhu. Waana mid ay dawladaha saxiixaa ka ansixinayaan golayaashooda baarlamaanka.

2. Heshiiskaan hadda waa mid u furan in ay ku soo biirto dawlad kasta.

3. Waraaqaha ama dukumeentiyada ansixinta iyo ku soo biiridda waa in loo dhiibaa oo uu hayaa Xoghayaha Qaramada Midoobay.

*Qodobka 87aad*

1. Heshiiskaan ama axdigaan waxa uu dhaqan-galayaa sadex bilood kadib, maalinta bisha ku xigta ugu horaysa, marka ay dawlada labaatanaan soo dhiibto dokumantiga kusoo biiridda.

Heshiiskaan ama axdigaan waxa uu ku fulayaa (loo adeegsanayaa) dawlad walba oo ansixisa ama ku so biirta laga bilaabo maalinta ugu horraysa ee bisha ku xigta muddada saddexda bilood ah ka dib taariikhda ay dawladdaasu ay dhiibto qoraalkeeda ansixinta ama kusoo biiridda.

*Qodobla 88aad*

Uma bannaana dawlad kasta oo ku soo biiraysa ama ansixinaysa heshiiskaan in ay ka saarto fulintiisa qayb ka mid ah heshiiskan, ama, iyadoo aan wax u dhimin qodobka 3aad, ay ka saarto qolo gaar ah oo ka mid ah soogalootiga shaqaalaha ah fulinta heshiiska (ay dawladaasu fulin lahayd).

*Qodobka 89aad*

1. Dawlad kasta oo ku jirta heshiiska, oo ay dhici karto in ay doonayso in ay ka baxdo ama ka tanaasusho heshiiskan hadda, waa in aanu ka horrayn (ka bixitaankeedu) shan sano ka dib marka Axdigaan uu ka dhaqan galo dawladda heshiiska ku jirta ee ay arrintu qusayso, iyada oo u maraysa qoraal ogaysiin ah oo ay ku hagaajiso Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

2. Ka noqoshada heshiisku waxa uu dhaqan galayaa maalinta ugu horraysa ee bisha ku xigta 12-ka bilood ka dib taariikhda uu Xoghayaha Guud uu helo ogaysiiska ka noqoshada heshiiska.

3. Ka noqoshada ay dawlad heshiiska kaga noqonayso, waa in aanu keenin in uu dawladdaas ka cafiyo waajibaadka saaran sida uu dhigayo axdigaan hadda ee la xiriira samaynta fal ama ka baaqsiga fal samayntiis kaas oo dhaca ka hor taariikhda ka bixitaanka heshiisku dhaqan galayo, ama waa in aanu ka bixitaanka heshiisku sina wax ugu dhimin in Guddigu sii wado eegidda arrin walba taas oo Guddigu eegiddeeda uu ku jiray ka hor intaan taariikhda bixitaanka ama ka noqoshada heshiiku dhaqan galin.

4. Ka dib taariikhda uu dhaqan galo ka noqoshada heshiika ee dawlad ku jirta heshiiska ay ku dhaqaaqdo, Guddigu waa in aanu bilaabin eegidda wax arrin ugub ah oo quseeya dawladdaas.

*Qodob 90aad*

1. Ka dib shan sano marka uu dhaqan galo heshiiskaan, dawlad kasta oo heshiiska ku jirta waxa ay codsan kartaa in dib loo eego heshiiska iyadoo u maraysa ogaysiis qoraal ah oo ay ku hagaajinayso Xoghayaha Qaramada Midoobay. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa uu ka dib usii gudbiyaa hindisaha wax ka bedelka heshiiska dawladaha kale ee ku jira heshiiska isaga oo ka codsanaya in ay usoo gudbiyaan haddii ay markaas danaynayaan in shir la qabto, oo ay isugu yimaadaan dawladaha heshiiska ku jira si loo eego codna loogu qaado hindisayaasha wax ka badelka heshiiska. Haddii ay dhacdo markaas in afar bilood gudahood laga bilaabo

taariikhda ogaysiiska (in dawladuhu ay ka soo jawaabaan haddii shir la qaban lahaa hindisaha wax ka bedelka lagaga doodo iyo in kale) in ugu yaraan saddex meelood dawladaha heshiiska ku jiraa ay doonayaan qabashada shirkaas, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa in uu ku baaqaa qabashada shirkaas isaga oo ay maamulayso Qaramada Midoobay. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa in uu u gudbiyaa wax ka bedel kasta oo dawladaha heshiiska ku jira, shirkana yimi, badankood u codeeyeen in heshiiska lagu sameeyo Golaha loo Dhan yahay si ay u ogaalaadaan.

2. Wax ka badelka heshiiska lagu sameeyaa waa in uu dhaqan galaa marka uu ogolaado Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ayna sidoo kale dawladaha heshiiska ku jiraa ay saddex meelood labo ku aqbalaan wax ka bedelkaas iyadoo la raacayo hababka dastuuriga ah ee dawlad kasta u gaarka ah.

3. Marka wax ka bedelada heshiiska uu bilaamo, waxa uu ku fulayaa ama fulintiisu waajib ku noqon dawladaha heshiiska ku jira ee aqbalay wax ka bedelada heshiiska lagu sameeyay, dawladaha kale ee heshiiska ku jira iyaga waxaa waajib saaran ah meelmarinta qodobada heshiiskaan hadda ah iyo wax ka bedelo hore, oo heshiiska lagu sameeyay, haddii ay jiraan oo ay dawladaasu aqbaleen.

*Qodobka 91aad*

1. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa in uu guddoomaa ama helaa qoraalka gaabsashada ee dawladuhu sameeyaan waqtiga saxiixa, ansixinta ama kusoo biiridda, waana in Xoghayaha Guud uu kula wareegaa (wada gaarsiiyaa) qoraaladaas dawladaha oo dhan.

2. Lama aqbali karo ka gaabsi ama (shaki muujin) heshiiska dawlad ka qaadato haddii uu ka hor imaanayo mawduuca iyo ula jeedada heshiiska ama axdiga.

3. Waqti kasta waa suurta gal in laga noqdo ka gaabsiga heshiiska iyadoo la ogaysiinayo isbedelkaan Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, kaas oo markaas ka dib ku wargalinaya dhammaan dawladaha arrintaas. Ogaysiiskaan waxa uu dhaqan galayaa taariikhda la guddoomay ama la helay (ogysiiska).

*Qodobka 92aad*

1. Ismaandhaaf kasta oo ka yimaada fasiraada ama fulinta heshiiskaan hadda ah, oo labo dawladood ama ka badan u dhexeeya kaas oo aan wada xaajood lagu dhammayn karin, waa in, iyadoo ku xiran marka dawlad ka mid ah dawladahaas codsato, loo gudbiyaa arrintooda garqaadid ama dhexdhexaadin. Haddii markaas lix bilood gudohood laga bilaabo waqtiga garqaadidda la codsaday, lagu guul darraysto in la nidaamiyo arrinta la isku hayo, dhinac walba oo qayb ka ah khilaafka waxa uu u gudbin karaa khilaafka Maxkamadda Caddaaladda Adduunka, iyada oo la raacato hab waafaqsan nidaamka u degsan maxkamadda.

2. Dawlad kasta oo heshiiska qayb ka ah waxa ay ku dhawaaqi kartaa waqtiga saxiixa ama ansixinta heshiiskaan hadda ah in aanay isku tirinayn in ay ku khasban tahay in ay fuliso faqradda

1aad ee qodobkaan hadda ah. Dawladaha kale ee heshiiska ku jira iyaguna kuma khasbana in ay fuliyaan faqraddaas marka ay la dhaqmayaan dawladdaas soo saartay baaqa noocaas ah.

3. Dawlad kasta oo heshiiska ku jirta taas oo soo saartay baaq iyadoo raacaysa faqradda 2aad ee qodobkaan waxa waqtigay doonto ka noqon kartaa baaqaas iyadoo ogaysiis (go'aankeedaas ku saabsan) ku hagaajin karta Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qodobka 93aad*

1. Heshiiskaan ama axdigaan waxaa loo dhiibaayaa, iyadoo nuquladiisa ku qoran afka Carabiga, afka Ingiriiska, afka Shiinaha, afka Ruushka, afka Faransiiska iyo afka Isbaanishka, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay,

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa in uu u gudbiyaa nuqulada la ansixiyay ee heshiiskaan hadda ah dhammaan dawladha (caalamka).

# Heshiiska Xuquuqda Dadka Naafada ah

***Waxaa lagu qabatimay qaraarkii golaha loo dhanyahay ee tirsigiisu ahaa 61/106 ee 13 December 2006***

## GOGOLDHIG

*Dawladaha ku jira heshiiskaan:*

(a) Iyadoo la tixgalinayo mabaadiida ku xusan Xeerka Qaramada Midoobay ee aqoonsanaya Sharafta soo Jireenka ah iyo xuquuqda maguurtada ah ee ay leeyihiin dhammaan xubnaha qoyska bini-aadamka, asaaskana u ah xorriyadda, caddaaladda, iyo nabadda caalamka,

(b) Iyadoo la garwaaqsanayo in Baaqa Caalamiga ah ee Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Aadamiga iyo labadii axdii ee caalamiga ahaa ee quseeyay Xuquuqda Aadanaha, ay qeexayaan in qofkasta xaq uleeyahay, ayadoo kala sooc la'aan ah, in uu helo dhammaan xuquuqda iyo xorriyadaha ku cad heshiiyadaan,

(c) Iyadoo la xoojinayo caalaminimada dhammaan xuquuqda aadmiga, xorriyadaha asaasiga ah, qaybsami la'aanteeda, isku xirnaanteeda, is kaabideeda iyo sida ay lagama maarmaan ay u tahay in dadka naafada ah ay helaan xuquuqdaas oo dhamaystiran si aan kala sooc laheyn,

(d) Iyadoo dib loo eegayo Heshiiska Caalamiga ahaa ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Hiddaha (dhaqanka), Heshiiskii Caalamiga ahaa ee Xuquuqda madaniga ah iyo Siyaasadda, Heshiiska Caalamiga ahaa ee cirib tirka dhammaan noocyada Takoorka ee ku salaysan isirika, Heshiiska cirib tirka Dhamman noocyada Takoorida Haweeynka, Heshiiska kasoo horjeeda jirdilka iyo dhammaan hab dhaqan kasta noocuu doono ha ahaadee ee ku dhisan naxariis darro; bani-aadantimo la'aanta iyo quursi, Heshiiska Xuquuqda Caruurta, iyo Heshiiska Caalamiga ah ee Ilaalinta xuquuqda dhammaan Shaqaalaha Soogalotiga ah iyo xubanaha ka tirsan qoysaskooda,

(e) Iyadoo la garwaaqsanayo in naafanimadu ay tahay fikrad wali hormaraysa, iyo in naafanimadu ka timaado isla fal-galka dadka naafada ah iyo xannibaadaha, duruufaha iyo deegaanka ku xeeran taas oo u diidaysa in ay la sameeyaan bulshadooda ka qaybgal dhamaystiran oo wax ku'ool ah oo ku dhisan sinnaan,

(f) Iyadoo la qirayo ahmiyadda ay leeyihiin mabaadiida iyo siyaasadaha tusaalaynta ah ee ku xusan Barnaamijka Waxqabadka Caalamiga (World Program of Action) ee quseeya Dadka Naafada ah iyo xeerarka Mideysan ee la xariira helitaanka fursadaha ay u simanyihiin dadka naafada ah si loo xoojiyo dejinta iyo qiimaynta siyaasadaha, qorshayaasha, barnaamijyada iyo tallaabooyinka heer qaran, gobol iyo caalami, si sara loogu qaado fursadaha sinnaanta ee dadka naafada ah,

(g) Iyadoo hoosta laga xariiqayo muhiimadda ay leedahay in arrimaha quseeya dadka naafada ah laga dhigo qayb muhiim ah oo ay tahay in lagu daro istiraatiijiyadda horumarka ama horumarinta joogtada ah (ee lawada higsanyo),

(h) Iyadoo sidoo kale loo aqoonsanyo in takoorka ama faquuqidda luugu gaysto qof naafaha naafanimadiisa awgeed ay ka dhigantahay xad-gudub dhan ka ah sharafta iyo qiimaha ma guurtada ah ee qofka bini-aadamka ah leeyahay,

(i) Iyadoo sidoo kale la aqoonsanayo kaladuwanaanshaha dadka naafada ah,

(j) Iyadoo la qirayo baahida loo qabo sii xoojinta iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha ee dadka naafada ah kuwaas oo ay ka mid yihiin dadka u baahan taageerada xoogan ama (fiiro gaar ah loo yeesho),

(k) Iyadoo xisaabta lagu darsanayo walwalka ka jira ee ah, in kastoo ay jiraan heshiisyadaas iyo qoralaadaas caalamiga ah ee kaladuwan, in ay dunida daafeheeda weli kasii socdaan meel ka dhacyo iyo caqabado lid ku ah xuquuqda ay leeyhiin dadka naafada ah iyo in ay ka mid noqdaan bulshada (dhib iyo dheef ba) si la mid ah sida dadka kale (ee lixdooda lixaad qaba),

(l) Iyadoo la garwaaqsanayo muhimadda uu leeyahay iskaashi caalami oo heersare ah oo dunidu ka yeelato sidii sare loogu qaadi lahaa loona hormarin lahaa duruufaha nololeed ee dadka naafada ah ku sugan yihiin dal kasta, gaar ahaan kuwa wadamada soo-koraya,

(m) Iyadoo la aqoonsanayo kaalinta wax ku ool ka ah ee hadda iyo hadhawba ay suurta galka tahay in dadka naafada ay ka galaan hurumarinta, barwaaqaynta iyo kala duwaashaha bulshooyinkooda, iyo in dheeri galinta in dadka naafada ah ay helaan xuquuqdooda aadamiga iyo xorriyadda asaasiga ah, iyo in kaalin buuxda laga siiyo naafada si ay gacan uga gaysan lahaayeen xoojinta dareenkooda waddaniyadeed, iyo xaqiijinta horumar wayn oo laga gaaro horumarinta bulshada dhaqan dhaqaale ee bulshada iyo ciribtirka saboolnimada,

(n) Iyadoo la garowsanayo muhiimadda ay leedahay in dadka naafada ah ay helaan madaxbanaani iyo awood ay aayahooda kaga tashan karaan,

(o) Iyadoo ay muuqato in ay habboontahay in fursad loo siiyo dadka naafada ah sidii ay

si firfircoon uga qayb qaadan lahaayeen arrimaha lagu go'aaminayo siyaasadaha iyo barnaamijyada, oo ay ku jiraan kuwa sida tooska ah u quseeya iyaga,

(p) Iyadoo laga walaacsanyahay duruufta adag ee ay ku sugan yihiin dadka naafada ah, kuwaas oo ay soo wajahaan noocyo meel ka dhacyo ah oo kala duwan oo kulaysan faquuq dhanka isirka, midabka, jinsiga (lab iyo dhaddig), luqadda, diinta, fikir siyaasadeed ee ay aaminsanyihiin iyo fikir kaleba, ama qowmiyadda isir ama dal ee ay kasoo jeedaan, xaaladda hantida, goobta ay ku dhasheen dhalashada ama xaalad kale oo ay ahaatoba,

(q) Iyadoo la garwaaqsanyahay in inta badan haweenka iyo gabdhaha naafada ah ay khatar badan kala kulmaan guriga dhexdiisa iyo dibadiisaba, isugu jirta dhaawac loo gasto ama xadgudub, dayac iyo hab dhaqan aan habbooneyn oo lagula kaco, six xun oo loola dhaqmo iyo dhiig-miirasho lagu sameeyo (hadday ahaan lahyd in si xaq darro ah loogu shaqaysto, xuquuqdooda loo duudsiiyo ama xitaa si xaqdarro ah galmo ahaan looga faa'iidaysto),

(r) Iyadoo la garwaaqsanayo in ay habboontahay in caruurta naafada ah ay si buuxda ugu raaxaystaan dhamman xuquuqda aadmiga iyo xorriyadaha asaasiga ah ee ay kala simanyihiin caruurta kale, iyadoo la tixraacayo waajibaadka iyo masuuliyadda ay dusha u riteen dawladaha ku jira Heshiiska Xuquuqda Caruurta si loo gaaro yoolkaas isaga ah (dhawrista xuquuqda caruurta naafada ah),

(s) Iyadoo la adkaynayo baahida lo qabo in lagu daro fikrada jinsiga (lab iyo dheddig) dhammaan dadaalada lagu doonayo in lagu dhiiri geliyo helitaanka dadka naafada ah ay si buuxda u helaan dhammaan xuuquqdooda aadmiga iyo xorriyadahooda asaasiga ah,

(t) Iyadoo hoosta laga xariiqayo in dadka naafada ah badankoodu ay ku noolyihiin duruuf saboolnimo, iyo ayagoo islamarkaa la qirayo baahida daran ee ee loo qabo in xal laga gaaro ama la yareeyo saamaynta xun ee ay saboolnimadu ku leedahay dadka naafada ah,

(u) iyadoo maanka lagu hayo in hirgelinta xaalad nabad-gelyo iyo amni oo ku dhisan xushmad buuxda oo loo hayo ujeedooyinka iyo mabaadiida ku xusan Axdiga Qaramada Midoobay iyo qoraalada taabba galka ah ee ka hadlaya dhawrista xuquuqda aadmiga, ay kuwaasi yihiin kuwa lagama maarmaanka u ah in ilaalin buuxda loo helo dadka naafada ah, gaar ahaan marka lagu jiro xaaladaha isku-dhaca hubeysan iyo dulaanka iyo qabsashada shisheeye,

(v) Iyadoo la qirayo in suurtagalnimada ah in la gaaro jawi la taaban karo oo dadka naafada ah ay ku helaan deegaan ka tarjuma xaladooda dhaqan dhaqaale iyo bulsho iyo adeegyada caafimaad, waxbarasho, warfaafin iyo xiriir, ay muhiim u tahay in loo suurta galiyo dadka naafada ah sidii ay ku hanan lahaayeen dhammaan xuquuqdooda aadamiga iyo xorriyadahooda asaasiga ah,

(w) Iyadoo la ogsoonyahay in qofka, waajib ka saaranyahay shakhsiyaad kale iyo bulshada uu ka tirsan yahay, uu dhabarka u ridanayo masuuliyadda ah in uu isku taxalujiyo sidii uu gacan uga gaysan lahaa xoojinta xuquuqaha lagu aqoonsaday Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha,

(x) Iyadoo laga dheregsanyahay in qoysku yahay unuga dabiiciga ah, asaasigana ah ee bulsho, iyo in uu mudanyahay in bulashada iyo dawladuba difaacaan, iyo in dadka naafada ah iyo xubnaha qoyskoodu ay mudanyihiin difaac iyo kaalmo lagama maarmaan ah si loogu suurta galiyo qoysaska in ay si siman oo dhamystiran uga qaybqaataan xuquuqda dadka naafada ah,

(y) iyadoo lagu qanacsanyahay in heshiis caalami ah oo dhamaystiran, iskuna xiran, si loo horumariyo loona ilaaliyo xuquuqda iyo sharfta dadka naafada ah, uu si wayn uga qaybqaadan doono wax ka qabashada dayaca haysta dadka naafada ah, iyo dhiirigalinta sidii dadka naafada ah ay kaalin firfircoon uga qaadan lahaayeen dhinacyada madaniga, siyaasadda, dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka iyadoo ku salaysan fursado loo simanyahay, haddii ay ahaan lahaayeen dawladaha soo koraya iyo kuwa horay u maray.

*Waxa ay (dawladahaasi) isku raaceen:*

*Qodobka 1aad*

## Ujeedo

Ujeedada laga leeyahay axdigaan ama heshiiskaan waa in kor loo qaado, la ilaaliyo, la kafaalo qaado, in dhammaan dadka naafada ah ay ku raaxaystaan dhammaan xuquuqaha aadmiga iyo xorriyadaha asaasiga, iyadoo loo simanyahay, iyo xoojinta iyo xushmaynta karaamada aasaasiga ee maguurtada ah.

Waxaa soo galaya eray cilmiyeedka (dadka naafada ah) dhammaan dadka la il-daran cillado jir ahaneed, caqli, maskaxeed ama dareen oo muddo dheer la degtay, taas oo oo ka hor istaagi karta in ay kaalin firfircoon ka galaan bulshada ay ku dhex nool yihiin si la siman dadka lixda lixaad qaba.

*Qodobka 2aad*

## Eray bixin

Ujeedooyinka heshiiskaan:

“Is-gaarsiin ” waxaa soo hoos galaya luqadaha, qoraalada lasoo bandhigo, xarfo la taaban karo oo (dadka indhaha la’ wax lagu baro) hab farriimeed ama xiriir dareenka taabashada ku

dhisan, weeraha ama ereyada farta waa wayn lagu daabaco, shaaci-badane la heli karo (sida kumbiyuutarka, si kasta wax usoo gudbiya ama u shaaciya sida cod, sawir, qoraal, iyo filin ahaan intaba), iyo sidoo kale moodooyin iyo hannaan farriimo la isugu gudbiyo oo xoogan (sida qalab wayneeya qoraalka ama codka) badel na noqon kara, sida qalab farriimaha maqal ahaan u tabiya, sidii qof wax u akhriya, ama wax ku tabinaya luqad si fudud loo fahmi karo iyo hab ama hannaan kasta oo la heli karo in farriin lagu gudbiyo iyadoo la adeegsanayo xog maalka iyo is-gaarsiinta uu fududeeyay cilmiga farsamada iyo wax soo saarka casriga ah.

"Afka/Luqadda" waxaa soo galaya hadalka, tilmaanta, iyo wixii kale oo habab la isku fahmi karo ah oo aan hadal ahayn.

"Faquuqidda ku salaysan naafanimada" waxaa loola jeedo takoor, dayrin, iyo xayiraad ama xannibaad ku salaysan naafanimo, taasoo ujeedada ama raadka ka dhalanaya uu yahay awood dhimid, ama dhicisayn lagu sameeyo aqoonsiga ku raaxaysiga xuquuqda aadmiga asaasiga ah si naafadu ay dadka kale ula simanyihiin dhinacyada siyaasadda, dhaqaalaha, bulshada, dhaqanka, arrimaha rayidka ah iyo dhinac kale oo kasta. Waxaa kale oo soo galaya nooc kasta oo faquuq ah sida in laga hor istaago naafada helidda tallaabooyin ama maamuus macquula ah oo adeegyadooda loogu fududeeyo.

"Tallaabooyinka ama maamuuska macquul ka ah" waxa laga wadaa dib-u-habayn iyo tallaabooyin habboon oo macquula oo aan keenayn culays aan lo baahnayn, meeshii looga baahdo xaalad cayiman, si loo dammaana-qaado in dadka naafada ah ay ku raaxaystaan ama adeegsadaan dhammaan xuquuqdooda aadmiga ee asaasiga ah iyagoo ula siman dadka kale.

"Naqshadeynta guud" waxaa laga wadaa u qaabaynta waxsoosaarka, deegaanka, barnaamijyada iyo adeegyada; si uu unoqdo mid dadkoo dhan ay u adeegsan karaan, sida ugu badan uguna macquulsan, iyadoo aan loo baahneyn wax ka bedelid iyo naqshad gooni ah oo lasameeyo. "Naqshadeynta guud ah" waxaa soo geli kara qalabka sida gaar ah u caawiya qeybo ka tirsan naafada, inta baahida loo qabo ay taagan tahay.

*Qodobka 3aad*

## Mabaadiida guud

Mabaadiida Heshiiskaan waxay noqonaysaa:

(a) Xushmeynta karaamada asalka ah ee bini-aadamku leeyahay, iyo madaxbannaanida qofka, oo ay kamid tahay xorriyadda qof kastaa u leeyahay in uu aayihiisa ka tashan karo.

(b) Takoorid la'aan;

(c) In loo dammaana-qaado naafada kaalinta buuxada bulshada ku leeyihin

(d) Xushmeynta kala duwanaanshaha iyo in loo aqbalo dadka naafada ah sidii in ay yihiin dad ka mid ah kala duwanaanshaha iyo dabeecadda bini-aadmaku usamaysan yahay.

(e) U-sinaanta Fursadaha;

(f) Suurta gelinta gaaridda (fursadahaas);

(g) Sinnaanta ragga iyo dumarka;

(h) Xushmeynta awoodaha horumaraya ee caruurta naafada ah iyo xushmeynta xaqa ay u leeyihiin ilaalinta haybtooda;

*Qodobka 4aad*

## Waajibaadka Guud

1. Waxay ballan qaadayaan dawladaha ku jira heshiiska in ay hubiyaan oo ay sara u qaadaan ka shaqaysiinta iyo dar-dar-gelinta dhamman xuquuqda aadmiga iyo xoriyadaha aasaasiga ah ee ay leeyihiin dadka naafada ah ayagoo aan lagu takooreyn naafanimadooda. Si hadaba yoolkaas loo hergeliyo, waxa dawladaha qaybta ka ah heshiiskaan ballan qaadayaan sida so socta:

(a) In ay qaadayaan tallaabooyin ku habboon oo loo qaado dhinacyada sharci dejinta, maamulka iyo tallaabooyin kaleba, si loo meel-mariyo xuquuqda lagu aqoonsaday hehsiiskaan;

(b) In ay qaadayaan dhammaan tallaabyinka munaasibka ah, oo ay kamid tahay tallaabo loo qaado dhanka sharci dajinta; si loo bedelo ama loo joojiyo sharciyada jira, xeerarka, caadooyinka, iyo dhaqamada, kuwaas oo keenaya faquuqidda dadka naafada ah;

(c) In ay xaqiijiyaan in dhammaan siyaasadohooda iyo marnaamijyadooda ay ku ilaalinayaan oo ay ku xoojinayaan xuquuqda aadmiga ee ay leeyihiin dadka naafada ah;

(d) In ay joojiyaan ku dhaqaaqidda fal ama ku dhaqmid kaas oo ka hor imaanaya heshiiskaan, iyo in ay dammaano qaadaan in madaxda iyo haya'adaha dawladda ay u dhaqmayaan si waafaqsan heshiiskaan;

(e) In ay qaadaan dhammaan tallaabooyinka munaasibka ah si loo ciribtiro takooridda ku saleysan naafanimada, taas oo uu gaysto qof, haya'ad iyo shirkad kasta oo gaar loo leeyahay;

(f) In ay dhiiri galiyaan baaritaanada iyo tayaynta badeecadaha, adeegyada, qalabka iyo adeegyada sida guud loo qaabeeyo; sida lagu qeexay Qodobka 2aad ee heshiiskaan, kaasoo u baahan qabatinka ugu yar ee suurta galka ah iyo in uu ku fadhiyo kharashka ugu yar si loo kaafiyo baahida khaaska ah ee qofka naafada ah qabo, iyadoo adeegyadaas laga dhigayo kuwa la heli karo lana adeegsan karo, iyo in la dhiiri galiyo habka naqshadaynta caalamiga ah marka la dajinayo halbeegyada iyo mabaadiida tusmaynta;

(g) In ay xoojiyaan kuna sameeyaan cilmi baaris iyo tayayn farsamada casriga ah iyo in farsamadaas ay heli karaan naafadu, adeegsan karaana, iyadoo ay ku jiraan farsamada casriga ah ee dhanka isgaarsiinta iyo xogaha, iyo qalabka sahla isu socodka, iyo farsamooyinka casriga ah ee caawiya kuna habboon naafada, iyo wixii kale oo hababab, qalab ama adeeg ah oo caawin kara naafada;

(h) In ay siiyaan dadka naafada ah warbixin iyo xog la helikaro oo ku saabsan qalabka iyo hababka u sahlaya socodka iyo wixii farsamo cusub ah ama adeegyo ah oo gacan siinaya naafada;

(i) In ay kor uqaadaan tababarada ay siiyaan shaqaalaha takhasuska leh (si xeel dheer wax u bartay) iyo xirfadlayaasha la shaqeeya dadka naafada ah iyadoo lagu tababarayo xuquuqda lagu aqoonsaday heshiiskaan; si loo hagaajiyo kaalmada iyo adeegyada ee ay kafaalo qaadayso xuquuqdaas.

2. Arrimaha ku saabsan xuquuqda dhaqaalaha, bulshada iyo hiddaha, waxay balanqaadaysa dawlad kasta oo kamid ah dawladaha ku jira heshiiskaan in ay si tar- tiib tar-tiib ah intii karaankeeda ah, iyadoo la kaashanaysa caalamka, hirgaliso gabi ahaan xuquuqda naafada, iyadoo aan meel lagaga dhicin waajibaatyada ku xusan heshiiskaan ee ay khasabka tahay in dhaqso loo fuliyo, si waafaqsan qaanuunka caalamiga ah.

3. Dawladaha ku jira heshiiskan waa in ay si buuxda ugala tashadaan dadka naafada ah oo ay kamidyihiin caruurta naafada ah, iyagoo u maraya heya'adaha matalaya, sharci dejinta iyo fulinta siyaasadda looga gol leeyahay fulinta heshiiskaan, iyo in si buuxda looga qayb galiyo naafada iyo hay'adaha matala wixii hawlo go'aan qaadasho ah oo kale ee quseeya dadka naafada ah.

4. Ma jiro wax heshiiskaan kamid ah oo loo fasiran karo in uu saamaynayo ama wax u dhimi karo shuruuc kasta oo si kabadan (sida heshiiskan qabo) u xaqiijinaya xuquuqda dadka naafada ah, kaas soo ku xusan sharciga lagaga dhaqmo dawladda ku jirta heshiiskaan ama sharciga caalamiga ah ee looga dhaqmo dawladaas. Ma bannaana in lagu soo rogo xannibaad ama jebin xaq kasta oo kamid ah xuquuqda aadmiga iyo xoriyaadka aasaasiga ah ee la aqoonsanyahay ama kajira dawlad ku jirta heshiiskaan, ayadoo lagu dhaqmayo sharci, heshiis, xeer ama caado iyadoo la xujaysanayo in heshiiskaan hadda ah aanu aqoonsanayn xuquuqdaas iyo xorriyaadkaas, ama uu u aqoonsanyahay si kooban.

5. Qodobada heshiiskaan waxa uu ku fulayaa (loo adeegsanayaa) dhammaan qeybaha dawladaha federaalka ah ka kooban yihiin iyadoo aysan jirin wax xaddiditaan ah ama kasoo reebis ah.

*Qodobka 5aad*

## Sinnaanta iyo Takoorid la'aanta

1. Dawladaha ku jira heshiiskaan waxa ay aqoonsanyihiin in dadka oo dhan u simanyihiin sharciga hortiisa iyo waxa u keenayo, iyo in ay xaq u leeyihiin ilaalin ay ka helaan sharciga iyo ka faaiidaysi ay ka faaiidaan sharciga iyadoon faquuq cid gaar ah la faquuqayaa jirin.

2. Dawladaha ku jira heshiiska waa in ay mamnuucaan dhammaan noocyada takooridda ku saleysan naafanimada, iyo in ay u kafaalo qaadaan dadka naafada ah sharci wax ku ool ah oo ka ilaaliya faquuqa.

3. Si kor loogu qaado sinnaanta, loona ciribtiro takooridda, waa in dawladaha ku jira heshiiska qaadaan tallaabooyin munaasib ah si ay ugu xaqiijiyaan dadka naafada ah tallaabooyinka adeeg fududaynta macquulka ah.

4. Lagama soo qaadi karo (looma tix galin karo) takoorid sida heshiiskaan ku cad, talaabooyinka cayiman kuwaas oo lagama maarmaan u ah in la dar-dar-geliyo oo laxaqiijiyo sinnaan dhab ah oo loo helo dadka naafada ah.

*Qodobka 6aad*

## Haweenka Naafada ah

1. Waxa ay dawladaha qaybta ka ah heshiiskaan aqoonsanayaan in haweenka iyo gabdhaha naafada ah la kulmaan qeybaha kala duwan ee takooridda, sidaa darteedna ay qaadayaan tallaabooyin si buuxda loogu xaqiijinayo haweenka iyo gabdhaha naafada ah helidda iyo ku raaxaysiga xuquuqdooda aadminimo iyo xoriyadahooda asaasiga ah, si loo wada siman yahay.

2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo dammaano qaado in horumar buuxa iyo awood siin loo sameeyo haweenka naafada ah, si haweenka loogu xaqiijiyo adeegsiga xuquuqda aadamiga iyo xorriyadaha asaasiga ah ee ku xusan heshiiskaan.

*Qodobka 7aad*

## Caruurta Naafada ah

1. Dawladaha qaybta ka ah heshiskaan waa in ay qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si caruurta naafada ah ay si buuxda ugu raaxaystaan dhammaan xuquuqda aadamiga iyo xorriyadaha asaasiga ah ee ku salaysan inay kala simanyihiin caruurta kale.

2. Waa in tixgalinta iyo mudnaanta ugu muhiimsan la siiyaa danta caruurta marka ay timaado hirgalinta tallaabooyin ama hannaan quseeya caruurta naafada ah.

3. Dawladaha qeybta ka ah heshiskan waa in ay hubiyaan in caruurta naafada ah ay si xor ah u cabiri-karaan fikradahooda ku aadan dhammaan arrimaha quseeya, iyadoo fikradahooda lagu qiimaynayo hadba da'da ay jiraan iyo caqligooda, taasna waa in ay kala simanyihiin caruurta kale, waana in la siiyaa caruurtaas adeegsiga xaqaas iyadoo la jaanqaadaysa hadba heerkooda da'da iyo naafanimadooda.

*Qodobka 8aad*

## Wacyi gelinta

1. Dawladaha qaybta ka ah heshiiskaan waxay balan qaadayaan in ay qaataan tallaaboyin deg-deg ah oo habboon si loo:

   (a) Wacyi geliyo bulshada dhammaantood lagu booriyo ilaalinta xuquuqda caruurta naafada ah, oo ay kamid tahay ilaa heer qoys, iyo sara u qaadidda xushmeynta xuquuqda dadka naafada ah iyo sharaftooda;

   (b) La dagaalamo dacaayada (laga aaminsanyahay naafada), iska-necbaanta, iyo dhaqamada wax yeelaya dadka naafada ah oo ay ka mid tahay tan ku salysan jinsiga ama da'da, dhammaan dhinacyada nolosha;

   (c) Xoojiyo wacyi gelinta la isku baraarujinayo awoodaha iyo waxqabadka dadka naafada ah ay leeyihiin.

2. Si loo gaaro arintaas, tillaaboyinka loo baahanyahay waxaa kamid ah:

   (a) Bilaabida iyo lasocoshada qabashada olole wacyi gelineed oo wax ku'ool ah oo guud taas oo loogaa gol-leeyahay:

      (i) Xoojinta aqbalaada xuquuqda dadka naafada ah;

(ii) Faafinta fikrado fiican iyo wacyi-gelin bulsho oo qoto dheer kuna aadan dadka naafada ah;

(iii) Dhiirigelinta aqoonsiga xirfadaha, kartida iyo aqoonta dadka naafada ah leeyihiin, iyo ka qeybgalintooda goobaha shaqo iyo suuqa shaqada;

(b) Qaadashada mawqifka xushmeynta xuquuqda dadka naafada ah ee dhammaan heerarka waxbarasho oo ay ku jiraan caruurta oo idil laga soo bilaabo marka ay aad u yar –yar yihiin;

(c) Dhiirigelinta faafinta iyo soo daynta dhammaan qalabka warbaahinta ay shaaciyaan sawir ama muuqaal ka tarjumaya dadka naafada ah oo la jaanqaada ujeedoyinka Heshiiskan;

(d) Dhiirigelinta qabashada barnaamijyo tababaro wacyigelineed ee la xariira dadka naafada ah, iyo xuquuqdooda.

*Qodobka 9aad*

## La gaarikaro

1. Si awood loogu siiyo dadka naafada ah in ay u noolaadaan si madax bannaan, hadana ay kaalintooda si buuxda uga qaataan dhammaan dhinacyada nolosha, Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan dhamman tallaabooyinka munaasibka ah si loo xaqiijiyo in dadka naafada ah ay u helaan, si la siman dadka kale, bii'ada (deegaan) muuqata ee ku xeeran (sida hawda, dhulka, dhirta, biyaha IWM), gaadiid, xog iyo is-gaarsiin, oo ay kamid tahay farsamada casriga ah iyo hababka isgaarsiinta iyo xogta, iyo wixii adeegyo ah oo ufuran ama loo qoondeeyay dadweynaha, miyi iyo magaalo ba. Tallaabooyinkan, oo ay ku jirto ogaanshaha iyo ciribtirka caqabadaha ka hortaagan naafada sidii ay u gaari lahaayeen ama uga faaiidaysan lahaayeen adeegyada soo socda:

(a) Dhismayaasha, wadooyinka, gaadiidka iyo adeegyada kale ee ku yaala guryaha gudohooda iyo dibadooda, oo ay kamid yihiin Iskuulada, xarumaha caafimaadka iyo goobaha shaqada;

(b) Warbixinada iyo isgaarsiinta, iyo adeegyada kale oo ay kamid ka yihiin adeegyada elektarooniga ah, iyo adeegyada loo baahdo marka xaalad deg-deg ah dhacdo.

2. Sidoo kale, waxay qaadayaan dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan, tallaabooyin ku habboon oo looga gol-leeyahay:

(a) Dajinta halbeegyo lagu cabiro heerarka ugu hooseeya ee edeegyada iyo mabaadii' ama xeerar tusmooyin ah si loo suurta galiyo gaaridda iyo isticmaalka adeegyada guud, iyadoo la faafinayo halbeegyadaan iyo mabaadiidaan lana hubinayo fulintooda;

(b) Dammaana qaadida shirkadaha ama wakaaladaha gaarka ah (private entities) ee bixiya adeegyadada bulshadu ay xil iska saaraan oo xisaabta ku darsadaan sidii ay adeegyadooda uga dhigi lahaayeen kuwa gaara dadka naafada ah;

(c) Siinta tababaro dhinacyada adeegyada bixiya ku saabsan sidii ay adeegyadooda u gaarsiin lahaayeen dadka naafada ah;

(d) Dhajinta ama adeegsiga boorar lagu qoro luqadda ay wax ku fahmaan in dhoolayaashu iyo naafada kale oo lagu dhajiyo gaabaha bixiya adeegyada dadwaynaha;

(e) Diyaarinta dad iyagu takhasus ama aqoon xeel dheer u leh luqadda tilmaanta ee wax loogu sheego naafada (indhoolayaasha, dhagoolada IWM) si khubaradaasi u hagaan dadka nafaada ah ee iyaga dantu kasoo gasho goobaha bixiya adeega dadwaynaha;

(f) Dhiirgelinta dhammaan noocyada kala duwan ee kaalmo iyo taageero ee la siiyo dadka naafada ah si loo xaqiijiyo in ay helaan wixii isgaarsiin ama xiriir ah;

(g) Dhiirigelitain dadka naafada ah ay helaan aqoonta farsamada cusub (tiknoloojiyada), hababka xogta iyo xiriirka, sida interneetka IWM;

(h) Dhiiringelinta naqshadeynta, hormarinta, soo saaridda iyo qeybinta agabka hababka xogta iyo xiriirka farsamada casriga ah si waqtiba waqtiga uu ka horeeyo, looga dhigo agabkaas mid gacnta ku jira dadka naafada ah oo ay ku helaan qiima jaban.

*Qodobka 10aad*

## Xaqa Nolosha

Dawladaha qeybta ka ah heshiikaan waxay dib u xaqiijin in qofkasta uu xaq u leeyahay in uu noolaado, iyagoo qaadaya tallaabooyinka laga maarmaanka ah si loo hubiyo in dadka naafada ah ay helaan xaqaas wax ku'ool ka ah si la siman dadka kale.

*Qodobka 11aad*

## Xaaladaha khatarta iyo xaaladaha bani'aadintimo ee deg degga ah

Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay ballan qaadayaan, iyagoo eegaya waajibaadka ka saaran fulinta xeerarka caalamiga ah, oo ay kamid yahay xeerka Caalamiga ah ee xuquuda bani'aadantinimo iyo xeerka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, in ay qaadayaan tillaabooyinka laga maarmaanka ah si loo hubiyo difaacidda iyo badbaadinta dadka naafada ah kuwaas oo

ku sugan xaalad khatar ah, sida xaalad dagaal hubaysan iyo xaalada bani'aadantinimo iyo masiibooyin dabiici ah.

*Qodobka 12aad*

## Aqoonsiga sinnaanta ay dadka Naafada ah iyo dadka kale sharciga hortiisa usiman yihiin

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay dib carrabka ugu adkaynayaan in dadka naafada ah ay leeyihiin xaqa ah in loo aqoonsado dad sharcigu qabto (oo waxna ku dacwoon kara lana dacwayn karo) meel kasta oo ay joogaan.

2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay qirayaan ku raaxeysiga dadka naafada ah ay tahay in ay ku raaxaystaan awood sharci ee dhammaan dhinacyada nolosha iyagoo taas kala siman dadka kale.

3. Dawladaha heshiiskan qeybta ka ah waxay qaadayaan tallaabooyinka ku habboon si ay ugu helaan dadka naafada ah kaalmada ay u baahan karaan markay adeegsanayaan awoodooda sharci.

4. Dawladaha heshiiskaan qeybta ka ah waxay xaqiijinayaan qaadidda dhammaan tallaabooyinka laxariira adeegsiga awoodda sharciyadeed iyagoo bixinaya dammaanad qaad ku habboon oo waxtar leh, si looga hortago in si xun loo adeegsado tallaabooyinkaas si waafaqsan xeerka caalamiga ah ee xuquuqda aadnaha. Dammaana-qaadyadaas waxa ay xaqiijinayaan in tallaabooyinka laxariira adeegsiga awood-sharciyeedka ay xushmeenayaan xuquuqda, rabitaanka iyo doorbididda qofka, waana in ay ka fogtahay iska hor imaad dhanka danaha ah (dano is diidan), saameyn ama wax u yeerin aan jid ahayn (aan gar ahayn), waana in (tallaabooyinkaasu) yihiin kuwa ku habboon oo la-jaanqaadaya duruufta qofku ku sugan yahay, oo ku hirgali karta waqti yar oo suurta gal ah, iyadoo ay dib -u eegis iyo la socod ay ku samaynayso haya'adda markaas awoodda u leh, madaxa bannaan oo dhex–dhexaadkana ah ama waxaa dabagal kaa iyo dib u eegistaa samaynkara haya'ad garsoor. Waana in Dammaanad qaadkaasu ahaadaa mid u dhigma heerka tallaabooyinkaasu ay saamayn karaan xuquuqda iyo danaha qofka.

5. Iyadoo la raacayo axkaamta qodobkaan, dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadan tallaabooyinka ku habboon oo wax ku ool ah si loo xaqiijiyo xuquuqda dadka naafada ah, iyadoo ku salaysan sinnaan ay naafadu dadka kale ula siman yihiin in ay hanti yeeshaan ama dhaxal ahaan u heli karaan, maamushaan hantidooda ama ay heli karaan amaahda iyo curaarta uu baxsho bankigu iyo noocyada kale ee amaahda maaliyadeed ah, iyo in ay hubiyaan (dawladaha heshiiska ku jiraa) in dadka naafada ah aan looga qaadin hantidadooda si aan sharciga waafaqsanayn oo aan laga baaraan degin.

*Qodobka 13aad*

## Gaaritaanka ama Helitaanka Adeegga Garsoorka

1. Dawladaha heshiiskan qeybta ka ah waa in ay xaqiijiyaan in dadka naafada ah ay u helaan habab wax ku ool ah oo ay ku gaarsiin karaan garsoor si la siman dadka kale, oo ay kamid tahay siinta habab hawl fududayn oo la jaanqadaysa da'dooda, iyadoo looga gol leeyahay in la fududeeyo doorka wax ku ool ka ah ee naafadu si toos ah iyo si dadban ba ka ga qaybqaadan karaan dhammaan hababka sharciga iyo heerarka baaritaanka danbiyada iyo heerarka kale ee bilawga ah ba, sida in ay markhaatiyaal noqdaan.

2. Si loo hubiyo helitaanka dadka naafada ah ay adeega garsoorka helaan, waxa ay dhiirigelinayaan dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan siinta tababaro ku habboon oo loo qabto dadka ka shaqeeya cadaadaladda, oo ay kamid yihiin booliska iyo shaqaalaha xabsiyada.

*Qodobka 14aad*

## Xorriyadda Qofka iyo Amnigiisa

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay xaqiijiyaan in dadka naafada ah, si lasiman dadka kale:

(a) Ku raaxeystaan xaqa xorriyadda iyo amniga ee qof ahaaneed;

(b) Waa in aan lagaga qaadin xorriyadooda si sharci darro ah ama si aan sabab ku saleysneyn, waa in haddiiba xorriyadooda laga qaadayo ay noqotaa mid sharciga waafaqsan, waana in aan sina naafanimadu unoqon mid xujo looga dhigto in xorriyadda qofka loogaga qaado.

2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay xaqiijiyaan, haddi loo diido dadka naafada ah xorriyadooda iyadoo ka dhalatay tallaabo (sharci) oo la qaaday, dammaanado (qofkaas xaqiisa sugaya) sida uu dhigayo xeerka caalamiga ah ee xuquuqda aadmiga, iyo in ay dhamaan (dawladahaasu) si waafaqsan ujeedooyinka iyo mabaadiida heshiiskaan ku soo arooray, oo ay ka mid tahay siinta tallaabooyin iyo maamuus macquula (oo ka tarjuma naafanimadooda si ay u helaan wixii ay u baahan yihiin si la siman dadka lixda lixaad qaba ee ay isku duruufta yihiin).

*Qodobka 15aad*

## Reebanaanta hab-dhaqan kasta oo Jirdil ah, ciqaab ah, naxariis darro ah, aan bini-aadamnimo ahayn quursina ku ah sharafta qofka

1. Majiro qof loo geysan karo jirdil ama silic dilyo iyo sharaf dhac ama ciqaab ka baxsan bani aadamnimada. Si gaar ah, waa inaan qof loogu geysan tijaabo caafimaad iyo mid cilmibaaris ba, haddii aanu ogalaansho bixin xorriyadiisa oo dhameystiran.

2. Waxay qaadayaan dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan dhammaan tallaaboyinka sharci-dajineed, maamul, gaarsoor, iyo tallaabooyinka kale oo wax ku ool ah, oo naafada iyo dadka kale usimanyihiin, si loo joojiyo in loo geysto dadka naafada ah jirdil, silic dilyo, ciqaab adag, ama kabaxsan bani'aadanimada ama quursi ku ah sharafta qofka.

*Qodobka 16aad*

## Reebanaanta dhiigmiirashada, xoog muquuniska iyo xadgudubka

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan dhammaan tallaabooyinka munaasibka ah ee sharci-dajin, maamul, bulsho, waxbarasho iyo tallaabooyin kaleba; si looga difaaco dadka naafada ah, gudaha guryohooda iyo bannaankaba, dhammaan noocyada diigmiirashada, xoog maquuniska iyo xadgudubka, oo uu ku jiro xadgudubka jinsiga (lab ama dheddig ahaan shaha) ku salysan;

2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay sidoo kale qaadaan dhammaan tallaabooyinka munaasibka ah si looga hortago dhammaan noocyada kale ee dhiigmiirashada, xoog maquuniska iyo xadgubka, iyadoo la qaadayo tallaabooyin ay ka mid yihiin bixinta taageero iyo kaalmo ku habboon oo la siiyo naafada, qoysaskooda iyo kuwa naafada daryeela si loo xaqiijiyo, si gaar ah, hababka ku haboon ee jinsiga iyo da'da caawinaadka iyo taageeridda dadka naafada ah, qooyskooda iyo dadka xananataas oo tixgalinaysa jinsiga (lab iyo dheddig) iyo da'da, waxaa kaloo ka mid ah in la suurrta gasho bixinta xog iyo wacyigelin ku saabsan hababka laga hortago falalka dhiigmiirashada, xadgudubka, iyo xoog muquuniska. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay kafaala qaadaan in adeegyada ay bixinayaan ay noqdaan kuwa tixgalin siiya da'da naafada iyo jinsiga (lab iyo dheddig) ay yihiin.

3. Si looga hortago falalka dhiigmiirashada; xad-gudubka iyo xoog muquuniska, dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay xaqiijiyaan in dhammaan agabka iyo barnaamijyada loo qoondeeyay in ay u adeegan dadka naafada ah, ay noqdaan kuwa ay si wax ku ool ah dabagal ugu samayso haya'ad madax bannaan.

4. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan tallaabooyin ku habboon si loo dhiirigeliyo in dadka naafada ah ay soo ceshadaan caafimaadkooda jir ahaaneed, garasho,

iyo nafsi ahaaneed, iyo in ay helaan baxnaanin iyo dhexgalid bulshada ay dhexgalaan, marka ay la kulmaan nooc kasta oo kamid ah noocyada dhiigmiirashada, xadgudubka ama xoog muquuniska, iyadoo ay ku jirto in naafada loo suurta gasho helitaanka adeega ilaalinta iyo difaaca. Soo kabashada ama soo raysashada iyo dhexgalka ay naafadu dadka dhexgalaan waa in ay ku timaataa jawi dhiirigalinaya caafimaadka qofka, daryeelkiisa, ixtiraamkiisa, aaya katalintiisa, islamarkaasna daboolaysa baahiyaha gaarka ah ee jinsiga (lab iyo dheddig) ama da'da darted qofku u qabo.

5. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay dajiyaan sharciyo, siyaasado wax ku ool ah, oo ay kamid yihiin sharci dajinta iyo siyaasadaha xooga saaraya haweenka iyo caruurta si loo kafaalo qaado in la ogaado xaaladaha iyo dhacdooyinka dhiigmiirasho, xad gudub, xoog muquunis ee lasoo darista dadka naafada ah iyo sidii baaritaan loogu samayn lahaa falalkaas, iyadoo maxkamada lala tiigsanayo cidda lagu helo falalkaas mar alla iyo marka ay suurta gal noqoto.

*Qodobka 17aad*

## Ilaalinta sharafta qofka

Qofkasta oo naafa ah waxuu xaq u leeyahay in la xushmeeyo nabadgalyadiisa qof ahaaneed iyo tiisa caqli si lasiman dadka kale.

*Qodobka 18aad*

## Xorriyadda isu -socodka iyo Jinsiyadda

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay qirayaan xaqa dadka naafada ah ay u leeyihiin in ay ku raaxaystaan xorriyadda iso-socodka iyo xorriyadda ay ku doorankaraan meesha ay degayaan iyo helitaanka jinsiyad ama dhalasho, si la siman dadka kale, oo ay kamid tahay damaanaqaad ah in ay naafadu ku raaxaystaan oo helaan waxyaabaha soo socda:

(a) Xaqa helitaanka jinsiyad iyo badelitaankeeda iyo in aan lagaga qaadi karin jinsiyadooda si sharci darro ama naafanimadooda awgeed;

(b) In aan loogu diidi karin, naafanimo, awoodda ay leeyihiin in ay helaan, hantiyaan, adeegsadaan dukumeentiga jinsiyadooda, iyo dokumentiyada kale ee aqoonsiga, ama in ay ka faaiidaysan karaan hababka kale ee socdaalka taas oo ay ugu baahan karan adeegsiga xaqa ay u leeyihiin in ay meeshay doonaan u socdaalaan;

(c) In ay xor u yihiin in ay ka tagaan dalkii ay doonaan oo dalka ay u dhasheen ku jiro;

(d) In aan loogu diidi karin, si sharci daro ah, xaqa ay u leeyihiin in ay galaan dalka ay u dhasheen.

2. Caruurta naafada ah waa in la diiwaan galiyaa isla marka ay dhashaan, sidoo kale waa in ay helaan marka ay dhashaanba xaqa in magac loo bixiyo, xaqa helitaanka jinsiyad, iyo sida ugu suurta galka badan in ay bartaan waalidkood helaana xannaanadooda.

*Qodobka 19aad*

## Nolol Madaxbanaan iyo ka mid ahaansho bulsho

Dawladaha qeybta ka ah axdigaan waxay qirayaan xaqa ay u leeyihiin dhammaan dadka naafada ah, iyagoo xaqaas kala siman dadka kale, in ay ku dhexnoolaadaan bulshada iyagoo helaya ikhtiyaar la mid ah kan dadka kale leeyihiin, waxayna qaadayaan (dawladaha heshiiska ku jiraa) tallaabooyin wax ku ool ah si loo fududeeyo ku raaxeysiga dadka naafada ah si dhameystiran xaquuqdooda ugu raaxaystaan, dhexgalka iyo qaadashada kaalintooda ay ku leeyihiin bulshada. Waxana ka mid ah arimaha ay dawladahaasu kafaala qaadayaan wax yaalaha soo socda:

(a) Fursad u siinta dadka naafada ah in ay doortaan meesha ay degaan u noqonaysa, iyo dadka ay la noolaanayaan, si lasiman dadka kale, iyo in aan lagu khasbi Karin in ay u noolaadaan hab nololeed gaar ah;

(b) In loo suurtagaliyo dadka naafada ah helitaanka taxane adeegyo taageero ah oo ay guriga dhexdiisa ku helaan iyo adeegyada kale ee bulsho, oo ay ka mid tahay kaalmada laga maarmaanka u ah sahlidda noloshooda iyo dhex-galka ay bulshada ku dhex milmaan iyo in laga ilaaliyo in wax kala sooc ah ama saarid bulshada laga saarayo lagula kaco naafada;

(c) Kafaa'idaysiga dadka naafada ah ay ka faa'iidaysan karaan, si la siman dadka kale, adeegyada iyo agabka bulsho, ee la siiyo dadweynaha, iyo in la dammaano qaado sidii adeegyadaa ay u noqon lahaayeen kuwa si buuxda u haqab-tira baahiyahooda (naafada).

*Qodobka 20aad*

## Soc-socodka qofka

Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan tallaabooyinka wax ku ool ah si loo xaqiijiyo guur-guurka qofka naafada ah uu meeshuu doono ikhtiyaarkiisa hadba ugu guur guuri karo sida ugu suurta gashan, waxaana ka mid ah arrintaas wax yaalaha soo socda:

(a) Sahlida xorriyada guur guurka ee dadka naafada ah ee ay hadba goorta iyo habka ay doonaan ay u soc-socon karaan, iyagoo ku helaya qiimo ay awoodaan;

(b) Sahlida helitaanka dadka naafada ah ay helikaraan habab iyo qalab tayo leh, tasiilaadka cilmiga farsamada iyo wax soo saarka (tiknoloojiyadda) iyo dad gacan siiya si loogu sahlo naafada guur guurka iyagoo adeegyadaas ku helaya qiima ay awoodaan;

(c) Siinta tababaro dadka naafada ah iyo dadka la shaqeenaya iyadoo lagu tababarayo xirfadaha soc-socodka;

(d) Ku dhiirigelinta shirkadaha goonida loo leeyahay ee iyagu soo saara qalabka sahla socodka iyo farsamooyinka cusub (tiknoolijayad a) ee sahla socodka in ay dhawraan oo xil iska saaran dhammaan hababka kala duwan ee naafada loogu fududayn karo soc-socodka naafadaa.

*Qodobka 21aad*

## Xorriyada hadalka, fikirka iyo helitaanka xogta

Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan tallaabooyinka ku haboon si loo xaqiijiyo in dadka naafada ah ay adeegsadaan xaqooda xorriyadda hadalka (xorriyatul al-qawl) iyo cabiridda fikirkooda oo ay ka mid tahay xorriyadda ay u leeyihiin in ay raadiyaan, helaan, faafiyaan xogta iyo aragtiyada ay helaan ama qabaan, si la siman dadka kale, iyagoo adeegsanaya dhammaan hababka wax la isugu gudbiyo ee ay door bidaan sida ku qeexan qodobka 2aad ee heshiiskaan, oo ku jirto:

(a) Siinta dadka naafada ah wararka iyo xogta ku socota dadweynaha iyadoo la adeegsanayo noocyada farsamo ee la heli karo kuna habboon dadka kala duwan ee naafada ah iyadoo aan kharash dheeraad ah la saarayn naafada;

(b) Aqbalaadda iyo sahlidda adeegsiga dadka naafada ah ay ku isticmaali karaan mucaamilkooda rasmiga ah luqadda tilmaanta iyo farta indhoolayaashu wax ku akhriyaan ama wax ku fahmaan (Braille), iyo hababka kale ee naafadu kuwada xiriiri karaan kuwaas oo helitaankoodu sahlan yahay, ahna kuwa ay ikhtiyaarkooda u doorteen dadka naafada ahi;

(c) Ku dhiirigelinta shirkadaha gaarka loo leeyahay ee bixiya adeegyada dadweynaha, iyadoo la adeegsanayo khadka internetka, in ay ku siiyaan warbaxinada iyo farriimaha dadaka naafada ah iyagoo adeegsanaya qalabka ugu sahlan kuwaas oo naafadu si fudud u adeegsan karaan;

(d) Ku dhiirgelinta warbaahinta, ay ku jiraan kuwa internetka wax ku tabiya, in ay kadhigaan adeegyadooda kuwa ay helikaraan (awoodaan) dadka naafada ahi;

(e) Aqoonsiga luqadaha tilmaanta (luqad ama afgarad kasta oo qof naafo ah adeegsado) iyo dhiirigelinta adeegsiga afgaradkaas.

*Qodobka 22aad*

## Xushmeyta Kali Ahaansho (in qofku u adeego xornimadiisa oo aan cid kale fara gashan)

1. Lama Ogola in si sabab la'aan ah ama aan sharci darro ah loo farageliyo, iyadoo aan la tixgelinayn meesha u ku noolyahay ama sida uu unoolyahay, arrimaha qofka (naafada ah) gaarka u ah, qoyskiisa, gurigiisa ama warqadihiisa, ama habkasta oo oo isgaarsiin ahaan u adeegsado, sidoo kale lama dhaawici karo sharaftiisa ama sumcadiisa. Dadka naafada ah waxay xaq u leeyihiin in ay sharciga ka hoos galaan fara gelinta iyo xadgudubka noocaas oo kale ah haddiiba ay la kulmaan.

2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay ilaaliyaan xogaha ugaarka ah ee ku saabsan arimaha gaarka ah ee dadka naafada ah, caafimaadkooda iyo baxnaanintooda si si la mid ah sida loo ilaaliyo khusuusiyadda dadka kale.

*Qodobka 23aad*

## Xushmeynta Guriga iyo Qoyska

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan tallaabooyin habboon oo wax ku ool ah si loo tirtiro faquuqa dadka naafada ah lagula kaco marka ay timaato arrin guur, qoys, waalidnimo iyo xariir; si ay ula siman yihiin dadka kale, si loo xaqiijiyo arrimaha soo socda:

(a) Xaqa dadka naafada ah ee gaaray da'da guurka ay uleeyihiin in ay guursadaan, unkaan qoys; ku dhisan rabitaan buuxa oo xor ah oo kasoo fula labada ruux ee iyagu doonaya in ay is-guursadaan;

(b) Xaqa dadka naafada ah ay u leeyihiin in ay go'aan ka gaaraan ikhtiyaarkooda ah tirade caruurta ay rabaan in ay dhalaan iyo waqtiga ay kala fogaynayaan dhelidda caruurta, iyo in ay helaan xog iyo wacyi gelin da'dooda u qalanta oo ku saabsan arrimaha taranka iyo qorshaynta qoyska iyo siinta (naafada isqaba) qalabka lagama maarmaanka u ah suurta galinta adeegsiga xaqaan;

(c) Xaqa dadka naafada ah ay u leeyihiin, oo ay ku jiraan caruurtu, in la ilaaliyo khusuusiyadooda (arrimaha u gaarka ah).

2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay xaqiijinayaan xuquuqda iyo masuuliyadda dadka naafada ah qaadi karaan, iyagoo masuul ka noqonaya xannaanada caruurtooda, dardaaranka, kafaala qaadidda ama korsashada ilmo (aanay dhalin), iyo caado kasta oo kuwaas la mid ah, oo shuruucda iyo caadaatka dalkaasi qabaan (ay dhigayaan), iyo xaalad kasta oo ahmiyadda ugu wayn siinaysa caruurta. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay siiyaan taageero iyo caawimaad munaasib ah dadka naafada ah si ay ugu sahlaan barbaarinta iyo korinta caruurtooda;

3. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay xaqiijiyaan in caruurta naafada ah ay leeyihiin xuquuq siman marka laga hadlayo nolosha qoyska. Si looga shaqaysiiyo xuquuqdaas, loogana hortago qarinta caruurta naafada ah, cidla uga tegidooda, dayicidooda, kala soocooda (takooridooda), dawladaha qeybta ka ah waxay ballan qaadayaan in ay siiyaan waqti hore xog iyo adeegya buuxa caruurta naafada ah iyo qoysaskooda;

4. Dawaladaha qeybta ka ah heshiiskan waa in ay xaqiijinayaan in aan ilmo lagaga qaadin si khasab ah labadiisa waalid; hadii aanay markaas go'aamin haya'ad awood u leh sharci arrintaas, oo ku xiran dib u eegis uu garsoorku arrintas ku sameeyo, iyo in ay waafaqsan tahay shuruucda iyo xeerarka dalka ka jira iyo in arrintaasu tahay mid loo qaaday danta ilmaha. Sina uma bannaana in looga qaado cunuga labadiisa waalid maadama u naafa yahay, ama labadiisa waalid ay naafa yihiin ama mid kood naafa yahay.

5. Dawladaha heshiiskaan qeybta ka ah waa in ay ballanqaadaan in marka aysan awoodin qoyska ilmaha dhalay in uu si toos ah u xanaaneeyo ilmaha naafada ah in ay dadaal u galaan sidii ay ilmahaas ku siin la haayeen daryeel kale, iyadoo ilmuhu ku jirayo gacanta qoys waynihiisa, haddii aysan suurtagal ahayn taasina laggu daryeelayo ilmahaas bulshadiisa dhexdeeda iyo jawi qoys.

*Qodobka 24aad*

## Waxbarashada

1. Dawladaha heshiiskaan qeybta ka ah waxay aqoonsanyihiin xaqa ay dadka naafada ah u leeyihiin in ay helaan waxbarasho. Si looga shaqaysiiyo xaqaan iyadoo faquuq jirin fursadahana loo siman yahay, dawladahaas waa in ay hubanti ka dhigaan hab waxbarasho oo kulminaya dhammaan heerarka waxbarasho iyo tacliin xiriir ah iyagoo higsanaya arrimaha soo socda:

(a) Horumarin buuxda oo lagu sameeyo awoodaha bini'aadamka, iyo dareenka sharafeed iyo han wayni ee bini aadamku qof ahaan isu qabo, iyo xoojinta xushmeynta xuquuqda aadanaha iyo xoriyaadka asaasiga ah;

(b) Kobcinta qofnimada dadka naafada ah, awoodahooda iyo hal abuurkooda, iyo sidoo kale awoodahooda caqli iyo jir; si ay ugaaran awood buuxda iyo isku filnaansho;

(c) U sahlida dadka naafada ah kaqeybgal wax ku ool ah oo ay ku yeeshaan bulshada xorta ah.

2. Iyagoo garwaaqasan xaqiiqdaan, Dawladaha heshiiskan qeybta ka ah waa in ay meel mariyaan waxyaabaha soo socda:

(a) In aan looga cayrin dadka naafada ah nidaamka waxbarashada naafanimo, iyo in aan laga cayrin karin caruurta naafada ah waxbarashada hoose iyo tan sare tan ee bilaashka ah iyo tan khasabka ahba naafanimo awgeed;

(b) U sahlidda helitaanka dadka naafada ah ay ka heli karaan waxbarasho bilaash ah oo tayo leh dugsiyada hoose iyo kuwa sare, si la siman dadka kale ee ay la noolyihiin;

(c) Ilaalinta baahiyahooda qofeed sida ugu macquulsan;

(d) Helitaanka dadka naafada ah ay helaan kaalmada laga maarmaanka ah ee habka waxbarashada guud; si loogu sahlo helitaanka waxbarasho wax ku'ool ah;

(e) Taageero qof qof ah oo wax ku ool ah oo lagu siiyo naafada jawi u ogolaanaya iyaga in ay gaaraan koboc aqooneed iyo mid bulsho oo meesha ugu sarraysa ah oo wafaqsan ulajeeda la higsanayo ee ah in la gaaro isdhexgal buuxa (oo dhexmarta bulshada iyo naafada)

3. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay u suurta galiyaan dadka naafada ah in ay bartaan xirfado nololeed iyo xirfadaha dhinaca hormarinta bulshada si ay ugu sahasho kaalin buuxda oo ay ka qaataan waxbarashada, si la siman kaalinta dadka kale, iyagoo ah xubno ka tirsan bulshada. Si ujeedkaas loo xaqiijiyo, dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan tallaabooyin habboon, oo ay ka mid yihiin wax yaalaha soo socda:

(a) Sahlida waxku barashada habka farta indhoolayaasha wax lagu baro (Braille) iyo qeybaha qoraalka bedelka ah, iyo hababka iyo noocyada kale isgaarsiinta awoodda leh, iyo xirfadaha hagidda iyo socodka, iyo sahlidda kaalmada iyo hagidda ay ka helayaan dadka iskumidka yihiin;

(b) Sahlida barashada luqada tilmaanta iyo dhiirigelinta aqoonsiga luqadda dhagoolayaasha;

(c) Xaqiijinta in waxbarashada la siiyo dadka indhoolayaasha ah, dhagoolayaasha, iyo dadka labadaba la'a (indhoole-dhagoole), gaar ahaan kuwa caruurta ah, iyadoo wax lagu barayo luqadaha ugu habboon, iyo hababka isgaarsiin ee dadkaas wax ku fahmaan, iyadoo lagu siinayo waxbarashadaas jawi keeni kara koboc aqooneed iyo mid bulsho

4. Si loo hubiyo ka shaqaynsiinta xaqaan, dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan tallaabooyin ku habboon oo ah shaqaaleysiinta macalimiin, ay ka mid yihiin macalimiin naafo ah, kuwaas oo aad u yaqaan luqadda tilmaanta/ama habka farta indhoolayaasha wax lagu baro (Braille), iyo tababaridda iyo diyaarinta khubarada iyo shaqaalaha ka hawl gala dhammaan heerarka waxbarasho. Waxaa ka mid ah tababarkaas wacyigelinta ku aadan naafanimada iyo adeegsiga hababka, qalabka munaasibka ah ee bedelka ah, iyo farsamooyin iyo qalabka waxbarashada u sahla dadka naafada ah.

5. Dawladaha heshiiska ku jira waa in ay xaqiijiyaan in dadka naafada ah helaan waxbarasho sare oo guud, tababaro xirfadeed, waxbarashada dadka waawayn iyo waxbarasho xiriir ah inta uu nool yahay, si la siman dadka kale. Si haddaba loo gaaro ujeedkaas, dawladaha ku jira heshiiska waa in ay kafaala qaadaan in ay bixinayaan adeegyada iyo maamuuska macquulka ah ee u sahlaya naafada helidda waxbarashadaas.

*Qodobka 25aad*

## Caafimaadka

Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxa ay aqoonsanayaan in dadka naafada ah ay leeyihiin xaqa ah in ay ku raaxaystaan heerarka ugu sareeya ee caafimaad, iyadoo aanu jirin faquuq loogu gaysan naafanimadooda awgiis. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan tallaabooyin ku habboon oo xaqiijinaya helitaanka dadka naafada ah ay helaan adeegyo caafimaad oo toxgalinaya kala duwanaashaha raga iyo dumarka, oo uu ku jiro adeega baxnaaninta caafimaad. Dawladaha ku jira heshiiska waa in ay si gaar ah uga shaqeeyaan arrimaha soo socda:

(a) Siinta naafada daryeel iyo barnaamijyo caafimaad oo bilaash (lacag la'aan) ah oo kharash macquul ah ku kacaya una dhigma dhanka tayada, xaddiga, heerka iyo noocaba daryeelka la siiyo dadka kale, iyadoo ay ku jirto adeegyada caafimaad ee taranka, kaalmada iyo barnaamijyada guud ee logu tala galay caafimaadka dadweynaha;

(b) Siinta naafada adeegyada caafimaad ee ay baahida u qabaan maadaama oo ay naafo yihiin awgeed, gaar ahaan ogaanshaha hore (in haddii xanuun jiro oo kale isla markaba la ogaan karo) iyo soo faragelinta (wax ka qabashada) mar alla marka loo baahdo adeeg, iyo in la helo adeegyo kale oo wax ka qabanaya ama la tacaalaya yaraynta iyo ka hortagga dhacdooyinka dadku naafo ku noqdaan, iyadoo ay soo galayaan dadka waawayn iyo dadka yar-yar;

(c) Ka hirgalinta adeegyadaas caafimad meesha ugu dhaw oo suurta gal ah ee deegaanada naafadu ku nool yihiin, oo ay ka mid yihiin goobaha miyiga;

(d) Ku boorinta xirfadlayaasha adeega caafimaad bixiya, in ay naafada siiyaan daryeel

caafimaad oo la mid ah kan ay dadka kale siiyaan, oo ay ku jirto in ay daryeelkaas ay ku siiyaan naafada rabitaankooda iyo codsigooda, iyagoo ku dhaqaaqaya arrima dhawr ah oo ay ka mid tahay sara uqaadidda wacyiga xuquuqda aadanaha ee dadka naafada ah, dhawrista sharaftooda iyo ka talinta aayahooda iyo baahiyahooda, iyadoo arrintaa lagu gaarayo tababarid la tababarayo naafada iyo faafinta hal-beegyo akhlaaqi ah oo ku saabsan daryeelka caafimaad ee la siinayo naafada haddii uu ahaan lahaa mid guud ahaan loo leeyahay iyo mid gaar loo leeyahayba;

(e) Xaaraanti-nimaynta takoorida dadka naafada ah lagu takooro bixinta adeega caymiska caafimaad (lacag qofku si joogto ah u bixiyo, si haddii uu xanuunsado qofkaas loo daweeyo) iyo caymis nololeedka (lacag si joogto ah qofku ubixiyo, si haddii qofka bixinaya dhib gaarto ama uu dhinto lacag qofka ama reerkiisa loo siiyo), marba haddii arrintaa uu dhigayo sharciga lagaga dhaqmo dalkaas, waxaana shardi ah in adeegydaas lagu siiyo naafada hab caddaalad ah oo macquul ah;

(f) Lama diidi karo bixinta daryeel caafimaad ama adeegyada caafimaad ama cuntada iyo dareere iyadoo sabab looga dhigayo naafanimo.

*Qodobka 26aad*

## Baxnaaninta iyo dib- ubaxnaaninta naafada

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskan waa in ay qaadaan talaabooyin habboon oo wax ku ool ah, oo ay ka mid tahay habka is caawinta dadka naafada ah, si loogu suurta galiyo in ay helaan badaxbannaani buuxda iyo awoodo iyo xirfado buuxa oo ay ku meel maraan, iyo xaqiijinta kaalin buuxda oo dadka naafada ah ku yeeshaan dhammaan dhinacyada nolosha. Si haddaba loo gaaro yoolkaas la higsanayo, dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay bixiyaan adeegyo iyo barnaamijiyo dhamaystiran oo si ballaaran u baxnaaninaya una daryeela naafada, gaar ahaan dhinacyada caafimaadka, shaqada, waxbarashada iyo adeegyada bulsho, iyadoo loo hirgaliyo adeegyadaan sidan soo socota:

(a) Mid bilaabmaysa waqtiga ugu horreeya ee suurtagal ah, iyadoo la bixinayo adeeg ku salaysan qiimayn lagu samaynayo baahiyaha kala duwan ee qof kastaa gaarkiisa u qabo;

(b) Gacan ka gaysashada in naafada lagu daro bulshada, kaalin buuxdana la siiyo oo ay kaga qaybqaataan dhammaan dhinacyada nolosha bulshooyinkooda si mutadawacnimo ah (iskood isku direen) miyi iyo magaaloba.

2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay dhiirigaliyaan dajinta barnaamijyo tababaro bilaw ah oo loo qabto dadka khubarada ah iyo shaqaalaha kashaqeeya bixinta adeegyada baxnaaninta iyo dib-udajinta naafada.

3. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay dhiirigaliyaan helidda la heli karo, aqoonta iyo adeegsiga qalabka iyo farsamooyinka cusub ee caawiyayaasha ah kuwaas oo loo naqshadeeyay ama loo sameeyay dadka nafada ah, maadaama oo ay la xiriiraan dadaalada loogu jiro baxnaaninta iyo dib-udajinta naafada.

*Qodobka 27aad*

## Shaqada iyo shaqaalaha

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxa ay aqoonsanyihiin xaqa shaqo ee dadka naafada ah leeyihiin, si la siman dadka kale; waxaana kamid ah siinta fursado ay ku helaan noloshooda iyagoo ka shaqaynaya shaqo markaas ay ikhtiyaarkooda ku doorteen oo ay ka hayaan suuq xor ah oo u furan soona dhawaynaya kusoobiiridda naafadu shaqooyinka ku soo biiraan. Waana in dawladaha heshiiska ku jiraa dhawraan oo xoojiyaan xaqa ah in ay naafadu shaqaysan karaan, oo ay ku jirto ilaalinta iyo dhawrista xaqa uu yeelanayo qofka naafooba isagoo shaqada ku jira, arrintaa oo lagu meel marin karo iyadoo la qaado tallaabooyin habboon, sida dajinta shuruuc iyo xeerar (arrintaa qeexaya), si loo gaaro ujeedooyin dhawr ah oo ay ka mid yihiin:

(a) Mamnuucidda takoorka ku dhisan naafanimada ee quseeya dhammaan arimaha laxariira shaqaalaha kala duwan, oo ay ka mid tahay shuruudaha shaqaaleysiinta, magacaabista iyo shaqada, shaqada sii wadideeda iyo dallacsiinta shaqada, iyo duruufaha bad-baado iyo caafimaad ee shaqada;

(b) Ilaalinta in dadka naafada ah ku shaqeeyaan jawi shaqo oo uqalma kuna habboon duruuftooda, si la siman dadka kale, oo ay ka mid tahay fursado isku mid ah oo ay helaan, mushaar siman oo u beegtooma shaqada ay qabtaan, iyo duruuf shaqo oo aan dhibi ka soo gaarayn, iyo sidoo kale in shaqaalaha naafada ah laga ilaaliyo kadeed iyadoo qaandhaw laga siinayo wixii dhib ku dhaca inta shaqada ay hayaan;

(c) In loo kafaala qaado dadka naafada ah in ay adeegsadaan xaqa ay u leeyihiin helitaanka xuquuqda ururada shaqaalaha (sida in ay ka mid noqon karaan, jago ka qaban karaan, ururadaasi naafada xaqooda usoo celin karaan shaqaale ahaan) si la siman dadka kale;

(d) U suurtagalinta dadka naafada ah inay helaan si wax ku ool ah u helaan barnaamijyada guud ee jihaynta iyo farsamo iyo xirfadeed, adeegyada shaqalaysiinta, iyo tababarada shaqo ee joogtada ah;

(e) Xoojinta fursadaha shaqo iyo horumarinta xirfadeed iyo shaqo ee ay helayaan dadka naafada ah ee raba in ay ka shaqaystaan suuqa shaqada, iyadoo hadana la siinayo fursado shaqo ay ku helaan, ku nagaadaan shaqadaas, kuna noqdaan shaqadooda (haddii markaas duruuf uga maqnaadaan IWM);

(f) Xoojinta iyo dhiirigelinta in naafadu hesho shaqooyin iskood ay u abuurtaan, samaynta shirkado ama iskaashatooyin ganacsi iyo hab kasta oo shaqo xor ah u abuuri kara;

(g) Ka shaqaaleysiinta dadka naafada ah waaxaha dawladda;

(h) Dhiirigelinta shaqaalaha naafada ah ee kashaqeeya goobaha gaarka loo leeyahay iyadoo la raacayo siyaasado, iyo tallaaboyin munaasib ah, oo ay ka mid tahay tallaabooyin la raacayo, dhiirigelin iyo wixii tallaabooyin kale ah (oo loo baahdo);

(i) Kafaalaqaadidda tallabooyin hawl fududayn ah oo macquula oo loo sameeyo dadka naafada ah;

(j) Dhiirigelinta in dadka naafada ah ka helaan khibrado shaqo suuqa furan ee shaqada;

(k) Xoojinta barnaamijyada lagu barayo ama loogu samaynayo xirfado, sida shaqo loo haysto (xafito) iyo sida shaqo dib loogu noqdo, iyadoo la eegayo danaha dadka naafada ah.

2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay xaqiijiyaan in aan dadka naafada la adoonsan, iyo in laga ilaasho, si la mid ah sida dadka kale, shaqooyinka khasabka ah.

*Qodobka 28aad*

## Heer Nololeedka habboon iyo ilaalinta bulshada

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxa ay aqoonsanyihiin xaqa dadka naafada ah ay u leeyihiin in ay ku raaxaystaan heer nololeed oo u qalma iyaga iyo qoyskooda, sida in ay helaan cunto, dhar iyo hoy; iyo sii wadidda horumarinta duruufahooda nololeed, waana in ay qaadaan tallaabooyin ku habboon oo lagu dhawro xaqaas iyo xoojinta sidii looga shaqaysiin lahaa xaqaas, oo ay ku jiraan tallaabooyin lagu higsanayo.

2. Dawlada qeybta ka ah heshiiskaan waxa ay aqoonsanyihiin xaqa difaaca-bulsho ee dadka naafada, ku raaxeysiga xaqaas ayadoo aysan jirin takoor naafo, waxayna qaadayaan tilaabooyinka ku habboon ee lagu difaaci karo xaqaas laguna xoojin karo ku shaqeyntiisa, oo ay ka mid tahay tallaabooyin loola jeedo:

(a) Dammaanaqaadka sinnaanta dadka naafada ah ay kala siman yihiin dadka kale fursadaha helitaanka biyo nadiif ah, adeegyo iyo qalab munaasib ah oo ku kacaya qiimo macquul ah iyo wixii kaalmooyin kale ah oo ku xiran ka jawaabidda baahiyaha la xiriira naafanimada;

(b) Xaqiijinta kafaa'idaysiga dadka naafada ah, gaar ahaan haweenka, gabdhaha iyo dadka waaweyn, ka faaiidaysan karaan barnaamijyada ilaalinta bulshada (sida barnaamijyada lagu taageero dadka sabool ka ah) iyo barnaamijyada yareynta saboolnimada;

(c) Xaqiijinta ka faa'idaysiga dadka naafada ah iyo qoysaskooda ee ku nool xaalad saboolnimo ay ka faaiidaysan karaan kaalmada ay dawladu bixiso ee la xariira kharashaadka ku baxa naafada, waxaa kaloo ku jira tababaro munasib ah, talo siin, kaalmo maaliyadeed iyo daryeel kumeel gaar ah oo lasiiyo naafada;

(d) Xaqiijinta ka faa'idaysiga dadka naafada ah ay ka faaiidaysan karaan barnaamijyada guud ee gur-yaynta (hoy abuurka);

(e) Xaqiijinta ka faa'idaysiga dadka naafada ah ay ka faaiidaysan karaan, si ay ula siman yihiin dad ka kale, manaafacaadka barnaamijyada hawlgabnimada.

*Qodobka 29aad*

## Ka qeybgalka Siyaasadda iyo Nolosha Guud

Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay u dammaanaqaadaan dadka naafada ah xuquuqdooda siyaasadeed, sida dadka kale, waxayna ballan qaadayaan arrimaha soo socda:

(a) Xaqiijinta in dadka naafada ah ay si wax ku ool ah uga qayb qaadan karaan siyaasadda iyo nolosha guud, sida dadka kale, iyaga oo si toos ah oo xor ah wax u dooranaya ama dooranaya ciddii iyaga matali lahayd, waxaana ka mid ah xaqa iyo fursadda dadka naafada ah ay u leeyihiin in ay wax doortaan lana doorto, taas oo lagu xaqiijinayo arrimaha soo socda:

(i) Ka-faalaqaadidda in tallaabooyinka iyo agabka codeynta ay yihiin kuwa ku habboon, la heli karo, si fududna loo fahmi karo loona adeegansan karo;

(ii) Ilaalinta xaqa dadka naafada ah u leeyihiin in ay codkooda ku dhiiban karaan waraaq sir ah xilliga doorshooyinka iyo afti qaadidda si baqdin la'aan ah, iyo xaqa ay u leeyihiin in ay isu soo sharrixi karaan, qabanna karaan jagooyinka iyo masuuliyadaha dawladda heer walba, iyo adeegsiga farsamada casriga ah (tiknoloojiyadda) ee naafada hawshaas u fududayn karta haddii loo baahdo;

(iii) Dammaanaqaadka xorriyadda dadka naafada ah uleeyihiin in ay cabbiraan ama muujiyaan doonitaankooda iyagoo codkooda dhiibanaya, iyo in loo ogolaado, haddii loo baahdo, cid ay iyagu dalbadeen oo ku caawiya cod bixinta.

(b) In ay ka shaqeeyaan suurtagalinta jawi u saamaxaya dadka naafada ah in ay si buuxda, oo aan faquuq lahayn, uga qayb qaataan dabiridda (fulinta) hawlaha guud, oo ay ka mid yihiin arrimaha soo socda:

(i) Kaqeybqaadashada ay dadka naafada ah ka qayb gali karaan hay'adaha iyo ururada aan dawliga aheyn ee ka shaqeeya hawlaha siyaasadda iyo danaha guud, oo ay ku jiraan ka mid noqoshada axsaabta ku lug leh arrimaha siyaaddda iyo maaraynta arrimohooda;

(ii) Yagleelidda ururo ay dadka naafada ah leeyihiin iyo kuu biiridooda si ay u matasho danaha dadka naafada ah guda iyo bannaan ba.

*Qodobka 30aad*

## Kaqeybqaadashada nolosha dhaqanka, madadaalada, iyo ciyaaraha

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay aqoonsanyihiin xaqa dadka naafada ah u leeyihiin in ay ka qeybqaataan, si lasiman dadka kale, nolosha dhaqan, waana in ay waxayna qaadan tallaabooyin habboon si loo xaqiijiyo in dadka naafada ah ay helaan:

(a) In ay heli karaan qalabka iyo agabka dhaqanka si sahlan;

(b) In ay helikaraan barnaamijyada telefisyoonka, filimada, bandhigyada rawaayadaha iyo noocyada kale ee dhaqanka la xiriira;

(c) In ay heli karaan gelidda goobaha bandhigyada ama adeegyada dhaqanka sida riwaayadaha, matxafyada, goobaha shaneemooyinka, maktabadaha, adeegyada dalxiiska, iyo goobaha muhiimadda taariikheed leh dhaqan iyo taariikheed leh.

2. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay qaadaan tallaabooyinka ku haboon si loogu sahlo dadka naafada ah in ay helaan fursado ay ku hormariyaan kuna adeegsadaan awoodahooda, hal-abuurka, farsamada iyo awoodaha maskax iyo garaad, iyadoo taas aysan ahayn dantooda oo kaliya balse ay tahay kadhigidda bulshada mid hodan ka ah dhanka dhaqanka.

3. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxa ay qaadayaan tallaabooyin ku haboon, si waafaqsan xeerarka caalamiga ah, si loo xaqiijiyo in xeerarka ilaalinaya xuquuqda hantida maskexeed aanay noqon mid caqabad aan munaasib ahayn ama carqalad in dadka naafada ah ay helaan wixii qalab ama walxo dhaqan ah.

4. Dadka naafada ah waa in ay helaan, si la siman dadka kale, aqoonsi la aqoonsado iyo taageero ay ku helaan haybtooda dhaqan iyo luqadeed, oo ay ka mid tahay fara-ka hadalka (luqadda calaamadaha jirka la iskula hadlo, sida dhagoolayaasha).

5. Si loogu suurgaliyo kaalin firfircoon oo dadka naafada ka ciyaaraan hawlaha madadaalada, ciyaaraha iyo isboortiga, si la siman dadka kale, dawaladaha ku jira heshiiska waa in ay qaadaan tallaabooyin ku habboon oo kala ah:

(a) Dhiirigelinta in dadka naafada ah ay si buuxda uga qaybgalaan dhammaan hawlaha madadaalada iyo ciyaaraha heer kasta;

(b) Xaqiijinta in dadka naafada ah ay helaan fursad ay isku-abaabulaan, hormariyaan kana qeyb galaan ciyaaraha iyo madadaalada ugaarka ah naafada, iyo in laga shaqeeyo, si loo gaaro yoolkaan, dhiirigelinta in la siiyo naafada xaddi macquul ah oo waxbarasho, tababar iyo hanti, si la siman dadka kale;

(c) Xaqiijinta gelintaaka dadka naafada ah geli karaan goobaha ciyaaraha, madadaalada iy dalxiiska;

(d) Xaqiijinta fursad siinta caruurta naafada ah si ay uga qeyb galaan, si la siman caruurta kale, hawlaha ciyaraha iyo madadaalada, oo ay ka mid yihiin kuwa ka dhaca iskuulka dhexdiisa;

(e) Xaqiijinta helitaanka dadka naafada ah ay helaan adeegyada ay baxiyaan dadka ka shaqeya agaasinka madadaalada, dalxiiska iyo ciyaaraha.

*Qodobka 31aad*

## Tiro –koobka/Istiitikada iyo xog Arurinta

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxay ballan qaadayaan in ay sameeyaan arurinta xog iyo macluumaat munaasib ah, oo ay ka mid tahay ururinta xog tiro-koob iyo mid cilmi baariseed, si ay ugu suurtagasho dawladahaas in ay qaabeeyaan, dajiyaan, fuliyaana heshiiskaan. Waxaana habboon in hawlaha xog ururintu ay la timaato wax yaalaha soo scoda:

(a) U hoggaansamidda dammaanadaha sharci ahaan lagu dhaqmo, oo ay ka mid yihiin sharciga macluumaad ururinta, si loo xaqiijiyo ilaalinta sir-qarinta iyo xushmeynta waxyaalaha ugaarka ah (khusuusiyadda) dadka naafada ah;

(b) U hoggaansamidda mabaadiida caalami ahaan la isku raacsanyahay ee ilaalinta xuquuqda aadanaha, xorriyaadka asaasiga ah, iyo mabaadiida akhlaaq ahaaneed ee ka xeeran sameynta tiro- koobka iyo adeegsigiisa.

2. Macluumaadka la aruuriyay si waafaqsan qodobkaan, waa in la abla ableeya (la kala saaraa), hadba sida ku habboon, haddana loo adeegsadaa qiimaynta inta dawladaha heshiiskaan jiraa ay ka soo dhalaaleen waajibaadkii saarnaa sida uu dhigayo heshiiskaan, iyo daah ka qaadidda caqabaadka naafada ka haysta adeegsiga xuquuqdooda iyo ka shaqaynta sidii looga gudbi lahaa carqaladahaas.

3. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay ka soo dhalaalaan masuuliyadooda ah faafinta tiro-koobyada. Sido kale waa in ay xaqiijiyaan sidii dadka naafada ah ay ku heli la haayeen tira-koobkaas.

*Qodobka 32aad*

## Iskaashiga Caalamiga ah

1. Dawladaha qeybta ka ah heshiiskan waxay aqoonsan yihiin ahmiyadda uu leeyahay iskaashiga caalamiga ah iyo sii xoojintiisa si loo taageero dadaalada wadamadu ku doonayaan in lagaaro ujeedka heshiiskaan, waana in ay qaadaan tallaabooyin munaasib ah oo wax ku ool ah oo arrintaan lagu haqiijinayo, iyagoo iskaashi arrinkaan kala samaynaya ururada caalamiga ah iyo kuwa goboleedka ee aarintu qusayso iyo beesha rayidka ah, gaar ahaan ururada iyagu u xilsaaran ama udooda arrimaha naafada. Tallaabooyinkaas waxaa ku jiri kara oo hoos gali kara waxyaabahan soo socda:

(a) Xaqiijinta in la gaarsiiyo iskaashiga caalamiga dadka naafada ah oo ay ka faaiidaystaan, oo ay ka mid yihiin barnaamijyada horumarineed ee caalamiga ah;

(b) Fududaynta iyo gacan ka gaysashada awood dhiska (loo sameeyo dawladaha), oo ay ka mid tahay is-dhaafsiga xogta, khibradaha iyo barnaamijyada tababarada iyo hababka dabakhidda ama fulinta ugu wacan;

(c) Sahlida iskaashi laga wada sameeyo dhanka cilmi-baarista iyo helitaanka farsama aqooneed;

(d) Bixinta kaalmo farsamo iyo mid dhaqaale, sida ugu suurta gashan, oo ay ku jirto iyadoo la fududaynayo cilmi iyo farsamo casri ah oo la heli karo gacanna siinaysa (dawladaha iyo haya'adaha ku hawlan adeegga naafada) iyo gudbinta aqoontaas iyo farsamadaas casriga.

2. Axkaamta qodobkaan waa in ay noqdaan kuwa aan taabaneyn waajibaadka ka saaran dawlad kasta fulinta iyo meelmarinta waajibkeeda kaga aadan heshiiskaa.

*Qodobka 33aad*

## Fulinta heer qaran iyo Dabagalka

1. Dawladaha ku jira heshiskaan waa in ay magacaabaan, iyagoo raacaya sida uu qabo qaab dhismeedka haya'adohooda maamul, haya'ad qur ah (kaligeed ah) oo hawlaha isku xirta ama ka

badan taas oo dawladda u qaabilsan arrimaha ku saabsan fulinta iyo meelmarinta heshiiskaan. Iyadoo siinaysa ahmiyad gaar ah samaynta hab isku xir oo dawladdu yeelato si loo socodsiiyo hawlaha looga fadhiyo in ay qaabtaan laamaha iyo heerarka kala duwan (ee dawladdu).

2. Dawladda ku jira heshiiskaan waa in ay, iyagoo raacaya nidaamkooda sharci iyo maamul, sameeyaan, ama xoojiyaan qaab-guud oo dawladdu yeelato, oo ay ka mid tahay abuuridda hab madax bannaan, hadba sidi loo baahdo, oo u xilsaaran xoojinta, ilaalinta iyo dabagalka fulinta heshiiskaan. Waana in dawladuhu xisaabta ku darsadaan, marka ay abuurayaan ama samaynayaan qaabkaan, dhammaan mabaadiida la xariirta heerka iyo hababka ay ushaqeeyaan haya'adaha wadaniga ah ee ka shaqeeya ilaalinta iyo kor uqaadidda xuquuqul insaanka.

3. Bulshada rayidka ah, gaar ahaan dadka naafada ah iyo ururada matala, waa in ay si buuxda uga qeybqaataan hawsha dabagalka.

*Qodobka 34aad*

## Guddiga qaabilsan ilaalinta Xuquuqda Naafada

1. Waa in la sameeyaa Guddi qaabilsan Xuquuqda Dadka Naafada ah (waxaana loogu yeerayaa hadda kadib "Guddiga"), si uu u qabto fulinta hawlaha hoos ku xusan:

2. Guddigu waxa u ka koobnaanayaa marka u hirgalayo heshiiskaan labo iyo toban (12) khabiir. Waxaana lagu darayaa lix (6) xubnood, si tirada guddigu u gaarto sided iyo toban (18), ka dib marka heshiisku helo ansixinta ama kusoo biiridda lixdan (60) dawladood oo dheeraad ah;

3. Xubnaha guddigaan waa in ay noqdaan kuwa ku awoodooda ku meel mara (oo aan cid kale wax u yeerin), isla markaasna lagu yaqaan anshax sare, karti iyo khibrad ama waaya aragnimo ay u leeyihiin arrimaha uu ka hadlayo heshiiskaan, Marka ay soo magacaabayaan musharixiintooda, dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan waxaa loogu yerayaa in ay tixgaliyaan axkaamta ku xusan qodobka 4-aad, faqradiisa 3-aad ee heshiskaan.

4. Xubnaha guddiga waxaa soo dooranaya dawladaha ku jira heshiiska, iyada oo la dhawrayo qaybta deegaanka (in guddiga qaybtiisa lagu saleeyo deeganada kala duwan ee adduunka) iyo in laga qayb galiyo dhammaan xadaaradaha kala duwan iyo xeerarka sharci ee adduunka ka jira, isla markaasna la tixgaliyo ka qaybgalka isu dheeli tiran oo labada jinsi (rag iyo dumar) iyo kusoo daridda khubaro naafo oo ka mid noqda guddiga.

5. Xubnaha guddiga waa in lagu doortaa kulamada ay isugu yimaadaan dawladaha ku jira heshiiskaan kuwaas oo iyagoo codkooda ku dhiibanaya habka codka qarsoodiga ah ka doorta liiska ay ku qoranyihiin shakhsiyaadka dawladaha heshiiska ku jira ka soo xuleen muwaadiniintooda. Kulamadaas, oo ku qabsooma kooram ah in ugu yaraan seddex meelood labo dawladaha qeybta

ka ah heshiiska ay joogaan, waxaana xubnaha guddiga noqda, musharixiinta ka hela codadka ugu badan iyo codka aqlabiyadda dhamaystiran (51%) wakiilada dowladaha xubnaha ka ah ee iyagu soo xaadira codkana dhiibta.

6. Waxa la qabanayaa doorashada ugu horeesa waqtiga aan ka badneyn lix bilood marka laga soo bilaabo fulinta heshiiskaan. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa in uu u diraa dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan, afar bilood kahor ugu yaraan waqtiga laqabanayo doorashada, waraaq uu ugu yeerayo in ay ku soo diraan magacyada dadka u sharraxan labo bilood gudahood. Markaa kadib, Xoghayaha Guud waa in uu diraa magacyada musharixiinta oo ku qoran habka xarfaha alifeetadu u kala horeeyaan, iyo dawladaha ay u sharraxan yihiin ee dowladahaa qeybta ka ah heshiskaan.

7. Xubnaha Guddigu waxa la doortaa muddo afar sano ah. Waxaana la ogolyahay in hal mar dib loo soo doorto. Laakiin waqtiga xilka ay haynayaan lix xubnood oo ka tirsan guddiga oo lagu doortay doorashada hore waa in uu ku noqdaa labo sano oo qura; doorashadaas koowaad ka dibna, gudoomiyaha shirka ee lagu xusay faqrada 5aad ayaa lixdaa xubnood qori tuur ku soo doorta.

8. Waxaa la dooranayaa lixda xubnood ee dheeraadka ah marka laqabanayo doorashooyinka caadiga ah sida ku xusan axkaamta qusaysa ee qodobkaan.

9. Haddii u dhinto ama u iscasilo mid ka mid ah xubnaha guddigu, ama uu shaqadiisa gudan waayo sabab jira awgeed, dowaladda qeybta ka ah heshiiskaan ee awalba soo sharraxatay, waa in ay soo magacawdaa khabiir kale oo buuxin kara shuruuradaha lagu soo xusay qodobkaan, si uu usii ahoodo xubin inta waqtiga ka harsan.

10. Guddigu waa in uu isagu degsadaa hababka xeer hoosaadkiisa.

11. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa in uu guddiga siiyaa shaqaalaha iyo agabka loo baahanyahay si guddigu hawshiisa uga soo dhalaalo sida uu dhigayo heshiiskaan, waana in XGQ uu ku baaqaa qabashada kulankooda koowaad.

12. Marka uu soo ogolaado Golaha loo dhanyahay, Xubnaha guddiga ee lasameeyay waa in ay mushaaraadkooda laga siiyaa hantida Qaramada Midoobay siday Go'aansadan Golaha Qaramada Midoobay, iyadoo la raacayo shuruudaha iyo hal beegyada ay arrintaa u dajiyaan Golaha loo Dhanyahay, lana eegayo ahmiyadda ay leedahay masuuliyadda Guddiga loo idmaday ama uu hayo.

13. Xubnaha guddigu waa in ay xaq u yeeshaan tasiilaadka, mudnaanta iyo xasaanadda ay leeyihiin khubarada ka shaqeeya hawlaha hoos yimaada Qaramada Midoobay, hadba sida ku cad qodobada ku xusan Axdiga Mudnaanta iyo Xasaanadda ee Qaramada Midoobay (Convention on the Privileges and Immunities of the United Nations).

*Qodobka 35aad*

## Warbixinada Dawladaha Qeybta ka ah Heshiiskaan

1. Dowlad kasta oo qayb ka ah heshiiskan waa in ay u gudbisaa Guddiga, iyadoo usoo marinaysaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, warbixin dhameystiran oo ku saabsan tallaabooyinka loo qaaday meelmarinta waajibaadkeeda kaga aadan heshiiskaan, iyo wixii horumar ah ee ay kaga tallaabsatay arrintaan, laba sano ka dib marka heshiiskaan ka dhaqan galay dawladaas.

2. Wixii intaa ka dameeya, dawladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay soo gudbiyaan warbaxinadooda ugu yaraan afartii sanaba mar, iyo mar kasta oo Guddigu ka codsado arrintaa.

3. Guddigu waxa uu qeexi karaa mabaadii hagid iyo tusmooyin ah oo ay u aragto lagamamaarmaan in lagu dabakho warbaxinada.

4. Dawladda qeybta ka ah heshiiskaan, ee warbaxinteeda kowaad u gudbisay guddiga, waajib kuma ah in ay ku soo darto macluumaat ay horay usoo gudbisay warbaxinada danbe. Dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan marka ay diyaarinayaan warbaxinada ay ugudbinayaan Guddiga, waxaa looga baahan yahay in ay sameeyaan fur-furnaan iyo wax hufnaan, iyagoo fiiro gaar ah siinaya axkaamta ku xusan faqradaha 3aad ee qodobka 4aad ee heshiiskaan.

5. Waxa banana in lagu daro warbaxinada waxyaabahii iyo dhibaatooyinkii saamaynta ku yeeshay fulinta waajibaadka ku xusan heshiiskaan.

*Qodobka 36aad*

## Eegidda Warbaxinada

1. Guddigu waa in uu eegaa warbixin kasta, uuna u gudbiyaa wixii talo iyo tusaale ah ee munaasib ah dowladda qeybta ka ah heshiiskaan ee arrintu qusayso. Dowladda qeybta ka ah heshiisku waxa ay ugu jawaabi karta Guddiga macluumaat kasta oo ay door biddo. Guddiguwaxaa uu ka codsan karaa dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan warbaxinno dheeraad ah oo xiriir la leh fulinta heshiiskaan.

2. Dowladda qaybta ka ah heshiiskaan haddii ay la dib-dhacdo warbixinta soo gudbinteeda, waxa uu guddiga ogeysiinayaa dowladdaas in ay sameyso baaritaan lagama maarmaan ah oo ku aadan fulinta heshiiskaan, iyagoo ka duulaya xog lagu kalsoonyahay oo guddigu hayo, haddii aanay ku soo gudbin dawladaasu warbixinta looga fadhiyo saddex bilood gudohood, lagasoo bilaabo xilligii ogeysiiska. Guddigu waxaa uu ugu yeerayaa dowladdaas in ay ka qayb qaadato baaritaanka. Haddii ay dawladdaas ay soo gudbiso warbixinta, waxaa la hirgalinayaa axkaamta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkaan.

3. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey waxa u ka dhigayaa warbixinta mid ay heli karaan dhammaan dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan.

4. Dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay si buuxda uga dhigaan warbaxinadooda kuwa ay heli karaan dadwaynohoodu, lana socon karaan talooyinka la bixiyay ee la xiriira warbixinadaan.

5. Guddigu waa in uu u gudbiyaa warbixin kasta, hadba sida ay ugu habboon tahay, oo dawladaha qaybta ka ah heshiiskaan ku dalbanayaan talo siin ama kaalmo, waana in Guddigu isaga oo raacinaya mulaaxadaadkiisa iyo tallaabooyinkiisa ee ku aadan codsiyadaan iyo tilmaamahaas uu u gudbiyaa wakaaladaha hawlaha gaarka ah qabta, iyo sanduuqyada iyo Barnaamijyada Qaramada Midoobay (UN ka haya'adahiisa waxa ay kala yihiin sanduuq sida UNICEF, barnaamij sida UNDP, haya'ad sida UNFPA IWM) iyo dhammaan haya'adaha kale ee hawlaha gaarka ah qabta.

*Qodobka 37aad*

## Iskaashiga dhexmaraya Dowladaha ku jira Heshiiska iyo Guddiga

1. Dawlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskaan waa in ay la shaqaysaa guddiga, gacanna ku siisaa xubnaha ugu jira Guddiga in ay kasoo dhalaalaan waajibaadkooda.

2. Guddigu waa in uu tixgalin muhiim ah siiyaa, marka laga hadlayo xiriirka uu la leeyahay dawladaha ku jira heshiiska, hababka iyo tallaabooyinka loo hormarin karo awoodaha wadaniga ah si gacan looga gaysto meelmarinta heshiiskaan, oo ay ku jirto in iskaashi caalami ah arrinta laga yeesho.

*Qodobka 38aad*

## Xariirka Guddigu la yeelanayo Hay'adaha Kale

Si gacan looga gaysto in heshiiskaan si wax ku ool ah loo fuliyo, lana dhiirigeliyo iskaashi caalami ah oo laga yeesho dhinacyada heshiiskaan taabanayo.

(a) Hay'adaha hawlaha gaarka ah qaabilsan iyo wakaaladaha kale ee Qaramada Midoobay waxay xaq u leeyihiin in cid iyaga wakiil ka ah u joogto wixii ku saabsan fulinta qodobo soo galaya xayn-daabka hawshooda. Guddigu waxa uu ka codsan karaa wakaaladaha iyo haya'adaha qaabilsan hawlaha gaarka ah in ay usoo gudbiyaan talooyinka ay qabaan khubaradooda ee ku aadan hirgelinta dhinac ka mid ah dhinacyada heshiiskaan kaas oo soo hoos galaya awoodoodda shaqo ee haya'ada. Sidoo kale, Guddigu waxa uu ugu yeeri karaa wakaaladaha qaabilsan hawlaha

gaarka ah iyo laamaha kale ee raacsan Qaramada Midoobay soo gudbinta warbixino ku saabsan sidii loo hirgalin lahaa heshiiska inta markaas iyaga ka qusaysa;

(b) Guddigu waa in uu latashadaa, marka uu hawshiisa gudanayo, hay'adaha kale ee xariir ka la leh kuwaas oo lagu abuuray heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, iyadoo looga gol leeyahay in la hubiyo in qolo walba mabaadiideeda, talooyinkeeda iyo fikradaheedu ay yihiin kuwa isla jaanqaadaya, si loo baajiyo is burin, iyo is-dul -fuul.

*Qodobka 39aad*

## Warbixinta Guddiga

Guddigu waa in uu warbixin siiyaa Golaha Guud iyo Golaha (Qaramada Midoobay) u qaabilsan Dhaqaalaha iyo Bulshada, taas oo uu kaga hadlayo hawlihiisa labadii sanoba hal mar, waxa uuna soo gudbin karaa talooyin iyo hindisayaal ka shidaal qaadanaya baaritaanadii iyo warbixinadii ay soo gudbiyeen dawladaha ku jira heshiiskaan . Talooyinkaas iyo hindisayaashaas guud waa in lagu daraa warbixinta guddiga oo ay lasocoto faalooyinka iyo mulaaxadaadka dowladaha heshiiska ku jira ay qabaan, haddiiba ay jirto.

*Qodobka 40aad*

## Shirka ay yeeshaan Dowladaha qaybta ka ah heshiiska

1. Dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan waa in ay shir isugu yimaadaan markasta oo laga doodayo ama la eegayo arrin kasta oo la xiriirta hirgelinta iyo meelmarinta heshiiskaan.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midooabay waxa uu kulan isugu yeerayaa dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan, muddo aan ka dambeyn karin lix bilood kadib dhaqan-galka heshiiskaan. Xoghayahu Guud waxaa uu ugu yeeraya dawladaha in shirarka soo socda ay qabsoomayaan labadii sanoba hal mar iyo qaraar markaas haddii ay ku gaaraan dawladaha ku jira heshiiska in kulan markaas la isugu yimaado.

*Qodobka 41aad*

## Keediyaha Heshiiskaan

Cidda (heshiiskaan) loo dhiibayo oo haynaya waa in uu noqdaa Xoghayahay Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qodobka 42aad*

## Saxiixa (heshiiska)

Saxiixidda heshiiskaan waxa uu ufuran yahay dhammaan dawladaha iyo haya'ad goboleed ka dhammaystiraya heshiiskaan ee ku sugan xarunta Qaramada Midoobay ee New York, laga bilaabo 30-ka Maarso 2007.

*Qodobka 43aad*

## Raali-ku -noqoshada (heshiiskaan fulintiisa waajibinaysa)

Heshiiskaan waxa uu ku xiranyahay ansixinta (ay baarlamaanadooda ka ansixiyaan) Dowladaha horay u saxiixay iyo ogolaanshaha (xaqiijinta) urur goboleedyada saxiixay ee dhammaystiraya heshiiskaan, waxana heshiiskani uu ufuranyahay oo kusoo biiri kara dawlad kasta iyo urur goboleed kasta oo dhammaystiraya heshiiskaan.

*Qodobka 44aad*

## Urur Goboleedyada Heshiiska Dhammaystiraya

1. "Urur Goboleed dhammaystiraya" waxay utaagan tahay haya'ad ay ka sameeyaan dawlado madaxbannaan meel ka mid ah adduunka, iyadoo dawladaha heshiiska ku jira ay ku cadaynayaan, qoraaladooda rasmiga ah, xadka ay kaar sii santahay awoodooda ay uu dhigayo heshiisku, waana in ay garsiiyaan cidda haysa (heshiiska) wax ka badelid kasta oo lagu sameeyo heshiiska oo awoodeeda aan ka baxsanayn.

2. Tixraacyada ku xusan heshiiskaan ee "Dowladaha qeybta ka ah heshiiskaan" waxaa lagu dabakhayaa hay'adaas inta soo galaya awoodeheeda.

3. Ujeedooyinka faqrada 1aad ee qodobka 45aad iyo faqradaha 2aad iyo 3aad ee qodobka 47aad ee heshiiskaan; waa inaan wax laga soo qaadin qoraal kasta oo Urur Goboleed dhamaysiraya Heshiiska uu kaydiyo.

4. Urur Goboleedyada Dhammaystirku waxay adeegsan karaan, wixii awoodooda (sharci) soo galaya, xaqa ah in ay codkooda ka dhiibtaan shirka ay isugu yimaadaan dowladaha qeybta ka ah heshiiska, iyagoo yeelanaya tiro codad ah oo le'eg ama u dhigma tirada dawladaha ururadaas ku jira ee hadana heshiiskaan xubnaha ka ah.

*Qodobka 45aad*

## Dhaqan Galka Heshiiska

1. Axdigaan wuxuu dhaqan galayaa maalinta saddonaad ee ku xigta maalinta kaydinta qoraalka labaatanaad (20-aad) ee ansixinta iyo kusoo biiridda.

2. Dhaqan galka heshiiskaan waxa uu bilaamanayaa, oo ku fulayaa dal walba ama Haya'ad goboleed kasta oo dhammaystiraya, oo ansixisa ama kusoo biirta Heshiiska kadib kaydinta qoraalka labaatanaad (20-aad) maalinta soddonaad (30-aad) ee laga bilaabo maalinta keydinta ama dhitaynta.

*Qodobka 46aad*

## Ka gaabsashada

1. Lama Ogola in la muujiyo ka gaabsasho (ku aadan heshiiskaan) oo ka hor imaanaya nuxurka ama mawduuca iyo ujeedooyinka heshiikaan.

2. In lala noqdo gaabsashada waqti kasta waa bannaan tahay.

*Qodobka 47aad*

## Wax ka beddelka

1. Dal walba oo qeyb ka ah heshiiskaan waxa uu soo jeedin karaa wax ka beddelidda Heshiiskaan, iyagoo ugudbinaya Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey. Xoghayaha Guudna waa in uu ogaysiiyaa Dalalka qeybta ka ah heshiiskaan wax kabeddelka lasoo jeediyey, isagoo ka codsanaya dawladaha in ay soo wargaliyaan haddii ay doorbidayaan in la qabto shir lagu falanqeeyo, go'aanna looga gaaro hindisaha iyo haddii kaleba. Haddii saddex meelood meel ugu yaraan dalalka ku jira heshiiska, ay doorbidaan in la qabto shir, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa in uu muddo afar bilood gudahooda laga soo bilaabo ogeysiiskaas, uu qabtaa shirka, iyada oo ay maamulayso Qaramada Midoobay. Xoghayuhu waa in uu u gudbiyaa wax ka-beddel kasta oo ay saddex meelood labo dalalka qeybta ka ah heshiiska, kuwaas iyagu kulanka jooga, codkoodana dhiibtay, ay ucodeeyeen Golaha loo dhanyahay ee Qaramada Midoobay si ay u aqbalaan, ka dibna waa in uu u gudbiyaa (wax ka bedelka) dhammaan dawladaha heshiiska ku jira si ay iyana u aqbalaan.

2. Waxa u hirgalayaa wax ka beddelka la qabatimay, lana ogolaaday sida ku xusan faqradda 1aad qodobkaan maalinta 30aad ee ku xigta maalinta tirade qoralada la aqbalaadda la dhiteeyaa ay gaaraan saddex meelood labo meelood ee dalalka qeybta ka ah heshiiska laga bilaabo taariikhdii wax ka beddelka. Kadib, waxa wax ka bedelkani ku fulayaa dal walba oo qeyb ka ah heshiiska maalinta soddonaad (30aad) ee ku xigta wakhtiga u dalkaasi dhigo ama dhiteeyo qoraalka aqbaalaada. Balse wax ka-bedeliddu waajib kuma ah cid ama dawlad aan aqbalin.

3. Haddii dawladaha ku jira heshiiska ee shirka isugu yimi ay isku raacaan wax ka bedelka laso jeediyay in lagu sameeyo heshiiska, Waxa uu bilaammayaa dhaqan galka wax ka beddelka la ogolaaday lana qiray iyadoo la raacayo sida ku xusan faqradda 1aad ee qodobkaan, oo la xiriira kaliya qodobada 34aad, 38aad, 39aad iyo 40 aad, dhamaan dowladaha qeybta ka ah heshiiska laga bilaabo maalinta soddonaad (30aad) ee ku xigta maalinta tirada qoraalada aqbalaadda ee kaydsan ama dhitaysan ay tira ahaan ka noqdaan saddex meelood labo dawladaha heshiiska ku jira taariikhda la qabatimay wax ka bedelka (heshiiska).

*Qodobka 48aad*

## Ka Bixidda (heshiiska)

Dal walba oo Heshiiskaan ku jira wuuxuu ka bixi karaa Axdigaan waqti kasta, isagoo si qoraal ah ku ogaysiinaya (tallaabadaas) Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Ka bixida caynkaas ah, waxay taabo gal ka noqonaysaa dalka ay qusayso sanad ka dib laga bilaabo tan iyo maalintuu wargalinta (ka bixidda) uu helay Xoghaya Guud.

*Qodobka 49aad*

## Hannaanka Lagu Heli Karo (heshiiska)

Qoraalka Heshiikaan waa in uu noqdaa mid si fudud loo heli karo.

*Qodobka 50aad*

## Qoraalada Asalka ah (saxda ah)

Qoraalada heshiiskaan ee ku qoran afafka Carabiga, Shiinaha, Ingiriiska, Ruushka, iyo Isbaanishka waa kuwa isku mid ah oo asal ah (aan koobi iyo sannifaad midna ahayn).

Iyadoo la sugayo arrintaas, waxaa saxiixay Heshiiskaan dadka hoos saxiixoodu ka muuqdo iyagoo wakiil ka ah dawladahoodii.

# Hab-Maamuuska Ikhtiyaariga ah (borotakoolka) ee Axdiga Ilaalinta Xuquuqda Dadka Naafada ah

***Waxaa Ansixayay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Tirsigiisu yahay 61/106 13-kii December 2006***

DAWLADAHA QEYBTA KA AH HAB-MAAMUUSKAAN WAXA AY ISKU RAACEEN SIDAN SOO SOCOTA:

*Qodobka 1aad*

1. Dawladda qeybta ka ah Hab-maamuuskaan ("Dawladda Qeybta ka ah") waxa ay aqoonsanaysaa awoodda Guddiga Xuquuqda dadka naafada ah ('Guddiga") si ay u hesho una fiiriso farriimaha ay usoo diraan shakhsiyaad ama kooxo, ama dad ku hadlaya magaca shakhsiyaadka ama magaca kooxaha, kuwaas oo soo hoos galaya awoodeeda, ayagoo sheeganaya in ay yihiin dhibbaneyaasha xadgudubka dawlad qeyb ka ah axkaamta Heshiiskaan.

2. Lama ogola in Guddigu ka helo farriin la xiriirta dawlad ku jirta Heshiiskaan, balse aan qeyb ka aheyn Hab-maamuuskaan.

*Qodobka 2aad*

Guddigu waa in uu kasoo qaadaa farriinta mid aan la aqbali karin haddii ay:

(a) Farriintu tahay mid aan la garaneyn;

(b) Ama farriintu ay keenayso xadgudub lagu sameeyay hannaanka farriinta (loo soo gudbiyay ama loo dhigay) ama ay tahay mid aan waafaqsanayn qodobada heshiiskaan;

(c) Ama arrintaan lafteedu tahay mid Guddigu horay u baaray, ama ay aheyd ama ay tahay mid baaritaan ku socdo sida uu dhigayo hab kale ee baaritaan oo caalami ah ama dhigayso dhex-dhexaadin caalami ah;

(d) Ama aan soo wada marin dhammaan hababka dhayidda (qaan dhawga) ka jirta waddanka gudihiisa. Xeerkaan ma fulayo haddii waqtiga fulinta dhayidda (mag-dhawga) ay daba dheeraatay si aan macquul aheyn ama aan loo badineyn in ay keento arintaas dhayid (qaan dhawga) wax ku'ool ah.

(e) Ama ay tahay mid aan raad cad laheyn ama aan lagu xoojin caddeemo ku filan;

(f) Ama arrimaha ay ka hadlaysaa farriintu ay yihiin kuwo dhacay intii aanu ka dhaqan galin Hab-maamuuskaan dawladda ku jirta heshiiska ee arrintu ay quseyso, haddii aanay arrimahaas aheyn kuwa socday waqtiga dhaqan galinta kadib.

*Qodobka 3aad*

Iyadoo la raacayo axkaamta qodobka 2aad ee Hab-maamuskaan, Guddigu waa in uu adeegsadaa hab qarsoodi ah soo bandhigidda farriin kasta ee loo gudbinayo dawladda qeybta ka ah Hab-maamuuskaan. Dawlada heshay farrintaas waa in ay u gudbisaa Guddiga, waqti ku siman lix bilood gudahood, sharaxaado ama bayaano qoraal ah oo ay ku cadeenayso arrintaas iyo tallaabooyinka dhayidda ah ee dawladaas ay qaadey.

*Qodobka 4aad*

1. Mar kasta oo Guddigu helo farriin kadib iyo inta aan lagaarin go'aan ku aadan arintaas, Guddigu waxaa uu u gudbin karaa dawlada qeybta ka ah Heshiiskaan ee ay quseyso codsi, si deg deg ah, si dawladaas ay u qaado tallaabooyin kumeel gaar ah si loo baajiyo in waxyeelo aan wax laga qaban karin loo geysto dhibbane ama dhibbaneyaasha xadgudubka eediisu taagneyd.

2. Marka ay Guddigu adeegsadaan awoodooda waafaqsan faqrada 1aad ee qodobkaan, arrintaas kama dhigna oo lagama dheehan karoaqbalaadda ama saxsanaanta farriinta.

*Qodobka 5aad*

Guddigu waa in uu qabtaa kulamo albaabadu u xiranyihiin marka ay baarayaan farriinta Hab-maamuuskaan aan ka baxsanayn. Guddigu waa in uu ugudbiyaa marka u daraaseeyo farriintaas kadib, hindisiyaashiisa iyo tallooyinkiisa, haddii ay jiraan, dawladda qeybta ka ah Hab-maamuuskaan ee ay quseyso iyo dacwoodihii.

*Qodobka 6aad*

1. Haddii Guddigu helaan xog lagu kalsoon yahay oo muujinaysa xad-gudubyo waaweyn ama agaasiman oo ay gashay dawlad qeyb ka ah xuquuqda ku xusan Heshiiskaan, Guddigu waa in uu u yeeraa dawladdaas qeybta ka ah Hab-maamuskaan si la isaga kaashado baaritaan lagu sameeyo xogtaas (soo yeertay) iyo gudbinta milicsiyo ama mulaaxadad ku aadan xogta laga hadlayo.

2. Iyado si gooni ah loo eegayo milicsiyada (mulaaxadaatka) aysoo gudbisay dawlada qeybta ka ah Heshiiska ee ay quseyso arrintu, iyo xog kasta oo lagu kalsoon yahay ee lahayo, Guddigu waxaa u magacaabi karaa xubin ama kabadan oo xubnihiisa ka mid ah si ay u sameeyaan baaritaan iyo u soo gudbinta sida ugu dhakhsaha badan warbixin Guddiga (ku saabsan arrinta ay baareen). Baaritaankaas wuxuu noqon karaa booqosho gobol (dhul) ka tirsan dawlada qeybta ka ah Hab-maamuuskaan lagu soo kala bixiyo, haddii loo baahdo oo ay ogolaato dawladdaasu.

3. Darsidda natiijooyinka kasoo baxa baaritaanka kadib, Guddigu waa in ay u gudbiyaan (wixii ay soo arkeen ama sida ay la tahay) Dawladda Qeybta ka ah Hab-maamuuskaan ee ay quseyso natiijooyinka iyadoo ay lasocoto jawaab kabixin iyo talo soo jeedin.

4. Waa in ay gudbisaa Dawladda Qeybta ka ah Hab-maamuuskaan ee ay quseyso milicsiyada (mulaaxadaat) Guddiga, lix bilood gudahooda laga soo bilaabo marka ay helay natiijooyinka iyo jawaab bixinta iyo talo baxinta uu soo gudbiyey Guddigu.

5. Waa in loo fuliyaa baaritaanka si qarsoodi ah, waana in la isku taxalujiyaa sidii loo heli lahaa iskaashiga Dawladda qeybta ka ah Hab-maamuuskaan inta lagu jiro dhammaan heerarka baaritaanada.

### *Qodobka 7aad*

1. Guddigu waxa uu ka dalban karaa Dawladda qeybta ka ah Heshiiskaan in ay ku darto warbaxinteeda ay soo gudbinayso, sida uu dhigayo qodobka 35aad ee Heshiiskaan, faahfaahinta tallaabooyin kasta oo ay qaadeyso iyadoo ka jawaabeysa baaritaanka la sameeyey sida uu dhigayo qodobka 6aad ee Hab-maamuskaan.

2. Guddigu waxa ay ka dalban kartaa, haddii loo baahdo, lix bilood kadib sida ku xusan faqrada 4aad ee qodobka 6aad, Dawlada qeybta ka ah Heshiiskaan ee arrintu quseyso, in ay kasoo wargaliso tallaabooyinka laga qaaday baaritaanka.

### *Qodobka 8aad*

Dawlada qeybta ka ah Heshiiskaan waxa ay ogeysiin kartaa, waqtiga saxiixidda hab-maamuskan ama aqbalaadiisa, ama ku biiridda, in aysan aqoonsaneyn awoodaha Guddiga ee ku xusan qodobada 6 aad iyo 7aad.

### *Qodobka 9aad*

Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay waa in uu noqdaa kaydiyaha (qofkahaynaya qoraalka) Hab-maamuuskaan.

### *Qodobka 10aad*

Qalin kuduugista Hab-maamuuskaan waa mid ufuran Dawladaha iyo urur goboleedyada dhameystiraya Heshiiskaan ee saxiixay Heshiiska, waxa uunu ka dhacayaa saxiixaas Xarunta Qaramada Midoobey ee New York taariikhdu marka ay tahay 30 Maarso 2007.

### *Qodobka 11aad*

Hab-maamuuskaan waxaa uu ku xiranyahay ansixinta Dawladaha qalinka ku duugay Hab-maamuuskaan kuwaas oo ansixiyey ama ku biiray Heshiiskaan. Waxana uu ku xiranyahay

ogolaanshaha rasmiga ah ee laga helo midowga urur goboleedyada dhameystirka ee saxiixay Hab-maamuuskaan, kuwaas oo horay si rasmi ah u ogalaaday ama ugu biiray heshiiska. Ku soo biiridda Hab-maamuuskaan waxa uu u furanyahay Dawlad kasta ama urur goboleedyada dhammeystiraya ee ansixisay ama ogolaaday si rasmi ah ama ku biirtay Heshiiska balse aan saxiixin Hab-maamuuskaan.

*Qodobka 12aad*

1. ”Urur goboleedyada dhameystirka Heshiiska” waxaa loola jeeda urur ay sameeyaan Dawladaha madaxbanaan meel adduunka ka tirsan, Dawladahaas oo iyagoo xubna ka ah Heshiiskaan kuwareejiya ururkaas awoodohooda la xariira arrimaha uu xeerinayo Heshiiskaan iyo Hab-maamuuskaan. Ururadaasna waa in ay ku muujiyaan, qoraaladooda rasmiga ah, xuduuda awoodaha ay u leeyihiin arrimaha uu xeerinayo Heshiiskaan iyo Hab-maamuuskaan. Kadibna, waa in ay gaarsiisaa kaydiyaha wax ka bedel kasta oo ku yimaada xuduuda awoodaheeda.

2. Tixraacyada “Dawladaha Qeybta ka ah” ee ku xusan Hab-maamuuskaan waxaa lagu dabbakhayaa ururadaas inta awoodooda soo galaysa.

3. Ujeedooyinka faqrada 1aad ee qodobka 13 aad, iyo faqrada 2aad ee qodobka 15aad ee Heshiiskaan darteed, waxba laga soo qaadi maayo qoraal kasta oo ay dhitaysato urur goboleedyada dhameystiraya Heshiiskaan.

4. Urur goboleedyada dhameystiraya Heshiiska waxa ay, adeegsan karaana xaqooda ah in ay codkooda ka dhiibtaan arimaha soo hoos galaya awoodooda marka ay dhacayaan kulamada Dawladaha qeybta ka ah Heshiiskaan, waxayna leeyihiin codad lamid ah codadka Dawladaha xubnaha ah kuwaas oo qeyb ka ah Hab-maamuuskaan. Ururadaas ma codeynkaraan haddii Dawlad ka mid ah xubnaheeda ay codeyso, lidkeeduna waa la mid.

*Qodobka 13aad*

1. Iyadoo la raacayo dhaqangalka Heshiiskaan, Hab-maamuuskaan wuxuu dhaqan galayaa maalinta soddonnaad (30aad) ee ku xigta maalinta kaydinta dukumentiga tobnaad (10aad) ee ansixinta ama kusoo biiridda Hab-maamuuskaan.

2. Hab-maamuuskaan wuxuu ku fulayaa Dal walba ama urur goboleed dhameystiraya Heshiiska oo ansixinaya ama ku soo biiraya Hab-maamuuskaan kadib kaydinta dukumintiga tobnaad ee ansixinta ama ku biiridda maalinta soddonaad ee taariikhda la dhiteeyay.

*Qodobka 14aad*

1. Lama ogola xadidaad/ gaabsasho aan waafaqsanayn/ ujeedooyinka Hab-maamuuskaan.

2. Xadidaad/ kagaabsasho kasta waa lala laali karaa markii la doono.

*Qodobka 15aad*

1. Dal walba oo qeyb ka ah Heshiiska waxa ay soo jeedin karaan wax ka beddelida Hab-maamuuska, waxa ayna ugudbinayaan Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey. Xoghayaha Guudna waxa u gaarsiinayaa Dalalka qeybta ka ah Heshiiskaan wax ka beddelka lasoo jeediyey, isagoo codsanaya in lasoo ogeysiiyo haddii ay doorbidayaan in loo qabto kulan dalalka qeybta ka ah, si ay u eegaan hindisaha wax ka bedelidda, go'aanna uga gaaraan. Haddii saddex meelood meel dalalka qeybta ka ah Hab-maamuuskaan ugu yaraan ay doorbidaan in la qabto shirka, afar bilood gudahooda marka laga soo bilaabo fariinstaas, Xoghayaha Guud waxaa uu qabanayaa kulan ay maamuleyso Qaramada Midoobey. Xoghayaha Guudna wuxuu wax ka-beddelid kasta oo ay saddex meelood labo dalalka qeybta ka ah Hab-maamuuskaan, ee joogay, codkoodana dhiibtay ay isku raacaan u gudbinayaan Golaha Guud ee Qaramada Midoobey si loo ansixiyo, ka dibna wuxuu u gudbinayaa dalalka qeybta ka ah Hab-maamuuskaan si ay u aqbalaan.

2. Waxaa uu hirgalayaa wax ka beddelka la ogolaaday ee la ansixiyey si waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkaan maalinta soddonaad ee ku xigta maalinta kaydinta tirada dukumentiyada aqbalaada ay soo gudbiyaan dawladaha qaybta ka ah hab-maamuuska, ay gaaraan saddex meelood labo. Dal walba oo qeyb ka ah Heshiiskaan, waxuu wax ka-beddelku ka dhaqan galayaa maalinta soddonaad ee ku xigta wakhtiga dalkaasi dhigo dukumentiga aqbaalaadda. Wax kabeddelidda waxa ay waajib ku noqonaysaa dalalka qeybta ka ah Hab-maamuuskaan ee aqbalay (oo kaliya).

*Qodobka 16aad*

Dal walba oo Hab-maamuuskaan ku jira wuxuu ka bixi karaa Hab-maamuuskaan waqti kasta isagoo si qoraal ah ugu sheegaya Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Ka bixidda caynkaas ah waxay ka dhaqan galaysaa dalka ay quseyso muddo sanad ah laga bilaabo taariikhda wargalinta uu helay Xoghaya Guud.

*Qodobka 17aad*

Qoraalka Hab-maamuuskaan waa in uu noqdaa mid si fudud loo heli karo

*Qodobka 18aad*

Nuqulada heshiiskaan ku qoran afka Carabiga, Shiinaha, Ingiriiska, Ruushka, iyo Isbaanishka waa kuwa isku mid ah oo asal ah (oo koobi iyo sanifaad midna ahayn).

Iyadoo arrintaas la xaqiijinayo lana qirayo, shakhsiyaadka saxiixoodu hoos ka muuqdo waxa ay qalinka ku duugayaan Heshiiskaan iyaga oo wakiil ka ah dawladdahooda.

# Heshiiska Caalamiga ah ee Ka-badbaadinta Dhamaan Dadka Qarinta Khasabka ah

***Lagu ansaxiyay Qaraarkii Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Tirsigiisu yahay 61/177 ee 20-kii December 2006***

## HORDHAC

*Dowladaha qeybta ka ah Heshiiskan,*

Iyaga oo tixgilinaya waajibka dowladaha ka saaran axdiga Qaramada Midoobay si sare loogu qaado xushmeyn caalami ah ee xuquuqda aadanaha iyo xoriyaadka asaasiga ah,

Iyaga oo xushmeynaya Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha,

Iyaga oo xusuusan heshiiska caalamiga ah ee xuquuqda dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka, iyo heshiiska caalamiga ah ee xuquuqda rayidka iyo siyaasada, iyo heshiisyada iyo baaqyada kale ee caalamiga ah ee la xiriira xuquuqda aadanaha, sharciga bini'aadanimada iyo xeerka ciqaabta ee caalamiga ah,

Sidoo kale iyaga oo maanka ku haya baaqa caalamiga ah ee la xiriira ka ilaalinta dhamaan dadyowga qarinta khasabka ah, kaas oo uu ansixiyay golaha guud ee Qaramada Midoobay qaraarkiisa 47/133 ee soo baxay Disamber 1992,

Iyaga oo ka warqaba dhibaatada daran ee ay leedahay qarinta khasabka ah, kaas oo ah faldambiyeed, xaaladaha qaarkoodna loogu qeexo xeerka caalamiga ah in uu yahay faldambiyeed lid (kasoo horjeeda) ku ah aadaminimada,

Iyaga oo ay ka go'antahay ka hortaga qarinta khasabka ah, iyo in ay la dagaalamaan ciqaab la'aanta qarinta khasabka ah,

Iyaga oo tixgelinaya xaqa uu qof walba u leeyahay in aan lagu sameyn qarin khasab ah, iyo xaqa dhibanayaashu u leeyihiin caddaalad iyo magdhaw,

Iyaga oo xaqiijinaya xaqa uu dhibane kasta u leeyahay ogaanshaha xaqiiqada ku saabsan duruufaha qarinta khasabka ah iyo aayaha qofka la qariyay, sidoo kale xaqa qofku u leeyahay raadinta, helitaanka, faafinta xogta, si loo gaaro hadafkan,

*Dowladuhu waxay ku heshiiyeen qodobada soo socda:*

# QEYBTA I

*Qodobka 1aad*

1. Qofna laguma sameyn karo qarin khasab ah.

2. Ma jiraan xaalado gaar ah waxay doonaan ha noqdeene, ha noqoto xaalad dagaal ama khatar dagaal, xasiloonidaro siyaasadeed oo gudaha ah ama xaalado dagdag qaran, oo looga dhigan karo marmarsiiyo qarinta khasabka ah.

*Qodobka 2aad*

Ujeedooyinka heshiiskan "Qarinta Khasabka ah" waxaa laga wadaa xarig, qabasho, afduub, ama qaab kasta oo xoriyad ka qaadis ah, taasoo ay ku kacayaan hay'adaha dowlada, shaqsiyaad, ama kooxo shaqsiyaad ah oo edegsanaya fasaxa, taageero ama ogolaasho dhanka dowlada ah, iyada oo ay raaceyso diidmo qirasho ka qaadis xoriyad ama cadeyn aayaha ama meesha uu ku danbeeyay qofka la qariyay taaso dhigeyso qofka caynkaa ah meel ka baxsan ilaalinta sharciga.

*Qodobka 3aad*

Dowlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskan waa in ay qaadaa talaabooyinka ku haboon si ay u baarto falalka lagu qeexay qodobka 2aad oo ay galeen shaqsiyaad ama kooxo aan adeegsaneyn fasaxa, taageerada ama ogolaanshaha dowlada si ay maxkamad usoo taagto kuwa ka masuulka ah.

*Qodobka 4aad*

Dowlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskan waa in ay qaadaa talaabooyinka lagama maarmaanka ah si ay u hubiso in qarinta khasabka ah ay noqoto dambi ku jira xeerkeeda ciqaabta.

*Qodobka 5aad*

Ku kicid baahsan ama habaysan ee soo noqnoqoshada qarinta qasabka ah waa dambi lid ku ah aadaminimada sida ku qeexan xeerka dhaqangalka ah ee caalamiga ah waana in uu yeeshaa ciqaabaha ku cad isla xeerkaa.

*Qodobka 6aad*

1. Dowlad kasta oo heshiiskan qeyb ka ah waa in ay qaadaa talaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo qabto kuwa danbi ahaan masuulka ka ah, ugu yaraan:

   (a) Cidwalba oo danbigaan geysata, amarta, talo ku bixisa sameyntiisa, iskudaya, ku raaca, ama ka qaybqaadata falka qarinta khasabka ah.

   (b) Sarkaal kasta:

(i) Oo og ama si toos ah iskaga indhatira xogaha in mid ka mid ah dadka uu madaxda u yahay ee ku hoos jira xukunkiisa uu galay faldanbiyeed ama sameeyay isku day faldanbiyeed oo ah qarin khasab ah;

(ii) Oo ku shaqeynayay ama kormeerayay si waxtar leh howlo la xiriira gaysashada faldinbiyeed qarin khasab ah;

(iii) Oo Ku fashilma qaadida talaabooyinkii loo baahnaa ama suurtagalka u ahaa si looga hortago qarinta khasabka ah, ama loo joojiyo gelitaankiisa ama in loo gudbiyo hay'adaha ay khusayso si ay u baaraan loogana dabatago arintaas.

(c) Faqr-hoosaadka (b) ee Qodobkan kuma jiro wax ka hor imanaya qodobada ku jira xeerarka caalamiga ah, kuwaa oo cadeynaya in mas'uuliyadda danbiyada ay qaadayaan taliyayaasha ciidamada (militeriga) ama qofka si toos ah u qabanaya shaqada taliyaha ciidamada militeriga.

2. Majiro amar ama tusaale kasoo baxay madax qaran oo ah rayid ama milatari ah, ama cidkale si looga dhigto marmarsiyo galista faldenbiyeedka qarinta khasabka ah.

*Qodobka 7aad*

1. Dowlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskan waa inay saartaa faldenbiyeedka qarinta khasabka ah ciqaab munaasab ku ah iyada oo maanka ku heysa culeyska faldenbiyeedkan.

2. Dowlad kasta oo qeyb ka ah hesiiskan waxa ay abuuri kartaa:

(a) Duruufaha sahli kara, oo loo sameynayo cid kasta oo ka qeybqaadata faldanbiyeedka qarinta khasabka ah, islamarkaana si wax ku ool ah uga qeybqaadata soo celinta qofka loo gaystay qarinta khasabka ah isaga oo nool, ama sameeya wixi suura gal ah si uu u cadeeyo kiiska qarinta khasabka ah, ama tilmaamo cidda masuulka ka ah faldenbiyeedka qarinta khasabka ah;

(b) Iyada oo aan la jibineyn hababka xeerarka ciqaabta ee kale, waa in dowladuhu tixgaliyaan xaaladaha cakiran, gaar ahaan hadii qofka la qariyay uu dhinto, ama ay cadaato in qofka loo geystay falka qarinta khasabka ah uu yahay haweeney uur leh, da'yar, dad naafo ah, ama dad si gaar ah u dhibaateysan;

*Qodobka 8aad*

Iyada oo aan wax loo dhimayn qodobka 5aad ee heshiiskan;

1. Dowladaha qeybta ka ah heshiiskan kuwaas oo ku dhaqama nidaamka ay dacwadaha ciqaabta ee qarinta khasabka ahi ku dhacaan/mudo-dhaafaan waa in ay qaadaan talaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo hubiyo xiliga dacwadaha ciqaabtu ku dhacaan inay noqoto:

(a) Xili-dheer oo munaasab u ah oo u dheelitiran culayska faldanbiyeedkan;

(b) Waana in laga bilaabaa xiliga uu dhamaado faldanbiyeedka qarinta khasabka ah, iyadoo la eegayo debeecadda socoshada.

2. Dowlad kasta oo qeyb ka ah waa in ay damaanad qaadaa xaqa dhibanayaasha qarinta khasabka ah ay u leeyihiin magdhow cadaalad ah xiliga dacwadu dhacsantahay.

*Qodobka 9aad*

1. Dowlad kasta oo qeyb ka ah waa in ay qaadaa talaabooyinka ku haboon iyada oo dhiseysa awoode-heeda si looga gaaro go'aan falka qarinta khasabka ah:

(a) Marka faldenbiyeed ka dhaco gobal kasta oo hoostagta awoodiisa garsoor, ama dusha markab ama diyaarad ka diiwaan gashan dowladaas;

(b) Marka qofka danbiga lagu eedayay uu yahay mid ka mid ah muwaadiniinta dowladaas;

(c) Marka qofka la qariyay uu yahay mid ka mid ah muwaadiniinteeda islamarkaana dowlada qeybta ka ah ay u aragto mid haboon.

2. Dowlad walba oo heshiiskan dhinac ka ah waxay qaadeysaa talaabooyinka ku haboon oo la xiriira dhisidda awoodaha, si go'aan looga gaaro, qarinta khasabka ah marka qofka lagu tuhunsanyahay faldanbiyeedka, uu joogo meel kasta oo hoostimaada garsoorka wadanka, hadii dowladaan aysan u dhiibin ama aysan ku wareejin dowlad kale taasoo waafaqsan masuuliyadda waajibaadka caalamiga ah, ama aysan u gudbin maxkamad danbi oo heer caalami ah oo hawsheeda lawada aqoonsanyahay.

3. Heshiiskan meesha kama saarayo awood ciqaabeed kale oo u socda si waafaqsan sharciga wadanka.

*Qodobka 10aad*

1. Hadii loo arko kadib marka la baaro xogta la hayo in sababo qabasho jiraan, dowlad waliba oo heshiikan dhinac ka ah hadii wadankeeda laga helo ruux looga shakiyay in uu geystay faldanbiyeedka qarinta khasabka ah waa in ay qabataa ruuxaas, ama ay ka qaadaa talaabo sharci ah, lagamamaarmaana u ah in qofkaa uusan baxsan, qabashada iyo talaabooyinka waa in lawaafajiyaa shuruucda dowladan dhinaca ka ah heshiiska waxeyna jirikartaa qabashadaas, waqtiga lagama maarmaanka u ah, hubinta joogista qofka si loo sugo gacan-u-gelinta, mastaafurinta ama hanaanka oogida fal-dabiyeedka.

2. Dowladda qaybta ka ah heshiiskan ee qaadaysa talaabooyinka ku cad faqrada (1) ee qodobkan, waa in ay sameysaa baaritaan bilow ah oo dag dag ah ama baaritaan caadi ah si loo

hubiyo dhacdooyinka. Waana iney ogeysiisaa dawladaha kale ee qeybta ka ah heshiiskan oo lagu tilmaamay qodobka 9aad, faqrada (1) talaabooyinka ay qaaday si waafaqsan faqrada (1) ee qodobkan oo ay ku jirto qabashada, iyo waxyaabaha keenay qabashada, wixii kasoo baxay baarista horudhaca ahayd iyo tii caadiga ahayd, isla markaana tilmaamaysa hadii ay rabto inay qabsato awoodaheeda garsoor.

3. Cidwalba oo loo qabto siwaafaqsan tirsiga 1aad ee qodobkaan waxaa u furan in ergada dowladdiisa ee ku sugan wadanka lugu xiray ay la xiriiraan, hadii qofku uusan laheyn jinsiyad waa inuu la xiriiraa ergada dowladda sida caadiga ah uu ugu noolyahay.

*Qodobka 11aad*

1. Dowlad walba oo heshiiskan qayb ka ah oo gudaheeda laga helo qof looga shakisanyahay in uu geystay denbiga qarin khasab ah waa in ay arintaa ku wareejisaa hay'adaha ku shaqadaleh, si loo qaado dacwadiisa, hadii aysan u dhiibin eedaysanaha ama aysan ku wareejin dowlad kale si waafaqsan waajibaadka caalamiga ah ee saaran dowlada, ama in ay ku wareejiso maxkamad danbiyadeed caalami ah oo go'aan keeda la aqoonsanyahay.

2. Hay'adahan waa in ay go'aan uga qaataan arintaa si waafaqsan shuruuda udhigan go'aan qaadashada denbiyada culus ee xeerka wadanka qeybta ka ah heshiiskan, xaaladaha lagu tilmaamay tirsiga labaad ee qodobka 9aad, firqada 2-aad, ee heerka cadeynta ee looga baahanyahay soo eedeynta iyo xukumida, mana aha kuwa sinna uga fudud kuwa lagu khuseeya kiisaska lagu soo gudbiyo Qodobka 9-aad, firqadiisa 1aad.

3. Qofkasta oo ku eedaysan geysashada qarin khasab ah waa in uu helaa damaanad la xiriirta in loola dhaqmo si caddaalad ah inta lagu jiro dhamaan heerarka dacwada qofka lagu maxkamadeynayo falka qarinta khasabka ah, waa inuu helaa maxkamad caddaalad ah, madaxbanaan, hufan taasoo lugu sameeyay si waafaqsan sharciga.

*Qodobka 12aad*

1. Dowlad waliba oo qayb ka ah heshiiskan waa in ay u damaanad qaadaa cid kasta oo sheegeysa in faldenbiyeedka qarinta khasabka ah uu ku dhacay, xaqa ay u leedahay in ay wargaliso hay'adaha ay khusayso arintaas, hay'adahaana waxaa laga rabaa in ay arintaa si dhaqsi ah oo hufan u baaraan, hadii loo baahdana waa iney si dhaqsi ah ugu dhaqaaqdo baaris xoogleh oo hufan, dowladdu waa in ay ilaalisaa cidda dacwooneysa markhaatigeeda iyo dhamaan dadka xiriirka la leh qofka la qariyay gudiga difaacaya, iyo waliba baarayaasha, waana iney ka ilaalisaa dhaqan xumida, hanjabaad loogu geysanayo gudbinta cabashada ama xogta ay bixiyeen darteed.

2. Hadii ay soo baxaan sababo macquul ah oo ah kuwa lagu tilmaamay tirsiga 1aad ee qodobkaan waa in hay'adaha ku shaqada leh ay baaraan arintaa xitaa hadii aysan jirin cid ashtako soo gudbisay.

3. Dowlad waliba oo qayb ka ah heshiiskan waxey ku dadaaleysaa in la siiyo hay'adaha lagu tilmaamay tirsiga 1aad ee qodobkan:

(a) Awoodaha lagamamaarmaanka u ah sidii ay ku guuleysan laheyd barista, tusaale ahaan helitaanka dokumantiyada iyo macluumaadka la xiriira baadhitaanka;

(b) Qaabkii ay ku gaari lahaayeen meesha qofka laga soo qabanayo, iyada oo hadii loo baahdo ogolaansho laga raadiyo garsoorka, oo laga filayo garsoor tixgalin doona degdega kayska.

4. Dowlad waliba oo heshiiskan qayb ka ah waa inay qaadaa talaabooyinka looga hortagayo caqabadaha ka hor imaanaya barista iyo in la gaaro xaqiiqada. Waana in dawladu hubisaa in dadka looga shakisan yahay qarinta qasabka ah in aanay duufsan hanaanka baadhitaanka iyaga oo cadaadis ama hatigaad ku wajahaya dhibanayaasha, qareenada, markhaatiyada ama qaraabada dadkan la qasab-qariyay.

*Qodobka 13aad*

1. Marka laga fiiriyo ujeedooyinka isdhaafsiga danbiilayaasha, ee ka dhaxeeya dowladaha heshiiskan dhinaca ka ah faldenbiyeedka qarinta khasabka ah laguma tirinayo denbi siyaasadeed, ama denbi xiriir la leh siyaasad, ama faldenbiyeed uu ka danbeeyo sababo siyaasadeed, isla markaana dowladaha uma furno diidmada codsiga soodhiibista danbiilaha.

2. Faldenbiyeedka qarinta khasabka ah sharci ahaan waa denbi ka mid ah kuwa ay tahay in dowladuhu isdhafsadaan marka la fiiriyo heshiiskasta oo ka mid ah heshiisyada dhexmaraya dowladaha.

3. Dowladaha qaybta ka ah heshiiskan waxay balanqaadayaan in denbigan ay ku daraan denbiyada ay tahay in dadka gaysta dowladuhu isu gudbiyaan, heshiis kasta oo ay gelayaan.

4. Dowlad waliba oo heshiskan qayb ka ah waxaa u furan in ay cuskato heshiiskan hadii dowlada ay ka dalbatay in ay denbiilaha usoo gacangiliso in ay heshiis uu jiro ka dhaxeeya labada dowladood.

5. Dowladaha qaybta ka ah heshiiskan oo isdhaafsiga denbiilayaasha aysan shardi ahayn waa in ay denbigaan u aqoonsadaan in uu yahay denbi ay tahay waajib in la isu gudbiyo.

6. Isdhaafsiga marwaliba waxaa lagu saleynayaa shuruudaha uu xadidayo qaanuunka dowladda qaybta ka ah heshiiska, iyo heshiisyada markaa dhaqangalka ah.

7. Heshiskan kuma jiraan wax loo fasirikaro in uu dowlada qaybta ka ah ku waajibinayo in ay aqbasho codsiga soo dhiibista, hadii ay ogaato in sababaha loo daba socdo qofka ay tahay kuwo ku saabsan ama saldhig ay u tahay, jinsiga, qabiilka, diinta, asal, ra'yi siyaasadeed, ka mid ahaanshadiisa urur siyaasadeed.

*Qodobka 14aad*

1. Dowladaha qaybta ka ah heshiiskan waxay balanqaadayaan in ay bixiyaan kaalmo dhinaca garsoorka ah oo ku saabsan baarista iyo xaqiijinta denbigan, iyo in ay u gudbiyaan dowlada ay khusayso dhamaan waxii suurtagal ah oo cadeymo ah.

2. Kaalmadan garsooreed waxay ku xirantahay shuruudaha ay xadideyso shuruucda wadaniga ah ee ay dowlada heshiiskan qaybta ka ah leedahay taasoo dalbatay in loo soo gudbiyo eedaysanaha.

*Qodobka 15aad*

Dowladha heshiiskan qaybta ka ah waxay iska kaalmeysanaayaan wixii suurtagal ah ee lagu kaalmeynayo dhibanayaasha qarinta khasabka ah, iyo sidii loo baadigoobi lahaa dadka la qariyay, xadidida halka ay ku suganyihiin, iyo qaabkii xoriyadooda ay ku helilahaayeen, iyo hadii uu dhinto sidii lagu heli lahaa meydkiisa.

*Qodobka 16aad*

1. Dowladda heshiiskan qaybta ka ah uma banaana in ay cayriso ama tarxiisho qof hadii ay jiraan sababo maangal ah oo tilmaamaya in qofkaa loo gaysan doono qarin khasab ah.

2. Si loo xaqiijiyo jiritaanka sababahan, hay'adaha ku shaqada leh waa in ay tixgeliyaan dhamaan arimaha iyo xaaladaha xiriirka la leh arintan, oo ay ka mid tahay hadii loobaahdo in dawladaasi ay ka jiraan tacadiyo joogto ah oo waaweyn, muuqda ama wadareed ah oo kadhan ah xuquuqda aadanaha iyo xeerka caalamiga ah ee bani'aadanimada.

*Qodobka 17aad*

1. Ma-banaana in qof lagu xiro meel qarsoodi ah.

2. Iyada oo aan wax loo dhimayn waajibaadka caalamiga ah ee dowladaha dhinaca ka ah heshiiskan ka saaran arimaha la xiriira in aan qofna laga qaadi karin xoriyadda, dowlad walba oo qeyb ka ah waxaa waajib ku ah si waafaqsan shuruucdeeda gudaha:

(a) Dajinta shuruudaha ay tahay in qofka xoriyada looga qaadi karo;

(b) In la tilmaamo cida iska leh soo saarista amarka xoriyad ka qaadista;

(c) In la damaanad qaado in aanan qofka lagu xirin meel aan rasmi ahayn oo dowladu aysan koontaroolin;

(d) In loo damaanad qaado in qofka xoriyadiisa laga qaaday in uu la xiriiri karo qoyskiisa, qareenkiisa, ama qof kasta oo uu rabo maxbuuska iyadoo la tixgelinayo oo kaliya ilaalinta shuruuda ku cad qaanuunka, hadi uu yahay ajnabi waa in loo damaanadqaado in uu la xiriiro qunsulkiisa si waafaqsan xeerka caalamiga ah ee dhaqangalay;

(e) In la damaanad qaado in hay'adaha ku shaqada leh ay gaari karaan goobta dadka lagu qarinayo, hadii loo baahdana waa in laga helaa ogolaansho marka hore hay'adda garsoorka;

(f) Damaandqaad la xiriira xaqa qofka laga qaaday xoriyada, hadii la tuhmo in uu dhacay kiis ah qarin khasab ah, marka qofka laga qaado xoriyadiisa uusan awoodin in uu xaqiisa la yimaado, qof kasta waxa uu xaq u leeyahay hadii ay maslaxad sharciga waafaqsan ugu jirto sida qaraabada qofka xoriyada laga qaaday, wakiilkiisa ama qareenkiisa markastaba in ay duraan maxkamada horteeda sax ahaanshaha xariga si hadii ay cadaato in arintaa aysan sax ahayn loo sii daayo.

3. Dowlad waliba oo qayb ka ah heshiiskan waa in ay furtaa galal ay ku qoreyso magacyada dadka laga qaaday xoriyadooda laguna qoro xogtii ugu danbeysay ee laga codsaday iyadoo u gudbineyso hay'ad kasta ee garsoor ama hay'ado kale ama hay'adaha ku shaqada leh si waafaqsan sharciyada dowladda qeybta ka ah arintaana ay quseyso ama si waafaqsan warqadaha shuruucda caalamiga ah la xiriira ee ay dowladu qeybta ka tahay. Waxyaabaha lagu qoraayo faylasha ugu yaraan waxa ka mid ah:

(a) Jinsiyada qofka xoriyada laga qaaday;

(b) Taariikhda, saacada, meesha qofka xoriyadda looga qaaday iyo cadeynta hay'ada qofka xoriyadda ka qaaday;

(c) Hay'adda amartay xoriyad ka qaadista iyo sababaha xoriyad qaadista;

(d) Hay'adaha ka warqabay xoriyad ka qaadista;

(e) Goobta xoriyad ka qaadista lagu sameeyay, taariikhda iyo waqtiga la galay goobta xoriyad ka qaadista lagu sameeyay, iyo hay'adaha masuulka ka ah goobta xoriyad ka qaadista;

(f) Waxyaabaha la xiriira xaalada caafimaad ee qofka xoriyada laga qaaday;

(g) Hadii dhimasho dhacdo inta lagu jiro xoriyad ka qaadista, waa in la cadeeyaa xaaladaha iyo sababaha dhimashada iyo dhanka loo qaaday maydka;

(h) Tariikhda iyo saacada lasii daayay, ama hadii loo wareejiyay meel kale si loogu xiro, iyo hay'adaha masuulka ka ah wareejintiisa.

*Qodobka 18aad*

1. Iyada oo la ilaalinayo qodobada 19 iyo 20, dowlad waliba oo qayb ka ah heshiiskan waa in ay u damaanad qaadaa cid walba oo leh maslaxad sharci ah in ay hesho xogtan, sida qaraabada qofka xoriyada laga qaaday, wakiilkiisa ama qareenkiisa, in loo suurtageliyo in ay helaan uguyaraan xogtan:

(a) Hay'adda amartay xoriyad ka qaadista;

(b) Taarikhda, saacada, iyo halka uu joogay marka xoriyada laga qaadayay, gelida goobta xoriyada looga qaaday;

(c) Hay'adda lasocotay xoriyad ka qaadista;

(d) Halka uu joogo qofka xoriyada laga qaaday oo ay ku jirto xaalada loowareejiyay goob kale si loogu xiro goobta loo wareejiyay iyo hay'adda masuulka ka ah wareejintiisa;

(e) Taarikhda, saacada iyo meesha laga sii daayay;

(f) Waxyaabaha la xiriiro xaalada caafimaad ee qofka xoriyada laga qaaday;

(g) Hadii uu dhinto isaga oo wali la hayste ah waa in la baaraa sababaha, iyo duruufaha uu u dhintay iyo halka la geeyay maydkiisa.

2. Waxa la qaadayaa talaabooyin ku haboon hadii loo baahdo si loo ilaaliyo dadka lagu sheegay tirsiga 1aad ee qodobkan, iyo dadka ka qaybqaatay ama gacan ka gaystay baaritaanka, dhamaan wixii dhaqan xumo ah, cabsi gelin ah, ama ciqaab ah ee la xiriira baarista xog ku saabsan qofka xoriyada laga qaaday.

*Qodobka 19aad*

1. Ma-banaana adeegsiga xog shakhsi ah, sida kuwa la xiriira caafimaadka, dhaxalka, oo laga soo uruuriyay marka la baarayay qofka la qariyay ama loo helay dano kale oo aan ahayn baarista waxna u dhimimeyso in loo adeegsado habka ciqaabta oo la xiriira danbiga qarinta qasabka ah, ama in la helo xaq magdhaw ah.

2. Soo uruurinta, shaandheynta, isticmaalka, iyo kaydinta xogta shaqsiga ah oo ay ku jirto xogta caafimaad iyo tan guud waa in aysan jibin ama aysan ku yeelan saameyn jibin ah xuquuqda aadanaha, xoriyadaha aasaasiga ah ama sharafta qofka.

*Qodobka 20aad*

1. Ma-banaano xadididda xaqa ku saabsan helitaanka macluumaadka, ku xusan qodobka 18 hadii aysan jirin xaalad gaar ah.

2. Iyada oo waxba loo dhimeyn baarista sharciyada xoriyad ka qaadista qofka dowladaha heshiiskan qaybta ka ah, waxay u damaanad qaadayaan dadka lagu xusay faqerada 1aad ee qodobka 18 aad, xaqa durida garsoor oo dag dag ah lana xiriirta xogta lagu xusay tirsigan, sinna uma banaana in shuruud lagu xiro duritaankan.

*Qodobka 21aad*

Dowlad waliba oo heshiiskan qayb ka ah waa in ay qaadaa talaabooyinka lagamamaarmaanka ah oo lagu siideynayo qofka laheysto, sidoo kale waa in dowladu ay qaadaa talaabooyinka ku haboon si loo kafaalo qaado in dhibane la siidaayay aan loo geysan dhibaatooyin la xiriira nabadgelyada jirkiisa, iyo awooda uu u leeyahay in uu sameeyo xuquuqdiisa, iyada oo aan waxba loo dhimeyn waajibaadka ku xusan sharciga gudaha.

*Qodobka 22aad*

Iyada oo aan waxba loo dhimeyn qodobka 6-aad ee heshiiskan dowlad waliba oo dhinac ka ah heshiiskan waa in ay qaadaa talaabooyinka lagama maarmaanka ah si looga hortago ama loo ciqaabo dhaqamada soo socda:

(a) Cid alaale cidii hor istaagta xaqa durida ee ku cad qodobka 17-aad, faqradiisa 2 (f) iyo weliba qodobka 20-aad, faqradiisaa 2-aad;

(b) Dayicidda waajibka ah in la diiwaangeliyo xaalad waliba oo kamid ah xaaladaha qofka xoriyada looga qaadayo, iyo dayicidda diiwaangelinta xogta uu masuulka ka yahay shaqaalaha ka shaqeeya diiwaangilintaas;

(c) Diidmada gudbinta xogta ku saabsan xoriyad ka qaadis iyo soo gudbinta warbixin aan sax ahayn.

*Qodobka 23aad*

1. Dowlad waliba oo heshiiskan qayb ka ah waa in ay tababar siisaa shaqaalaha kala ah milatariga, rayidka u xilsaaran fulinta sharciga, shaqaalaha caafimaadka, iyo shaqaalaha dowlada iyo kuwa kale oo ay suurtagalka tahay in ay la macaamilaan qof xoriyada laga qaaday, waana in lagu tababaraa arimahan:

(a) In ay reebantahay in lagu lugyeesho denbiga qarinta khasabka ah;

(b) Xadigga muhiimada ay leedahay ka hortaga iyo baarista denbigan;

(c) La aqoonsado laguna dadaalo muhiimada in xaalada qarinta khasabka ah loo xaliyo si degdeg ah.

2. Dowladaha heshiiskaan qeybta ka ah waxay ka shaqeynaayaan in aan la ogolaanin soo saarista amaro, tusaalooyin, keeni kara fal qarin khasab ah, ama dhiirigelin kara, dowlad kasta

oo qeyb ka ah waxay damaanad qaadeysaa inaan lagu ciqaabin qofna inuu diiday qaadashada amarkan.

3. Dowlad waliba waa in ay qaadaa talaabooyinka lagamamaarmaanka ah si dadka ku xusan tirsiga 1aad ee qodobkan kuwaas oo haya waxyaabo keeni kara aaminitaan in uu dhacay faldenbiyeed qarin khasab ah ama talaabooyin isku day ah, in ay gaarsiiyaan madaxdooda, iyo hadii loo baahdo in lagaarsiiyo hay' adaha kale ee ku shaqada leh.

*Qodobka 24aad*

1. Ujeedooyinka heshiiskan dhibane waxaa loola jeedaa qofka lagu sameeyay qarinta, ama cid walbo oo uu dhib ka soo gaaray faldenbiyeedka qarinta khasabka ah.

2. Dhibane kasta wuxuu xaq u leeyahay, ka warqabidda waxayaabaha dhabta ah, ee la xiriira duruufaha danbigan, habsocodka baarista iyo halka uu ku danbeeyay dhibanuhu.

3. Dowlad waliba oo heshiiskan qayb ka ah waa in ay qaadaa talaabooyinka ku haboon oo ku saabsan baarista dadka la qariyay, xadidida halka ay joogaan, iyo siideyntooda, iyo hadii uu dhinto in la xadido halka maydkiisu yaalo waana in uu helaa xushmada lagama maarmaanka u ah maydka.

4. Dowlad waliba oo qayb ka ah heshiiskan waa inay damaanad qaadaa in nidaamkeeda sharciyeed siinayo dhibanayaasha xaqa ay u leeyihiin in ay helaan magdhow dagdag ah oo munaasab u ah dhibka gaaray.

5. Xaqa magdhowga lagu xusay tirsiga 4aad ee qodobkan waa in ay kamid noqdaan:

(a) Celinta xuquuqda;

(b) Dhaqancelin;

(c) Soo celinta karaamada iyo sumcada qofka;

(d) In loo damaanad qaado in arintaa aan loo laaban doonin.

6. Iyada oo aan waxaba loo dhimayn waajibka dowladda ka saaran sii wadida baarista ilaa ay ka cadaato halka uu ku suganyahay qofka laga qaaday xoriyadiisa, hadana dowladdu waxaa waajib ku ah in ay meel saarto arimaha ku saabsan xaaladda sharciyadeed ee dadka ku maqan qarinta khasabka ah, gaar ahaan arimaha ku saabsan daryeelka qoyska qofka maqan uu masuulka ka ahaa, dhamaan arimaha ku saabsan nolosha bulshada, arimaha maaliyadda, sharciga qoyska iyo xuquuqda lahaanshaha.

7. Dowlad kasta oo heshiiska qayb ka ah waa in ay damaanad qaadaa dhisidda ururo ujeedadoodu ay tahay ka qayb qaadashada xadididda duruufaha xaaladaha qarinta khasabka

ah, halka uu ku danbeeyay dhibanuhu, isla markaana kaalmeeya dhibanayaasha, sidoo kale dowladu waa in ay damaanad qaadaa xoriyadda ka qaybqaadashada ururada noocaas ah.

*Qodobka 25aad*

1. Dowlad waliba oo heshiiskan qayb ka ah waa in ay qaadaa talaabooyinka looga hortagayo laguna ciqaabayo xeerkeeda ciqaabta:

(a) Qaadashada qaldan ee caruurta loo heysto qarinta khasabka ah, kuwa waalidkood/masuul-waalideedkooda loo haysto qarinta khasabka ah ama kuwa ladhalay iyaga oo waalidkood ku jiro xaalad qarin khasab ah;

(b) Been abuur, qarin dukumitiyo cadeynayo jinsiyada caruurta lagu tilmaamay qaybta koowaad ee tirsiga 1-aad ee qodobkan.

2. Dowladaha heshiiskan qaybta ka ah waa in ay iska kaalmeystaan raadinta caruurta lagu tilmaamay qaybta 1aad ee qodobkan iyo in lahelo jinsiyadooda, loona dhiibo qoysaskooda saxda ah si waafaqsan hababka sharciga ah, iyo heshiisyada caalamiga ah, oo ay waajibka tahay in la dhaqangeliyo.

3. Dowladuhu waa in ay iska caawiyaan sidii ay ku raadin lahaayeen, caruurta lagu tilmaamay faqrad hoosaadka (a) faqrada (1) ee qodobkaan, in latilmaamo jinsiyadooda, lana helo halka ay joogaan.

4. Iyada oo la ilaalinayo baahida loo qabo in la dhoowro danta u fiican caruurta, laguna tilmaamay faqrad hoosaadka (a) faqrada (1) ee qodobkan iyo xaqa ay u leeyihiin ilaalinta jinsiyadooda iyo iskuxirka bulshadeed, ee lagu aqoonsaday sharciga, waa in fursad la siiyaa dowladaha, qaba nidaamka ilma xanbaarka (adoption-ka), ama qaababka kale ee la xiriira gacana ku haynta/meelaynta caruurta, inay qaataan habab sharciyadeed si ay dib u eegis ugu sameeyaan arimahaas, hadii loobaahdana waa in la baabi' iyaa xaalad kamid ah xaaladahaas hadii ay ku timaado qaab qarin khasab ah.

5. Marwaliba muhimada koowaad waxaa iska leh caruurta gaar ahaan arimaha lagu xusay qodobkan, caruurta garaadka leh waa in fursad loo siiyaa dhiibashada aragtidooda si xor ah, waana in aragtidooda la qaataa iyada oo la tixgilinayo da'dooda iyo heerka bislaanshadooda.

# QAYBTA II

*Qodobka 26aad*

1. Ujeedooyinka fulinta heshiiskan waxaa loo sameynayaa gudi u xilsaaran Xaaladaha qarinta khasabka ah, kaasoo ka kooban 10 qof oo khubara ah, kuna sifoobay hufnaan, karti laguna yaqaano howlaha xuquuqda aadanaha, gudiga waa gudi madaxbanaan, oo dhaxdhaxaad

ah. Dowladaha heshiiska qaybta ka ah ayaa dooranaya xubnaha gudiga waxaana loo qeybinayaa qaab deegaan oo caddaalad ah. Marka la dooranayo gudigaan waxaa muhimada la siinayaa in la iskugu yeero dadka leh waaya aragnimada sharciga ee la xiriirta shaqada gudiga, sidoo kale xulista gudiga waa in la dhowraa qeybaha bulshada sida rag iyo dumar.

2. Doorashada gudigan waxay u dhacaysaa qaab sir ah oo lagu dooranayo liis xubno ay dowladuhu soo sharaxayaan, inta lagu jiro kulan sanadeed ay iskugu imaanayaan dowladaha uu iskugu wacay Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay si gudigan loo doorto, inta lagu jiro kulamadan oo sharci ahaan ku ansaxayaa sedax meelood labo meel dowlada heshiiskan qaybta ka ah, waxana xubin ka noqonaya gudiga tartamayaasha hela codadka ugu badan.

3. Marka heshiiskani dhaqangalo kadib, doorashada ugu horaysa waxay dhacaysaa muddo aan ka badneyn lix bilood, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaana iska leh qabanqaabada doorashadaas.

4. Mudada doorashada xubnaha gudigan waa afar sanno, iyadoo marlabaad oo kaliya lasoo dooran karo.

5. Hadii uu geeriyoodo mid ka mid ah gudiga ama uu is casilo ama uu howshiisa u gudanwaayo sababo kale, dowladda uu ruuxaasi ka yimid ayaa soo sharaxeyso aqoonyahan kale, sida waafaqsan faqeada 1-aad ee Qodobkan. Qofkaasi oo hadii ay u codeeyaan majooratiga dawladaha xubinta ka ah xilka sii heyn doonaa ilaa mudada ka hadhsan doorashada ku xigta.

6. Gudigaan waa in uu sameystaa xeer hoosaad kiisa.

7. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa in uu u diyaariyo gudiga wax alaale wixii ay u baahanyihiin oo ah shaqaale iyo qalabkii lagu shaqeynlahaa.

8. Gudigaan waxaa ay yeelanayaan wax ale iyo wixii ay leeyihiin shaqaalaha Qaramada Midoobay oo ah sahalo iyo awoodaha kale ee gaarka ah ee ku xusan heshiisyada Qaramada Mioobay ee loo yaqaano 'Convention on the Privileges and Immunities of the United Nations'.

9. Dawlad kasta oo xubin ka ah heshiiskan waa in ay iskaashi u muujisaa Gudida, isla markaana xubnaha gudida ka taageertaa sidii gudidu u gudan lahayd hawlaheeda waafaqsan heshiiska ee ay Dawladu hore u aqbashay.

*Qodobka 27aad*

Marka heshiiska uu dhaqangalo dowladaha qaybta ka ah heshiiskan waxay muddo aan ka yareyn afar sano kana badneyn lix sano qabanayaan shir si loo qiimeeyo howlaha Gudiga si waafaqsan qodobka 44, faqrada 2aad, hadii ay haboontahay in loo wareejiyo gudi kale; iyadoon laga saareyn suurtagalnimo kasta- dabagalka heshiiskan si waafaqsan shaqooyinka ku qeexan qodobada 28 ilaa 36 aad.

*Qodobka 28aad*

1. Marka la fiiriyo awoodaha heshiiskani siinayo gudiga, waxaa muhiim ah in gudigu uu shaqadiisa la kaashado xafiisyada, gudiyada, hay'adaha, wakaladaha, iyo gudiyada lugu sameeyay heshiisyo caalami ah oo raacsan Qaramada Midoobay, si looga wada shaqeeyo ilaalinta qarinta khasabka ah.

2. Si waafaqsan shaqada gudigan, gudigu waa in uu la tashado gudiyada kale ee lagu sameeyay heshiisyada kale ee caalamiga ah kuna saabsan xuquuqda aadanaha, si gaar ah gudiga loo xilsaaray xuquuqda aadanaha kaas oo lagu sameeyay heshiiska caalamiga ah ee ku saabsan xuquuqda madaniga iyo siyaasada.

*Qodobka 29aad*

1. Dowlad waliba oo dhinac ka ah heshiiskan waxay usoo gudbinaysaa warbixin gudiga iyada oo soo marsiineyso Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu ugudbinayaa warbixinta dowladaha heshiiska qaybta ka ah.

3. Gudigu wuxuu darsayaa warbixinada uga imaanaya dowladaha. Waxana ay kasoo saari karaan aragti, faalo ama talo-soojeedinta kula haboon. Waxana loo gudbin doonaa dawlada ay khusayso, Dawladaas ayaa markaasi hadii ay rabto ama hadii ay Gudigu ka codsato jawaab kusoo celin kara Gudida.

4. Gudigan waxaa u furan in ay dowladaha ka codsadaan in ay soo gudbiyaan warbixin dhameystiran oo la xiriirta hergilinta heshiiskan.

*Qodobka 30aad*

1. Waxaa u furan qaraabada qofka dhibanaha ah ama qareenkiisa in uu si dag dag ah codsi ku saabsan baarista arin dhibanaha u gudbiyo gudigan.

2. Hadii gudigu uu u arko in codsi degdega ah ee ku tilmaaman tirsiga 1aad ee qodobkan :

(a) Uusan asaas macruufa laheyn;

(b) Uu xaqii codsiga uu si qalad ah u isticmaalay;

(c) Horay loogu gudbiyay hey'adaha dowladda qaybta ka ah heshiiskan, kuwaasi oo oo awood u leh baadhitaankooda, waase hadii ay halkaasi suurtogal ka tahay;

(d) In uusan ka hor imaaneyn qodobada Heshiiskan; iyo

(e) In aan mar hore hay'ad kale ama garsoor kale oo caalami ah aan la horgeyn.

Gudigu wuxuu ka dalbanayaa dowladda ay khuseyso arintan in ay warcad ka keento arintan qofka la raadinayo, waxana wakhtiga u cayimaya Gudida.

3. Gudigu iyaga oo tixraacaya warbixinada ay dowladuhu usoo gudbiyeen si waafaqsan tirsiga 2aad ee qodobkan gudiga waxaa u furan in ay u gudbiyaan talooyin dowladaha dhinaca ka ah heshiiskan.Tusaale ahaan, in ay ka codsato Dawlada ay khusayso in ay qaado talaabooyinka lama humaanka ah, sida talaabooyib ku meel-gaar ah, si loo ogaado halka qofka la qariyay lagu hayo isla markaana amaankiisa la sugo si waafaqsan Heshiiskan. Isla markaana sida ugu dhakhso badan, wakhtigii loo cayimay, ay Dawladu ka wargaliso Gudida talaabooyinkii ay qaaday. Isla sidoo kale waa in ay Gudidu macluumaadka ay heshay u gudbisaa qofkii soo gudbiyay codsiga degdega ah.

4. Gudigu wuxuu sii wadayaa dadaalada uu kula shaqeynayo dowlada arintu ay khuseyso si loo baaro loona ogaado halka uu ku danbeeyo dhibanuhu.

*Qodobka 31aad*

1. Dowlad waliba oo heshiiskan qayb ka ah, marka ay heshiiskaan saxiixeyso ama kadib waxaa ufuran in ay shaaciso aqoonsigeeda la xiriira howlaha gudigan oo ku saabsan gudoomidda iyo baaridda cabashooyinka ka imaanaya dowladaas. Gudigu ma aqbalaayo cabasho kasta oo katimaada dowlad qayb ka ah heshiiskan hadii aysan shaacin aqoonsigeeda ku saabsan howlaha gudiga:

2. Gudighu waa in uu shaaciyaa in uusan aqbalin cabasho kasta:

(a) Oo kasoo baxda qof aan la aqoon;

(b) Hadii ruuxa cabanaya uu isticmaalo xaqa cabashada si khalad ah;

(c) Hadii cabashada la horgeeyo hay'ad caalami ah oo ah kuwa is ka leh go'aan gaarista;

(d) Hadii aysan ka dhamaan garsoorka gudaha.

3. Hadii gudigu u arko in cabashada ay oofsatay shuruudihii loo baahnaa kuna xusan tirsiga 2aad ee Qodobkaan, gudigu wuxuu gaarsiinayaa dowlada ay khuseyso.

4. Kadib marka gudiga uu qabto cabasho inta aysan go'aan ka gaarin, waxaa gudiga u furan in ay u diraan dowlada ay khuseyso iyaga oo ka codsanaya in ay qaaddo talaabooyin looga hortegayo in dhibka uu sii socdo.

5. Gudigu marka ay kawada hadlayaan arimaha la xiriira cabashooyinka wuxuu fadhigoodu noqonayaa mid qarsoodi ah.

*Qodobka 32aad*

Dowlad waliba oo heshiiskan qayb ka ah waxeey cadeyn kartaa in ay aqoonsantahay awooda uu gudigu u leeyahay in uu qabto uuna tixgeliyo xiriirada in dowlad qayb ka ah heshiiskan ay sheegeyso in dowlad kale aysan kasoo bixin waajibaadka kaga aadan heshiiskan. Gudigu waa in uusan aqbalin xiriirada dowlada aan sameyn cadeynta noocaa ah.

*Qodobka 33aad*

1. Hadii ay gudiga soo gaarto warbixin caqligal ah oo la rumeysan karo oo sheegeysa in dowlad heshiiskaan qayb ka ah ay si xoogan ujibisay heshiiskan, waxaa gudiga u furan kadib marka ay la tashato dowlada ay khuseyso in dowladda ay ka codsato in xubno gudiga ka tirsan ay soo booqan doonaan wadankeeda.

2. Gudigu wuxuu u qorayaa dowlada qoraal ay ku go'aansanaayaan in ay soo booqanaayaan, iyaga oo qoraalka ku tilmaamaya xubnaha wafdiga iyo sababta booqashada. Isla markaana waa in ay Dawladu ugu soo jawaabtaa Gudiga wakhti macquul ah.

3. Gudiga waxaa ufuran iyaga oo tixgilinaya codsiga dowladda oo sababaysan in ay dib u dhigaan booqashadooda ama ay joojiyaan.

4. Hadii dowladda heshiiskan qaybta ka ah ay ogolaato codsiga gudiga ee booqashada waa in ay gudiga ka kaalmeysaa arimaha booqashada una diyaariso wixii hawlfududeyn ah.

5. Marka ay dhamaato booqashadu gudigu wuxuu faalooyinkiisa u gudbinayaa dowladda.

*Qodobada 34aad*

Hadii gudigu helo xog u muuqata in ay ku taagantahay asaas caqli gal ah oo sheegayo in qarinta khasabka ah uu si xoogan oo baahsan uga jiro wadan heshiiskan qayb ka ah waxaa u furan gudiga in ay dowladaas ka codsadaan in ay u soo gudbiso warbixin arintaa ku saabsan, isla markaana in arintaa ay ugu bandhigto Golaha Guud ee Qaramada Midoobay, waxase loo sii marinayaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qodobka 35aad*

1. Awoodaha gudigan ee ku saabsan qarinta khasabka ah wuxuu bilaabanayaa kadib dhaqangalka heshiiskaan.

2. Hadii dowladi kusoo biirto heshiiskan waajibaadka gudigan waxay ka bilaabanayaan marka heshiiska ay dhaqangeliso.

*Qodobka 36aad*

1. Gudigan wuxuu dowladaha qaybta ka ah uu u gudbinayaa warbixin sanadeed ku saabsan qaabka loo fuliyay heshiiska.

2. Waxaa haboon in dowladda ay khuseyso lasii ogeeysiiyo inta aan la shaacin warbixinta sanadlaha ah, isla markaana la siiyo fursad iyo wakhti macquul ah oo ay kaga jawaabto waxyaabaha ku qoran warbixinta. Waxana ay Dawladu codsan kartaa in jawaabteedana la shaaciyo.

## QAYBTA III

*Qodobka 37aad*

Wax ku jira heshiiskaan waa in aysan saameyn qodobo taageeraya ka ilaalinta dhamaan shaqsiyaadka qarinta qasabka ah kuwaasoo ku jiri kara:

(a) Xeerka dowladda qaybta ka ah heshiiskan;

(b) Qawaaniinta caalamiga ah ee ka dhaqangashay dowladaas.

*Qodobka 38aad*

1. Saxiixa heshiiskan wuxuu u furanyahay wadan waliba oo xubin ka ah Qaramada Midoobay.

2. Heshiiskan waxaa meel marin kara dowlad kasta oo Qaramada Midoobay ka tirsan. Warqadaha saxiixa waa in la dhigaa kaydka Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

3. Ku biirista heshiiskan wuxuu u furanyahay dowlad waliba oo xubin ka ah Qaramada Midoobay. Ku biirida waa in lagu dhaqangeliyaa dhigidda warqadaha ku biiridda xogahayaha Qaramada Midoobay.

*Qodobka 39aad*

1. Heshiiskan dhaqangalkiisu wuxuu bilaabanayaa 30 maalmood kadib marka labaatan dowladood ay meel mariyaan, dokumintiga meel marintana ay dhigaan xafiiska Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

2. Dhaqangalka heshiiskan dowladaha ku soo biiro waxay u bilaabaneysa ka dib 30 maalmood marka ay meelmaryaan.

*Qodobka 40aad*

Xoghayaha Guud ee qaramada midoobay wuxuu ogeysiinayaa dowladaha heshiiska qaybta ka ah arimahan:

(a) Saxiixyada, meelmarinta, kusoobiirida soo gaarayo xafiiskiisa;

(b) Tariikhda ay bilaabaneyso dhaqangalka heshiiskani.

*Qodobka 41aad*

Heshiiskan wuxuu ka dhaqangelayaa dhamaan dowlad gobaleedyada hoostaga dowlada federaalka ah iyadoo waxba laga reebayn.

*Qodobka 42aad*

1. Muran kasto oo u dhaxeeya laba dowladood ama ka badan kuna saabsan heshiiskan fasiraadiisa taasoo ay suurtoobiwaysay in lagu xaliyo wadahadal iyo qodobada ku xusan heshiiskan, waa in lagu dhameeyaa dhexdhexaadin hadii ay codsato mid kamid ah dowladaha, hadii ay suurtoobiwayso in mudo lix bilood ah lagu gaaro heshiis waxaa dhinacyada heshiiska u furan in ay arintooda u bandhigaan Maxkamada Caalami ah (International Court of Justice).

2. Dowlad walba oo qayb ka ah heshiiskan marka ay saxiixayso heshiiskan waxaa u furan in ay shaaciso in aysan ku qasbanayn faqrada 1-aad ee qodobkaan. Isla markaana dawladaha kale kuma waajibo doonto dacwad ay dabada ka wado dawladaasi diiday/iska-reebtay waajibka faqradaa 1-aad.

3. Dowlad waliba oo heshiiskan qeyb ka ah oo hore u shaacisay ka-reebanaanteeda faqrada 2-aad ee qodobkan, waxaa u furan in ay shaaciso in ay ka soo laabatay reebanaanta, isla markaana waa in ay ogeysiis ahaan ugu soo gudbiso Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

*Qodobka 43aad*

Heshiiskan waxba uma dhimayo axkaanta xeerka caalamiga ah ee aadaminimada, iyo waajibaadka dowlada ka saaran heshiisyada Jineefa oo afarta ah soona baxay 12/8/1949 iyo labada borotakool oo dheeriga ah soona baxay 8/6/1977. Sidoo kale ma saamaynayso fursadana in Dawladahu u ogolaadaan Hay'ada Laanqaynta Cas inay booqato goobaha wax lagu xidho ee ka baxsan xeerka caalamiga ah ee bani'aadanimada.

*Qodobka 44aad*

1. Dowlad waliba oo heshiiskan qayb ka ah waxaa u furan in ay soo jeediso in isbadel lagu sameeyo heshiiskan, soo jeedinteedana ay u soo gudbiso Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Xoghayuhuna wuxuu soojeedintaas u gudbinayaa dowladaha heshiiska qaybta ka ah isaga oo ka codsanaya in ay soo gudbiyaan fikradahooda ku aadan in ay taageersanyihiin

qabashada shir looga hadlayo hindisaha lasoo jeediyay iyo in cod loo qaado. Hadii sadax meelood hal meel ay fikradooda ku soo dhiibtaan afar bilood gudahooda in ay taageersanyihiin qabashada shirkaa, Xoghayaha Guud wuxuu qabanqaabinayaa shirkaa oo ah mid Qaramada Midoobay garwadeen ka tahay.

2. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu u bandhigayaa isbadal walba oo uu shirku ku gaaro aqlabiyad ah sadax meelood labo meel dowladihii ka soo qeybgalay shirka, isla markaana codkooda dhiibtay.

3. Dhaqan galka isbadal walba oo ku yimaada heshiiskan wuxuu bilaabanayaa si waafaqsan tirsiga 1aad ee qodobkan, kadib marka uu helo muwaafaqada sadex meelood labo meel.

4. Marka isbedalada heshiiskan uu hirgalo dowladaha aqbalay waxaa waajib ku ah fulinta isbadaladan.

*Qodobka 45aad*

1. Heshiiskaan oo xigashadiisa ay iskaga midyihiin afafka kala ah Isbaanish, Ingiriis, Ruush, Shiine iyo Carabi waxaa la dhigayaa xafiiska Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu koobi (nuskhad) udirayaa dhamaan dowladaha lagu tilmaamay qodobka 38-aad.